Ku saabsan Iswiidhan



Barashada bulshada oo Soomaali ah

”Ku saabsan Iswiidhan” waa buug ku saabsan jiheeyn-bulshadeed oo loogu talagalay dadyoowga dhowaan dalka yimid. Ula jeedada laga leeyahay buugga waxa eey tahay in dadka imaanaya waddanka Iswiidhan la siiyo warbixin asaasi ah iyo inuu caawimaad degmooyinka waddanka ka siiyo shaqadooda ku aaddan jiheynta bulshada.

Laga soo bilaabaa bishii diisambar ee 2010:kii waxaa dalka ka jiro xeer-maamuleed oo maamulaayo shaqada khuseeyso jiheeynta-bulshadeed ee loogu tala galay dadyoowga dhowaan dalka yimid (2010:1138). Xeer maamuleedka waxuu tilmaama in hadafka laga lee yahay jiheeynta bulshada, tahay in dadka ka qeeyb qaadanaayo hormariyaan aqoontooda ku saabsan:

- Xuquuqda aadenaha iyo qiimaynta demoqraddiyada ku salaysan.
- Xuquuqda iyo waajibaadka qofka uu gaarka ah.
- Hab-dhiska bulshada.
- Dhaqangelinta nolol-maalmeedka.

Xeer-maamuleedka sido kale waxuu tilmaama waxa jiheeynta-bulshada ee ka koobnaaneyso. Buugga ”Ku saabsan dalka Iswiidan” wuxuu ku salaysan yahay xeer-maamuleed.

”Ku saabsan Iswiidhan” waxaa loo fasiray kow iyo toban luqadood. Qoraallada turjuman dhammaantood waxaa laga heli karaa bogga warbixinta maamulka goboleed ee loogu tala galay dadka wadanka ku cusub, **www.informationsverige.se**.

Dabacadda koobaad ee "Ku saabsan Iswiidhan" sanadkii 2010 ayaa maamulka magaalada Göteborg soo saaray.

Maamulka gobolka Galbeedka Götaland (Länstyrelsen i Västra Götaland) iyo maamulka magaalada Göteborg (Göteborgs Stad) ayaa si noqosho leh uga hoowl galo dib u habeeynta buugaan. Wax kabedelidda Daabacaaddaan oo ah middii toddobaad laga soo bilaabo 2010kii, waxaa sameeyay Pia Severinsson oo ka socota maamulka gobolka Galbeedka Götaland (Länstyrelsen i Västra Götalands län) iyo Jakob Sandahl oo ka socda magaalada Göteborg.

Helene Holmström
Madaxa maareynta goobaha howlaha
Maamulka tabta bulshada
Maamulka magaalada Göteborg
Maarso 2018

Talieh Ashjari
Agaasimaha kala-duwanaanshada
Waaxda xajinta bulshada
Maamulka gobolka Galbeedka Götaland
Maarso 2018



Xuquuqda daabacadda: Maamulka nagaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland
Habka muuqaalka: Maria Nobel, Maamulka gobolka Galbeedka Götaland
Masawirka dahaarka: Johan Ljungberg
ISBN 978-91-984845-7-1

Masawirqaade: Maria Nobel

Tusmada

1. Imaansha dalka Iswiidhan 7

U soo guurida dalka Iswiidhan 8

Ishexgalka dalka Iswiidhan 13

Taarikhda Iswiidhan - laga soo bilaabo waagi barafka ilaa qarniga casriga ah 16

Dalka Iswiidan iyo xilligii 1900:meeyadii 24

Ma jiraan wax dalka Iswiidhan/ummadda iswiidishka u gaar ah? 29

Caadooyinka iyo ciidaha dalka Iswiidhan 33

Munasabado ciido waaweyn ah oo la xuso nolosha oo shan 39

Su’aalaha wadahadalka cutubka 1 42

2. Daganaanshaha dalka Iswiidahn 43

Juqraafiga, ganacsiga iyo dhismaha guud 44

Dadweynaha 50

Guryaha iyo deggaanada 53

Bey'adda, dabiicada iyo dhawrista deegaanka 63

Habka ay degmadaadu u shaqayso 73

Maaraaynta dhaqaalaha 79

Ammaanka 81

Su'aalaha wadahadalka cutubka 2 84

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

3. In qofka isku filnaado iyo horumar laga gaaro Iswiidhan 85

Suuqa shaqada Iswiidhan 86

In cid loo shaqeeyo 95

In shaqo la raadsado 98

In aad furato shirkad gaar ah 104

Ceeymiska shaqo la'anta 105

In canshuur la dhiibo 107

Diiwaangaliska dadweeynaha 111

Ceeymiska bulshada ee guud 113

Ku noolashada itaaldarrada 115

Waxbarashada dadka waaweeyn 117

Wakhtiyada firaaqada iyo ururrada bulshada 125

Su'aalaha wadahadalka cutubka 3 132

4. Xuquuqda iyo waajibaadka qofka 133

Sinnaanta dadka iyo xuquuqda aadanaha 134

Ka hortaga Takooriska 138

Qoyska iyo qofka 142

Xuquuqda caruurta 143

Xoog uu sheegadka ragga uu geeysto dumarka iyo ehelka dhexdiisa 145

Su’aalaha wadahadalka cutubka 4 150

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

5. Sida qoys loo dhisto iyo sida carruur dalka Iswiidhan loogu korsado 151

Siyaabaha kala duwan ee lammaaneyaasha u wada nol yihiin 152

Xanaaneeynta caruurta iyo da' yarta 156

Xannaanada carruurta 163

Dugsiyada hoose-dhexe 165

Dugsiyada sare 168

Dugsiyada iyo demoqraddiyada 169

Kaalmo-dhaqaalaha loogu talagalay qoysaska 171

Su'aalaha wadahadalka cutubka 5 176

6. Saamayn ku yeelanshada Iswiidhan 177

Waa maxay demoqraddiyada? 178

Horumarka demoqraddiyada 180

Horumarka demoqraddiyada Iswiidhan 182

Hab-dhiska demoqraddiyada Iswiidhan 183

Distoorka Iswiidhan 194

Xisbiyada iyo fikradaha siyaasadeed 195

Hab-dhishka doorashada Iswiidhan 197

Demoqraddiyada nolol-maalmeedka 201

Su'aalaha wadahadalka cutubka 6 203

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

7. Daryeelidda caafimaadka ee dalka Iswiidan **205**

Waa maxay caafimaadka? 206

Khamriga, maandooriyayaasha iyo tubaakada 212

Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka Iswiidhan 215

La kulanka daryeelka caafimaadka 216

Xaggee la xarireeysaa? 217

Daryeelka ilkaha 226

Haddii aadan ku qanacsanayn 228

Su'aalaha wadahadalka cutubka 7 229

8. In waayeel lagu noqdo dalka Iswiidan **231**

Waayeel noqoshada 232

Hoowlo iyo dheef loogu tala galay waayeelada 235

Lacagta hawlgabka 236

Daryeelka waayeelka 241

Markii qof u geeriyoodo 242

Xeerka dhaxalka 245

Su’aalaha wadahadalka cutubka 8 248

Ururinta xigashooyinka **249**

Tusmo alifbeeto **251**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

1. Imaansha dalka Iswiidhan

Tusmada

U soo guurida dalka Iswiidhan

Ishexgalka dalka Iswiidhan

Taarikhda Iswiidhan - laga soo bilaabo waagi barafka ilaa qarniga casriga ah

Dalka Iswiidhan iyo xilligii 1900:meeyadii

Ma jiraan wax dalka Iswiidhan/ummadda Iswidhishka u gaar ah?

Caadooyinka iyo ciidaha dalka Iswiidhan

Munasabado ciido waaweyn ah oo la xuso nolosha oo shan

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

U soo guurida dalka Iswiidhan

Dalka Iswiidan waxaa qiyaastii ku nol 10 malyan oo qof. Qiyaastii 3,5 malyan waxay ku noolyihiin saddexda magaalo ee dalka Iswiidan ugu waawayn: Stockholm, Göteborg iyo Malmö. Boqolkiiba 17% ee dadwaynaha dalka Iswiidan ku nool waxay ku dhasheen dalka dibaddiisa, waxeyna tiradooda tahay qiyaastii 1,7 malyan oo qof.

Qarnigii 1900 waxaa Iswiidhan usoo qaxay dad badan. Marka wax yar laga reebo waddanka Iswiidhan laga soo billaabo dagaalkii labaad ee adduunka dadka soo galayay waddanka ayaa aad uga badnaay dadka waddanka ka haajirayay.

1950- iyo 60-meejadii waxaa dalka Iswiidan looga baahna shaqaale. Dadyoow ka yimi dalal Iswiidhan uu dhow ayaa ka shaqaysasho awgeed dalka Iswiidan u soo guuray. Sido kale dad badan ayaa ka mid Talyaaniga, Griig, Yuguslaafiya iyo Turkiga.

1980-meejadii waxaa dadyoow u dhashay dalalka Konfurta Amerika, Iraan, Ciraaq, Libnaan, Suuriya, Turkiya iyo Eriteriya magangalyo uu soo doontay Iswiidan. Muddo ka dib waxaa dalka Iswiidan magangelyo u soo doontay dadyoow u dhashay Soomaaliya iyo dalalka bariga Yurub.

1999:kii wuxuu Golaha Yurub go'aamiyay in Midowga Yurub loo dejiyo siyaasad midaysan oo ku aaddan magangelyo dooneyaasha iyo soo-galootiga. Waxaa loo yaqaan Wadashaqeeynta-Schengen. 2001:dii ayaa dalka Iswiidan

Sawir: Fanny Hansson, Magaalada Göteborg

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ku biiray wadashaqeeynta-Schengen. Taasi mecnaheed waxa ee tahay in dadka si sharciga waafaqsan ku joogo goobaha-Schengen, eey u safri karaan ayagoon baasaboor wadanin marka ee ka tilaabsanayaan xuduudaha-dalalka. Wadashaqeeynta-Schengen waxeey sababtay in tirada magangelyo doonka eey kor u kacdo biloowgii 2000-meejadii.

Uu soo guurida dalka Iswiidhan waxaa kala hago qaanunka-ajniga oo ka kooban shuruucda ku saabsan magangalyada, sharciga daganaanshada iyo dib uu kulanka reeryaasha.

Inta lagu jiray sanadkii 2016 waxaa Iswiidhan usoo haajiray 163 000 oo qofood. Boqolkiiba 54 dadkii soo haajiray waxey ahaayeen niman 44 boqolkiibana waxey ahaayeen dumar. Qiyaastii 15 000 oo qofood oo usoo haajiray Iswiidhan waxey heysteen dhalasho iswiidhish ah, laakiin dadka soo haajiray badankood waxey ka yimaadeen waddanka Siiriya. Warbixin dheeraad ah waxaad ka akhrisan kartaa **www.scb.se**.

Qiyaastii 1,7 malyan oo qofood oo deganaay Iswiidhan sanadkii 2016 waxeey ku dhasheen dalka dibaddiisa. Jadwalkan hoose wuxuu muujinayaa tirakoob oo uu SCB sameeyay oo ku saabsan waddamada eey ku dhasheen soo galootiga yimid sanadkii 2017.



Laga keenay: SCB

Codsiga magangalyada

Baaqa qaxootida ee Qaramada Midoobay waa nidaam caalami ah oo ku qeexan sida dalalka xubin ka ah Qaramada Midoobay ay ula dhaqmi karaan qaxootida. Qof Qaxooti eh, sida ku raacsan baaqa qaxootida, waa qof halis ugu jiro in loogu dabogalo sabab la xariirto cirqigiisa, dhalashiidiisa, galmadkiisa, diintiisa, fakirkiisa siyaasadeed, jinsigiisa ama

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ka tirsanaanshada koox bulshadeed ee gaar ah. Sharciga waxaa ku qoran in qofka qaxootiga ah loo ogalanaayo magangalyo, ayadoo ee san ku xirneen dalka uu magangalyo ka dalbado.

Xataa qofka aan buuxineyn shuruudaha qaxootoonimo ee Qaramada Midoobay, waxuu xaq uu yeelan karaa sharci deganaansho oo loo siinayo magangalyo oo uu u baahanyahay awgeed. Sida uu dhigayo sharciga ajaanibta ee Iswiidhan qofka waa la siin karaa sharci deganaansho haddii uu yahay magangelyo doon (sida eey qorayaan shuruucda wadareed ee midowga yurub).

Midowga Yurub waxeey lee yihiin sharciyo ka wada dhaxeeyo oo maamulaayo habka ee dalalka ugu gaaraayaan haddii qof lagu tirin karo qaxooti. Hoowl wadida magangalyada markii lagu jiro dalalka waa in ee tixgalin uu sameeyaan waxyaabo kala duwan ee ku saabsan qofka taariikhdiisa iyo xaaladiisa nololeed, wax yaalaha lagu tirin karo dabogal, xaalada dalka uu ka yimid qofka iyo in kale oo badan.

Haddii aad magangalyo Iswiidhan ka dalbaneeysid la xariir Hey'adda socdaalka (Migrationsverket). Hey'adda socdaalka waa hey'adda dowladeed ee baarto codsiga ka socdo qofka doonaayo in Iswiidhan soo booqdo, dego ama magangalyo ka dalbado ama noqonaayo muwaadin Iswiidhish ah.

Sida uu dhigaayo xeerka-Dublin, codsigaada magangalyo waa lagu baara dalka koobaad ee ka tagto ee yurub. Hey'adda socdaalka waxay dhammaan magangelyo doonka ka wayn 14 sano ka qaadeeysaa masawirka faraha, si loo hubsado in dalka Iswiidan u yahay dalka ugu horeeyay ee qofku magangelyo ka codsaday.

Bedelid lagu sameeyay sharciga magangel-yada

Baarlamaanka Iswiidhan wuxuu hirgaliyay sharci waqtigiisu xaddidanyahay kaasoo xaddidaya fursadaha eey dadka magangelyo doonka ah iyo qoysaskooda eey Iswiidhan ugu heli karaan sharci deganaasho. Sharciga waxuu hirgalay 20 bisha julaay 2016 waxaana lagu fikirayaa inuu sii jiro saddax sano. Sharcigaan waxuu xattaa saameyn karaa dadka magangelyada dalbaday wixii ka horeeyay 20 julaay 2016. Laanta socdaalka boggeeda internetka ayaad ka akhrin kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan bedelidda la sameeyay: **www.migrationsverket.se**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Shargi deganaansho oo ku meel gaar ah

Sharciga cusub waxuu ka dhiganyahay in qofka magangelyo dalabka ah isla markaana xaqa u leh magangelyo in la siiyo sharci degaanaasho Iswiidhan ah oo ku meel gaar ah. Qofka la qiimeeyo inuu qaxooti yahay waxaa la siinayaa sharci ku meel gaar ah oo saddax sano ah, qofka loo arko inuu yahay magangelyo doon waxaa la siinayaa sharci deganaansho oo 13 bilood.

Hadduu qofku heysto sababo magangelyo marka uu waqtiga sharciga ku meel gaarka ah dhamaado, waa loo dheereynayaa sharciga deganaanshaha Iswidhan. Haddii uu qofku naftiisa masruufi karo waxuu heli karaa sharci deganaansho oo kaamil ah.

Carruurta kaligood waddanka soo gala iyo qoysaska wata carruur ka yar 18 sano kuwaasoo loo arko ineey magangelyo u baahanyihiin waxey heli karaan sharciga degenaashaha dalka, waa haddii eey dalbadeen ugu dambeyn 24 bisha nofeembar 2015.

Sharci degnaansho loogu tala galay xigtada

Hadii aad rabtid inaad la deganaatid qof qoyskaaga dhow ah waa in qofkaas uu heysto sharciga deganaasha waddanka. Ninkaaga, xaaskaada, lammaanahaada, gacliyahaaga kugu diiwaangashan iyo carruurtaada ka yar 18 sano, kulligood sharciga deganaashaha Iswiidhan weey ka heli karaan haddii:

- Aad adiga heysatid dhalashada iswiidhishka, haddii aad heysatid sharciga deganaashaha ama sharciga deganaashaha ku meel gaark aah oo qoxootinimo.
- Inaad noloshaada daberri kartid oo aad is masruufi kartid adiga iyo qoyska sharciga deganaashaha dalbanaya.
- Inaad degantahay guri waasac oo aad dei kartaan.
- In adiga iyo lamaanahaaga aad ka weyntihiin 18 sano.

Masawirqaade: Colourbox

Waajibka masruufidda qof kasta ma saarna, sida carruurta ka yar 18 sano. Warbixin dheeraad ah ka akhriso **www.migrationsverket.se**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haddii aad tahay muwaadin iswiidhish ah ama aad heysatid sharciga deganaashaha waxaa qofka aad qorsheysid inaad guursatid loo ogolyahay inuu helo sharciga deganaashaha dalka si uu kuula noolaado Iswiidhan.

Sharciga degenaanshaha dalka Iswiidan waxaa laga codsada safaaradda ama qunsiliyadda dalka Iswiidan ee ku leedahay dalkaaga, ama dalka kale ee aad ku nooshahay. Codsadeha sharciga degenaanshaha waa in uu laf ahaantiisa u safaaradda/qunsiliyadda codsiga u keena.

Sharcigaan waqtigiisu xaddidanyahay waxuu ka dhiganyahay in xattaa dadka qoyska la ah qaxootiga la siiyay sharciga deganaashaha saddaxda sano ineey iyaga xattaa heli karaan sharciga deganaashaha si eey Iswiidhan ugu soo guuraan. Qoys dhow waxaa ah ninkaaga, xaaskaaga, lamaanahaaga kugu diiwaangashan iyo carruurtaada ka yar 18 sano. Dadka qoyska la ah magangelyo dalbadayaasha la siiyay sharciga deganaashaha 13:ka bil ah, isla markaana dalbaday magangelyo ugu dambeyn 24 nofeembar 2015 waxey ayaga xattaa heli karaan sharci deganaasho Iswiidhan ah.

Dadka qoyska la ah magangelyo dalbadayaasha la siiyay sharciga deganaashaha 13:ka bil ah, isla markaana dalbaday magangelyo ugu dambeyn 24 nofeembar 2015 waxey ayaga xattaa heli karaan sharci deganaasho Iswiidhan ah.

Mararka qaar qoysaska eey carruurtooda kaligood waddanka yimaadeen helayna magangelyo, waxeey heli karaan sharci deganaasho haddii xattaa ilmuha eey magangelyada dalbadeen wixii ka dambeeyay 24 nofeembar 2015.

Dhalsho Iswiidhish

Haddii aad ku talo jirto inaad dhalashada dalka Iswiidan codsato waa inaad codsigaada u geeysaa Hey'adda socdaalka. Codsadaha waa in da'diisa aysan ka hoosayn 18 sano, heystaana sharciga deganaashaha isla markaana uu dalka Iswiidan ku noolaay qiyaastii shan sano. Carruurta da'dooda 18 sano ka hooseeyso weey qaadan karaan dhalashada haddii xattaa labada waalid midkood uu dhalasho dal shisheeye heysto. Muddada sugitaanka jawaabta codsiga dhalashada weey kala duwan tahay, bogga internetka Hey'adda socdaalka ka fiirso inta hada ee mareeyso: **www.migrationsverket.se**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Muwaadin-Midowga Yurub

Haddii jinsiyad aad ka haysato dalka Switzerland ama dal kamid ah dalalka Midowga Yurub-/Isbahaysiga dhaqaalaha ee dalalka Yurub, hab madaxbanaan ayaa u booqan kartaa dalalka ka tirsan Midowga Yurub. 22 dal oo kamid ah 28 dal oo xubin ka ah Midowga Yurub waxay ku heshiyeen heshiiska loo yaqaanno heshiis-Schengen. Taasoo macneheeda ah in muwaasinka Midowga Yurub u dalalka heshiska saxiixay u dokumenti la'aan ku mari karo xuduuda dhulalka. Haddii dhalasho aad ka haysato dal aan ka tirsanayn Midowga Yurub, dokumenti la'aan ayaa booqan kartaa dalalka saxiixay heshiiska Schengen. Laakin ugu badnaantii saddex bilood ayuu socdaalka socon karaa.

Sharciga-shaqada

Sharciga-shaqada waa go'aan ay Hey'adda Socdaalka gaarto, oo u suurtagelinayso muwaadin shisheeye in uu dalka Iswiidan ka shaqaysto. Shardiga asaasiga ah waa qofka in sharciga-shaqada uu dibada ka soo codsada hadana helaa inta uu san Iswiidhan soo galin. Muwadiniinta dalalka waqooyiga Yurub, Midowga Yurub/muwaadinka Isbahaysiga dhaqaalaha ee dalalka Yurub, muwaadinka Switzerland iyo xubnaha qoysaskooda uma baahan in sharciga noocaas ah ay codsadaan. Sidaasoo kale dadyoowga muddo shan sano ku nola dal kamid ah dalalka Midowga Yurub uma baahna in uu codsado ruqsadda shaqada.

Ganacsade uma baahna sharciga shaqada, laakinse waa in uu haystaa sharciga degenaanshada.

Ishexgalka dalka Iswiidhan

Is dhexgal waxey ka dhigantahay in la dareemo in qeyb laga yahay mujtamac. Waxaa loola jeedaa in dadkoo dhan eey dareemaan ineey qeyb ka yihiin bulshada iswiidhishka. Isdhexgalku waxuu ku saabsanyahay in kooxo kala duwan oo bulshada ka mid ah iney kulmaan kadibna eey wax is weydaarsadaan.

Dowladda Iswiidhan ayaa mas'uul ka ah dhigida jiheeynta siyaasadda is-dhexgalka bulshada dalka Iswiidan. Dowladda waxeey dooneeysaa in dadka dhamaantood ka tirsanaadaan bulshada ayadoo loo fiirineeyn goobta ee ku dhasheen iyo goobta ee ka soo jeedaan. Sidaas darteed ayee Dowladda

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Iswidhan waa mujtamac dhaqamo kala duwan leh. Dadka mujtamaca oo dhan waa iney isku si uga qeybqaataan buolshada iyadoon la fiirineyn dhaqanka, diinta ama asal ahaan halka uu kasoo jeedo.

Masawirqaade: Colourbox

sanadooyinka hore uu siineeysaa taageero dheeraad ah soogaleeti dhawaan dalka soo galay. Ula jeedada waxeey tahay si dadka Iswiidhan ku cusub uu helaan bilaaw iyo shuruud fiican oo hadhow keeneeyso nolol madaxbanaan in ee ku noolaadan.

Taabo galinta qaxootiga dhawaan yimid

Waxaa jirta taageero gaar ah oo uu lee yahay Qofka 20 sano buuxsaday (laakinse weli 65 buuxsan) ee dhowaan dalka yimi haystana sharciga deganaanshaha qaxooti ahaan, qaxootida dalka la keenay, magangeliyo u baahan ama ah qof qaraabo la ah dadyoowgaas. Waxaad markaas iska diiwaan gelin kartaa qorshaha daganaanshaha oo heli kartaa magdhawga maalmeed. Qofka dhowaan dalka Iswiidan yimi waa qof qaxooti ama soo-galeeti ah oo dalka Iswiidan ku cusub.

Qorshaha daganaanshaha

Xafiiska shaqada (Arbetsförmedlingen) waxuu ka mid yahay hay'adaha dowliga oo ku caawiyo qaxootida dhowaan dalka yimi iyo soo-galeetida in ay bulshada ku biiran. Haddii aad ka tirsan tahay kooxda u qalanta qorshaha daganaanshaha waa inaad la hadashaa gacanhaayaha taabo gelinta ee joogo xafiiska shaqada, wada-hadal kala yeelataa waxa la iskaga baayan yahay si aad u bilaawdo shaqo raadsi. Waxaad helaysaa qorshe ka koobnaan karo hawlo kala duwan oo kaa taageeri doona jidka in la helo shaqo, laakiin waxey tahay inuu ugu yaraan ka koobnaado waa barashada af-iswiidishka loogu talagalay soogalootiga (sfi), howlo shaqo diyaarin ah (sida qiimaynta waxbarashada iyo khibradaha xirfada iyo

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

tababar shaqo) iyo jihayn bulsho oo ku siineysa aqoonta aasaasiga ah ee bulshada iswiidhishka. Dhaqdhaqaaqyada lagu qoro qorshahaaga waa in ku mashquulin karo waqtiga buuxa ee shaqada (heltid), oo u dhiganta 40 saacadood isbuucii. Qorshahaaga daganaanshaha waxuu soconayaa qiyaastii 24 bilood. Haddii aad ku jirto fasaxa waalidnimada waxaad dib u qaadan kartaa wixii ku dhaafay, laakiin ugu badnaan 12 bilood.

Dhinaca Arbetsförmedlingen ayaad wixi dheeraad ah ka ogaan kartaa: **www.arbetsformedlingen.se.**

Ujeedada qorshaha daganaanshaha waa in adigu aad sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagal ah aad u barato iswiidhishka una hesho shaqo si aad u dabari karto masaariiftaada.

Xafiisak shaqada ayaa laguugu caawin karaa jidka ku socdo shaqo gaar ah.

Sawir: Johnér

Lacagta taabo galinta

Lacagta taabo galinta waa lacag lagu siinayaao markii aad tixraacdo qorshehaada taabo gelin. Haddii aad carruur leedahay waxaa lagu siinayaa lacag dheeraad ah. Lacagta taabo gelinta kala heerar ma aha ee waa isku wada mid, lamana fiirinayo halka aad degan tahay. Si qofka uu u helo karaa lacagta taabo gelinta waa inuu waqti buuxa u ka qaybgalo qorshaha sal-dhigida. Haddii aad shaqo heysatid weey yaraaneysaa lacagtaada taabbo gelinta iyadoo laga duulayo shaqadaada inta eey tahay. Haddii aad heysatid shaqo aan qeyb ka aheyn qorshahaaga taabo gelinta markaas waxba lacagtaada iskama dhimeyso. Haddii aad xaq u leedahay lacagta taabo gelinta waxaad kaloo heli kartaa lacagta kabidda

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

guriga haddii aad gurigaaga kaligaa degantahay. Xaaladaha qaarkood sida haddii aad carruur heysatid, waxaa lagu siin karaa lacag dheeraad ah iyo lacag guriga lagaaga kabo. Qasnadda ceymiska ayaa go'aan arrintaas ka gaarta.

In qofka dalkiisa ka tago oo uu guuro dal cusub

Ka soo tagida dalka hooyo ayadoo loogu soo guuraayo dal cusub waxeey uu dhigma kartaa dhib iyo taxidiyo cusub. Waxaa laga yaabaa waayo aragnimo uu lee dahay shoog badan iyo khasaaro guri, lacag, asxaab iyo qaraabo joogay dalkaada hooyo. Ma sahlano in la barto luuqad cusub, nidaam cusub iyo dhaqan cusub. Qaxa wuu sababi karaa xaalad nafsi ee adag. Dadka qarkood caafimaadkood waxuu xumaan karaa marka ee helaan sharci deganaansho.

Haddii ee xaaladaada caafimaad hoos uu dhacdo waxaad taageero ka heli kartaa qof xirfad uu leh. Warbixin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa rug caafimaad. Sido kale haddii aad lee dahay qorsho taabo galin waxaad la hadli kartaa gacanhayahaada joogo Xafiiska shaqada si aad uu hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan meesha aad ka heleeysid caawimaad.

Taarikhda Iswiidhan - laga soo bilaabo waagi barafka ilaa qarniga casriga ah

Xilligii qadiimiga

Xilligii qadiimiga waa xilli mar hore ahaa. Sido kale waxaa loo yaqaanna xilliga horudhaca taariikhda. 15 000 sano ka hor dalka Iswiidan waxaa ku daboolnaa baraf. Xilligaas waxaa loo yaqaanno xilligii barafka. 3 000 sano kaddib barafkii wuu dhalaalay laga bilaabo konfuurta dalka Iswiidan, waxaa soo ifbaxaya dhir, xayawaanno iyo aadane. Aadenaha wuxuu berrigaas ku nolaa ugaarsasho, kalluumaysasho iyo uruurinta dhirta la cunni kari.

Qiyaastii 6 000 ka hor waxay dadkii dalka Iswiidan ku nola bilaabeen in ay beeraha fashaan iyo xoolaha dhaqdaan. Waxay kaloo bilaabeen in ay adeegsadaan qalabyo ka samaysan dhagax iyo alwaax. Xilligaas waxaa loo yaqaanna xilligii dhagaxa.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

Dhagax-taarikheed ee run waa dhagax ee leh xuruuf. Xuruufta runor waa qoraal la isticmaali jiray in laga jooga ka badan 100 sano.

Qiyaastii 1 500 sano ka hor tiriska milaadiyada wuxuu dadyoowgii waagaas dalka Iswiidan ku nolaa bilaabeen farsamada birta iyo naxaaska. Xilligaas waxaa loo yaqaanna xilligii naxaaska. Wuxuu aadaneha waagaas bilaabay in uu qaarada Yurub ka ganacsado.

Qiyaastii 500 sano ka hor tiriska milaadiyada waxay dadyoowgii waagaas dalka Iswiidan ku nolaa bilaabeen adeegsashada waxyaalaha birta ka samaysan. Xilligaas waxaa loo yaqaanna xilligii birta.

Xilliga Vikingka

Xilliga laga bilaawo 800:meejadii ilaa 1000:meejadii miilaadiyada waxaa loo yaqaanna vikingatiden. Vikingarna waxay ahaayeen dad xariif ku ahaa doon-dhisida iyo socdaalada badda. Waxay kaloo xariif ku ahaayeen dagaallada iyo la ganacsiga dalalka kale. Vikingarna waxay waagaas la wareegeen taliska dalal badan oo ku yaallo waqooyiga Yurub.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirka waxaa ka muuqdo doon u dhisan sidii doomihii Xilligii dad-kii hore ee waqooyiga yurub (viking)

Masawirqaade: Colourbox

Xiligii Dhexe

Taariikhda Iswiidhan waxaa xilligii Xiligii Dhexe laga bilaaba ku dhawaad sanadka 1000 ilaa 1520-yimadii.

Intii diinta krishtaanka dalka Iswiidan laga hirgelin, waxay dadkii waagaas ku nola caabudi jireen dhowr waxyaallo. Kuwa ugu caansanaa waxaa la oran jiray Oden, Tor iyo Freja. Taasoo loo yaqaanno asatro.

Markii diinta krishtaanka dalka Iswiidan laga hirgeliyay waxba bulshada iska beddelay. Dalka Iswiidan wuxuu qiyaastii 1000 yeeshay boqorkii krishtaanka ahaa ee ugu horreeyay, kaasoo la oran jiray Olof Skötkonung. Dhacdoonada 1200:meeyadii way badnaayeen. Waxaa la hagaajiyay hab-dhiska beeraha iyo ganacsiga. Magaalooyin cusub ayaa la dhisay. Dhulka dalka Iswiidan waxaa loo qaybiyay hadba muqaalka daabiiciga. Qayb kastana waxay lahayd sharci u gooni ah. Billoowgii sharciyada ma qornayn. Sharcigii ugu horeeyay ee qorna wuxuu hirgalay 1200:meeyadii.

Xilligii dhexe waxaa la horumariyay baarlamaanka dalka Iswiidan oo go'aanno ka gaari jiray xeererka dalka. Baarlamaanka wuxuu u qaybsanaa afar meelood: darajo sare/nasab fiican, wadaadada, ganacsade iyo beeraleey. Dadka darajada sare/nasab fiican waxay ahaayeen dadyoow lahaa awood iyo xuquuq daxaltooyo ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

Baadariyaasha waxay lahaayeen awood aad u culus, waxayna haysteen milkiyada boqolkiiba 20 dhulalka ugu wanaagsan ee dalka Iswiiddan. Ganacsateyaasha waxay hogaamin jireen ganacsiga iyo farsamada magaalooyinka. Beeraleeyda waawayn waxay hogaamin jireen nolosha miyiga. Reerbaadiyaha waxay ku noolaayeen baadiyaha, halkaas ayay ka shaqaysan jireen oo beeraha ku falan jireen xoolahana ku dhaqan jireen.

Midowga waqooyiga yurub

Waqtiyadii danbe ee Xiliyadii dhexe waxaa dagaallo isla galay Denmark, Norway iyo dalka Iswiidan, waxayn ku dirirayeen awooda dalalka Waqooyiga Yurub. Sannadka markii u ahaa 1397 waxay dalalka Waqooyiga Yurub wada saxiixeen heshiis oo la magac baxay midoowgii-Kalmar. Heshiiska midoowgii-Kalmar wuxuu mideeyay dalalkii heshiiska saxiixay.

Xilligii awoodda saraysay

1500:meeyadii waxaa aduunwaynaha ka dhacay dhacdoonno muhim ah. Columbus wuxuu socdaal ku tegay Mareykanka. Gutenberg wuxuu alifay farsmada daabacaada buugga. Madaxa diinta katoolikada ee Rom waxaa ka lummay awoodii u haysan jiray.

Dadyoow badan ee dalka Iswiidan ku nool maqsuud kuma ahayn sida i boqorka Denmark ee waagaas hogaaminaayay is-bahaysiga. Dadkii magaalada Stockholm lagu laayay waa

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Jikada weeyn ee ku taalo qalcada Läckö. Qaabka jikada 1600:miyadii.

Masawirqaade: Lennart Haglund

dhacdoon caan ah, oo ahayd markii boqorka Denmarka u magaalada Stockholm qoorta ka gooyay dad tiradooda gaarayso 100 oo ahaa dad darajo sare/nasab fiican. Xasuuqa kaddib ummadda dalka Iswiidan waxay ku dhaqaaqeen kacaan. Gustav Vasa ayaa abaabulay ciidan oo kaddib awoodda kala wareegay boqorkii Denmark. Gustav Vasa 6 juun 1523 u boqor noqday. Nabadii ayaa dalka Iswiidan ku soo noqatay, boqorkiina in uu dalka mideeyo ayuu ku guuleeystay. 6 juun waa maalinta qaranka Iswiidan.

Waagii u boqor Gustav Vasa dalka ka talinaayay waxaa wax iska beddelay kaniisadda. Wadaad reer Jarmal ah oo la oran jiray Martin Luther ayaa saamayn badan ku yeeshay kaniisadda dalka Iswiidan. Martin Luther waxuu haye fikrado cusub oo badan kuna saabsan habka ee kaniisada ahaeeyneeyso. Waxay ahaan jirtay kaniisad raacsan kaniisada katooliikada, waxay ku biirtay kaniisada protestant. Kaniisadda dhul badan ee iska dhiibtay, canshuur in ee dhiibto ayaa lagu qasbay, ayadoo siineeyso doowlada sii xoogsaneysay. Isla markaas barlamaanka awoodiisa kor uu kaceeysay.

Laga bilaabo bartamihii 1500:meeyadii ilaa biloowgii 1700:meeyadii wuxuu dalka Iswiidan ka qaybgalay dhowr dagaallo ka dhacay baddaÖstersjön. Badda Östersjön waxay aheyd bad muhiim u ah ganacsiga. Dagaalku wuxuu ku saabsanaa in awooda badda Östersjön maamulideedda gacanta lagu hayo. Sidoo kale Iswiidhan waxeey qeyb

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ka aheyd dagaal diimeed dheer oo socday sodan sano sanadooyinkii 1618-1648. Dalka Iswiidan wuxuu dagaal la galay dalalka Denmark, Ruushka, Booland iyo Jarmalka, wuxuuna ku guulaystay awood u helida Östersjön. Bartamihii 1600:meeyadii wuxuu dalka Iswiidan la wareegay qeybo waaweyn oo ku yaal waqooyiga Jarmalka iyo Booland. Dalka Iswiidan wuxuu noqday dal awood wayn leh.

Dhulka dalka Iswiidan ka sokkoow waxaa waagaas dalka Iswiidan ka tirsanaa dalalka Finland, Estonia, Latvia, qaybo Rushka iyo Jarmalka. Xilliga kaddib waxaa boqorkii waagaas dalka Iswiidan u talin jiray boqor Karl XII lagu qasbay in lagala wareego dhulkii dalka Iswiidan usan lahayn, taasoo dagaal loo adeegsaday. Sannadka markii u ahaa 1721 nabad ayaa dalka Iswiidan ka jirtay, xilligii awood waynayd Östersjön wuu dhamaaday.

Waqtigii xuriyada, xilligii aqoonti iyo kacdoonyaasha

Xilliga awood weeynida markii dhamaatay oo boqorkii dhintay, Iswiidhan waxa la asaay hab maamuleed cusub. Awooda waxaa loo qeeybiyay bulshada, waxeeyna noqotay mudo uu bilaabad ah xuriyad sii badan, sidaas darteed ayaa loogu magacaaba xilliga xuriyada. Awooda ugu sareeyso waxaa gacanta ku haye afar qeeybood ee barlamaanka: Darajo sare/nasab fiican, wadaadada, ganacsatada iyo beeraleeyda. Qeeyb kasto hal cod ayee ku laheeyd arimaha khuseeyo sharciyo iyo canshuuro cusub. Barlamaanka Iswiidhan ee cusub ma aheeyn mid demoqraadi ahaan lagu doortay laakin waxuu ahaa mid si gaar ah ugu wasacsanaa xiliga uu ku jiray.

Inta lagu jiray xilliga xuriyada, Iswiidhan waxeey xoog saarta dhaqaalaha dalka ayadoo maali galineeyso cilmi baarista saayniska. Ayadoo ee Iswiidhan yeelaneeysay aqoon ku saabsan dabiicada, waxeey Iswiidhan noqoneeysay mid wax si gaar ah uu soo saarto oo iska ilaaliso dibad-ka-keenka. Sidaas darteed 1740 waxaa la bilaabay machadka-aqoonta (vetenskapsakademi).

Sido kale 1700:yimadii waxaa bilaabatay mudo loo yaqan xiligii aqoonta. Markaas dalal badan oo Yurub ayaa helay dhaqaale ka wanaagsan kii hore. Intii lagu jiray 1700:yimadii waxeey yurub martay isbedelo badan, waxaa ka mid in dad barteen sida wax loo akhriyo iyo in dad badan calaamo su'aal

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

saareen awooda kaniisada iyo dadka darajada sare ee ku lee yihiin bulshada. Arimaha dhaqaalaha iyo bulshada oo soo roonaatay ayadoo uu raacsan xilligi aqoonta fikradaha yimid, waxeey keentay in dib uu habeeyn iyo kacooni badan oo kashay bulshadii hore ee Yurub iyo Mareeykanka. Kacaankii ugu caansanaa wuxuu ahaa kacaanka dalka Fransiiska oo dhacay markii sannadku uu ahaa 1789.

Sanadkii 1771 Gustav III ayaa boqor ka noqday Iswiidhan. Markii ee xisbiyada siyaasadeed ee kala duwan isku bilaabeen ku jireen halgan ee isku beegsanayaan, ayuu boqorka dowlada af ganbiyay sanadkii 1772. Wuxuu isku dayaaye in uu korarsado awoodda dalka oo u keligii dalka u taliyo. Markaas ayee dhamaatay xilligi xuriyada. Arintaan eedeeyn badan ayaa ka dhalatay, Gustav III waxaa lagu dilay goob lagu xafladaynaayay 1792.

Dalka Iswiidhan xilligii 1800:meeyadii

Sannadihii 1796 ilaa 1809 Boqor Gustav IV Adolf ayaa ahaa boqorka dalka Iswiidan. Xilligii u boqorku dalka Iswiidan u talinaayay wuxuu dalka dagaal kula jiray dalka Rushka. Boqor Gustav IV Adolf waa looga gacan sareeyay dagaalkii, taasoo sababta in dalka Iswiidan ay dalka Finland ku wareejiso dalka Rushka. Laga bilaabo (1815) waxaa dalka Iswiidan ka jirtay nabad. Qanco la'anti loo qabay maamulkii Gustav IV Adolf iyo siyaasadii dagaaleed ee ku fashilmay waxeey keentay in 1809 boqortooyada uga tago adeerkiis Karl XIII. Isla xilligaas wuxuu baarlamaanka diyaariyay distoorka tilmaamayo xeerka hab-maamuleedka yareeyay awooda boqorka. Afar xeer ee distoorka laga bilaabaa 1809 waxeey ahaayeen:

- Regeringsformen, qaabka dowladda ee ku qeexan hab-dhiska qaranka Iswiidhan.
- Successionsordningen, oo ku qeexan sida boqortoyada loo kala dhaxlo.
- Tryckfrihetsförordningen, xeerka sugaayo xorriyada ereyga isagoo qoran.
- Riksdagsordningen, hab-dhiska baarlamaanka ee ku xusan afarta nooc e xildhibaano, darajo sare/nasab fiican, wadaadada, ganacsateyaasha iyo beeraleeyda.

Boqor Karl XIII ma lahayn wax carruur ah oo boqortoyda ka dhaxlaa. Sidaas awgeed, boqorka waxuu soo korsaday Jean Baptieste Bernadotte si uu asaga uu noqdo boqorka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Godka naxaaska ee Falu, waa dhaxal dhaqan ee caalamiyeed

Masawirqaade: Colourbox

Iswiidhan. Jean Baptiste Bernadotte waxuu mideeyay dalka Iswiidan iyo dalka Norway, taasoo jirtay qiyaastii 100 sano. Markii sannadku uu ahaa 1865 waxaa la ciribtiray baarlamaankii xildhibaanadiisa ahaayeen afar nooc, (darajo sare/nasab fiican, wadaadada, ganacsateyaasha iyo beeraleeyda). Baarlamaanka waxaa loo yeelay laba guri oo loogu magacdaray Golaha.

1800:meejadii waxaa korarsamay tirada ummadda dalka Iswiidan. Biloowgii 1800:meejadii waxaa dalka ku nolaa 2,4 maljan qof. Markii sannadku uu ahaa 1900 waxaa ku nola 5,1 maljan qof. Sare u kaca tirada dadwaynaha waxay sababtay in dadwaynihii ay shaqo u raadsadaan degmooyin ka fog hoygooda. Dadyoow badan waxay shaqo u raadsadeen magaalooyinka waawayn iyo dalka Mareeykanka. Sannooyinkii u dhaxeeyeen 1865 iyo 1914 waxaa dalka Mareeykanka u guuray dadyoow tiradooda garayso hal maljan.

Warshadaynta

Warshadaha waxay soo gaareen dalalka Waqooyiga Yurub goor dambe haddii la barbardhigo Yurub intiisa kale. Bartamihii 1800:meejadii dadyoowga dalka Iswiidan ku nool badidooda waxay falan jireen beeraha. 1860:meejadii waxaa dalka Iswiidan laga bilaabay dhisida wadooyinka tareenada. Tareenada waxay sababeen in dalka Iswiidan u dalal kale ka iibiyo alwaax iyo bir. Waxaa la dhisay warshado waawayn, maadaama la haystay makiinado waawayn waxaa bilaabatay in hawlihii hab sahlan loo qabto.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dalka Iswiidan iyo xilligii 1900:meeyadii

Hirgelinta demoqraddiyada

Biloowgii 1900:meeyadii waxaa sii kordhay tirada dadyoowgii ka soo guuraayay miyiga isla markaana u soo guuraayay magaallooyinka. Waxaa hoos u dhacay tirada beeraleeyda waxaana islamarka sare u kacay tirada shaqalaha. Waxaa kaloo sare u kacay tirada dadkii doonaayay in ay helaan xaqacodbixinta doorashada. Markii sannadku uu ahaa 1907 waxaa dhammaan ragga da'dooda 24 sano la siiyay xaqa codbixinta. Waxey aheyd 1919 markii uu baarlamaanka go'aamiyay xaqa codbixinta oo eey nimanka iyo naagaha ka mideysanyihiin. Dhamaadkii 1800:meeyadii waxaa bilaawday dhisida ururrada shaqaalaha. Ururrada waxay doonayeen hagaajinta xaaladaha shaqaalaha oona kordhiyaan mushaharadooda. Taasoo marmar ay ku guulaysan jireen. Si ee ugu mudaaharadaan shurada shaqo ee aan cadaalada darida ahaay marmarka qarkood shaqaalaha weey diidi jireen in ee shaqeeyaan. Waxaa loo yaqaan shaqo joojin. 1909:kii shaqo joojin weeyn ayaa dhacday oo 300 000 oo shaqaale ayaa mudaaharaad galay. Taasi waxeey dhacdo muhim leh uu aheeyd hormarinta xaqa shaqada iyo demoqraadiyada.

Dagaaladii adduunka ee koowaad iyo xilligii u dhaxeeyay labada dagaallo

Biloowgii dagaaladii adduunka ee koowaad ee 1914:kii waxay dalalka waqooyiga Yurub wada saxiixeen heshiis, kaasoo ku ballanqaadeen dhaxdhaxaadnimo iyo in aysan dagaaalka lug ku yeelan. Dagaalkii koowaad waxuu socday intii u dhaxeysay 1914-1918.

Iswiidhan waxaa sanadkii markiuu ahaay 1922 laga aasaasay rugta baayoolajiga jinsiga. shaqadeedu waxey aheyd iney u kuurgasho farqiga u dhaxeeya dadka waxaana loo bixiyay ruga baayoolajiga jinsiga ee qaran (Statens institut för rasbiologi). Rugta waxey saameyn ku laheyd sharci ku saabsanaa tarantirid oo la hirgaliyay sanadkii 1934. kumanaan qofood ayaa iyaga oo aanan rabin tarantiray dadkaasoo loo arkay iney dadka kale ka liitaan. Marka eey so shaacbaxday cunsurinimadii Jarmalka ayaa dhaleecooyin badan loo soo jeedshay baayoolajiga jinsiga ku saleysan. Fikirka ah ineey dadka kala qiimo duwanyihiin iyadoo la fiirinayo halka eey kasoo jeedaan ayaa aad u faaftay waqtiyadii dhexe ee

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

dagaalka kaasoo saameyn weyn oo dhinacyada siyaasadda iyo bini'aadanimada ka geystay qaaradda Yurub oo dhan. macluumaad dheeri ah ka akhriso: **www.levandehistoria.se**

Markii sannadka u ahaa 1931 waxaa dalka Iswiidan soo gaaray murug-dhaqaaleed. Kaasoo markii sannadka u ahaa 1929 ku bilaawday xaalad adag gudaha suuqa saamiyada ku yaallo magaalada New York ee dalka Mareekanka kaddib adduunka oo idil ku faafay. Shidada waxay dhalisay shaqola'aan, shaqo ka fariisasho iyo dibadbaxyo. Xilligaas dadwaynaha dalka Iswiidan ku nol waxay heleen caymiska shaqola'aanta oo ka fiican kii hore iyo xaqa fasaxqaadashasda. Hawlgabyada waxay heleen gunno ka fiican tii hore.

1930:meeyadii waxaa sare loo qaadaya xaaladda dumarka carruurta leh. Dumarka carruur lahaa waxaa la siiyay daryeel-caafimaadeed iyo lacag. Ujeedada ee kala heeyd dowlada Iswiidan waxay ahayd in la kordhiyo tirada carruurta dalka ku dhashaan. Waxaa la ciribtiray kharashka ku ummuulinta isbitaalka. Dowlada waxeey dhistay xarumaha daryeel-caafimaadeedka carruurta iyo guryo heer sare ah oo loogu talagalay qoysaska carruurta lahaa. Shaqobixiyeyaasha waxaa laga mamnuucay in dumarka uurka leh ay shaqada ka eriyaan.

Iswaafaqsanaan ka dhaxeeysa dhinacyada suuqa shaqada

Sidoo kale isbeddelo weeyn ayuu maray suuqa shaqada. Bilaawgii 1900:miyadii ilaa 1930:miyadii waxaa caada aheeyd in shaqo dhiibaha iyo shaqaalaha isku dgaali jireen mushaarka, xiliyada shaqada iyo habka goobta shaqada uu taale. Laakin sanadkii 1938 waxaa LO (ururka shaqaalaha) iyo SAF (ururuka shaqo-dhiibaha ee iswiidhishka ah) ku heshiiyeen habka loo wada shaqeeyn lahaa iyo habka mustaqbaalka loo heshiin lahaa. Waxeey saxiixeen heshiishka loo yaqaan heshiishka-Saltsjöbad. Wadashaqeeynta ka dhaxeeyso shaqo dhiibaha iyo shaqaalaha waxeey aheeyd mid muhiim uu ah hormarinta dhaqaalaha dalka Iswiidhan.

Dagalkii aduunka ee labaad

Dagaalkii adunka ee labaad waxuu bilaawday 1939. Muddadii dagaalada wuxuu Hitler iyo kooxihii raacsanaa sababeen geerida dadyoow yahuud ah oo tiradooda gaarayso shan maljan iyo 100 000 oo qof oo kale ah dadka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

romerka, shuuciyiin, qaniisiin iyo dadyoow itaaldarrana. Markii dagaaladii adduunka ee labaad bilaawdeen wuxuu dalka Iswiidan saxiixay heshiis oo ku ballanqaaday dhexdhexaadnimo iyo in usan marna ka qaybgeli doonin dagaalada. Iswiidhan waxeey caawiyas qaxootidii ka yimi dalalka Denmark, Norway iyo dalalka baltika. Dalka Iswiidan wuxuu dalkiisa ku qaabilay qaxooti yahuud oo u dhashay dalka Denmark, kuwaasoo tiradooda gaaraysay 7 500 qof oo ujeedada ahayd in loo diro dalka Jarmalka.

Siyaasadda dhexdhexaad ee dalka Iswiidan waa laga eeg sheegtay inta lagu guda jiray dagaalkii iyo xittaa ka gadaal, waxa lagu eedeeyay waxaa ka mid ah inuu cunsuriyiintii jarmalka u oggolaan jirtay in gaadiid siday ciidammo iyo hub uu dalka dhexmaro.

Dagaalkii aduunka labaad dalal badan ayaa isla asaasay Qaramada Midoobe, QM, si looga hortago dagaal aduun cusub.

Xilligii dagaalaada aduunka labaad

Xilligii dagaallada ku xigay waxaa qaarada Yurub loo qaybiyay laba qaybood, Bari iyo Galbeed. Kuwa ku yaalay bariga Yurub waxay hoos yimaadeen awooda shuuciyadda, taasoo badi ahaan Midowga Sofiet u talin jiray.

Kuwa ku yaallay galbeedka Yurub iyo Maraykanka waxay asaasteen gaashanbuurta NATO oo ah urur ciidan oo ujeedadiisa ahayd in dalalka ku yaallay galbeedka Yurub laga difaaco shuuciyiinta. Cagajugleentii dhextaalay dalalka ku yaallay galbeedka Yurub iyo kuwa bari waxaa la oran jiray dagaallada qaboow.

Sanadkii 1961:kii waxaa Jarmalka laga dhisay darbiga-Berlin. Darbigaas waxuu maamulka shuuciga uka talinaaye Bariga-Jarmalka ugu tala galay in dadka ee san ka bixin dalka guduhiis. Dad badan ayaa ka qaxay bariga-Berlin oo uu qaxay Galbeedka-Berlin intaan darbiga la dhisin. Darbigii-Berlin waxuu calaamad uu noqday kala qeeybiska Yurub intii lagu jiray dagaaladii qaboobaa. Kala goyska waxuu sii jiray ilaa sanadkii 1989 oo ahaa sanadkii darbiga Berlin la burburiyay. Taas waxaa loo yaqaan dhicii darbiga-Berlin.

Dalka Iswiidan iyo xilligii u dhaxeeyay 1960 iyo 2000

1960:meejadii waxaa sare u kacay dhaqaalaha dalka Iswiidan. Goobaha xanaanada carruurta, xarumaha

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Darbigii-Berlin **Masawirqaade: Colourbox**

daryeelka-bukaanka iyo xarumaha waayeelka lagu daryeelo caafimaadeedkooda ayaa la sii dhisay. Shaqaalaha waxay xaq u yeesheen afar toddobaad oo fasax ah. Dalka Iswiidan wuxuu noqday dal casri ah oo dadwaynahiisa u suurtageliyay nolol heer sare ah. Waxaa la helay nolol-sugan iyo fursado lagu helo raashin, hoy iyo shaqo. Nolasha sugan ee noocan ah waxaa loo yaqaanna hab-dhiska daryeelka iyo nabadgalyada dalka Iswiidan (den svenska välfärden). Markii sannadka u ahaa 1974 waxaa hirgalay sharci cusub oo ku saalaysnaa in awooda dadwaynaha u dhaxeeya u dadwaynaha leeyahay. Boqorka waxuu wali ahaa madaxa dalka ugu sareeyo, madaxa qaranka, laakinse dhammaan hawlaha siyaasada waxaa ku dhaqaaqaaye dowladda iyo baarlamaanka.

Boqor Carl XVI Gustaf wuxuu noqday boqorkii ugu horeeyay oo sharciga cusub la kulma. Markii sannadka u ahaa 1980 waxaa wax laga beddelay qodobada dhaxaltooyada boqortoyada, taasoo suurtagelin doonto in qof dumar ah ay noqon karto boqorad. Amiirada Viktoria ayaa beddelkii walaalkeeda kayar amiir Carl Philip dhaxli doonto boqortoyada.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Markii sannadka u ahaa 1979 waxaa sare loo qaaday qiimaha saliidda shidaalka. Dalalka xubinta ka ah Opec (Organization of the Petroleum Exporting Countries) ayaa go'aamiyay. Markii qiimaha saliidda shidaalka kor loo qaaday waxaa dalalka galbeedka Yurub ka dhacay dhibaatooyin dhaqaaleed.

Markii sannadka u ahaa 1986 ayaa ra'iisul wasaarahii dalka Iswiidan Olof Palme la dilay. Ilaa maanta lama garanayo qofkii dilay.

Biloowgii 1990:meejadii waxay ahayd xilli dalalka Yurub murug ka jirtay. Dalka Iswiidan waxaa ka dhacday dhibaatada bangiyada iyo lacagaha. Dadyoow tiro badan shaqo la'aan ayaa ku dhacday. Shirkado tiro badan way ciribtirmeen. Dhaqaalaha qaranka aad buu hoos ugu dhacay.

Markii sannadka u ahaa 1994 wuxuu shicibka iswiidish afti ku codeeyay in dalka Iswiidan u ku biiro Midowga Yurub.

Wasiiradii arimaha dibada Anna Lindh ayaa la dilay 2003:kii. Qofkii dilay xabsi daa'in ayaa lagu xukumay.

Xiligii 2000-miyadii waxaa dhacay dhibaatooyin dhaqaale oo saameeyn weeyn ku yeeashay dhaqaalaha caalamka.

Ku dhawaad sanadka 2000 waxaa dhacday Burburidii warbixinta teknoloojiyadda (IT-kraschen). Waxey ka dhigan in shirkadooyin badan ee ka shaqeeynaaye warbixinmacluumeedka teknoloojiyadda eey musalifeen. Waxaa sabab u aheyd ka baaraandeg ka badbadis ah, taasi oo keentay in suuqa maalgalinta shirkdaha hoos uu dhaco.

Ku dhawaad sanadkii 2008, waxaa dhibaato dhaqaale ee sababtay deeynta iyo qiimeeynta guriyaasha. Dhibaatadeen dhaqaale waxeey keentay in dalal badan ee ku dhawaadeen in ee musalifaan (Island, Griiga, Isbayn), saameeyntana wali waa mid hada jirto (2017).

Sanadkii 2010 dalalka yurub waxeey mareen dhibaato-deeyn dhaqaale oo ilaa hada wali socoto (2017). Dalal badan oo yurub waxeey keentay in lacagta ka baxdo ee ka badan tahay lacagta soo gasho, dhibatada dhaqaalena waxeey ku faaftay dalal badan oo Yurub ku yaal.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

Dad badan waxeey uu arkaan guriyada yar ee gaduudan in ee yihiin sifo lagu yaqaan iswii-dhishka.

Ma jiraan wax dalka Iswiidhan/ummadda iswiidishka u gaar ah?

Waxa qeexaayo dhaqanka iswiidhiska iyo waxa lagu yaqaan iswiidhishka in la sharaxo waa adag tahay. Ummad kasto ee aduunka ku nool waxeey leedahay qiimo dhaqaneed oo siineeyso isbahaysi. Sifooyin-qiimeed badan waxaa qeeybsan karo dhaqamooyin badan, mana u baahno in qof kasto ee umadda ka tirsan lahaado. Sidaas darteed waxa qof uu noqon karo waxa lagu yaqaan iswiidhish qof kale waxa dhici karto in uu san taasi la qeeybsan.

Markii loo fiiriyo dhanka cirqiga iswiidhisha bilaawgii waxeey ka yimaadeen umadda jermaniga. Maanta dadka iswiidhishka asalo badan ayee lee yihiin. Arinta ugu horeeyso ee umadda iswidhishka ka dhaxeeyso waa luuqada iswiidhishka. Waa luuqad ku tirakoobo qeeybta luuqadeed ee indo-yurub isla markaana ah luuqad jarmaaned oo ee ku hadlaan ku dhawaad toban milyan oo qof, inta badana joogo Iswiidhan iyo qeeybo ka tirsan Finland. Af-iswiidishka wuxuu ku xusuusinayaa af-norway iyo af-danish.

Dhaqamada hab joogto ah ayay isku bedbedelaan. Dhaqanka iswiidhishka waxaa saameeyay, dhaqankana sameeyay muuqaalyo iyo dhacdooyin badan ee bulshada ka dhacay. Tusaale ahaan waxyaalo saameyay dhaqanka iswiidhishka waxaa ka mid ah warshadeeynta, kor uu soo kaca hab-dhiska daryeelka iyo nabadgalyada, ka madaxbanaanida diinta iyo madaxbanaanida shakhsiga. Waxyaalahaan iyo waxyaalo kale

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ayaa saameeyn ku yeesha habka caalamka loola dhaqmaayo, habka ee dad iskula kulmaan iyo waxa eey ka aaminsanyihiin bulshada.

Waxyaalaha adag oo aan la fahmi karin hadana kala duwan ayuu ka mid yahay dhaqanka. Halkaan waxaa lagu tilmaama waxyaalo qarkood ee dad badan uu arkaan sifo lagu garto iswiidhish, hadana lagu yaqaan dhaqanka iswiidhishka. Mecnaheeda ma ahan in dadka Iswiidhan dhamaantod kugu raacsanaayaan ama eey iska garanayaan tilmaamahaas.

Kalsoonida loo qabo dowladda iyo hey'adaha dowladda

Iswiidhan aaminaad weeyn ayaa loogu qabaa dhanka dowlada iyo hey'ddaha dowlada. Bulshadooyinka oo uu qofka si gaar ah ugu madaxbanaan yahay waxaa uu shardi ah in uu jiro dhinac xoogan oo nabadgalyo iyo daryeel la taagan sidii reerka uga shaqeeyo bullshadooyinka ku dhisan wadaqeeybsiga. Dalka Iswiidhan dowladiisa ayaa door ka ciyaarto. Dadka Iswiidhan joogo inta badankood waxeey kalsooni u qabaan go'aamada hey'adaha dowladda, habka qaanuunka cadaaladda iyo shaqaalaha xafiisyada dowladda. Taasi waxaa qeeyb ka mid ah sharaxaad uu noqon karto in dhishkii dowlada Iswiidhan ee ku saleeysaneed demoqraadiyo. Habsocodka badankiis waxuu ku saleeysnaa dhaqdhaqaaqa dadka, tusaale ahaan dhaqdhaqaaqa-shaqaalaha, dhaqdhaqaaqa-dumarka, dhaqdhaqaaqa ururadda sarkhaanimada ka soo horjeeda, kuwaasoo dad badan oo Iswiidhanoo dhan ku nool.

Saameeyna jawiga

Jawiga waxaa loo arkaa in hab kala duwan uu saameeyay dhaqanka Iswiidhan. Mudada barafka ee dheer hadana mugdiga badan waxeey keentay in dadka eeysan ku kulmin banaan in badan ee badelkeeda ku kulmaan biibitooyinka, makhaayadaha ama guryaha. Laakin dad badan mudada barafka waxeey la micna dhigan tahay in lakulanka asaxaabta yaraado markii loo bardhigto mudada samarka. Samarka markii la gaaro waxaa is badala nolosha bulshanimada. Dadka markaas banaanka joogo oo asxaabta la socdo waa bataan markii loo bardhigo mudada barafka.

Dabiicada

Dad badan ee joogo Iswiidhan waxeey jecelyihiin uu dhawaanshaha dabiicada. Xuquuqda dhexjoog dabeecadda

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

waxeey qof walba xaq u siinayaa in uu dhexjoogo dabeecadda oo uu ka mid yahay dhulka bannaan oo qof leeyahay. Dabiicada iyo xuquuqda dhexjooga dabeecadda waxeey calaamad muhiim ah uu tahay aqoonsiga-shakhsiga iswiidhishka ah. Sido kale Iswiidhan waxeey lee dahay door muhiim ah oo hur uu socod ku ah dhanka shaqada-dabiicada ee caalamka.

Iswiidhan iyo diin

Diinta krishtanka mudo dheer ayee ku xooganeed Iswiidhan. Bulshada iswiidhishkana waxeey ku dhismatay qiimaha krishtanka ee luther. Qiimeeyn waa garasho ku saabsan waxa nolasha saxda iyo runta ku ah. Xafladaha iyo ciidadha dalka Iswiidan badidooda waxay ka af tirsadaan diinta, sida xaqiijin (konfirmation), munaasabada kaniisada ee ku soo dhaweeynta, arooska iyo dugitaanka. Dalka Iswiidan wuxuu maanta kamid yahay dalalka adduunka ee dadkiisa ka madaxbanaan yahay aaminaad diimeed. Bulshadooyinka diin ka madaxbanaan waxaa horeeyn lagu garanaa in dowladada xeerarkeed ku dhisneeyn diin iyo cawiiqdo, ee arimo diimeed ma is raacsiiyaan. Madaxbanaanid diimeed waxeey ku saabsan tahay in bulshada ku dhisnaato qiimeeyn baniaadan. Muctaqadaadka diinta ee ahadaan arin qofka uu gaar ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Qiyaastii boqolkiiba 60 ee shicibka iswiidish waxay cudwi ka yihiin kaniisada krishtaanka ee Iswiidan. Laakin waa dhif inta hada iyo jeerba ku cibaadeeysato kaniisada. Boqolkiiba 45 qiyaastii carruurta dalka Iswiidan lagu dhalo waalidkood waxeey horgeyeystaan kaniisada dalka Iswiidan. Tiro ka badan boqolkiiba konton waxay jecel yihiin in aysan Kaniisada dalka Iswiidan isku guursan. Qiyaastiii boqolkiiba 75 waxuu aaskooda ka dhacaa kaniisada.

Diinta krishtanka markii laga rebo waxaa kale oo Iswiidhan joogo dad badan oo diimooyinka kale leh. Waxaa ka mid ah islam, diinta hiinduuska, diinta jahuuda, diinta buudistaha, diinta bahá'í, asatro, schamani iyo katolika iyo ortodokiska.

Aamin l'aanta awood sare waa ictiqaad ku dhisan in ee san jiran awood sare ee xoog weeyn leh sidii ilaah. Agnosticism waa ictiqaad ku dhisan in aan la ogaan karin haddii uu jiro hal ilaah. Dad badan ee labadaan qeeybood ka tirsan waxaa la fiican ka madaxbanaanida diin.

Khamro

Iswiidhan waxeey dhaqan dheer uu lee dahay cabitaanka. Laga soo bilaaba xilligii dhagaxa dadka joogo Iswiidhan waxeey sameeyn jireen cabitaan khamri ku jiro, gaar ahaan khamrada culus. Jawiga Iswiidhan laguma beero karo cinabka, laakin waxaa lagu beeri karaa bataatiga iyo xabuubka ee ka kooban tahay khamrada culus iyo nabiidka. 1800:meeyadii wuxuu qof kasta oo iswiidish ah sannad kasta cabbi jiray qiyaastii 50 liiter oo khamri ah. Cabitaanka khamrado badan ee mudadaan waxa uu keenay in uu asaasmo dhaqdhaqaaqa-joojinta khamaricabbida. Dad badan waxay arkeen in khamriga u aad u waxyeelaayay caafimaadka dadwaynaha. Dad badan ayaa wadajir u bilaabeen olole looga dan lee yahay in cabida khamriga la yareeyo. Ururuku wuxuu la magacbaxay dhaqdhaqaaqa joojinta khamricabbida. Tan iyo waagaas khamri-cabbida waxay dalka Iswiidan ka noqotay arrin siyaasadeed oo muhim ah.

Tixgelinta saacadaha balamada

Tixgelinta saacadaha ballanka waa arrin aad muhim ugu ah dalka Iswiidan. Haddii qof u ku ballamiyo markii saacadda ay ku beegan tahay 14.00 gelinka dambe, wuxuu qofku ka filanaaya in aad 14.00 oo gow ah la joogto oo aad daqiiqad ku darsan. Dad badan waxeey uu arkaan soo daahida ixtiraam la'aan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Caadooyinka iyo ciidaha dalka Iswiidhan

Caadooyinka waa munaasabado loo dabbaaldego oo soo noqnoqota. Ciid waa dhacdoon gaar ah oo muhim ah oo loo dabbaaldego, tusaale ciid-diimeedka påsk. Caadooyin iyo ciido badan oo dalka Iswiidan looga dabbaaldega waxay ka aftirsadaan diinta. Caadooyinka qaarkood waxay ku salaysan yihiin diinta krishtaanka. Kuwa kalena waxay ku aftirsadaan xilliga dadkii dalka Iswiidan ku nola ay caabudi jireen dhowr waxyaalood, sida Tor iyo Oden. Waayahan dambe caadooyinka iyo ciidaha diimeedka waa maalmo fasax ah oo qoysaska iyo saaxibada ku kulmaan.

Caadooyin qaarkood oo muhiim ah

Janaayo

Sannadka cusub 1 jannayo waa maalin ciid ah. Dadka badidooda maalintaas ma shaqeeyaan wa maalin ciid ah. Habeenka ka horeeya waa maalinta sannadka ugu dambeeysa. Dad badan waxay u dabbadldeggan sannadka cusub oo maalinta ku xigta bilaaban doono.

Febraayo

Bisha febraayo waa bisha fasax loo yaqaanno februarilov ama sportlov. Mudadaas caruurta iskuulka hal isbuuc ayee ka fasaxanyihiin. Bisha febraayo ama maarso dadwaynaha badidooda ee dalka Iswiidan ku nol waxay cunnaan dolshe loo yaqaanno semlor. Dolsheda waxaa laga sameeyay miro bahda lowska ah iyo subagga caanaha. Waa caadada soo ifbaxday waagi dadwaynaha dalka Iswiidan ay soomi jireen. Intii soonka usan bilaaban waxay dadka cunni jiren raashin dufanta ku badan. Qofka soomi jiray waqti go'an waxba ma cunni jirin, taasoo u sabab ahayd diinta.

Maarso iyo abriil

Ciidda-diimeedka Påsk waxaa la dabbaaldegga bisha maarso ama abriil. Påsk waa ciida krishtaan ee ugu muhiimsan. Waxaa loo dabbaaldegga geeridii Nebi Ciise iyo dib u soonolanshadiisa. Påsk waayahan dambe waa maalin ciid oo dadwaynaha badidooda ee dalka Iswiidan ku nol la ciidaan saaxibada iyo qoyska. Waagi hore waxaa caadi ahaan jirtay in horranta påsk dadyoowga soomaan 40 maalmood. Markii maalinta ciida påsk la gaaro waxaa loo dabbaaldegi

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

jiray dhammaadka soonka. Waxaa waagaas la cunni jiray tusaale ahaan, ukun. Sidaas awgeed, ummadda iswiidish ilaa maanta waxay xilliga påsk cunnaan ukun badan. Muddada påsk waxaa carruurta dugsiyada laga siiyaa hal toddobaad oo fasax ah. Waxaa la yiraahda påsklov. Ciid-diimeedka Påsk ka hor waxay carruurta gashtaan dhar eey si kale isugu ekeeyneysiinayaan. Waxay albaabada uu garaacayaan dadwaynaha ayagoo ugu hambalyeeyaan påsk wanaagsan. Dadkana waxey carruurta siiyaan nacnac.

Muddada påsk waxay dad badan soo bandhigayaan påskris. Påskris badi ahaan waa laamo-geed. Waxaa lagu farshaxameeyaa baalo midabooyin kala duwan leh. 30 abriil waa maalinta ka horeeysa maalinta munaasabada valborg. Dadka waxeey ku soo dhoweyaab xilliga gu'ga. Goobo badan waxaa ka dhaca dabshid waxaana loo heesa gu'ga.

Inta lagu jiro xiliga påsk-iga, dad badan ayaa soo saaro bariiska-påskiga

Masawirqaade: Colourbox

Nouruz

Nouruz waa dabaaldaga sanadka cusub ee sameeyaan tusaale ahaan dadka faarisiga, kurdida iyo afghanistan. Inta badana Iswiidhan Nouruz waxaa loo yaqaan sanadka cusub ee faarisiga ama kurdiga. Nouruz waa soo dhaweeynta xilliga gu'ga, waxeeynta maalinta ku soo aado 20, 21 ama 22 maarso. Maalintaas waa maalinta xilliga gu'ga ku aadan oo habeenku ay isleeg yihiin. Waxeey ku soo aadaa dhamaadka maarso. Nouruz waxuu socdaa 13 maalmood oo leh xaflad, cunto iyo farxad. Sido kale waxaa la shidaa dab laga kor boodboodo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dabka munaasabada Valborg, sido kalena loo yaqaan qoray shidida maayo. **Masawirqaade: Colourbox**

Maayo

1 maajo waa maalinta ciida shaqaalaha. Tan iyo 1800:meejadii ayaa dalal badan maalintaas laga dabbaaldega. Koowda maayo waa maalin ciid ah. Dadwaynaha badidooda waa fasax, iskuulaadkana way xiran yihiin. Dadyoow tiro badan ayaa 1 maayo ku dhaqaaqo dibadbax loogu socdo shaqaalaha xuquuqdooda.

Ciidda-diimeedka Kristi himmelsfärdsdag waxay ku beegan tahay 40 maalmood ciida påsk kaddib. Waxaa loo dabbaaldegga xuska markii Nebi Ciise u geeriyooday. Kristi himmelsfärdsdag waa maalin ciid ah. Dadwaynaha badankood ma shaqeeyaan maalintaas, dukamaanka badidooda way xiran yihiin. Markii tobban maalmood ay Kristi himmelsfärdsdag ka soo wareegato waa maalin ciiddiimeed kale pingsten. Waa ciid krishtaan.

Juun

6 juun waa maalinta qaranka Iswiidhan, waana maalin ciid. Maalinta qaranka waxay dad badan labbistaan dharka hiddaha iyo dhaqanka. Dharku weey kala duwan hadba qeeybta Iswiidhan ee uu qofka ka soo jeedo.

Biloowgii bisha juun waxaa bilaawdo fasaxa xilliga fasaxa kuleelaha ee carruurta. Iskuulada waxaa caruurta loogu

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Midsommar lagu qabtay Nääs. **Masawirqaade: Bianca Rösner**

qabtaa xafladda iskuul xirida. Waxaa loo xafladeeyna maadama xili dugsiyeedka uu dhamaaday, fasaxa kuleelahana bilaabanaayo. Marka ee carruurta ay yaryar yihiin waxaa wehliya waalidiintooda.

Maalinta ka horeeysa maalinta munaasabada Midsommar waa maalin ciideed ee caan ah. Midsommar waxaa mar kasta loo dabbaaldegga maalinta jimcada ku soo aadeeyso inta uu dhaxeeyso 19 juun iyo 25 juun. Munaasabada Midsommar waxaa la dabbaaldegi jiray intii dalka Iswiidan usan noqon dal krishtaan ah. Maalinta midsommar ka horeeyso waxaa lagu ag ciyaara geed loo yaqaanno midsommarstång. Waa bir/qori dheer oo lagu farshaxameeyay baal iyo ubax. Dad badani waxay timaha ku sitaan ubax. Maalinta midsommar waxaa caado ahaan loo cunna kalluun kala nooc ah, baradho iyo miro.

Luuliyo iyo agoosto

Dadwaynaha dalka Iswiidan ku nol badidooda waxay fasax shaqada ka qaataan bilaha luulyo iyo agoosto. 20 agoosta ku dhawaadkeeda ayee iskuulada dib loo bilaabaa. Dhammaadka bisha agoosto waxaa caadi ah xaflad la cunno kalluun nooc gaar ah kräftskiva. Waa xaflad la cunno nooca kallunkaas oo la kariyay. Badanaa waxaa loola cabba hal

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

galas oo khamri culus ah. Taasoo loo yaqaanno nubbe ama snaps. Isla markaas waxaa la heesaa heeso loo yaqaanno nubbevisor ama snapsvisor.

Sebtembar iyo oktoobar

Dhammaadka bisha oktoobar ama biloowga bisha nofeembar way xiran yihiin dugsiyada, carruurta mudo hal isbuuc ah. Waxaa loo yaqaan höstlov ama läslov.

Marka eey bilooyinka oktoobar iyo nofeembar isbadalayaan waa halooween. Xilligaas carruurta waxay u labbistaan hab, kaddibna albaabada ayay dadka ku garaacaan oo ay soo waydiistaan nacnac. Dad badan waxay soo iibsadaan bocor waawayn kaddib dhexgeliyaan shumac. Halloween waa caado dalka Iswiidan ku cusub. Caadadaas waxeey ka timid bilaawgii dalka Irland, kadibna mareeykanka ayaa lagu sii badalay ayadoo ee la tageen halkaas soo-galooyti ka yimid irland.

Jom Kippur

Bisha Sibteembar ama oktoobar waxaa soo gala Jom Kippur oo ah ciid muhiim u ah diinta yahuudda. Waxaa loogu dabbaal dagaa soon, alle bari, iyo in dadka kale caf iyo masaafax la weydiisto. Jom Kippur (maalinta isa saamaxa) waxeey soo gashaa marka eey dhamaadaan tobanka maalin ee ugu horreeyso sanadka cusub ee yahuudda (Rosh Hashana).

Noofambar

Munaasabada Alla helgons dag waxaa la dabbaaldegga maalin sabti ah oo u dhaxaysa 31 oktoobar ilaa 6 nofeembar. Alla helgons dag ciid krishtaan ciid waa maalin dadkii geeriyooday la soo xusuusto. Dad badan ku nol dalka Iswiidan waxay booqdaan qubuuraha eheladii iyo saaxiibadii ka geeriyooday.

Disimbar

Disimbar waa biisha ciid-diimeedka krismaska. Krismaska waa ciid-diimeed oo lagu xuso dhalashadii Nabi Ciise.

13 disambar waa Maalinta-Lucia. Iswiidhan waxaa loogu dabaldagaa maalinta Lucia si uu iftiaanka usoo laabto xilliga barafka kadib. Caruurta xanaanada iyo iskuulada dhigto waxeey gashtaan dhar cad, waxeeynaa heesaan heeso gaar ah oo ku saabsan Lucia iyo krismaska.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Munasabada Lucia ee 13 bisha disambar.

Masawirqaade: Colourbox

Maalmo ka hor inta aan la gaarin maalinta ka horeeyso krismaska ayaa iskuulada la xiraa. Caruurta markaas waxeey ku jiraan fasaxa krismaska, waxeeyna fasax lee yihiin ilaa bilaawga janaayo. 24 disambar waa maalinta ka horeeyso maalinta krismaska. Dadka badana e waxuu krismaska u yahay ciid lala qaato reerka. Waxaa la cunaa cunto krismas ee gaar ah, tusaale ahaan raashin tusaale ahaan laba nooc oo kalluun ah, baradho, hiliba qansiirka, khilibka la isku kuuso (köttbullar) soor bariis. Waxaa la is siiyaa hadiyo loo yaqaan hadiyadaha-krismaska. Reer badan waxeey keensadaan geedka krismaska. Geedkaas waxaa la suraa iftiimo, baliil iyo waxyaalo birqo. Geedkaas hoostiis ayaa la dhigaa hadiyadaha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Farshaxanka krismaska.

Masawirqaade: Colourbox

6 janaayo waa maalinta-sadaxiitobanaad, waana maalin fasax ah. 13 janaayo ayuu dhamaada krismaska, waxaana markaas la qaadaa waxyaalaha krismaska hadana la tuuraa geedka-krismaska.

Ramadan

Ramadan waa bisha muudo ee musliimaanta soomaan hal bil. Dadka waa weeyn ee sooman waxaa markaas ka mamnuucan cunid, cabid, galmo inta uu dhaxeeyso qorax soo baxa iyo qorax dhaca. Ramadan waxaa lagu dhameeystiraa xalad weeyn, ciid al fidr. Dumarka uurka leh ama canug nuujinaayo uma baahna iney soomaan. Qofka da'da ah iyo qofka jiran sido kalena uma baahna. Ramadan waxuu bilaawdaa bisha sagaaleed ee sanadka islaamka. Waxuu ku aadsamaa muudooyin kala duwan maadama uu ku adanyahay bil tirista.

Munasabado ciido waaweyn ah oo la xuso nolosha oo shan

Munsaabada kaniisad kusoo dhaweeynta

Boqolkiiba 45 ee carruurta dalka Iswiidan lagu dhalo waalidkood waxeey horgeyeystaan kaniisada Iswiidan. Sido kale waa caadi in waalidka canuga marka ee magac siiyaan xaflad loo qaabto canuga. Waxaa loo yaqaan munaasabada magac siinta Munaasabada kaniisad ku soodhaweeynta ama munsaabada magac bixida waxaa caado inta badanaa uu ah in xaflad logu dhigo guriga oo lagu casumo asaabta iyo reerka. Martida waxeey hadiyad siiyaan canuga.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xaqiijin (xaflad kaniisadeed)

Xaqiijinta waxeey ku saabsan tahay caqiido krishtan. Waa munaasabad kaniisada loogu dhigo dhalinyarada ayadoo lagu xaqiijiaayo munsabaadii kaniisad ku soo dhaweeynta. Inta badana 14 sano ayee jiraan marka ee maraan xaqijinta. Dhalinyaradii hore ayaa ka badneed dhalinyarada maanta marka loo iskugu bardhigo dhanka xaqijinta. Munaasabaas kadib waxeey inta badana xaflad uu dhigaan qaraabada iyo reerka. Waxaa caado ah in qofka maray xaqijinta la siiyo hadiyo.

Sawir: Johnér

Aroos

Dadka badana ee guursado waxeey dhigtaan xaflad ee ka soo qeeyb galaan qaraabada iyo asxaabta. Martida waa ka qeeybqaataan nikaaxa. Nikaaxa waxaa ka danbeeyo casho iyo xaflad ciyaar. Wazaa caado ah in martida hadiyado siiso labada isguursatay.

Maalmaha dhalashada

Dad badan waxeey xusaan maalinta ee dhasheen Waxaa caado ah in caruurta da'da buuxsato xaflad yar (kalas) uu qabtaan asxabtooda. Xaflada yar marka la joogo caruurta waa ciyaaraan, keegna waa cunaan. Canuga sanadka buuxsanaayana waxaa la siiyaa hadiyada. Dadka waa weeyn ee da'da buuxinaayano waa loo xafladeeyaa. Asxaabta iyo qaraabada dhow waxeey hadiyad siiyaan qofka da'da buuxinaayo. Dadka qaarkood waxeey si gaar ah uu sii xafladeeyaan marka ee gaaran tiro siman, tusaale ahaan 50 sano.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Reerka waxeey xusayaan maalin dhalasho.

Masawirqaade: Colourbox

Xabaalidda

Waxaa caado ah in qofka marku uu dhinto xilliga aaska la tago kaniisada ama goob-xusuuska yar. Goob-xusuuska waa dhismo yar ama qol la isticmaalo badalka kaniisada. Inta badanaa waxaa aaska ka soo qeeyb galo reerka iyo asxaabta dhow.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su’aalaha wadahadalka cutubka 1

Yaad uu aragtaa in ee masu'uul ka yahay arimaha isdhexgalka Iswiidhan?

Haddii uu isdhexgalka shaqeeyn waayo, dhiibatado ugu weeyn ee bulshada la kulmeeyso maxeey tahay?

Waa maxay wax yaalaha ugu dhib badan in laga tilaabsado marka uu qof dal ku cusub yahay?

Maxaad adiga uu baahan tahay si aad nolshaada ugu wadatid dalka cusub?

Intaan ka hor, maxaa ka taqaanay taarikhda Iswiidhan.

Dhacdooyinkee uumaleeyneeysaa in ee muhiim uu ahaayeen sida ee egtahay Iswiidhan maanta?

Sidee u aragtaa in ee Iswiidhan tahay dal ka madaxbanaan diin.

Iswiidhan maxeey uga duwantahay iyo uga egtahay dalalkale dhaqamadood iyo ciidahood?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Guri weeyn ee reereed

Masawirqaade: Colourbox

2. Daganaanshaha dalka Iswiidahn

Tusmada

Juqraafiga, ganacsiga iyo dhismaha guud

Dadweynaha

Guryaha iyo degaannada

Bey'adda, dabiicada iyo dhawrista deegaanka

Habka ay degmadaadu u shaqayso

Maaraaynta dhaqaalaha

Ammaanka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Khariidada Iswiidhan iyo dalalka dariska.

Sawir: Josefin Berger

Juqraafiga, ganacsiga iyo dhismaha guud

Dalka Iswiidhan waxuu bari uga yaala shibhi jasireedka skaandineefia ee waqooyiga yurub. Goobta ee ku taalo Iswiidhan, Danmark, Norway, Iceland iyo Finland waxaa la isku dhahaa Waqiiya Yurub (Norden). Dhulka dalka Iswiidan waa dhul dhuuban oo dheer. Dhirika waqooyiga ilaa koonfurta waa 1 600 kiilomitir, meesha ballaca galbeed ilaa bari uu yahay 500 kiilomitir. Bedka guud waa 450 000 kiilomitir oo labajibbaaran. Iswiidhan waxeey uu qeeybsantaa sadax qeeybood: Götland ee ku taalo koonfurta, Svealand ee ku taalo dhexbartanka iyo Norrland oo ku taalo waqooyiga dalka. Sido kale Iswiidhan waxaa loo qeeybiyaa 25 dhul dabiici ah, 21 gobol iyo 290 degmo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dabiicada iyo cimilada

Dabiicada waqooyiga iyo koonfurta Iswiidhan aad ee kala duwan tahay. Qeeybaha waqooyiga dalka Iswiidhan waxaa ku yaalo buuro, jiqaq iyo haro. Wabiyaal badan ee ku yaalo Norrland waxaa looga soo saara tamar ayadoo la adeegsanaayo goobta korantada laga dhaliyo. Bartamaha Iswiidhan waa dhul coows iyo jiq badan. Koonfurta dalka Iswiidan waxaa ku yaal dhulbeereed iyo dhul siman. Xeebaha galbeedka iyo barigana waxaa ku yaal jasiirado iyo xeebo farabadan oo aad u bilicsan. Jasiiradaha ugu waaweyn waxaa

Saddaxda haro/baliyo ee ugu weyn Iswiidhan waa Vänern, Vättern iyo Mälaren.

Sawir: Koyos

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

lagu magacaabaa Öland iyo Gotland, waxayna ku yaalliin xeebta bari oo Stockholm ka hooseysa. Buurka Iswiidhan ugu sareeyo waxuu ku yaalaa waqooyiga dalka. Waxaa lagu magacaabaa Kebnekaise, dhirirkiisuna waa 2 099 meter.

Iswiidan waxeey leedahay afar xilli: gu', xagaa, dayr iyo jiilaal iyo jawi leh farqi-heerkuleed oo badan. Cimilada dalka Iswiidan waxaa saameeya mawjadaha kuleelka ee Badweynta Atlaantik. Sidaas darted ayey Iswiidan uga kulushahay dalal kale ee waqooyiga Yurub.

Buuraha dabiicada

Masawirqaade: Colourbox

Dhulalka keeydka dabiiciga ah

Dhulalka keeydka dabiiciga ah waa dhul weeyn ee hey'addaha dowladeed siisay ilaalin gaar ah maadama ee dabiicada, geedaha iyo xayawaanada joogo goobta yihiin kuwo xasaasi ah, dhif ah ama qurxoon. Iswiidhan waxeey lee dahay 4000 oo dhulal keeyd dabiici. Waxeey ahaan karaan jiqaq, burar dheer, beero ama jasiirado yaryar. Meelaha keeydka dabiicigi waxeey lee yihiin tabeelo ka waramaayo waxyaalaha aad meesha ku sameeyn kartid iyo waxa aadan ku sameeyn karin. Goobaha keeydka dabiiciga ah waxeey kala lahaan karaan sharciyo kala duwan.

Xuquuqda dhexjoog dabiicada

Iswiidhan waxaa ka jiro wax ya yiraahdo xuquuqda dhexjoog dabiicada. Xuquuqdaan waxeey qof walba xaq u siinaysaa in uu dhexjoogo dabiicada oo uu ka mid yahay dhulka bannaan

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

oo qof leeyahay. Micnaha kale ee xaqa dhegjoogga dabiicada waa in aan laga taxadarno oo xushmad loo muujinno marka la dhexjoogo dabiicada. Xaqa dhexjoogga dabiicada wuxuu ku qoran dastuurka Iswiidan, wuxuuna qeexayaa waxa la oggol yahay iyo wax aan la oggolayn. Bogga internetka Hey'adda ilaalinta dabiicada (Naturvårdsverket), **www.naturvardsverket.se**, waxaad ka akhrisan kartaa xuquuqda dhexjoogga dabiicada oo ku qoran afaf badan.

Intaan soo socoto ayaa la ogalyahay marka dabiicada la joogo

- Waad ku socon kartaa, baaskiil waad ku wadi kartaa, meel kasta ee dabiicada waa dhexjoogi kartaa laakin aad uguma dhawaan kartid guri. Haddii aad albaab furto waa inaad xirtaa marka aad gasho.
- Waad ku socon kartaa, baskiil waad ku wadi kartaa, farasna waad ku mari kartaa jidadka gaarka loo lee yahay.
- Hal habeen ayaa teendho ka dhextaagan kartaa. Haddii aad dooneeyso in aad xili intaas ka dheer teendhaha ku taagnaato in aad weeydiisa cidda dhulka leh.



Seerada dabiicadda ee Herrestafjället. **Masawirqaade: Maria Nobel**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

- Waad ku dabaan kartaa, doona ku raaci kartaa oo dhulka uga soo dagi kartaa laakin aad ugama dhawaan kartid guri.
- Waa lagu ogalyahay in aad gurato ubax, miro iyo boqoshaaga.
- Waad ka kalluumeysan kartaa xeebaha iyo shanta haro oo dalka Iswiidan ugu waaweyn.
- Waad ku shidan kartaa dab yar haddii aad taxadareysid. Laakin waxaa ugu fiican in aad dab ku shidato meesha si gaar ah loogu tala galay dabi-shidida. Inta badana xilliga xagaaga lama ogalo in dab la shito.

Intaan soo socdo ku sameeyn kartid markaad dabiicada joogtid

- Ma dhexmari kartid goofaf, jardiinooyin ama dhul beeran, sida dhul beereed.
- Dabeecadda ku ma dhexwadi baabuur ama mooto.
- Sido kale kuma wadi kartid Waxaadan jidadka yaryar, jardiinooyinka ama waddooyinka lagu ordo.
- Dab ma shidi kartid haddii dhulka iyo dhirtu qallalan yihiin ama dabayl xoog lihi dhacayso. Sababtoo dabkaasi waa uu fidi karaa.
- Dab ku ma dulshidi kartid dhagax ballaaran, sababto waa u burburi karaa. Inta badana xilliga xagaaga lama ogalo in dab la shito.
- Ma dhaawici kartid oo ma gooyn kartid geed ama yacay, gurigana uma qaadan kartid.
- Ma guran kartid khudrad, miro ama wax kale oo ka dhexbaxo dhul beered yar ama weeyn.
- Ma lagu ogolo in aad qashin ku tuurto ama uga tagto.
- Ma lagu ogalo in aad ugaarsato, dhib uu geeysato ama aad dhaawacdo xayawaan. Ma qaadan kartid ukunta shimbiraha ama ma taaban kartid buulasha iyo hoggaga xayawaanka iyo ilmahooda.
- Ruqsad la'an kama kaluumeeysan kartid harrooyinka ama biyomareenada.
- Eyga xariga kama furi kartid inta u dhexeysa 1 maarso ilaa 20 agoosto. Sababtoo xilligaas xayawaanada jiqda ku nool waxeey heeystaan caruur yar. Ey xarig la'an ah wuu ka nixin karaa ama wuu dhaawici karaa xayawaanka. Waxaa ugu fiican in markasto eyga xarig ku xiran yahay.
- Ma guri kartid ubaxyada la dhoowray. Sababta loo dhowrayo waa in la badbaadiyo dhirta khatarta ugu jirto iney ciribtirmato.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dhib ka ilaalinta xoolaha

Iswiidhan waxaa ka jiro sharci xoolaha ka ilaalilnaayo dhibka. Qaanuunka xaq-dhowrka xeywaanka waxaa ku yaal sharciyo dhigaya sida loo dhaqo loona dayactiro xeywaannada. Xaq-dhawrka xoolaha waxuu ku saabsan yahay in aan xoolaha ula dhaqano si wanaag ku jiro iyo in aan ka difaacno xanuun iyo cudur.

Hanti dabiiciga ah

Iswiidhan waxeey lee dahay dhulal hanti dabiici leh oo weeyn. Taasi oo ka kooban duur, macdanta birta iyo korontada biyaha laga dhaliyo.

In ka badan boqolkiiba kontan, dhulalka swiidhan waa duur geedo ku yaaliin. Tamarta - korontada iyo kuleelka waxa laga keena korantada biyaha laga dhaliyo, wershadaha korontada iyo shidaalka dibada laga keeno. Sido kale waxa la isticmaalo korontada dabeesha laga dhaliyo.

Ku dhawaad boqoolkiiba 7,5 ee dhulka Iswiidhan waxaa loo isticmaalaa beero. Boqolkiiba 5 in ya ka yar ayaa ka shaqeeyo beeraha dalka. Maanta waxaa ugu badan oo la beeraa xabuub kala duwan, caws xooluhu daaqaan, baradho, dhir laga sameeyo saliid iyo xididdo laga sameeyo sonkorta. Qayb muhiim ee beeraha iswiidhishka waxa weeye soosaarka caanaha.

Dhaqdhaqaaqyada ganacsiga

Ganacsiga Iswiidan la leedahay dalalka kale ee Yurub waxay mar walba ahayd mid muhiim ah. Tusaale ahaan Iswiidhan waa halka dal ee ugu iibgeeyn badan macdanta birta gudaha Midowga Yurub. Markii u dalka Iswiidan bilaabay qarnigii 19aad sancada warshadaha waxaa kordhay badeecada loo iibgeeyo dalalka kale. Iswiidan waxeey aad u iibgeysan jirtay alwaax, xaashiyo iyo noocyada birta. Dabayaaqadii qarnigii 19aad waxay Iswiidhan bilowday in ee iibgeysado badeeco dalka lagu sameeyey oo ay ka mid yihiin gaariyaal, taleeefano, baabuurta waaweyn, biro wareegsan iyo mishino noocyo badan. Maanta dalka Iswiidan ma u soo saarto badeeco sidii hore si la mid ah. Badeecooyinka, tusaale ahaan alaabta guriga iyo dharka ee lagu iibiyo dalka Iswiidan waxay shirkado iswiidhish ah ku sameeyaan dalal kale. Waxaa kaloo jira shirkado badan oo iswiidhish oo ka hoowl gala dhanka isgaarsiinta iyo warbaahinta casriga ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

Dhismaha guud

Waxaa dalka Iswiidan ku yaal waddooyin badan oo loogu tala galay gaariga iyo gaadiidka tareemada gaar ahaan meelaha ee dadka badan deganyihiin. Waddooyinka tareenada badankood waxay maraan Stockholm, Göteborg iyo koonfurta dalka Iswiidan. Waqooyiga dalka waxaa badan raacaan baska ama gaari khaas ah. Qofka doonaya in uu u safro meel fog oo dalka ka mid ah wuxuu qaataa diyaaradaha. Magaalooyinka waaweyn badankood waxaa ku ag yaalo garoon diyaaradeed. Arlanda ee ku yaalo dibada Stockholm waa gooranka diyaaradaha ee ugu weeyn dalka. Garoonka diyaaradaha ee ugu weeyn Göteborg waxaa lagu magacaabaa Landvetter. Dadka ku nool koonfurta dalka Iswiidan waxay badankood isticmaalaan garoonka Kastrup ee ku yaalo Copenhagen, Denmark.

Dadweynaha

Iswiidhan waxaa dagan in ka badan 10 malyuun oo qof. Dadka Iswiidan weey kordheen tobanaankii sano oo la soo dhaafay. Taasna waxaa sabab u ah ssoo-galooytiga oo dalka ku soo batay iyo dadka oo cimrigoodu dheeraaday. Cimriga dumarka waxa weeye qiyaastii 84 sano, raggana 80 sano. Qaybta ugu badan ee dadweeynaha Iswiidan waxay ku nool yihiin magaalooyinka. 3,5 malyoon oo qof ayaa ku nool hareeraha Stockholm, Göteborg iyo Malmö.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

Dadka laga tirada badan yahay iyo luuqadahooda

Iswiidhan waxeey lee dahay sharci loogu tala galay in lagu dhoowro dadka laga tirada badanyahay. Waxaa dalka Iswiidan loo aqoonsaday dad qaran oo laga tiro badan yahay shan qolo oo kala ah yuhuudda, romer, samer, fiinishka dalka Iswiidan iyo dad ku nool dooxada Tornedalen ee waqooyiga dalka Iswiidan. Afafka taariikhiga ah ee dadka laga tirada badan yahay waxay kala yihiin jiddisch, romani chib, samiska, fiinishka iyo meäankieli. Dowlada waxeey ku hoowlan tahay sidii loo xoogin lahaa xuuquqda dadyowgaa laga tiro badan yahay.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sápmi - dhulka dadka samer

Dadka samer wax-eey degan yihiin afar waddamo. Ruushka, Finland, Norway iyo Iswi-idhan. Dhulka juquraafi ahaan lagu tiriyo Sápmi waxuu ka bilaawdaa Idre ee koonfurta gobolka Dalarna, ilaa badda-barafka ee waqooyiga dalka Norway iyo dhanka bariga ilaa Kolhalvön ee ku taalo Ruushka.

Muujiye: Anders Suneson - samer.se

Waxay dadyowgaas laga tirada badan yahay wadaagaan in ay waqti dheer ku nolaayeen dalka Iswiidan iyo in ay ka tirsanaanshahoodu uu yahay mid cad. Waxay kaloo dadkaasi leeyihiin diimo, afaf ama dhaqamo u gaar ah, iyo in ay doonayaanin ay ku dhegganaadaan astaamahooda.

Dadka saamka waxa weeye dadka keliya oo dalka Iswiidan loo aqoonsan yahay in ay yihiin dadkii asliga ahaa. Waxay ku kala nool yihiin dalka Iswiidan, Norway, Finland iyo Ruushka. Waxaa dalka Iswiidan ku nool qiyaastii 20 000 oo saam ah. Waxaa dhaqan ahaan dadka saamku ka shaqaystaa dhaqashada ugaarsiga, kalluumeysiga, farshaxanka iyo dhaqashada cawsha waqooyiga Yurub. Cawsha waqooyiga Yurub (renar) waa xoolo geeso dheer leh oo dadka saamku rabeeystaan. 6 bisha febraayo waxeey saamku u dabbaaldagaan maalinta u dabbaaldegga qaranka. Taariikhdaas waxaa loo doortay maadaama eey tahay markii la qabtay kulankii ugu horreeyay eey yeeshaan saamku kaasoo ka dhacay magaalada Trondheim 6 bisha febraayo 1917.

Ku dhawaad 600 sano ayee Iswiidhan iyo Finland ahaayeen hal, dadka finishka-iswidhishka ahna waxeey Iswiidhan deganaahyeen ilaa xilligii dhexe. Dadyoowgaas maanta waxaa Iswiidhan ka dagan in uu dhaxeeyso 450 000 iyo 600 000. Tornedalen oo loogu hadlo afka meankieli, waxaa 1809 loo qeeybiyay laba qeeybood, halkaasi ee qeeybta galbeedka noqotay qeeyb ka tirsan Iswiidhan, qeeybta barina noqotay qeeybta ka tirsan Finland. Qeeybta dalka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Iswiidhan waxaa dagan dadka laga tira badan yahay ee lagu magacaabo tornedalingar. Go'aan la gaaray 2014 ayaa waxaa lagu go'aamiyay in 15 julaay noqoto maalin u calaamadeysan tornedalingarna.

Yahuuda waxeey Iswiidhan ku noolaayeen ilaaa 1600:miyadii. 1900-kii waxaa batay dadka yahuudda ah ee usoo guuray Iswiidhan iyadoo sabab u aheyd dagaalkii labaad 22 adduunka iyo ugaarsigii loo geystay dadka asalkooda ahaay yahuud. waxaa dagan ilaa 25 000 oo yahuud. Ku dhawaad 4000 oo ka mid ah waxeey ku hadlaan afka jiddisch. Jiddisch waxey laga billaabo sanadka 2000 ka mid tahay luqadaha yaryar ee Iswiidhan.

Romer waxeey Iswiidhan ku noolaayeen ilaaa 1500:miyadii. Iswiidhan waxaa dagan in uu dhaxeeyso 50 000 ilaa 100 000 oo romer. Dadka romka waa koox isku dhexdaran oo leh luuqado, diimo iyo dhaqamo kala gadisan. Afka romka waa Romani chib.

Guryaha iyo deggaanada

Degmooyinka qaar ayey fududahay in guryaha dhaqso loo helo, qaar kalena waa adag tahay. Degmooyin badan waxaa baahi looga qabaa guryo la kireysto.

In guri laga helo magaalooyinka waaweyn iyo agagaarkooda

Magaalooyinka waaweyn iyo xaafadaha ku wareegsan waxaa aad u adag in la helo guryo la kireeysto. Xaafadaha qaar ayaa aad loo jecel yahay. Sidaas awgeed ayey aad uga sii adag tahay in guryo laga helo xaafadahaas. Ajnabi badan oo dhowaan soo galay dalka waxay doortaan in ay degaan magaalooyinka waaweyn. Sido kale magaalooyinkaan waxaa joogo dad bdan oo uu baahan guriyaal, taaso oo abuureeyso tartan badan loo galo guriyaal. Waa caadi in qeeyb guri ka mid ah laga kireeysto ama guri gacan labaad ah la kireeysto. Waxaa fududaan karta in guri laga helo bannaanka magaalooyinka waaweyn. Inta badanna waxaa jira isgaarsiin wanaagsan oo xagga tareenka iyo basaska oo qofku ugu safri karo magaalada weyn.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Guri weeyn ee reereed

Guri leh qeeybo guri oo laga kireeysto ama guriyaha s-kaashatada labadoodba waxeey wadagaan magaca guri weeyn ee reereed.

Masawirqaade: Colourbox

Hab deegaameed ee kala duwan

Waxa guri ka kireeysan kartaa guri kireeye. Waxaa markaas ka heli kartaa waxa loo yaqaan heshiis gacan koobaad ah oo khuseeyo guri kiro. Waxaad kaloo qayb ka iibsan kartaa guri dabaqyo ka kooban. Waxaa lagu magacaabaa xuquuqda iibsiga degganaanshaha. Haddii aad iibsato guri gooni ah, waxaa lagu magacaabaa xuquuqda lahaanshaha. Sido kale waxaa guri ku kireeysan kartaa gacan labaad. Mecnaheed waa in aad mudo guriga ka kireeysato qof guriga kireeystay ama guriga leh. Sido kala waxaad qol ka kireeysan kartaa qof guriga kreeystay ama guriga leh. Waxaa loo yaqaan in uu qofka noqdo la deggane. Ku fikir inaad heshiis la qorto qofka aad guri ka kireysaneysid. Waana inaad gashaa ceymis guri oo adiga kuu gaar ah. Haddii kale wax ceymis ah kuma jirtid haddii eey wax dhici lahaayeen.

Guri la kireeysto

Haddii aad degantahay guri la kireeysto guriga, waxaad guri ka kireeysatay guri kireeye. Inta badana guri kireeyaha leh guriga waa shirkad. Shirkada waxaa lahaan karo dad ama degmada. Haddii aad adiga ama qof kale oo ku soo booqanaayo guriga wax ka jabiyo, kharash lagu sameeynaayo adiga ayaa dhiibeeysid. Haddii aad wax halaabaan maadama ee duqoobeen, waxaa kharashka sameeynta iyo badalida bixinaayo guri kireeyaha. Alaab caadi uu dooqoowday waxeey ahaan kartaa tusaale ahaan qalabka wax lagu karso oo noqday mid duqoobay oo aan shaqeeyneeyn.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haddii aad heeysato heshiishka gacan koobaadka waxaad xaq uu lee dahay in aad deganaato inta aad dooneeysid oo adna dhawreeysid sharciga iyo heshiishka guriga. Taasi mecnaheed tusaale ahaan waa, in aad kirada bil kasto ku bixisid waqtigeeda iyo in aad dhibin dariska. Marka aad dooneeysid in aad guriga ka guurto inta badana waa inaad sii bixisaa kirada muddo sadax bil ah. Waxaa loo yaqaan xilliga ogeeysiinta. Haddii aad guriga uu heeysato heshiishka gacan koobaadka waxaad guriga ku badalan kartaa mid kale. Badaladi waa in ee shirkada guriga ka kireeysay marka hore ogalaato. Sido kale guri kireeyaha ayaa go'aamiyo haddii guriga la dayactiraayo. Haddii aad dooneyso in aad dayactirto waa in marka hore uu ogalaadaa guri kireeyaha.

Guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha

Guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha waa qaab maxkamadeed loogu tala galay haddii uu dagaal ka dhex dhaco guri kireeystaha iyo guri kireeyaha. Iswiidhan waxaa ku taalo sideed xarumo ee lee dahay guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha. Waxeey ku yaaliin Stockholm, Västerås, Linköping, Jönköping, Malmö, Göteborg, Sundsvall iyo Umeå. Guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha waxuu go'aan ka gaaraa waxa aan heshiis lagu aheeyn, tusaale ahaan haddii qof guri kireeyste ah uu guriga uu kireeyo gacan labaad ahaan. Haddii aad caawinaad uu baahan tahay guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha ka waxuu ka jawaabi karaa su'aalo ku saabsan sharciyada jiro. In dheeraad ah waxaad ka akhrisan kartaa bogga internetka Guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha **www.hyresnamnden.se**

Guryaha is-kaashatada

Si aad u degto guri aad qayb ka iibsatay, waxaad bixineysaa lacag go‘an oo hormaris ah. Mecnaheed waxeey tahay in aad qeeyb ka gadaneeyso ururka guriga iska leh. Ururka nuucaad ah waxaa loo yaqaan ururka-guriyaha is-kaashatada Waxaad xubin ka noqoneysaa ururka, gurigana waad isticmaaleysaa.

Ururo-guryo is-kaashato qaarkood waxeey ka tirsanyihiin hey'ad lguriyaal ku leh Iswiidhan, tusaale ahaan HSB ama Riksbyggen. Ururada kale waa yaryihiin. Urur kasto asaga ayaa gooni ka masu'uul ah in hab sax loogu maamulo dhaqaalaha ururka. Marka aad degan tahay guriyaha is-kaashatada, waa in aad bil kasto kharash lacageed siisaa ururka. Sido kale haddii aad lacag ka deeynsatay banki waa inaad dhiibtaa ribbada deeynta iyo qeeyb ka mid ah

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

lacagta deeynta. Qeeybta aad ka degan tahay dabaqa guriga-iskaashada adiga ayaa si gooni ah ka go'aamiyo rinjiyeenta, dayactirka iyo qalabeeynta gurigaada. Xubinta ururka waxeey go'aamiyaan sida wadajirka loo dhoowraayo guriga iyo dayactirka waa weeyn ee lagu sameeynaayo guriga oo dhan.

Xaqaa yeelanshada

Iswiidhan ka ma jiraan guriyaal dabaq ku yaalo oo ku xiran xaqqa yeelanshada. Guriyaasha badankood waa guriyaal is-kaashato iyo guriyaal la kireeysto. Xaqqa yeelanshada waxuu ku badanyahay marka aad degan tahay guriyada weeyn ee filooyinka ama guriyada saffan. Markaas adiga ayaa guriga si gaar ah uu leh oo ka mas'uul ah. Goob ee ku yaaliin guriyaasha saffan waxaa marmar laga aasasaa urur. Ururada waxeey masu'ul ka noqon karaan meelaha la isla wada isticmaalo, tusaale ahaan jidadka, goobaha ciyaarta iyo coowsyada. Dadka meelaha degan oo dhan markaas waa isla qeeybsadaan qarashka.

Habkaan ayaa guri u helee

Degmooyin badan waxeey lee yihiin xafiiska xidhiidhinta guryaha. Xafiiska xidhiidhinta guryaha badana waxuu lee yahay bogg internet oo aad iska diiwan galin kartid oo ka raadsan kartid guriyaal.

Marka aad iska diiwan galiso waa in aad bogga internetka gasha in badan si aad uu fiiriso haddii la soo geliyay guriyaal banaan. Haddii aad aragto guri banaan oo la soo bandhigaay, markaas waa raadsan kartaa.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Maalinta ugu danbeeyo ee guriga la raadsan karo marka la dhaafo, guri kireeyaha waxuu doontaa dadka imaan karo oo guriga fiirinaayo. Guri kireeyayaal badan waxeey heystaan sisteem saf loo galo taasoo fursad u siineysa in qofkii waqti dheer safka ku jiro uu jaanis fiican u heysto inuu guri helo. Marka aad guri soo fiirsato waa in aad jawaab kala ah haa ama maya ku dhiibtid oo uu dirtid guri kireeyaha. Guri kireeyaha ayaa kula soo xariiraayo haddii adiga lagu siinaayo heshiishka gacan koobaadka guriga.

Haddii ee dad badan isla hal guri codsadeen, guri kireeyaha waxuu xaq uu lee yahay in u hal ka doorto. Qofka guriga iska leh (guri kireeyaha) ayaa markasto go'aamiyo qofka heshiishka gacan koobaadka la siinaayo. Xafiiska xidhiidhinta guryaha ma go'aamin karo. Inta badana waxeey qaadataa mudo dheer inta laga helaayo soo bandhig guri maadama ee jirto baahi guriyaal ee aad uu weeyn.

Talo ku socoto qofka guri raadinaayo

Marmarka qaarkood kuma filno in aad guri ka raadsato hal ka mid ah xafiisyada xidhiidhinta guryaha. Sido kale waxaa fiicnaa karto in aad si toos ah uu la xariirtid guri kireeye. Guri kireeyaasha waa weeyn badankood waxeey lee yihiin bogg internet oo aad iska diiwangalinta kana codsan kartid guriyaal. Sido kale waxaad weeydiisa dadka aad taqaano, qaraabada iyo asaxaabta si aad uu hesho warbixin ku guriyaal banaan.

Hab kale ee guriyaal lagu helo waxeey noqon kartaa in waraaqad lagu dhajiyo dukaamo, maktabada, mariinka aqal laga soo galo ama meelo kale oo leh sabuuradaha ogeeysiiska.

Sido kale waxaad wargeeyyada kala duwan iyo boggag internet kala duwan, ka heli kartaa faanis ku saabsan guriyaal banaan. Halkaas waxaad ka heli kartaa guriyaal gacan labaad ah, oo mecnaheed tahay in aada toos uga kireeysanaayo qofka guri kireeyste ah oo asagu horay uga kireeystay shirkad guriyeed.

Haddii ee aad u adagtahay in guri laga heli degmo, waxaa laga yaabaa in aad ka fursad fiican tahay haddii aad u guurto degmo kale.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ogeeysiinta guurida

Sida u sharciga dhigaayo, marka aad guri ka guurto waa in ogeeysiisaa Xafiiska arimaha canshuurta (Skatteverket). Markaas hey'addaha dowlada waxeey warbixin ka helaayaan cinwaankaada cusub. Waa lacag la'aan in la ogeeysiinta guurida laga sameeyo Xafiiska arimaha canshuurta. Haddii aad dooneeyso in boostooyinkaado loo diro cinwaakada cusub (kadaba dirista boostada) waa in aad dhiibta kharash loogu tala galay.

Ogeeysiinta guurida iyo kadaba dirista boostada waxaad ka sameeyn kartaa bogga Svensk adressändring, **www.adressandring.se**

Kireeynta gacan labaadka iyo la deggane

In guri gacaan labaad ahaan lagu kireeyo mecnaheed waa in uu qof shirkada ka heeysto heshiish gacan koobad ah, uu qof kale ka sii kireeyo guriga. Shirkada guriga kireeyso waa in ee marka hore ogalaataa in guriga gacan labaad lagu kireeyn karo. Haddii ee shirkada kuu diido waxaad isku dayi kartaa in aad ogalaansho ka hesho guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha. Adigoo ogalaansho heeysaan haddii aad qof kale guriga ka kireeyso, shirkada guriga leh weey kuugu qasbi kartaa in aad uu celiso guriga gabi ahaantiisaba. Sido kale waxaad kireeyn kartaa hal ama qolaal badan ee gurigaada ka tirsan adigo degan. Taas waxaa la dhahaa la deggane. Waxaad qof qol ka kireeyn kartaa adigoo shirkada guriga kireeyso weeydiin ogalaansho laakin lama ogalo in dad badan isla hal guri degnaadaan. Waxaad qof qol ka kireeyn kartaa haddii aad heeysato heshiishka koobaad ee guriga.

Masawirqaade: Maria Nobel

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haddii aad heeysato heshiishka koobaad ee guri kiro ah oo aad dooneeyso in aad guriga qof kale ka kireeyso waa in aad lee dahay sabab la ogalaaday. Sabab la ogalyahay waxeey ahaan kartaa in aad shaqo ka raadsaneeyo magaalo kale ama haddii aad dooneeyso in aad tijaabiso la daganaanshaha wada noole (sambo). Sida caadiga ah, shirkada guriyaha kireeyso waxeey ogalaataa in guriga uu kireeyso hal-hal sano.

Dhanka guriyada is-kaashatadana, qiyaas ahaan isla sababooyinka ayaa khuseeyo.

Kireeyn gacan labaad

Haddii aad dooneyso in aad guri ku kireeysato gacan labaad ahaan, waxaad muhiim ah in aad ogaato haddii e shirkada guriyaha kireeysto ogalaatay kireeynta. Ha iiloobin in aad saxiixdo heshiish marka aad guri ku kireeysaneeyso gacan labaad. Heshiishka waxaa saxiixo qofka heeysto heshiishka gacan koobaadka iyo qofka guriga ku kireeysanaayo gacan labaad. Haddii aada saxiixin heshiiska, qofka heeysto heshiishka gacan koobaadka wuu ka saaran karaa guriga marka uu doono. Sido kale qofka leh heshiishka gacan koobadka ah waxuu ku sugan yahay khatar guriga looga qaado haddii shirkada guriga ee san u ogalaan in uu kireeyo gacan labaad.

Qofka guriga heeysto ayaa mas'uuliyada saaran tahay

Qofka guriga gacan koobadka ku heeysto waxaa kale oo lagu magacaabaa qofka guriga heeysto. Qofka heeysto guriga waxuu mas'uul ka yahay in uu qofka gacan labaad ku kireeysanaayo in uu dhiibo kirada. Waxaa laga soo celin karaa heshiishka gacan koobaad haddii uu qofka aad guriga ka kireeysay guriga uu san kirada dhiibideed ku toosnaan ama dariska dhibo.

Gacan labaad markaad ku kireeyneeysoo meeqo ayaa ku kireeyn kartaa?

Haddii aad heeysato heshiishka gacanta koobaadka ah ama guri is-kaashi oo aadna guriga ku kireeyn rabto gacan labad, waxaa jiro sharciyo ku saabsan inta lacag aad qaadan kartid. Waxaad xaq u lee dahay in aad lacag ku heshaa kharashka guriga. Haddii uu guriga qalabeeysan yahay waa la aqbali karaa in aad ku darto boqolkiiba 10-15 ee lacagta kirada. Haddii aad adiga kireeysato guri gacan labaad ah oo aad dhiibto in ka badan kirada laf ahaanteda, waxaad aadiga

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

kartaa guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha. Guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha waxuu kuugu caawin karaa in u kuusoo celiyo lacagtaadii. Guryaha iskaashatada ah kuma jiraan. Guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha qiimeyn ayuu ku sameeynaa kiiskasto.

Guri badalid

Haddii aad guri gacan koobaad ah heeysato waxaad xaq u lee dahay in aad badalato guri haddii aad lee jirto sabab la ogalyahay. Sababooyinka la ogalyahay waxaa ka mid ah in aad u baahantahay guri si weeyn, guri ka kiro yar ama guri u si dhow goobta shaqada. Haddii aad dooneeyso in aad badalatid guriga waa in marka hore ee ogalataa shirkada guriga kireneeyso. Haddii aad guriga badalato adigoo laguu ogalaan, waxaa burburi karo heshiishka gacan koobaadka oo guriga sidaas lagaaga soo celiyo. Haddii aad tahay guri kireeyste waxaad xaq uuu lee dahay in aad guriga badalato isla marka aad hesho heshiishka gacan koobaadka.

Heshiishka suuqa madoow

Heshiishka suuqa madoow ayaa lagu magacaabaa heshiishka gacan koobaadka ee la iibiyo ama iibsado. Waa sharci daro in la iibiyo heshiis gacan koobad. Qofka iibiyo heshiish gacan kobaad ah, waxaa lagu xukumi karaa xabsi mudo labo sano ah. Sharci daro ma ahan in la iibsado ama la gato heshiis gacan koobad laakin haddii aad sameeyso khatar weeyn ayaa ku kacooysaa. Shirkada guri kireeyaha waxeey xaq uu lee dahay in ee burburiso heshiishka gacan koobadka ah haddii guriga lagu kireeystay hab sharci daro ah.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Kontroolida guriga

Inta aadan uu guurin guri waxaad guri kireeyaha ka dalban kartaa in aad iska kontaroosho. Mecnaheed waa in guri kireeyaha kontroolaayo haddii ee guriga dhaawacyo lee yahay. Haddii guriga ee ku yaaliin dhaawacyo uu sababay qofkii hore udagnaa, adiga kuma qasbanid in aad kharashka sameeyntooda bixisid.

Ogeysiinta ansax beelid kirada guriga

Haddii aad dooneeyso in aad guri ka guurto waxaad mar kasto xaq uu lee dahay mudada ogeeysiinta ansax beelida guriga. Mudada ogeeysiinta ansax beelida guriga waxeey bilaabaneeysaa marka aad ogeeysiiso guri kireeyaha in aad guureeysid. Inta badan guriyaasha kirada mudadiisa ee ogeeysiinta ansax beelida guriga, waa sadax bilood. Taasi mecnaheed waxeey tahay in aad dhiibeeysid kirada guriga xattaa haddii aad dooneeysid in aad guriga mudo hore ka guurto.

Guri kireeyaha waxuu xaq uu lee yahay in qofka guri kireeystay hehiishkiisa la burburiyo haddii uu san dhoowreen heshiishka. Qofka aan dhoowrin sharciga waxuu ahaan karaa qof aan kirada waqtigeed ku dhiibin ama sameeyay wax aan uu ficneeyn qeeybta uu ka daganyahay guriga ama guriga oo dhan.

Isticmaalka guriga aad degantahay

Guryaha Iswiidan oo dhan waxaa loo dhisay in ay kululaadaan xilliga qaboobaha. Guryuhu waxay u nugul yihiin qoyaanka. Si sahlan ayaa guriga dhaawac ku gaari karaa haddii qab qalad ah loo xanaaneeyo. Haddii aad aragto tuubooyin ama qasabado biyo siideynaya ama tifiq leh, la xiriir mar walba guri kireeyaha. Guriga waxaa ku samayssan marawaxado dibedda u saara hawada suyucday. Sidaas awgeed, waa muhiim in marawxaduhu mar walba furan yihiin.

Meelaha la wadaago

Dhammaan dadka guriga kirada ugu jira ayaa xil ka saaran yahay meelaha ay wada isticmaalaan, sida jaranjarooyinka, qolka dhardhaqida iyo hareeraha guriga. Kharashka lagu nadiifiy, tusaalee ahaan jaranjarooyinka, qeeybaha dhulka hoose iyo kore, waxeey badanaa ku jiraan kirada aad bixiso. Laakiin adiga ayaa ka mas'uul ah in aadan waxba ku daadin

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ama ku tuurin. Waa in aadan marnaba dhigin alaab marinka jaranjarooyinka, waayo waa in u bannaan yihiin dadka doonaya in ay bannaanka u cararaan haddii guriga dab qabto ama wax kale ka dhacaan. Waa in aad raacdaa nidaamka ah in aad qabsato waqtiga dhar-dhaqida oo aadna qolka nadiifisaa marka aad isticmaasho kadib.

Ceeymis guri

Waa muhiim in aad lee dahay ceeymis guri sababto waxaad ku siinaa ceeymiska ilaalin-asaasi. Waxaa jiro shirkadooyin badan oo iibiyo ceeymis guri. Marka aad ooneeyso ceymis waa in aad si gaar ah isku bardhigtaa oo doorataa shrikada kuu haboon . Caymiska gurigu wuxuu lacag ka siinayaa haddii alaab lagaa xado ama kharibmaan, sida daadad ama dab. Caymiska gurigu wuxuu kuu ilaalinaa dhamaan alaabta ku taal guriga. Wuxuu kaloo ilaaliyaa dhamaan dadka ku qoran warqadda caymiska oo deggan guriga. Haddii aad lee dahay gurigaada waxaa ceeymiska guriga ku dhameeystiri kartaa ceeymiska guri is-kaashada ama ceeymiska filada.

Ceeymiska waxuu ka kooban yahay qeeybo kala duwan:

- Difaaca hantida - wuxuu lacag kaa siiyaa alaabta waxyeello kaa gaarto ama lagaa xado.
- Difaaca arrimaha sharciga - wuxuu ka caawinaa bixinta kharashka qareenka haddii aad is dagaashaan qof.
- Difaaca weerarka - wuxuu magdhow ka siiyaa haddii dhaawac kaa soo gaaro sida jirdil ama kufsi.
- Caymiska mas'uuliyadda - wuxuu ka caawina lacag haddii ay waajib kugu noqoto in aad qof magdhow siiso.
- Difaaca safarada ee khuseeyo 45 maalmood gudahood aad dal kale ugu safarto.

Sido kale waxaa jiro ceeymis nuuc kale ah oo ku siinaayo difaac:

- Ceeymiska-khatarooyinka dhamaantod - waxuu ku siinaa difaac sii badan oo loogu tala galay alaabtaada. Waxeey khuseeysaa waxa lagu magacaabo dhacdooyin lama filaan ah, tusaale ahan haddi mobeeylka kaaga dhaco badda.
- Ceeymiska-shilka iyo jirada - waxuu lacag ka siinaaya kharashka kaaga bixi karo booqasho dhakhtar haddii aad ku dhaawacmato shil. Haddii aad naafo ku noqoto, waxaa lagu siin karaa lacag badan hal mar ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Bey'adda, dabiicada iyo dhawrista deegaanka

Dhawrista deegaanku mecnaheed waa in bulshada uu hormarto hab waafaqsan dabiicada. Waa dadka iyo shirkada uu dhaqmaan hab aan waxyeello gaarsiin dabiicada. Barlamaanka ayaa go'aamiyay hadaf bey'adeed ee loogu tala galay dhawrista deegaanka oo ee Iswidhan oo dhan raaceeyso. Bey'adda waa in la ilaaliyaa, taas oo micneheedu tahay in aan lagu siideyn wax waxyeello u geysta dadka iyo in la xafido bad ku noolaha. Isticmaalka xoogga tamarta iyo hantida dabiiciga waa in la xaddidaa oo la kordhiyaa tayadooda si looga hortat handaada badalida jawiga.

Degmooyinka ayaa ka mas'uul ah shaqada gudaha ee bey'adeed. Waxeey tusaale ahaan ku saabsantahay habka degmooyinku wax uga qabanayaan qashinka ama sidii aan tamarta ugu isticmaali lahayn hab wanaagsan. Qof kasto oo Iswiidhan ku nool waxuu mas'uul ka yahay in u noolaado hab uu fiican bey'adda.

Maaraynta qashinka iyo dib u isticmaalida

Sannad walba waxaa Iswiidan la tuuraa qashin badan. Guryuhu waxay tuuraan 4,2 tan oo qashin ah. Tani waxay noqotaa 430 kiilo oo qashin ah calaa qof. Maaraynta qashinka waxaa sannad walba ku baxda lacag badan. In qashinka hab aan wanaagsanayn loo maareeyaa waxay muhiim u tahay bey’adda.

In badan oo ka mid ah qashinka la tuuro dib ayaa loo isticmaali karaa. Habkaas ayaan uu xafideeynaa kheeryraada dabiiciga. Waxaa Iswiidhan ka jiro ku qeexaayo in dhammaan dadka Iswiidan ku nool kala soocaan sqashin. Waxaana dalka ka jiro nidaam loogu tala galay in la raaco oo dib loo isticmaalo sheyga iyo tarmarta ku jirto qashinka.

Agagaarka guryaha waaweyn ee kirada, waxaa ku yaal xarumo lagu kala sooco qashinka.

Mecnaheed waa in aad meesha loogu tala galay ku tuurtaa cuntada la soo reebay, birta, dhalada, balaastigada iyo waraaqadaha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Shirkado badan oo guryaha kireeya waxay kireystayaashooda u qaybiyaan bacooyin gaar ah oo loogu talagalay cuntad soo harto. Cuntada soo harto ee badan waa la ururiyaa oo waxay noqdaan carro.

Waxaa kale oo jiro meelo kale oo aad qashinka geeyn karto:

- **Goobta dib u isticmaalida qasihinka**
  Halkaan waxaad geeyneeysaa baakato, wargeeysyo iyo bateriyaal.
- **Xarumaha bey'adeed**, oo inta badana ku taalo xarumaha bensinka.
  Halkaan waxaad geeyneeysaa qashinka khatarta ku ah bey'adda.
- **Xarunta dib u isticmaalida qashinka**
  Halkaan waxaad geeyneeysaa qashinka iyo waxyaalaha weeyn iyo qashinka khatarta ah, tusaale ahaan kimikada iyo waxyaalaha elegtrooniga ah.

Kala saarida cuntada soo harto

Cuntada la soo reebo waala warshadeeyntaa ayadoo laga dhigaayo carro nafaqo badan leh. Marka aad kala soocdo cuntada soo harto waxaa yaraanaayo qashanka loo baahanyahay in lagubo.

Sawir: Maamulka Wareega Biyaha, magaalada Göteborg

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waxyaalahaan ayaa lagu tirayaa cuntada soo harto oo warshad la marin karo:

Waxa ka soo haro kaluunka, cuntada laga helo xayawaanada bada ku jiro, waxa ka soo haro hilib, qolofka ukunta, cagaarka iyo khudaarta, rootiga, shaaha, kafeega iyo shaandhada kafega, waraaqada nadaafada guriga, ubaxyada, geedaha iyo carrada.

Kala soocdida baakadaha, wargeeysyada iyo batteriyada

Degmo kasto waxaa ku taalo goob loogu tala galay dib u isticmaalida qashinka oo aad geeyn karto tusaale ahaan, baakado, wargeeysyo iyo batteriyaal. Marka aad baakadaha geeyso goobaha dib u isticmaalida qashinka, waa in ee ahadaan kuwo nadiif ah oo qalalan.

Goobaha dib u isticmaalida qashinka waxaa yaalo qeeybo kala duwan oo loogu tala galay:

- wargeeysyo
- waraaqado
- caaga
- biraha
- dhalooyin aan midab laheeyn
- dhalooyin oo midab leh
- bateriyaal

Sawir: Maamulka Wareega Biyaha, magaalada Göteborg

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Wargeeysyo

Marka aan wargeesyo dib loo isticmaalo waxaan noo haraayo tamar badan oo lagu sameeynaayo wargeeysyada cusub. Sababto waraaqadii hore ayaa laga sameeyn karaa wargeeyska cusub.

Waraaqadaha

Waxyaalaha ka sameeysan waraaqadaha tusaale ahaan, kartoomada faaruqa ah, dib ayaa loo isticmaali karaa, waxaana lagu isticmaali karaa si loo sameeyo baakado cusub.

Caaga

Caaga adag iyo khafiifkaba ah dib ayaa loo isticmaali karaa. Haanta loogu tala galay balastigada waxaad ku rideeysaa waxyaalaha ka sameeysan caaga. Waxyaalaha ka sameeysan caaga oo aan baakadasaneeyn, tusaale ahaan buraashka lagu dhaqo alaabta iyo waxyaalaha caruurta ku ciyaaraan, waxaa lagu tiriyaa qashin caadi ah ee meeshaan laguma tuuro.

Biraha

Birta marar badan ayaa dib loogu isticmaali karaa, waxeeyna noo reebeeysaa tamar badan.

Haanta loogu tala galay birta waxaa ku rideeysaa wayaalaha ka kooban birta iyo aluumiiniyam.

Haantaas waxaa kuma rideeysid waxyaalo-bireed oo leh midab ama koolo - waa qashin khatar ah, waxaana geeyneeysaa xarunta bey'adda. Sido kale meeshaan kuma rideeysid gasaca-buufinta - waa qashin khatar ah.

Dhalooyinka

Sido kale dhalooyinka marar badan ayaa dib loo isticmaali karaa Haddii dhalooyinka dib loo isticmaalo waxeey noo reebeeysaa tamar badan. Ku dhawaad boqolkiiba 40 dhalooyinka dib loo isticmalo waxaa laga sameeyo dhalooyin cusub. Dhalada midabka leh iyo mida aan midabka la heeyn kala sooc.

Qashinka soo haro

Qashinka aan lagu kala sooci karin haamankaas, waxa ku rideeysaa haanta caadiga ah ee ku jirto qolka qashinka. Waxaa lagu gubaa xarun weeyn ee loogu tala galay gubida qashinka. Markii qashinka soo haray dab lagu shido,

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

kuleelka ka soo baxo waa la isticmaalaa. Waxaa tusaale ahaan loo isticmaali karaa kuleelinta guriyaasha. Waxaa lagu magacaabaa kuleelka buuraleeyda (fjällvärme).

Waxyaalaha elegtroonigida ah

El-avfall ayaa loo yaqaan qashinka elegtronigada ka sameeysan. Qashinka elegtrooniyada ka sameeysan oo dhan waxaa lageeeyaa xarunta dib u isticmaalida. Waxaa lagu tiriyaa nalalka, nalka nuuca dhaadheer iyo wax kasto oo leh fiilo koronto ama battari. Batteriga waa laga bixiyaa oo meel gooni ah ayaa lagu ridaa.

Qashinka weeyn

Qashinka weeyn waxuu ahaan karaa tusaale ahaan qalabeeynta guriga ee duqa ah ama baaskiilada aan shaqeeneeyn. Haddii aad degantahay guri kiro, cidda guriga leh ayaa ka caawin karto dayactiriada qashinka weeyn. Haddii kale waxaad geeyneeysaa xarunta dib u isticmaalida.

Qashinka khatarta ah

Qashinka khatarta ah waxeey ahaan karaa waxyaalaha sunta ku jirto, waxyaalaha qarxo, waxyaalaha dab ka kicin karo ama kiimikada. Qashinka khatarta ah haddii uu yahay xattaa mid aan badneeyn waxuu sababi karaa dhaawac. Sidaas darteed ayee muhiim uu tahay in aan qashinka khatarta lagu dhexdarin qashinka caadiga ah. Qashinka khatarta ah waxaa la geeynaa xarunta bey'adda ama xarunta dib u isticmaalida ama gaarida gaarka ah ee qaado qashinka khatara ah.

Masawirqaade: Bo Kågerud

Ku dhawaad dadka dhamaantood waxaa guriga uu yaalo qashin khatar ah. Waxeey ahaan kartaa maaddo xooggan oo mile ah, dareere dab lagu shido ama qalabka digida dabka. Waxaa tusaalooyin kale ah Batteriga gaariga, saliida gaariga (spillolja), rinjiga, kloorinka, koolada iyo nalka nuuca dhaadheer.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Daawooyinka soo haro ee la tuurayo waxaa loo geeynaa Farmashiyaha.

Masawirqaade: Christer Ehrling

Qashinka khatarta tusaale ahaan waa:

Batariga baabuurta, haraaga saliidda, rinjiga iyo koolada soo harto, kaloorinka, nalalka caadiga ah iyo nalalka dhadheer, maado mile ah, maadada rinjiga lagu qaso, nooc saliida ka mid ah, gaaska la shito iyo maadada xooggan oo mile ah, batteriyaal la karkeeyn karo iyo qalab qaarkood oo loo adeegsado ka ridida baruurta iyo nadaafada.

Qashinka oo dibada lagu daadiyo

Dhibaato weyni waxay ka jirtaa qashinka lagu tuuro dibada, ayadoo taasi aan la ogaleeyn. Bii'ada ayey dhaawac u geysaneysaa, malaayiin karoon ayaa sannad walba ku baxa nadiifinta iyo ka qaadida qashinka.

Biyaha iyo bullaacadaha

Iswiidhan waa dal biyo badan. Biyaha ka soo shubma tubooyinka waa kuwo tayo wanaagsan. Inta badana waa ay ka fiican yihiin biyaha dhalooyinka lagu iibiyo. Biyaha qaboow lee ayaa nadiif ah. Biyaha kulul waxaa wasakh ka soo raaci kartaa dhuumaha ay soo raacaan. Sidaas awgeed, ha cabbin biyaha kulul, cuntadana si toos ah ha ugu karsan. Biyaha bullaacaduhu waxay tagaan xarun lagu nadiifiyo. Halkaas ayaa biyaha lagu nadiifiya, kadibna lagu sii daayaa badda. Laakiin biyaha dhamaantood lama wada nadiifin karo oo waxaa adag in laga sooco waxyaalaha sunta ah. Sidaas darteed, waa in aan dhammaanteen ka taxadarnaa waxyaalaha aan bullaacadda raacsiineyno.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Biyaha qaboow ee qasabada biyaha lee ayaa lagu tiriyaa lbiyo la cabo karo.

Masawirqaade: Hanna Sjöstedt

Maxaa bullaacadaha la raacsiin karaa?

Waxaa musqusha la raacsiin kartaa waraaqada musqusha iyo waxyaalaha jirka qofka ka soo baxa oo lee. Waraaqada musqushu waa kuwo loogu talagalay oo biyaha ku milmi kara. Waraaqadaha kale oo ay ka mid yihiin waraaqadaha afka lagu tirtirto, waraaqadaha qoyaanka leh iyo kuwa lagu diifsado waxay sababi karaan bullaacadaha oo istaago. Sido kale dhibaato ayee uu keeni karaan xarunta nadaafida biyaha.

Si aad wixii sun ah uga ilaaliso bullaacadaha, waxaad soo iibsaan kartaa waxyaalaha bey'adda ama deegaanka u roon. Tusaale ahaan waxaa jiro oomooyin iyo daawada alaab dhaqida ee leh calaamada Svanen (shimbir biyeed oo cad) Bra miljöval (Doorashada fiican ee bey'added). Marnaba daawo ha ku tuurin bullaacadaha ama qashinka. Daawada aadan u baahneyn waa in aad geeysaa farmashiye. Farmashiyaha waxaa laga hela bacooyin gaar ah oo loogu tala galay in lagu tuuro daawooyin.

Tamar

Dhamaan tamarta iyo korantada aan isticmaalno waxeey sameeyn ku yeelataa bey'adda. Tamar badan ayaa ku baxdo gaadiidka, kululeeynta dhismayaasha iyo warshadaha. Inta badan tamara waxaa laga dhaliyaa saliid, gaas ama dhuxul. Taasna uma fiicno bey'adda. Si loo yareeyo isbedelka jawiga, waxaan uu baahanahay in aan yareeyno isticmaalida tamarta oo aan dooran tamarta laga dhaliyo biyaha, dabeesha iyo qoraxda oo uu fiican bey'adda.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Si aad uga qeeyb qaadato yareeynta isticmaalida tamarta waxaad raaci kartaa gaadiidka ka dhaxeeyo dadweeynaha. Mecnaheed waa in aad qaadato tareenka kor iyo hoos maro ama bas inta aad qaadan laheeyd gaari. Sido kale waxaad dooran kartaa in aad raacdo tareen badalka diyaarada. Sido kale weey fiicantahay in aad ku fakarto waxa aad ka gadeeyneeysid dukaanka. Waxaad iibsan kartaa alaab lagu sameeyay meesha degantahay agagaarkeed. Sido kale waxaad dooran kartaa inaad yareeyso cunida hilibka maadama soo-saarida hilibka ee tahay mid tamar badan ku baxdo. Sido kale waxaad isticmaalida ku yareeyn kartaa gurigaada.

Dhaqaaleeyso tamarta gurigaada

Tamarta gurigaada waxaad ku dhaqaaleeysan kartaa tusaale ahaan, in aada hordhigin alaab qalabka guriga kuleeliyo. Si ka sahlan ayuu kuleelka markaas ukala gaara qolka. Qalabka korontada badan weey shidan yihiin. Waxad tamar badan ku dhaqaaleeyn kartaa haddii aad markasto damiso qalabka elegtrooniga. Sido kale tamarta waxaad ku dhaqaaleeysan kartaa marka aad cunto karineeyso in aad dabool saarto digsiga ama biyo-kuleeliyaha.

Sido kale waxaad isticmaasha nalalka-tamarta yar ama nalalka dami marka aad guriga ka baxeeysid.

Korontadaada xagee ka timaada?

Tamarta korontada ee Iswidhan badankeed waxeey ka timaada xarunta korantada looga dhaliyo biyaha iyo wershada korontada. Xarunta korontada looga dhaliyo biyaha waa meel korontada looga dhaliyo meelaha biyaha badan ee Iswiidhan ku yaalo. Iswiidhan waxaa ku taalo sadax wershado koronto oo hada shaeeyo, marka isku geeyo waxeey wada lee yihiin toban meelo ee kala jajabka bu'da atamyada farsamo ahaan looga faa'ideysto. Wershadaha korontada waxeey daboolaan baahida korontada Iswiidhan barkeeda in ka badan. In yar oo ka mid ah korontada Iswiidhan waxaa laga dhaliyaa qoray-shidka, saliida iyo gaaska. Qoray-shidka waa tusaale ahaan xaabo ama geedo. Tamarta koronta, boqolkiiba tobban, waxaa laga dhaliyaa xarumaha dabeeysha korontada looga dhaliyo. Xarunta korontada looga dhaliyo biyaha iyo xarumaha korontada dabaysha laga dhaliyo ayaa bey'adda ugu roon sababto tamarta waxeey ka imaaneeyso waxyaalo aan dhamaaneeyn.

Xukuumadda Iswiidhan waxey hiigsaneysaa gool ah iney isticmaasho enerji boqol kiiba 100 la cusbooneysiin karo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Doorasha shirkada korontada

Lacag badan ayaa ku dhaqaaleeysan kartaa inaad iska bedeshid shirkada-korontada. Haddii aad degantahay guri dabaq ku yaalo, waxaad sanadkiiba dhaqaaleeysan kartaa in u dhaxeeyso 400 ilaa 1 000 karoon. Haddii aad degantahay guri weeyn waxaa dhaqaaleeysan kartaa kumanaan karoon. Waad iska badeli kartaa shirkadda korontada ee gurigaaga.

Doorashada fiican ee bey'added (Miljömärkningarna Bra Miljöval iyo Svanen)

Elpriskollen - isku bardhig sicirka korontada iyo shu-rudahooda

Bogga internetka Elpriskollen waxaad ka heleeysaa qiimaha koronto iyo shuuradaha shirkadooyinka korontada ee Iswiidhan. Waxaad gashaa bogga internetka **www.elpriskollen.se** si aad u aragto shirkada adiga kuugu haboon.

Waa sahlan tahay in aad badalato shirkad-koronto. Xaaladaha badankood waxaa ku filaan hal mar oo aad telefoon ku wacdo. Laakin waa in aad fiirisaa nuuca heshiishka aad heeysato sababto qaali ayee noqon kartaa haddii la badalanaayo muddo dhexbartankeed.

Heshiyaada-korontada ee kala duwan

Qiimaha korontada go'an:

Qiimaha korontadu waa mid go'an oo muddo loo qabtay. Heshiiska noocaan ahi waa uu wanaagsanaan karaa maadaama aad ka dhawrsan tahay haddii qiimaha korontadu kor u kaco. Laakiinse qiime jaban ma heli doontid haddii qiimaha korontadu hoos u dhaco.

Qiime koronto oo isbeddela:

Qiimaha korontadu wuxuu isla beddelaa suuqa ganacsiga. Qiime jaban ayaad ku heleeysaa marka qiimaha korontadu hoos u dhaco. Qiimaha korontadu kor ayuu u kici karaa ama hoos ayuu u dhici karaa inta heshiiska lagu jiro.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xarunta korontada dabaysha laga dhaliyo

Masawirqaade: Colourbox

Qiime koronto oo aan la goyn:

Qiime toos ayaad heleysaa haddii aadan adigu si kale dooran. Qiimuhu waa mid isbeddela qiyaas saddex goor sannadkii. Qiimaha aan la goyn badanaaba waa u ka qaalisan yahay qiimaha go'an iyo kan isbeddela.

Korontada leh calaamadda dabiicada (korontada cagaaran):

Korontada leh calaamadda dabeecadda micneheedu waxa weeye in korontada aad lacagta ka bixineyso laga dhaliyay qeeyb dabiicada u wanaagsan, tusaale ahaan waa korontada laga dhaliyo biyaha ama dabaysha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Habka ay degmadaadu u shaqayso

Dadka Iswiidhan dhamaantood waxeey deganyihiin degmo Dalka waxaa ku taalo 290 degmo. Degmooyinka dalka Iswiidan iyagaa go'aamiya inta canshuur ay dadka ku nooli bixinayaan iyo waxa lacagtaas loo isticmaalayo. Waxaa lagu magacaabaa ismaamulka dowladaha hoose.

Guddi waa koox siyaasiyiin ku jiraan oo degmada ugu qaabbilsan arrimo gaar ah, tusaale ahaan iskuulada. Qaybaha kale waxaa ka mid ah xannaanada carruurta, daryeelka waayeelka, adeega bulshada, gaadiidka, bey'adda, hawlaha xilliga firaaqada iyo dhaqanka.

Guddiga wuxuu ka kooban yahay siyaasiyiin badanaaba shaqeeya waqtigooda firaaqada. Taas micneheedu waa in xubinta guddiga ka shaqeeyaan iyagoo ku dhinac wada shaqo kale ama waxbarasho. Guddiyadu waxay helaan lacago kala duwan. Lacagta ay helayaana waxay ku xiran tahay hadba miisaaniyadda eey degmadu go'aamiso. Guddi waliba wuxuu leeyahay xafiis maamuleed. Waxaa halkaa ka shaqeeya shaqaale-dowladeed oo ka shaqeeyo qorsheeynta iyo hirgeliya go'aamada guddiga.

Halkaan hoose ayaa ka akhrisan kartaa arrimaha ee degmadooyinka mas'uul ka yihiin:

Xannaanada carruurta

Goobaha xannaanad carruurta waa magaca ee wada waadagaan meelaha caruurta lagu barbaaro. Goobaha xannaanad carruurta waxaa ka mid ah, sidaa dugsiyada xanaanada, guriga xannaanada carruurta iyo dugsiga xilli firaaqaha.

Masawirqaade: Colourbox

Dhamaan caruurta joogo Iswiidhan, marka ee gaaran 6 sano, waxeey xaq uu lee yihiin in ee dhigteen fasalka-dugsiga barbaarinta.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haddii aad waxbarato, shaqayso ama shaqo raadineyso, waxaad xaq u leedahay in aad cunugaaga geyso dugsiga barbaarinta ee xaafaddaada Dugsiga barbaarinta caruurta waxaa loogu tala galay caruurta uu da'doodu tahay hal ilaa shan sano.

Dugsiyada hoose-dhexe

Degmooyinka dhamaantood waxaa ku yaal dugsiga hoose-dhexe oo loogu talagalay carruurta da'doodu u dhexeyso lix ilaa 16 sano. Waxaa kaloo halkaa ka jiri kara dugsiyo madaxbannaan iyo kuwo gaar loo leeyahay. Haddii la dhigta dugsi gaar loo leeyahay waxaa la bixiyaa khidmad. Dugsiyada dowladaa iyo kuwa madaxabannaan, waxaa lagu maalgeliyaa canshuurta. Sanadka u canugu buuxsado lix sano ayuu bilaabi kara fasalka-dugsiga barbaarinta. Waad dooran kartaa haddii aad dooneysid in canuugaadu bilaabo fasalka-dugsiga barbaarinta. Carruurta dalka Iswiidan badankood waa ay dhigtaan. Sanadka u canugu buuxsado todobo sano waa khasab in iskuul dhigto. Taasi waxaa lagu magacaabaa waajibka iskuul dhigashada. Dugsiyada dowladda iyo kuwa madaxabannaanba waa lacag la'aan. Dugsiyada ku yaal xaafaddaada waxaad ka heleysaa shabakadda maamulka degmada.

Daryeelka waayeelka

Dadka waayeelka waxeey inta badana uu baahan yihin in laga caawiyo hoowlaha maalmeedka. Sharciga dalka Iswiidhan waxuu dhigaa in waayeelka xaq uu lee yiihin in bulshada ee ka helaan taagero iyo caawinaad.

Dad badan oo waayeel ah waxeey rabaan in ee sii dagnaadaan gurigooda. Degmada waxeey ku caawin kartaa daryeel iyo adeeg keenaayo in qofka waayeelka ah uu sii deganaado gurigiisa. Waxaa taasi lagu magacaabaa adeega guriga. Adeega guriga waxaa laga dalbadaa degmadaada. Lacagta khidmadda adeega guriga weey kala duwantahay hadba degmada aad degantahay. Sido kale waxaa la heli karaa qalab caawimeed ama wax yaalo kale oo sahlaayo in guriga la sii degnaado. Taasi, tusaale ahaan waxeey noqon kartaa qalabka ku socodka ee la fadhiisto, qeeybta qubeeyska oo la weeyneeyo ama catabada hoos loo dhigo.

Qofka waayeelka ah haddii usii degnaan karin guriga, waxuu uguuri karaa guri waayeelka loogu habooneeysiiyay. Waxaa jiro guryaha waayeeled oo kala duwan oo waayelka ka degi

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Susanne Kronholm, Johnér

karo qeeyb gaar ah. Guryaha waxaa joogo shaqaale qofka waayelka ku caawin karo daryeelka iyo adeega, tusaale ahaan cunto iyo nadaafada.

Xafiiska adeega bulshada/xafiiska bulshada

Sida meelo badan oo adunka ka mid ah, waalidka Iswiidhan ayey saaran tahay mas'uuliyadda xanaanada iyo daryeelida carruurtooda iyo dhallinyaradooda. Laakin haddii ee taasi si fiican uu shaqeeyn, mas'uuliyada badankeeda waxeey markaas saaran tahay degmada. Xafiiska adeega bulshada waxuu u caawiyaa caruurta iyo reeraha habab kala duwan uu dhibaateeysan. Waxeey noqon karaan reero aan heeysan lacag ku filan. Waxeey ahaan karaan dad aan heeysan meel ee degaan. Ama dad qabo dhibaato la xariirto maandooriyo iyo khamaro. Ama dad khatar ugu jiro in la jirdilo oo la kufsado. Caawimaadda uu dhiibaayo xafiiska adeega bulshada waxeey ka koobnaan kartaa wada-hadal, wax barasho waalidka la siiyo, qof xiriiriye ah oo loo qabto dhalinyarada ama reerka oo dhan. Qof xaririye ah waa sidii saaxiib ama qaraabo dheeraad ah oo lala hadlo ama wax farxad gelin leh lala sameeyo. Haddii xafiiska adeega bulshada soo gaarto dacwo ku saabsan in canug si xun guriga loogula dhaqmo. Waxaa xafiiska adeega bulshada waajib uga saaran yahay in uu baaritaan ku saameeyo xaalada uu canuga ku suganyahay.

Haddii uu canuga ku dhex jiro dhibaato badan, xafiiska adeega bulshada waxuu go'aan ku gaari karaa in canuga laga qaado waalidkiisa.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xafiiska adeega bulshada waxaad ka heli kartaa:

- Talo iyo caawinaad la siiyo dhalinyarada iyo reerka caruurta leh.
- Talo iyo caawinaad haddii aad dhibaato ku qabto wax aad si xun u isticmaasho.
- Talo iyo caawinaad ku saabsan shaqo iyo waxbarasho.
- Kaalmo dhaqaale.

Kaalmo dhaqaale

Kaalmo dhaqaale waa caawimaad aad ka dalban kartid xafiiska bulshada ee degmadaada haddii eey dhibaato xaga masruufka ah ku heysato. Waxaa kaalmada dhaqaale u isticmaaleysaa maareynta masruufkaaga. waxaana la dhahaa kaalmada masruufka. Waxaa la heli karaa kaalmo dhaqaale oo ka baxsan tan masruufka, sida qarashka xanaanada carruurta, dhakhtarka, daawada iyo daryeelka ilkaha.

Kaalmada masruufka waxey ka koobantahay lacag eey dowladda go'aamiso waana isku mid dalka oo dhan, waana qarashka raashinka iyo guriga sida kirada, korontada iyo ceymiska guriga. Lacagta kaalmada masruufka waxey noqoneysaa inta soo harto marka laga jaro dakhliga guriga soo galo.

Kaalmada masruufka waxaa la ogolaan karaa haddii uu dhaqaale meel kale oo laga keeno eysan jirin. Haddii qofka dalbanayo kaalmada masruufka uu shaqeyn karo waa inuu shaqeeyaa ama shaqo raadsadaa. Waxaa jira waajib dhigaya inuu qofka ka qeyb galo howlo u sahlayo inuu shaqo helo kuwaasoo uu xafiiska bulshada qabanqaabiyo. Haddii uusan qofka howlahaas ka qeyb qaadaneynin lama aqbalayo dalabkiisa. Haddii eey lacag bangiga kuu taal ama aad leedahay wax qiimo badan joogo, tusaale ahaan baabuur, markaas xaq uma lihid kaalmo dhaqaale.

Waxaad warbixin dheeraad ah ka akhrisan kartaa ciwaanka ceymisyada bulshada ee cutubka 3.

Xilliga firaaqada iyo dhaqanka

Degmooyinka Iswiidhan waxeey adeegyo kala duwan uu fidiyaan arimaha xilliga firaaqada iyo dhaqanka. Degmooyinka waxeey lee yihiin maktabad oo bilaash looga soo amaahan karo buugaag. Waxeey kale oo jiro dugsiyo dhaqameed oo caruurta iyo dhalinyarada in ee ku baran karaan ku ciyaarida

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

qalabka heesaha ee kala duwan, masawiraada ama jillidda riwaayadaha ayadoo looga qaadaayo kharash yar. Sido kale degmooyinka inta badana waxeey taageeraan ururada madaxa bannaan ee iskood wax u qabsado.

Rugta buugaagta

Degmooyinka iswiidhishka dhamantood waxeey lee yihiin maktabad loogu tala galay dadka degan. Mida ugu weeyn badanaa waxeey ku taala bartamaha, waxaana lagu magacaabaa maktabada-magalaada.

Degmooyinka weeyn waxaa ku olaan karo maktabad yar oo degmada uga taalo qeeybo kala duwan. Rugta buugaagta waxaa ka soo amaahan kartaa buugaag, ku akhrisan kartaa wargeeysyo, ku dhageeysan kartaa heeso iyo ku sticmaali kartaa kombiyuutar. Halkaas waxaa yaalo buugaag iyo wargeeysyo ku qoran luuqado kala duwan. Maktabooyinka qaarkood waxaa lagu qabtaa tababar-luqadeed iyo caawinaadda layliga.

Bilaash ayaa ku amaahaneeysaa bugaag, wargeeysyo iyo cajaladaha wareega ee cd:ga. Si aad uu amaahato waxaad uu baahan tahay in aad heeysato kaarka-maktabada (kaarka-amaahda). Kaarka waxaad ku heleeysaa.

Xafiiska macaamiisha

Degmooyinka badankood waxa ku yaalo xafiiska macaamiisha. Waxaad halkaas tusaale ahaan ka heli kartaa caawinaad haddii aad soo iibsatay shey ee wax ka qaldan yihiin oo aadna ku qanacsaneeyn. Xafiiska macaamiisha

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

waxaad ku ogaaneysaa xuquuqdaada aad lee dahay iyo waajibaadka ku saaran iyo waxa aad sameeyneeysid si aad uu celiso badeecada ee wax ka qaladan yihiin. Warbixin dheeraad ah ka akhriso bogga internetka **www.hallakonsument.se** ama wac **0771-525 525**.

La xariirka hey'addo dowladeed

Hey'addaha dowladeed ee Iswiidhan habab kala duwan ayaa uu la xariiri kartaa. Haddii aad qabto su'aalo sahlan waxaa ugu fiican in aad isticmaasho bogga internetka ee hey'adda. Waa badan yihiin hey'addaha dowladeed ee luuqado kala duwan warbixin ku hayo. Xafiiska ceeymiska bulshada, tusaale ahaan, waxuu warbixin ku hayaa 22 luuqad ee uu ka mid yahay af carabi, af soomaaliga, af faarisiga iyo afka sorani. Sido kale waxaad tagi kartaa xafiiska hey'adda dowladeed.

Xaqqa helida turjumaanka

Haddii aad afka iswiidhishka aada fahmeen, waxaad xaq u lee dahay turjumaan. Waxaad xaq uu lee dahay in turjumaan laguugu balamiyo xafiiska shaqada, xafiiska ceeymiska bulshada, xafiiska adeega bulshada iyo isbitaalada. Marka aad balanta sameeysaneeyso waa in aad ka waramtaa in aad turjumaan ubaahantahay.

Waxaad xaq uu lee dahay turjumaan.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Maaraaynta dhaqaalaha

Bangiga, koontada iyo kaarka bangiga

Dadka badankood waxeey lee yihiin hal koonto i iyo hal kaar-bangi. Kaarka bangiga waxaad soo baxsan kartaa lacagta koontada kuugu jirto. Kaarka bangiga waxaad galineeysaa baankoomaatka. Sido kale kaarka waxaad isticmaali kartaa marka aad ka adeegato dukaan. Si aad u hesho kaar bangi iyo koonto waa in aad la hadashaa bangiga.

Waxaa jiro kaarar kala duwan:

- **Kaarka bangiga** - waxaa loo isticmali karaa si lacag looga soo saarto baankoomaatka. Sido kale kaarka wax ayaa ku bixin karaa. Lacagta ti toos ah ayaa looga jiidanaa koontada.
- **Kaarka lacag-bixinta** - wax ayaa ku bixin kartaa. Lacagta toos looga ma jiidanaayo koontada. Badalkeeda bishii hal mar ayaa lagu siidiraa kharashka. Inta badanaa kaarka lacag-bixinta waa ka qaalisan yahay.
- **Kaarka deeynta** - waa kaar lacag ku deynsan karo. Marka aad kaarka deeynta wax ku bixiso, lacagtaasi waa lacag bangiga kuugu lahaanayo. Marka aad kaarka deeynta lacag ka isticmaasho, inta badana waxaa lagu saaranaa ribo sareeyso.

Dadka badankood waxeey bangiga lacag ka amaahdaan haddii ee gadanaayaan guri ama gaari. Si aad bangiga lacag uga deeynsato waa in aad lee dahay dakhli xasillan.

Kharashyada lagu bixiyo internetka ama toos looga jiito koontada

Si aad kharashka uga bixiso internetka oo aad internetka ka aragtid inta kuugu jirto koontada waa in aad marka hore uu tagtaa bangigaada. Halkaas ayaad ka heleeysaa warbixin ku saabsan sida aad uu sameeyn laheeyd.

Habka lacagta toos looga jiito koontada mecnaheed waa in lacagta kharashyada soo laab-laabto bil kasto laga jiito koontadaada.

BankID waa waraaq aqoonsi oo elektaroonig ah waana hab fudud aad aqoonsigaada u tusi kartid marka aad tusaale ahaan heshiis galeysid iyo marka aad internetka ka saxiixeysid inaad lacag dhiibeysid. Saxiixa elektaroonigga

Laga keenay: BankID.com

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ah ee laga sameeyo BankID ga waxuu la mid yahay saxiixa caadiga ah ee aad gacanta aad ku saxiixdid isku sharci ayeyna hoos yimaadaan. Si aad u sameysatid BankID waxaad u baahantahay tobanka nambar ee iswiidhishka ah. Bangiyada ayaa dadka u sameeya BankID.

Nambarka sirta ee BankID- gaaga waa mid adiga kuu gaar ah. Waligaa qof ha isaga sheegin nambarkaaga sirta ah. Ha galin BankID-gaaga haddii taleefanka ama baraha bulshada lagaala soo xiriiro. Waxaa qatar ugu sugnaan kartaa in lagu siro.

Lacag u deynso qalabeeynta guriga iyo waxyaabaha la xiriira

Haddii eey degmo ku qaadato eey ku qaabisho qaxooti ahaan ama inaad la qaraabo tahay qof qaxooti ahaan degmadaas ku joogay, markaas waxaad xaq u leedahay lacag deyn ah oo laga dalbado hey'adda waxbarashada CSN (Centrala Studiestödsnämnden) si aad alaab iyo waxyaabaha gurigaaga u baahanyahay aad ugu gadato. Deeynta qalabeeynta guriga waa deeyn la siiyo soo galooytiga qaxootiga dhawaan dalka yimid. Deeyntaas waxaa loo siiyaa si markaasi guriga loogu gato qalab iyo alaab.

Haddii aad dooneeyso in aad codsato deeynta qalabeeynta guriga waxaad la hadleeysaa gacanyarahaada xafiiska degmada ama gacanyarahaada u qaabilsan taabo gelinta ee joogo xafiiska shaqada. Si wada jir ah ayaad waxaa u buuxineysaan codsiga kadibna waxaad u direysaan CSN. Codsigaada waa in la diraa laba sano gudahood laga billaabo markaad degmada usoo guurtay.

Deeynta qalabeeynta guriga waa lacag deeyn ah. Taasi mecnaheedu waa in aad u celineysid CSN iyada oo ribo saarantahay. Deentaas waad dhiibeysaa haddii aad xattaa Iswiidhan ka guurto. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan deeynta qalabeeynta guriga ayadoo ku qoran luqado kala duwan, ka akhriso bogga internetka CSN:
www.csn.se/hemutrustningslan

Liiska bixinwaaga deynta

Haddii aadan kharshka iyo deeymaha lagu lee yahay ku bixin waqtigood, waxaa lagu soo diraa waraaqad xasuusin ah. Haddii aad markaasi lacagta sii bixin, waxaa arinkaada loo sii gudbiinaa shirkad lacagaha soo aruuriso. Haddi aadan lacagtaas wali uu dirin shirkada lacagaha soo aruurineeyso,

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

waxeey arintaada uu gudbeeysaa Hey'adda qaan-ururinta, waxaana laguuga daraa liiska bixinwaaga deeynta.

Ku jirida liiskaas waxeey astaan uu tahay in aadan si haboon u gudin lacagtii lagu lahaa. Taasi arimo weeyn oo badan ayee noloshaada ka taabaneeysaa. Mecnaheed waxeey ahaan kartaa in ee kuugu adkaato helid deeyn, in aad guri kireeysato, in aad shaqo hesho ama telefoon rukumasho ah.

Waxaa jiro shirkado ka shaqeeyo in ee dhiibaan warbixinta dhaqaalaha qofka ama shirkada. Shirkadahaas waxaa lagu magacaabaa shirkadaha ka warbixinta deeynta. Haddii aad tusaale ahaan dooneeyso in aad soo qaadato telefoonka gacanta oo aad iska yar-yareysid kharashkiisa, waxuu iibiyaha la xariira shirkada ka warbixinta deeynta. Ayagaa waa wargalinaayo haddii aad ku jirto liiska bixiwaaga deeynta. Liiska bixiwaawga waxuu qofka ku jiraa sadax sano, shirkadahana shan sano.

Hey'adda qaan-ururinta

Hey'adda qaan-ururinta badanaa waxaa loo yaqaan Kronofogden. Hey'adda qaan-ururinta waxeey soo ururisaa deeymanka aan la bixin. Haddii aad qof lacag ku lee dahay, Hey'adda qaan-ururinta ayaa ka caawin karto soo celinta lacagta. Hey'adda qaan-ururinta waxeey kale oo ka shaqeeysaa sifeeynta deeymaha. Taasi mecnaheed waa in Hey'adda qaan-ururinta qofka deeymo weeyn lagu lee yahay ku caawiyo sida uu habeeyn lahaa dhaqaalihiisa.

Ammaanka

Si aad Iswiidhan ugu noolaata nabadgelyo, waxaa jiro hey'addo dowladeed oo ka shaqeeyo dhanka ammaanka. Sido kale waxaa jiro waxyaalo aad iskii ugu qaban kartid amamankaada.

Gurmadka degdegga

Gurmadka degdegga waxuu damiyaya dababka. Waxuu kale oo uu gurmadaa shilalka ka dhaco berriga iyo badda. Gurmadka degdegga waxuu oo kale uu ka shaqeeyaa ka hortaga dababka. Waxeey tusaale ahaan ka waramaan habka ee uu shaqeeyan qalabka dab-ka-digaha iyo dab-damiska. Gurmadka degdegga waxaa kaloo lagu magacaabaa dab-damiska, waxeeyna ka tirsan yihiin degmada.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sidaan sameey haddii uu dab kaco

- **Badbaadinta** - Badbaadi dadka ku sugan khatar, laakin nolshaada khatar ha galin. Xusuusnoow in qiiqa-dabka uu sun yahay. Dhulka ku gurguuro si aad dibedda ugu baxdo. Xir daaqadaha iyo albaabada.
- **U dig** - u dig dadka khatar uga sugan dabka.
- **Qayla-dhaan dir** - Riix digniinta dabka haddii uu jiro. Waxaana 112 ka wacdaa meel aamin ah. U tag shaqaalaha gurmadka isla marka ee meesha yimaadaan.
- **Dami** - Haddii aad heeysato qalabka dab-daminta waa ku buufin kartaa. Ku buufi dab-damiska aasaaska dabka - ha ku buufin dabka dushiisa.

Haddii aad dab kacay waxaa ugu muhiimsan in aad wacdo 112! Waxaad uga waremeeysaa waxa dhacay iyo khasaaraha ku muuqdo. Sido kale waa in aad uga waramtaa meesha gurmadka looga baahhan yahay iyo qofka aad adigu tahay.

Laga keenay: SOSalarm.se

Booliska

Haddii aad dooneeyso in aad booliska wax weeydiiso ama ka waregeliso fal dembi waxaad wacdaa 114 14. Iswiidhan oo dhan lambarkaas ayaa laga isticmilaa. Haddiise ay halis degdeg ah dhacdo u dir qayla-dhaan lambarka 112. Waxaad wacaysaa 112, haddii aad aragto fal dembi, qof dhaawacmay oo caawimaad u baahan ama meel dab qabsaday.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ammaanka gaadiidka

Hey'adda gaadiidka waa Hey'adda dowladeed ee ka mas'ul ah ammaanka gaadiidka. Hadafka ee hey'adaha Iswiidhan lee yihiin waxa uu yahay in uu san qof ku dhiman ama ku dhaawacmin gaadiidka. Waxaa arintaas qeeyb muhiim ka ah in qofa gaariga wado ku sucdo xawaaro saxsan, uu san sakhraansaneeyn iyo dhamaan in la wada isticmaalo qalabyada difaaca. Waa sharci in dhammaan dadka baabuur socda ku dhexjira ay xirtaan suunka baabuurka. Caruurta waxay u baahan yihiin difaac gaar ah oo ay ka mid yihiin kursiga carruurta. Waxaa kaloo sharci ah in dhammaan caruurta da'doodu ka yar tahay 15 sano ay qaataan koofiyadda madaxa mar walba oo ay baskiil wataan.

Dalka Iswiidan waxaa baskiilka iyo gawaaridaba lagu wadaa waddada dhinaceeda midigta. Isticmaal waddada baskiilka haddii ay jirto. Adigu waxaad ku soconeysaa waddada lagu lugeeyo ama marshabiyeediga haddii ay jiraan. Waddadana waxaad sido kale uga socon kartaa dhinaca bidixda. Marka aad dooneyso in aad waddada ama jidka ka gudubto, isticmaal isgoys calaamadaysan oo loogu talagalay. Baabuurta iyo baskiilada waa in ee istaagaan eey adiga kusii daayaan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su'aalaha wadahadalka cutubka 2

Waa kuwee dadka laga tirada badan yahay oo ka jira dalkaada ama dalal kale oo aad adiga garaneeysid?

Sidee uu aragtaa xaqqa dhexjooga dabiicadda?

Waa kuwee hababka kale duwan ee aad guri ku heli kartid?

Maxaa fiican in aad ku fakarto marka aad isticmaaleeysid meelaha la wadaago ee guriga?

Maxay muhiim uu tahay in aan la tuurin, ama la sii daaya ama biiyo lagu raaciyo qashinka qatarta ah?

Maxaa ka mid hoowlaha degmadeed oo aad xariir la yeelatay?

Maxaa dhacaayo haddii laguugu daro liiska deeymaha?

Nambarkee ayaad waceysaa markeey kula soo gudboonaadaan xaalad degdeg ah, sida guri gubanaya oo kale?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland



Sawir: Nixon Johansen Cáceres, Johnér

3. In qofka isku filnaado iyo horumar laga gaaro Iswiidhan

Tusmada

Suuqa shaqada Iswiidhan
In cid loo shaqeeyo
In shaqo la raadsado
In aad furato shirkad gaar ah
Ceeymiska shaqo la'anta
In canshuur la dhiibo
Diiwaangaliska dadweeynaha
Ceeymiska bulshada ee guud
Ku noolashada itaaldarrada
Waxbarashada dadka waaweeyn
Waktiyada firaaqada iyo ururrada bulshada

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Suuqa shaqada Iswiidhan

Suuqa shaqada waxuu uu qeeybsamaa qeeyba gaarka loo lee yahay iyo qeeybta dadweeynaha. Qeeybta gaarka loo lee yahay waxaa ka jiro shirkado fa'iido raadis ah oo si gaar ah loo lee yahay. Shirkadahaan waxeey tusaale ahaan karaan dukaamo yar ama ganacsi kale, warshado wax soo-saaro, hoowlo dhismeed, cilmiga sharciga iyo dhaqaale, gaadiid iyo maqaayado. Boqolkiiba 70% waxeey ka shaqeeyaan qeeybaha gaarka loo lee yahay.

Qeeybta dadweeynaha waxaa leh, dowlada, degmooyinka iyo maamulka gobolka ee dhanka arimaha caafimaadka iyo gaadiidka. Qeeybaaha dadweeynaha waxaa ka shaqeeyo tusaale ahaan dad ku hoowlan dhanka caafimaadka, waxbrashada, booliska, xanaanada bulshada, dugsiyada barbaarinta, difaaca bey'adda, maareeynta qashinka, biyaha iyo bullaacadda iyo adeega badbaadinta.

Shaqooyinka shaqaale uu baahan - shaqooyinka inta ee ka jiran

Shaqooyinka loo maleeynaayo in ee mustaqbalka shaqaale looga loo baahnaan doonaan waxaa lagu magacaabaa bristyrken.

Si looga shaqeeyo shawooyinkaan waxaa badanaa loo baahan yahay waxbarasho xirfadeed oo heer dugsi sare ah ama heer ka sareeyo. Waxbarashada sare waxaa loo yaqaan waxbarashada ka danbeeyso dugsiga sare ee jaamacadeed.

Waxbarashada waxeey muhiim uu tahay si Iswiidhan shaqo looga helo. Waxbarashada dheerna waxeey badanaa albaabka ugu furee fursado badan oo lagu helo shaqo. Shaqo dhiibe badan waxaa uu shardi ah in qofka shaqada soo dalbanaayo uu ugu yaraan soo dhigtay dugsi sare. Mecnaheed waa in ka soo qalin jabiyay dugsi sare. In qofka ka soo qalin jabiyay dugsi sare waxeey sido kale laga maarmaan uu tahay markii la raadsanaayo waxbarasho sii socoto.

Halkaan waxaad ka akhrisan kartaa shaqooyinka uu xafiiska shaqada ku sheegaayo in shaqaalooyinka ku yaraan doonaan mudada soo dhow. (Laga keenay: Xafiiska shaqada)

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Shaqooyinka heerka jaamacadeed ayaa baahi weeyn loogu qabaa shaqaale (weyna sahlan tahay in shaqo laga helo) sanadka 2017

- Injineero iyo farsamo yaqaanaha dhanka sancada goodka macdanta iyo biraha
- Dhakhtar
- Hormariyaha nidaamka (systemka) iyo barnaamiyada kombiyuutareed
- Gacan haye xaga adeegga bulshada
- Qiimeeyaha heerka kaalmada
- Kalkaalisooyinka, caafimaadka dhanka daryeelka cilmi nafsiga, daryeelida degdegga ah, carruurta iyo raajada iyo kalkaalisooyinka qalliinka iyo kalkaaliyooyinka waaxaaha
- Shaqaalo ku xiil dheer waxbarashad oo gaarka ah (specialpedagog)
- Injineerada dhismaha ee waxbarashada dheer, dhismaha iyo waddooyinka, korontada iyo farsamada qalabka xiriirka taleefannada.
- Injineerida dhismaha iyo farsamo yaqaanka dhismaha
- Naqshadaha dhisida farsmada warbixinta (IT-arkitekt)
- Injineerada-VVS
- Macalimiinta dugsiga barbaarinta iyo xanaanada
- Macalinka (qeybta dambe ee dugsiga hose-dhexe)

Shaqooyin ku beegan heerar waxbarasho ee kale oo baahi weeyn loogu qabo shaqaale (eyna sahlan tahay in shaqo laga helo) sanadka 2017

- Cunto kariye
- Fuundi
- Kalkaaliso hoose
- Bir-tumaha dhismaha
- Laamiyeeri dhige
- Makaaniga gaarida xammuulka
- Daroowal gawaarida xamuulka
- Rakibaha qalabka ma gudbiyaha
- Sagxad dhige
- Koronto-yaqaan
- Rakibaha-VVS
- Saqaf rakibe
- Shaqaalaha shubka ka shaqeeyo

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

- Alwaax isku rakibe
- Rinjiyeele
- Qalab isku rakibe
- Shaqaalaha goobaha dhismaha
- Asaas sameeye
- Farsamada maamulka iyo sharciyada
- Xoghaya arrimaha daaweeynta

Shaqooyinka xagee la heli karaa mustaqbalka?

Xafiiska shaqada waxuu xattaa tirakoobka saadaaleeynta ka arkaa in baahi shaqaale looga qabi doono shaqooyinka qaarkood, mudo shan sano ilaa toban sano kadib ah. Baahidaan shaqaalaha loo qaabo qeeybo ka mid ah waxaa buuxiyo dad usoo guurayo Iswiidhan. Waxaa soo socdo liis shaqooyin iyo kooxyo looga baahnaan doono shaqaale shan sano ilaa toban sano kadib.

Sawir: Johnér

Shaqooyinka baahida weyn loo qabi doono shanta illaa tobanka sano ee socda

- Shaqooyinka teknaloojiyada farsamada IT
- Macalimiinta dugsiyada barbaarinta iyo shaqaalaha barbaarinta guriga xiligi firaaqada (fritids)
- Macalimiinta dugsiga hoose-dhexe
- Macalimiinta dugsiga sare
- Dhakhtar
- Kalkaaliyayaasha caafimaadka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

- Shaqaalo ku xiil dheer waxbarashad oo gaarka ah (specialpedagog)
- Dhakhaatirada ilkaha
- Kalkaalisada ilkaha
- Kalkaaliso hoose
- Shaqooyinka injineernimada
- Farsamayaqaanka baabuurta iyo xamuullada
- Farsamayaqaanka makiinadaha
- Daroowal bas
- Daroowal tareen
- Farsamayaqaanka makiinadaha CNC.
- Cunto kariye
- Shaqooyin badan oo xaga dhismaha

Laga keenay: Xafiiska shaqada

Sinaanta suuqa shaqada

Sinaanta mecnaheed waa in nimanka iyo dumarka uga siman yihiin xuquuqda, waajibaadka iyo fursadaha goobaha muhiimka ee nolasha dhamaanteed. Dowlada waxeey hadafkeedu yahay in sinaanta dalka Iswiidhan ee sii korto (warbixin dheeraad ah ka akhriso cutubka 4). Marka ee bulshada ka faiideeysato aqoonta iyo fikradaha ninka iyo dumarkaba waxaa ka mid ah oo kor uu kacaayo dhaqaalaheeda.

Iswiidhan habab badan ayee uu tahay dal sinaan ka jirto. Ku dhawaad boqolkiba 80 ee dumarka Iswiidhan ee uu dhaxeeyo 20 ilaa 64 sano, waxeey ka shaqeeyaan guriga dibadiis, taasi oo ah tiro badan markii loo bardhigo dalal badan. Laakiin suuqa shaqada waxaa laga wali laga tabayaa sinaan. Dumarka qabto isla shaqada ragga, waxeey inta badana lee yihiin mushaar ka hooseeyo ayago isla shaqada qabanaayo. Nimanka ayaa dumarka uga badan dhanka hogaaminta shirkadaha. Cilmi baarista waxeey muujineeyso oo kale in farqi uu dhaxeeyo fursadaha ragga iyo dumarka, dhanka isku dhex wadida shaqo iyo nolol qooys. Dumarka waxeey qabtaan hoowlaha guriga badankood xataa haddii sida ragga uu shaqeeyaan. Dumarka ayaa ku maqnaansho badan xilliga fasaxa waalidiinta.

Dowlada waxeey uu shaqeeyneeysaa sidii ee sare loogu qaadi lahaay sinnaanshaha qeeybo badan. Tusaale ahaan hadafka waxuu yahay in dumarka iyo ragga ee san dooraneyn shaqooyin ayadoo loo fiirinaayo jinsigood, ee

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ragga iyo dumarka sida ee ugu kala qeeybsanyihiin soddanka shaqo ee Iswiidhan loogu badan yahay.



Laga keenay: SCB

shaqada uu doortaan aqoontood, haboonaanshaha iyo hamigood. Suuqa shaqada Iswiidhan, dumarka waxeey tusaale ahaan ku badan yihiin shaqooyin daryeelka caafimaadka iyo xanaanada halka ee ragga ku badan yihiin goobta farsamada casriga iyo dhismaha. Ragga ayaa uga badan dumarka, dhanka furashada shirkadaha iyo hogaaminta goob shaqo.

Masawirka waxuu muujinaa in qeeybinta dumarka iyo ragga, dhanka shaqooyinka loogu badan yahay dalka Iswiidhan. Sadax ka mid ah 30 shaqo ayee ka jirto sinaan jinsiyeed. Waa boqolkiiba 40-60 jinsigiiba.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Caadada bulshadeed ee dhanka suuqa shaqada

Suuqada iswiidhisha waxaa ka jiro caadooyin bulshadeed oo lagu yaqaano.

Waxaa inta badanaa caadi u ah in hey'adda goobta shaqada ee tahay mid "siman" oo eysan laheyn darajoyin kala duwan. Taasi micnaheedu waa in hogaamiyaha iyo shaqaalaha in badan go'aamada isla wadaagaan. Habkaan loo qaado go'aamo waaqti sii dheer ayee qaadan kartaa laakin inta badana waxeey keentaa dareen ka qeeyb qaadasho iyo dareen masu'uliyad sii badan. Qofka shaqaalaha ahna waxaa laga sugaa badana in uu ka soo baxo masu'uliyadiisa.

Inta badana jawiga gooba shaqo oo badan waa mid aan rasmi ahaeyn. Waxeey ku saabsanaa kartaa habka la iskula hadlo iyo habka dharka loo gashto. Waxaa loo badan yahay in "dhar caadi ah" shaqada loo gashto.

Muhiim ayuu waqtiga waxuu goobo shaqo oo badan. Waa muhiim in shaqada waqtigeed lagu imaado.

Waqtiga shaaheynta waa waqti muhiim u ah gooba badan oo shaqo, waa waqti eey isla hadlaan oo la isla cabaan kafee ama shaah.

Shaqo dhiibe iyo shaqo qaate

Suuqa shaqada waxuu uu qeeybsamaa labo qeeybood: shaqo dhiibe iyo shaqo qaate.

Shaqo qateena waxaa kale oo lagu magacaabaa shaqaale. Waxaa juro ururo loogu tala galay shaqo qaataha iyo shaqo dhiibahaba. Waa ururo ee ka dhex shaqeeyo shaqo dhiibaha iyo shaqo qaata oo ka wada shaqeeynaayo danahooda ee dhanka suuqa shaqada. Dadka ka tirsan ururada waxaa loo ogalyahay in ee ka qeeyb qaataan saameeynta.

Ururada shaqo dhiibaha waxeey matalayaan danaha shaqo dhiibaha.

Ururada shaqo dhiibaha ugu weeyn waa:

- **Svenskt näringsliv** oo loogu tala galay shirkadaha gaarka ah
- **Hey'adda shaqa dhiibayaasha (Arbetsgivarverket) iyo SKL (Degmooyinka iyo gobollada Iswiidhan)** oo loogu tala galay goobaha shaqadeed ee dadweeynaha

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ururada shaqaalaha ayaa matalo shaqo qaataha, shaqaalaha, danahood.

Ururada shaqaalaha ugu weeyn waa:

- **LO (Landsorganisationen i Sverige)** Ururka gobollada Iswiidhan
- **TCO (Tjänstemännens centralorganisation)** Urur bartameedka shaqaalaha dowladda
- **SACO (Sveriges akademikers centralorganisation)** Urur bartameedka jaamiciyaasha Iswiidhan

Ururada shaqaalaha ee qarameed waxeey ka kooban yihiin urur kale oo yar oo matalo shaqooyin iyo laaman kala duwan.

Ururada shaqaalaha waxeey ka jireen Iswiidhan ilaa 1800-yimadii, dad badan oo shaqaale aha waxeey doortaan in ee ku jiraan. Xur ayaa loo yahay ka jirka ururada shaqaalaha. Dadka ku jiro urur shaqaale waxeey dhiibaan kharashka-ku jirida. Badan waxeey dadka ku jiraan urur shaqaale iyo qasnada shaqo laanta, A-kassa. Qasnada shaqo la'anta waa urur dhaqaale oo lacag siiyo dadka ka tirsan marka ee shaqo la'an ku dhacdo. Waxaa jiro qasnado shaqo la'aaneed oo badan, inta badanana qasnada shaqo la'anta waxeey ku xiran tahay ururka aad ku jirto.

Ururada shaqaalaha iyo ururada shaqo dhiibaha si joogto ah ayee uu kulmaan ayagoo ka hadlaayo sharciyada ka jiraayo suuqa shaqada. Kulumadaan lagu wada xaajoonaayo waxaa ka mid ah oo eey ku saabsan yihiin mushaarada iyo xuquuq kale iyo waajibaadka goobta shaqada. Xaqa wada xaajoodka waxaa lagu go'aamiyay sharciga wadatashiga, MBL (lagen om medbestämmanderätt) Sharciga xaq u lahaanshaha go'aan la qaadahsada.

Xuquuqda shaqada

Iswiidhan waxaa ka jiro sharciyo iyo heshiisyo badan oo khuseeyo shaqooyinka. Sharciyada iyo heshiyada ka dhaxeeyo shaqo dhiibaha iyo shaqo qaataha waxaa loo yaqaan xuquuqda shaqada.

Sharciga wadatashiga, MBL

Sharciga wadatashiga, MBL, waa nidaam muhiim ah oo ka tirsan xuquuqda shaqada. Sharciga waxaa ku tirsan nidaamyo ku saabsan xaqqa ku abuurida urur shaqaale goobta shaqada. Sbarciga waxuu kale uu sheegayaa in

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waxaa jiro xeerar iyo heshiisyo kala duwan oo nidaaminaayo suuqa-shaqada Iswi-idhan.

Sawir: Johnér

shaqo dhiibaha ku qasban yahay in shaqaalaha uga warama arimaha muhiimka oo khuseeyo goobta shaqada. Sido kale shaqo dhiibaha waa in uu la wada xaajoodaa ururada shaqad inta uu san badalo ku sameeyn goobta shaqada.

Sharciga difaaca shaqada, LAS

Sharciga difaaca shaqada, LAS, waxuu difaaca shaqaalaha marka ee ku saabsan tahay shaqo ka tagida.

Sharciga waxuu horeeyn uu khuseeya shaqaalaha leh shaqaaleeyn joogto ah. Sharciga waxaa ku qoran in qofka aan looga ceeyrin karin shaqada sabab la'an. Sababta macquulka ah waxeey ahaan kartaa in ee shaqada dhamaatay ama shaqaalaha in uu san shaqadiisa uu qaban si saxsan.

Sharciga difaaca shaqada waxaa ku jiro nidaamyo ku saabsan shaqaalaha marka hore shaqada laga burinaayo markii ee jirto shaqo yari. Waxaa loo yaqaan nidaamka kala hormariska. Nidaamkaas asaaskiisa waa in qofka shaqada ugu cusub marka hore la ceeyrinaayo inta aan la ceeyrin midkii ka soo horeeyay.

Heshiishka wadajirka ah

Heshiishka wadjirka ah waa qoraal heshiis ka dhaxeeyo shaqo dhiibaha iyo urur shaqaale. Heshiishka wadjirka ah waxuu lee yahay nidaamyo ku saabsan tusaale ahaan xilliga shaqda, xilliga fasaxa iyo mushaarada. Inta badana heshiishka wadajirka ah ayaa hago mushaarkaada.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Heshiishka wadjirka ah inta badanaa waxuu ku jiro nidaamka ku saabsan:

- habka shaqaaleeynta
- xilli shaqo oo dheeraad ah
- mushaarada iyo lacagaha
- xilliga shaqada
- fasaxyada
- ogeeysiinta shaqo ka tagida
- ceeymiska hoowlgabka iyo shilalka.

Heshiishka wadajirka ee shaqada waxaa lagu go'aamiyaa inta uu ahaanaayo mushaarka ugu hooseeyo ee shaqaalaha. Sido kale heshiishka waxuu khuseeyaa shaqaalaha aan ka tirsaneeyn urur shaqaala ee laakin ka shaqeeyo goob shaqo oo leh heshiishka wadajirka. Iswiidhan kama jiro sharci ku saabsan musshar ugu yar inta uu ahaanaayo.

Xataa haddii uu shaqo dhiibahaada lee yahay heshiishka wadjirka ah, waxaa lee dahay fursad aad shaqo dhiibaha kula wada xaajootid ama kala hadashid mushaarkaada. Waxaad heli kartaa mushaaro kale duwan ayadoo ee ku xiran tahay shaqada adkeeysigeeda iyo sida aad adiga shaqada uga soo baxeeyso. Hey'addaha waa weeyn iyo shirkadaha badankood waxeey heshiishka wadajirka ah la lee yihiin ururka shaqaalaha laakin waxaa jiro shaqo dhiibe aan la heeyn heshiishka wadajirka ah.

Khilaaf ka dhaco goob shaqo

Khilaaf ama dagaal ka dhaco goob shaqo waxaa loo xalinaa sida ugu dhaqsiyaha badan. Shaqo dhiibaha, hogaamiyaha, masu'uliyadiisa waaye in uu xaliyo khilaafyada dhaco. Haddii aad gasho khilaaf kala hadal hogaamiyaha goobta shaqada (shaqo dhiibaha). Haddii aad khilaafka lalee dahay shaqo dhiibaha oo aadna ka tirsantahay urur shaqaale waxaad taageero ka heli kartaa ururkaada shaqaale. Marka uu shaqo dhiibaha iyo shaqo qaataha ka dhec dhaco khilaaf eena ku heshii waayaan arin ka jiro goobta shaqada, waxeey la xariri karaan maxkamada arimaha shaqada, AD. Maxkamada waxeey baari karta khilaafka jiro, waxeeyna jawaab ku bixin kartaa qofka saxsan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

In cid loo shaqeeyo

Marka aad cid uu shaqeeyo waxaa muhiim ah in aad ku fakarta xuquuqda aad ku lee dahay iyo waajibaadka ka saaran dhanka shaqo dhiibaha. Inta ayaa ka akhrisan kartaa waxyaalaha muhiimka uu ah in aad taqaano marka lagu shaqaaleeyo.

Habka shaqaaleeynta

Habka shaqaaleeynta waa labo:

- shaqaaleeyn joogto ah
- shaqaaleeyn mudo xadidan leh

Shaqaaleeyn joogto ah waxaa kale oo lagu magacaaba fast anställning. Shaqaaleeynta waxeey mid joogto ah. Mecnaheed waa in ee san laheeyn mudo xadidan oo dhameeynso.

Shaqaleeyn mudo xadidan leh waa shaqaaleeyn soconeeyso ilaa mudo.

Tusaalaha shaqaaleeynta mudo xadidan leh:

Waxaa jiro nuucyo kala duwan oo shaqaaleeyn mudo xadidan leh.

Shaqaaleeyn mudo xadidan leh ee guud (Allmän visstids-anställning)

Shaqaaleeyn mudo xadidan leh ee guud mecnaheed waa in aad cid uu shaqeeyneeysid laga bilaabo taarikh ilaa taarikh kale ama in aad mudo ka shaqeeyso si aad uga shaqeeyo hoowl gaar ah. Tusaale ahaan shaqaaleeyn mudo xadidan leh waxeey ahaan kartaa in aad mudo xadidan ka shaqeeyso mashruuc, adigoo uu shaqeeleeysan mashruuca. Waxaad shaqaaleeyn mudo xadidan leh ee guud heli kartaa marka uu shaqo dhiibaha ku soo waco oo aad mushaar uu qaadaneeysid saacada aad shaqeeysid. Marmarka qarkood waxaa loo yaqaan shaqaleeynta-saacadeed.

Shaqo ku meel gaar ah (Vikariat)

Haddii lagu shaqaaleeyo hab haqo ku meel gaar ah mecnaheed waa in aad uusii shaqeeynsiid tusaale ahaan qof ku maqan fasaxa waalidiinta.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Mudada tijaabinta shaqaaleeynta

Marka aad hesho shaqaaleyn joogto ah waxaa caadi ah in shaqaaleeynta ku bilaabato mudada tijaabinta shaqaleeynta. Mudada tijaabinta shaqaaleeynta waa hab uu shaqo dhiibaha ku tijaabinaayo shaqaalaha. Fikrada tijaabinta shaqaaleeynta laga lee yahay waa in shaqaaleeynta ee noqoto mid joogto ah. Mudada tijaabinta shaqaaleeynta ma ka dheeraan karto lix bilood laakin sido kale waa la joojin karaa mudo intaas ka horeeyso.

Haddii aad marar ku lahaatay shaqaaleeyn mudo xadidan leh ee guud isla hal shaqo dhiibe, waxaa sharci ahaan marka loo fiiriyo, xaq uu yeelan kartaa shaqaaleeyn joogto ah. Waxeey khuseeysaa haddii aad, mudo shan sano gudahood ah, marka la isku daro uu shaqeeysas shaqo dhiibaha in ka badan labo sano. Waxee shaqaaleeyntaada isku badaleeysaa markaas mid joogto ah. Taasi mecnaheed waa in la tixraaco qaanuunka difaaca shaqaaleeynta. Arintaas waxeey ku qoran tahay sharciga difaaca shaqaaleeynta, LAS.

Mushaar

Mushaar joogto ah oo la dhiibo bishii hal mar waxaa la yiraa mushaar-bileed (månadslön). Haddii aad mushaar uu hesho saacadiiba, waxaad saacada aad shaqeeysaba uu heleeysaa lacag kooban.

Heshiishka shaqaaleeynta

Marka aad shaqo heshi waxaad saxiixeeysaa heshiishka shaqaaleeynta.
Heshiishka shaqaaleeynta waxaa ku qornaaneeyso:

- magacaada iyo tobankaada lambar
- hoowlahaada shaqadeed iyo magaca shaqada aad qabaneeyso
- shaqo dhiibaha magaciisa iyo goobta shaqada
- taariikhda ee shaqaaleeynta bilaabaneeyso
- habka shaqaaleeynta aad lee dahay
- xilliga ogeeysinta, mecnaheed waa maalinta laga bilaabaayo in lagu ogeeysiiyo ka tagida shaqada ama aad adiga iska uka tageeysid
- mushaarka aad heleeysid canshuurta ka hor - bruttolön
- inta maalmood oo lacagta fasaxa xaq uu lee dahay

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xilliga shaqada

Xilliga shaqada ee caadiga waxuu ugu badnaan ahaan karaa 40 saacadood isbuuciiba ayadoo lagu qabanaayo isla hal goob shaqo. Haddii aad 40 saacadood maalin ahaan isbuucaba uu shaqeeyso waa shaqo waqti buuxda ah. Haddii aad tusaale ahaan shaqeeyso habeenkii, shaqada waqtiga buuxdo waa ka yaraan kartaa 40 saacadood. Marka uu qofka leh shaqo waqti buuxod ah shaqeeyo in k badan waqtigiisa shaqo waxaa loo yaqaan xilli shaqo oo dheeraad ah. Waxaad xaq uu lee dahay in aad hesho lacag dheeraad ah haddii aad shaqeeyso xilli dheeraad ah.

Sharciga fasaxa

Sharciga fasaxa marka la fiiriyo waxaad ugu yaraan xaq uu lee dahay 25 maalmood oo fasax ah sanadkiiba, kumana xirno hab shaqeeyleeynta ama haddii aad uu shaqeeyso si buuxdo ama si aan buuxin. Laakin taasi ma khuseeyso qof leh shaqaleeynta mudada xadidadan ee guud oo mushaar-saacadeed qaato. Qofka leh shaqaleeynta mudada xadidadan ee guud oo mushaar-saacadeed qaato waxuu lee yahay lacag dheeraad ah oo boqolkiiba labo-iyo-toban ah, loogu daraaayo mushaarkiisa jumladeed (inta aan canshuurta laga jarin), taasi waxaa loo yaqaan lacagta fasaxa ee loogu magdhabo shaqaalaha.

Lacag ayaad bedelka fasaxa heli kartaa haddii aad shaqo dhameysid isla markaana aadan lasoo bixi karin fasax. Markaas waxaa lagu siinayaa lacag u dhiganta boqolkiiba laba iyo toban mushaarka aad sanadka oo dhan soo qaadatay.

Haddi aad jirato inta aad shaqeeyneeysid

Haddi aad shaqaaleeysan tahay oo aad jirato waxaad uga warameeysaa shaqo dhiibahaada maalinta koobaad aad jiratid. Shaqaalaha waxuu dhiibaa mushaarka jirada 14ka maalmood ee ugu horeeyo. Maalinta koobaad ee jirada waa maalinta sugida (karensdag). Mecnaheed waa in uu san malintaas heleeyn wax mushaar ah. Laga bilaabaa maalinta labaad ee aad jirata waxaad mushaarkaada lagaa siinaa boqolkiiba 80. Haddii aad shaqada uga maqan tahay jiro awgeed in ka badan todobo maalmood waa in aad cadeeyn jiro ka keentaa dhakhtar haddii uu mushaarka jirada kuu soconaayo. Waxaa loo yaqaan cadeeynta dhakhtarka (gundhiga daawadeed).

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

In shaqo la raadsado

In shaqo la raadsado waxeey qaadan kartaa waqti badan, waana in wax yaalo badan lagu fakaraa. Halkaan waxaa ku soo socdo talooyin ku saabsan shaqo raadsi.

- Waxaad tagi kartaa Xafiiska shaqada oo soo bandhigooda ayad shaqo ka raadsan kartaa shaqooyin banaan.
- Waxaad la xariiri kartaa shirkadaha shaqalaaha uu kireeyo shirkado kala duwan.
- Waxaad la xariiri kartaa shirkado shaqaale uu helo shirkado kale oo rabo in ee shaqaaleeyaan shaqaale cusub.
- Waxaad ka jawaabi kartaa soo bandhigyada shaqooyinka banaan ee lagu soo qoro wargeeysyada ama internetka.
- Si gaar ah ayaa uula xariiri kartaa shaqo dhiibe.
- Waxaad weeydiin kartaa dadka aad taqaan - ka fa'iideeyso dadka aad taqaan. Dad badan ayaa shaqo ku helo ayagoo fariin ka helay dad ee yaqaaniin.

Xafiiska shaqada

Xafiiska shaqada waa hey'ad dowladeed oo ku taalo dalka oo dhan. Xafiiska shaqada waxeey kaaga waramaayaan sida aad uu raadsaneeysid shaqo. Waxeeyna ku siinayaan warbixin ku saabsan shaqooyin iyo waxbarasho kala duwan. Xafiiska shaqada waxuu soo bandhiga shaqooyinka banaan ku soo qoraa boggisa internetka: **www.arbetsformedlingen.se**

Marka aad hesho sharciga deganaanshaha waxaa muhiim ah in aad shaqo doone ahaan iska diiwan galiso Xafiiska shaqada.

Lacagta taabo galinta

Haddii aad xaq uu lee dahay lacagta taabo galinta waxaa xoghaye joogo Xafiiska shaqada si wadajir ah kuula sameeynaa qorshaha taabo galinta. Qorshaha taabo galinta waa qorshe ku saabsan habka aad uu gali laheeyd suuqa shaqada, waxuuna qorshahaas mudo labo sano ah xaq kuu siina helida lacagta taabo gelinta.

Taageerada shaqo raadiyaha

Xafiiska shaqada waxuu taageerooyin kala duwan uu hayaa dadka shaqo raadiyaha ah. Waxaa jiro taageero gaar ah oo loola jeedo soo galooytiga cusub si ee ugu sahlanaato shaqo helida.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xafiiska shaqada waxuu qabanqaabiyaa kulamo uu qofka shaqa-goobaha kula kilmi karo shaqo-dhiibe isla markaana su'aalo weeydin karo.

Masawirqaade: Björn Tesch

Sido kale waxaa jirto fursad lagu heli karo shaqo toobar lagu qabanaayo goob shaqo. Shaqo toobar mecnihiis waa in aad mudo ka shaqeeyneeyso goob shaqo adigoo isla markaa lacag ka qaadanaayo Hey'adda qasnada ceeymiska. Mecnaheed waa in aada mushaar ka heleeyn shaqo dhiibaha.

Shaqo toobarka waxuu fursad kuu siinaa in aad soo gasho suuqa shaqada Iswiidhan oo aad ku muujiso waxa aad taqaan. Waxeey taasi ku siineeysaa khibrad shaqadeed ee gudaha dalka Iswiidhan. Isla markaana waxeey koor uu qaadeeysaa fursadaha aad ku heleeysid shaqo. Haddii shaqo toobarka si fiican uukala socdo waxaad weeydin kartaa

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

shaqo dhiibahaada haddii aad ka dhigan kartid qof laga tixraaco markii aad shaqooyin raadsaneeysid. Mecnaheed waa in qofka raadinaayo shaqo cusub uu wici karo oo weeydiin karo haddii aad mudada shaqo toobarka sii fiican uga shaqeeysay. Waa fiican tahay in qofka uu lee yahay tixraac. Ku dhawaad shaqo dhiibaha dhamaantod weey rabaan markii qof shaqaaleeynaayaan.

Xafiiska shaqada waxuu hayaa waxbarasho loogu tala galay shaqooyinka baahi ugu qabo shaqaale. Fikrada waxeey tahay in waxbarashada keeneeyso shaqo.

Shaqada hor dhaca iyo shaqada bilaabidda cusub

Shaqada hor dhaca iyo shaqada bilaabidda cusub waa labo shaqo fursado oo loogu tala galay dadka helay sharciga deganaashaha. Shaqa bixiyaha waxuu qeyb ka mid mushaarka shaqaalaha ka heleyaa Xafiiska shaqada. La xiriir Xafiiska shaqada haddii aan daneeneysid shaqada hor dhaca iyo shaqada bilaabidda cusub.

Shaqo-Toobar

Masawirqaade: Colourbox

Waraaqadaha codsiga

Marka aad shaqo codsaneeysid waxaad u direeysaa waraaqadda uu shaqa dhiibaha rabo. Inta badan shaqo dhiibaha waxuu rabaa in aad u dirto waraaqada shakhsiyeed (personligt brev) iyo warqada wax soo qabadka (CV).

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

Ka waran hadfkaada ka lee dahay shaqada, khibradaada shaqo, waxbarashadaada iyo aqoonta kale iyo sida aad tahay shakhsi ahaan-taadaba.

CV

Curriculum Vitae ee laga soo gaabiyay CV, waa afka laatiinka. Mecnaheedna waa in sheeko ku saabsan nolasha. CV:ga waxaad uga warameeysaa hadafka aad ka lee dahay shaqooyinka, khibradooyinkaada shaqo, waxbarashadaada iyo aqoontaada. Sido kale waxaad ka warami kartaa sida aad tahay shakhsi ahaantaada.

CV waxeey ka koobnaa kartaa intaan soo socoto:

- Magac, cinwaan, lambarka-taleefoonka iyo e-mailka.
- Waxbarashooyinka: waxbarashooyinka aad soo dhigatay.
- Shaqooyinka: shaqooyinka aad soo qabatay.
- Khibrado kale sidii aqoon-luuqadeed iyo aqoon-kombiyuutar.
- Tixraac: magaca shaqo dhiiba hore ama qof kale oo si fiican kuu yaqaano.
- Warbixin shakhsiyeed oo gaaban: hamiga, reerka iyo hoowlaha xiliga firaaqada.

Sido kale CV:ga waxaad uga si gaaban uga warami kartaa waxaa aad ku soo qabatay shaqooyin hore iyo waxbarashadaada waxa ee ka koobneed. Shahaado iyo cadeeyn waxaad geeyn kartaa markii aad lee dahay wareeysiga ama haddii uu shaqo dhiibaha ku weeydiyo.

Waraaqada codsiga/waraaqada shakhsiyeed

Waraaqada shakhsiyeed ama waraaqada shakhsiyeed waxaad ka warami kartaa sababta aad uu xiiseeyeeyso

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

shaqadaan ama shirkadaan. Sido kale waxaad sharaxeeysaa sababta aad shaqada ugu qalanto iyo khibradooyinka aad lee dahay. Waa muhiim in waraaqada shakhsiyeed tahay mid uu haboon shaqada aad codsaneeysid.

Warqadda shaqo dalabka wa iney ahaataa mid gaaban, qiyaastii warqadda A4 waa caadi.

Muujinta rabida shaqada

Haddii aad dooneeyso in aad meel ka shaqeeysaa ee laakin laheeyn soo bandhiga shaqooyinka banaan, waxaad uu muujin kartaa rabida shaqada. Waxaad markaas uu direeysaa CV:gaada iyo waraaqad aad uga warameeysid sababta aad uu dooneeysid in aad ka shaqeeyo goobtaas shaqo iyo waxa aad ku fiican tahay.

Wareeysiga shaqaaleeynta

Wareeysiga shaqaaleeynta waa wareeysi uu qofka shaqo dhiibaha la yeesho qofka soo codsaday shaqada. Waxaa jiro waxyaalo qaarkood oo loo baahan yahay in lagu fakaro markii la tagaayo wareeysi. Waa fiican tahay in aad wax ku saabsan shirkada akhrisato iyo in aad ku fakartid khibradaha aad lee dahay oo keenaayo in aad shaqada uu haboon tahay. Waxaad tusaale ahaan warbixita ka raadin kartaa internetka. Taasi waxeey uu cadeeyn doontaa in shaqada aad dalbatay hami uu heeyso.

Su'aalooyin caadi ah

Waa ficnaa kartaa in aad ku fakartid sida aad uga jawaabi laheeyd su'aalaha kala duwan oo wareeysiga ku imanaayo. Taasi waxeey keeni kartaa in aad kalsooni isku sii dareento marka aad la kulmeeysid shaqo dhibe.

Su'aalo caadi ah iyo guubaabin:

- Laf ahaantaada ka waran! Shakhsi ahaantaada sidee tahay?
- Ka waram shaqooyinkaadii hore iyo waxbarashadadii!
- Marka aad koox ku jirto sidee tahay oo uu shaqeeysaa?
- Ka waran qeeybaha aad adiga ku fiican tahay iyo sifooyinkaada fiican oo uu haboon shaqadaan?
- Maxaad rabtaa inaad ku fiicnaatid? (Wey fiicnaan kartaa in aad muujiso qeeybahaaga aad daciifka ka tahay.)
- Maxeey tahay sababta aad shaqadaan usoo codsatay? Maxaa shaqadaan ku soo jiiday?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

- Maxeey tahay sababta aan kuu shaqaaleeyneeyno? Maxeey tahay waxa keenaayo in shaqadaan kuu haboontahay?
- Waa maxay qorshaha aad uu lee dahay mustaqbalka?

Waxa kale oo aad uu baahan tahay in aad ku fakrto markii aad tageeysid wareeysiga shaqaaleeynta

Aragtida koobaad aad ayeey muhiim u tahay markii aad la kulmeeyso shaqo dhiibaha. Inta aadan tagin waxaad ogaataa haddii goobta shaqada shuruudo gaar ah ey leedahay dhar gaar ah ama hab gaar ah oo loo labisto.

Shaqo dhiibayaal badan waxeey filanaayaan in aad gacanta ka salaanto.

Waa muhiim in aad waqti ugu timaado wareeysiga. Haddii aad soo daahdo waxaad heleeyn kartaa fursada aad ku heli laheeyd shaqaaleeyn.

Marka aad ku jirto wareeysiga shaqada waxaa lagu weeydiin karaa su'aalo ku saabsan sababta aad shaqada usoo codsatay.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

In aad furato shirkad gaar ah

Sanadka 2017 ka, 500 000 oo qof ayaa Iswiidhan ku lahaa shirkado. Waxeyna u dhigmaan boqolkiiba 9 inta ka shaqeeyso suuqa shaqada.

Haddii aad dooneeyso in aad shirkad furato, waxaad caawinaad iyo talo ka heli kartaa hey'adooyin kala duwan, tusaale ahaan ALMI iyo Xafiiska shaqada. Warbixinno badan oo ku saabsan shirkad furasho waxaad ka heleeysaa boggaga: **www.tillvaxtverket.se** ama **www.verksamt.se**

Hey'adda cashuuraha waxey meelo badan ku qabataa kulamo lacag la'aan ah. Waxaa jira kulamo laguugu tala galay haddii aad billaabeysid shirkad waxeyna Hey'adda cashuuraha ku tusineysaa sida aan u diiwangalineysid shirkaddaada waxeyna kusiineysaa talooyin la xiriira billaabidda shirkad. Waxaad kaloo heleysaa fursad aad kula kulantid dad ka socda urrurada lookalka ah. Waxey kuu sheegayaan caawimaadda eey ku siin karaan haddii aad tahay shirkad billaabe cusub. Warbixin dheeraad ah ka akhriso bogga Hey'adda cashuuraha: **www.skatteverket.se**

ALMI Företagspartner AB waxaa iska leh dowlada. ALMI waxeey uu shaqeeysaa si shairkadooyin kale dalka uga bilaawdaan laakin sido kalena si ee hormari laheeyd shirkadaha yar iyo shirdaha weeyninkooda dhexdhexaad yahay. ALMI waxeey ku caawisaa warbixinta iyo soo saarida qorasho ganacsi. Qorsho ganacsi waxuu tilmaan uu yahay habka aad uga shaqeeyn doontid shirkadaada.

Tima-jarayaasha inta badana waa shirkadleey gaar ah.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

IFS Rådgivning waxeey ka mid ah ALMI. Waxaana loogu tala galay soo galooytiga rabo in ee shirkad furtaan. IFS Rådgivning waxeey talo bilaash ah kuu dhibtaa luuqada kala duwan. IFS waxeey ku taalo qeeybo kala duwan oo Iswiidhan ku taalo. In dheeraad ah ka akhriso bogga internetka: **www.almi.se**

Maaleeynta shirkad furashada

Marka aad dooneeysid in aad shirkadada furato waxaa inta badanaa loo baahan yahay maaleeyn (lacag). Marmar waxaad uu baahnaa kartaa in aad caawinaad ka hesho qof kale. Inta badanaa waxaa si sahlanaanee in aad shirkadaada maaleeyn uu heshid marka aad lee dahay fikrad ganacsi oo fiican iyo qorsho ganacsi oo si fiican looga fakaray. Waxaa jiro habab kala duwan oo maaleeynta aad habeeyn kartid si aad uu bilaawdo shirkad, tusaale ahaan:

- Deeynta bangiga
  Haddii aad aadid bangiga waxuu qiimeeynaa xaaladaada dhaqaaleed, waxuuna go'aaminaa haddi lagu ogalaan karo in aad lacag deeysankartid iyo inta lacag oo lagu ogalaan karo in aad deeynsatid. Deeynta bangiga markasto waxaa saaran dul-saar.
- Ra'isi maaleeynta
  Ra'isi maaleeynta waa lacag uu maaleeye gashanaayo shirkadaada si uu mustaqbalka fa'iido lacageed uga helo. Tani xataa waxeey uu baahan tahay qorsho iyo fikrad fiican. Inta badanaana mecnaheed waxeey tahay in aad heshiish qeeybsasho shirkadaada cid kale kula galeeysid.
- Kaalmo ama deeyn aad ka heleeysid maaleeynta dowlada tusaale ahaan Xafiiska shaqada ama Almi.

Ceeymiska shaqo la'anta

Ku dhawaaw boqolkiiba kontan dadka dalka Iswiidhan ka shaqeeyo waxeey lee yihiin shaqo mushaar leh. Shaqo la’aanta waa ku dhawaad boqolkiiba 6,5. Shaqo la’anta dhalinyarada uu dhaxeeyo 15-24 ayaa sii sareeyso oo waxeey mareeysaa boqolkiiba 16,4.

Iswiidhan waxeey lee dahay ceeymis difaacaayo qofka shaqo la’an ku dhacdo. Ceymiskaan, oo loo yaqaan, aeeymiska shaqo la’anta, waxuu uu suurta galina qofka shaqo la’anta in uu lahaado dakhli inta uu raadsanaayo shaqo. Waxaad

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Xafiiska shaqada

ku jiri kartaa mid ka mid ah qasnadooyinka ceeymisyada, a-kassa, oo ah urur dhaqaale oo lacag siiyo xubnaha ka tirsan oo shaqo la'anta ku dhacday. Haddii aad dooneysid in aad ku jirto a-kassa waa in aad bil kasto dhiibtaa kharash.

Shuruuda ku xiran helida qasnada ceeymiska

Haddii aad ku jirtay qasnada ceeymiska in ugu yar mudo hal sano ah oo aadna sanaadkaas ka shaqeeysay lix bilood, waxaad xaq uu lee dahay lacag lagu saleeynaayo dakhligaadi hore. Waxaad a-kassaha ka heleysaa lacag 300 oo maalmood ama 450 maalmood haddii aad heysatid ilmo ka yar 18 sano. Boqolkiiba 80 ayaa ka heleeysaa musharkaadi hore 200 maalmood ee ugu horeeyso. Kadibna waxey lacagta noqoneysaa boqolkiiba 70. Lacagta ugu badan aad heli karto halka maalin waa 910 karoon 100 maalin ee ugu horreyso. Laga bilaabo maalinta 101 aad ilaa maalinta 300aad, waxaad ugu badnaan heli kartaa 760 karoon maalin walba.

Waxaad lacag ka heli kartaa qasnada ceeymiska mudo xadidan gudaheed lee. Isla markaana, inta mudadaas lagu jiro, waa in aad ahaata qof uu firfircoon helid shaqo cusub. Qasnadaada ceeymiska ayaa go'aamineysa inta eey la'egtahay lacagta aad heleyso.

Haddii aadan ka tirsaneeyn qasnad ceeymis, adna dooneeyn, waxaad lacagta qasnada ceeymiska ka codsan kartaa qasnada-Alfa. Lacagta ee bixiso qasnada-Alfa waa lacag asaasi ah oo uu dhigmato 320 karoon maalintiiba.

Laagta asaaska waa lacagta aad heleeyso haddii aadan ka tirsaneeyn qasnada ceeymiska, a-kassan ama haddii aad mudo gaaban ka tirsanaatay. Lacagta asaasiga ah waxaa

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

la siiyaa dadka gaaray 20 sano ama ka weeyn. Waxaad lacagta asaasiga ka heli karaa qasnad ceeymis ama qasnada ceeymiska ee dheemistirka ah, qasnada-Alfa.

In canshuur la dhiibo

Nidaamka canshuuraha dalka Iswiidhan waxuu asaasi uu yahay nidaamka nabadgalida iyo daryeelka dalka. Ayadoo canshuurta heleeyso ayee dowlada Iswiidhan dadka dhan wada siin karta fursad waxbarasho iyo nolo fiican. Qeeyb weeyn oo ka mid ah nidaamka nabadgalida iyo daryeelka dalka, waxaa lagu bixiyaa canshuuraha. Canshuuraha ayaa tusaale ahaan lagu maal-galiyaa tusaale ahaan daryeelka bukaanka, xanaanda caruurta, adeega bulshada iyo xanaanada waayeelka. Laakin sido kalena jidadka, gaadiidka dadweeynaha, qaabilaada qaxootiga iyo hoowsha bey'adeed waxaa lagu maal galiyaa canshuurta. Dadka badanaa ee Iswiidhan degan waxeey kalsooni ugu qabaan in canshuurta laga qaado si wadajir leh loogu isticmaalo dhisida bulshada.



Masawir: Hey'adda canshuuraha

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Marka aad shaqeeyso waxaad bixineeysaa canshuur. Canshuurtaas waxaa loo yaqaan canshuurta-dakhliga. Mushaarka aad heleeysid inta aan canshuurta laga jarin waxaa lagu magacaaba, mushaarka jumlada ah (bruttolön). Mushaarka la helo markii canshuurta laga jaro waxaa loo yaqaan, mushaarka saafiga ah (nettolön). Mushaarka saafiga ah waa lacagta ku soo hartay oo aad ku noolaaneeyso. Nidaamka canshuureed ee Iswiidhan waxuu uu dhisan yahay, in qofka soo gasho lacag badan uu sii dhiibaayo canshuur badan. Dadka bulshadeed oo aan heeysan lacag ku filan waxeey bulshada ka heli karaan caawinaad.

Degmooyinka waa kala canshur duwan yihiin. Waxeey canshuuraha uu dhaxeeyaan boqolkiiba 29-35 ee mushaarka jumlada ah. Haddii lacag badan ku soo gasho waxaad canshuur dheerad ah siineeysaa dowlada. Haddii aad dooneeyso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan canshuuraha waxaad ka heleeysaa bogga internetka Hey'adda canshuuraha **www.skatteverket.se**

Heerka canshuuraadka dakhliga (Tirakoobka sanadka 2018).

Dakhliga sanadka	Canshuurta aad dakhlig ka bixineeyso
In ka badan **662,300** karoon	Canshuurta degmada oo ah boolkiiba 29%-35% + 20% canshuur dowladeed + 5% canshuur dowladeed dakhliga ka sareeyo xadkaan
In uu dhaxeeyso **455,300** iyo **662,300** karoon	Canshuurta degmada oo ah boolkiiba 29%-35% + 20% canshuur dowladeed dakhliga ka sareeyo xadkaan
In ka yar **455,300** karoon	Canshuurta degmada oo ah boolkiiba 29%-35%
In ka yar **19,247** karoon	Wax canshuur ah ma dhiibeeysid

Laga keenay: Hey'adda canshuuraha

Qof qaato lacagta jirada amalacagta hoowlgabka sido kale waxuu dhiibaa canshuurta dakhliga. Sido kale waxaad shaqadaada ku dhiibtaa canshuur loogu tala galay fa'iido. Tusaale ahaan fa'iido waa in aad baabuurka shaqaada uu isticmaali karto howlahaada gaarka ah ama in aad heli karto kubbonka cunta oo aad maqaayad uga gadan karto qado ama casho.

Cadeeynta xisaabinta dakhliga

Qofka oo uu dakhli soo galo isla markaana dhiibo cashuu rwaa inuu sanad walba cadeyn xisaabin dakhli u diraa Hey'adda cashuuraha. Hey'adda cashuuraha waxeey waraaqaha xisaabinta dakhliga kuugu soo direysaa

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Foomka cadeeynta dakhliga, asagoo ayaad u diri kartaa Hey'adda canshuuraha. Waa inaad u diri kartaa Hey'adda canshuuraha ugu dambeyn billowga bisha maajo.

Sawir: Marcus Lundstedt, Johnér

gurigaaga. Xisaabinta dhakhliga waxaa ku jira inta lacag ee aad shaqeysay iyo cashuur intee la 'eg ayaa sanadka gudihiisa dhiibtay. Macluumaadkaas waxaa soo gudbiya shaqa dhiibahaada, shirkadaha ceymiska iyo bangiga. Waa inaad kontorooshaa in eey sax yihiin. Waxaad isticmaashaa nambarrada si aad u aqoonsatid iyo si aad u saxiixdid ama waxaad isticmaashaa saxiixa elektaroonigga ah. Waxaad dalban kartaa inaad wacdid, ditid sms, isticmaashid borogaraamka abb-ka Hey'adda cashuuraha ama qaabka elektaroonigga ah. Nambarradaas waxeey ku yaallaanqeybta ugu sarreeysa ee waraaqaha xisaabinta dakhliga.

Canshuurta moms

Canshuurta qiimaha dheer, mervärdesskatt waxaa loo yaqaan moms. Dadka dhamaantood waxay canshuurta moms ka bixiyaan alaabta iyo adeegyada ay iibsadaan badankood. Moms waa qayb sicirka ka mid ah oo dadka wax iibsanayaa bixiyaan. Qeeybo kale duwan ayuu lee yahay momska ayadoo la fiirinaayo waxa la gadanaayo: 25, 12 ama 6 boqolkiiba. Waxaa jiro waxyaalo iyo adeegyo qarkood oo aan moms laga bixin tusaale ahaan daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada. Dowlada waxeey momska uu isticmaasha sidii qalab hogaamin siyaasadeed waxaana moms yar la saara waxyaalaha loo arko in iibsashaadood fiicantahay.

Canshuur dadban

Canshuurta dadban waa canshuur dheeraad ah oo la saaro waxyaalaha ama shaqooyinka qaarkood, tusaale ahaan khamrada, bensiinka, korontada iyo tobaakada. Cashuuraha

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

dadban waxaa loo isticmaalaa si loo xakameeyo ka iibsiga. Xukuumadda ayaa xakunto badeecada iyo shaqooyinka la saarayo canshuurta dadban badanaana waxaa la saaraa waxyaalo khatar u ah bey'adda ama caafimaadka.

Lacagta kharashka bulshada

Shaqo dhiibaha ayaa lacagta kharashka bulshada ka dhiibo shaqaalaha. Waxaana la dhahaa lacagta kharashka bulshada waxaa loo qoondeeyaa lacagta howlgabka ee shaqaalaha, lacagta waalidnimada oo uu shaqa dhiibaha ka dhiibo shaqaalihiisa una diro Hey'adda cashuuraha. Bishii hal mar ayuu uu diraa Hey'adda canshuuraha. Qofka shirkad gaar ah leh, ma dhiibaayo lacagta kharashka shaqo dhiibaha ee waxuu dhiibaa kharashka bulshada oo ah kharashkiisa gaarka ah.

In lagu shaqeeyo suuq madow

In lagu shaqeeyo suuq madow mecnaheedu waa in qofka shaqaalaha ah uusan bixin wax canshuur ah ama kharashka bulshadeed. Bulshada waxeey ku dhisantahay in qofka walba oo shaqeeyo uu dhiibo canshuur. Canshuurta waxaa loo isticmaalaa isbitaalada, jidadka, xanaanada waayeelka iyo hoowlo nabadgalyo iyo daryeelo kale oo u fidsan dadweeynaha dhamaantood.

Haddi aad suuqa madow ka shaqeeyso waxaa kugu adkaan karto in aad hesho heshiiska gacan koobaadka guri ama in aad alaab deeyn ku soo qaadato. Inta badana shirkadaha guriyada kireeyo waxeey doonayaan in qofka uu muujiyo heshiishka shaqaaleeynta.

- Adiga ka shaqeeya suuqa madow:
- Ma heleysid heshiis shaqaaleyn sidaas darteedna waa laguugu siri karaa mushaarka.
- Ma heleysid lacagta dadka eey shaqada ka dhamaato haddii eey shaqada kaa dhamato.
- Ma heleysid lacagta jirrada iyo lacagta fasaxa.
- Ma heleysid lacagta jirrada iyo lacagta waalidnimada.
- Waxaad heleysaa lacag howlgab oo yar.
- Ceymis kuma jirtid haddii uu dhaawac kusoo gaaro, ama aad qof shaqada ka shaqeeya dhaawacdid ama haddii aad wax eey kaa jabaan markaad shaqada ku jirtid.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Diiwaangaliska dadweeynaha

Diiwaangaliska dadweeynaha mecnaheed waa in laga diiwan galiyo Hey'adda canshuuraha oo laguugu tirriyo qof degan degmo ka mid ah Iswiidhan. Dadka la diiwangaliyo oo dhan waxaa la siiyaa toban-lambar. Waajibaadyo iyo xuquuq badan oo leedahay waxey ku xiranyihin inaad diiwangashantahay iyo halka aad ka diiwaangashantahay. Waxeey ahaan karaan xaq u lahaanshaha lacagta kaalmada carruurta iyo kaalmada kirada guriga, halka aad cashuurta ka bixineysid iyo meesha aad ka codeyneysid. Degmo kasta ayadaa qorsheysata howlaheeda iyadoo eegeysa tirada dadka degan meesha. haddii aad bedelatid ciwaan guri waa inaad u sheegtaa Hey'adda laant asocdaalka hal isbuuc markaad guurtid kaddib.

Warbixin ku saabsan diiwaangaliska dadweeynaha ka akhriso bogga internetka ee Hey'adda cashuuraha: **www.skatteverket.se/folkbokforing**

Cadeeynta shakhsiga

Cadeeynta shakhsiga waa waraaqad muujineeyso macluumaadkaada ka diiwangashan Hey'adda canshuuraha, sida magac, ciwaan guri iyo xaalkaada xaasnimo. Waxaad cadeeynta shakhsiga u baahan tahay tusaale ahaan marka aad qaadaneeysid liisinka. Waa muhiim in la ogaadaa in caddeynta shaqkhsiga aan loo isticmaalin karin inaad caddeyso qofka aad tahay.

Haddii aad uu baahato cadeeynta shakhsiga waxaad ka dalban kartaa bogga internetka Hey'adda canshuuraha ama mid ka mid ah xafisyadeed. Waa sahlan tahay in aad hesho waraaqada cadeeynta shakhsiga marka aad uu baahato.

Kaarka aqoonsiga

Id-kort waxaa laga soo gaabiyay identitetskort (kar aqoonsi). Waxaad isticmaaleysaa kaarka aqoonsiga markaad da'daada caddeyneysid iyo marka aad aqoonsigaaga caddeyneysid tusaale ahaan markaad daawo ka dooneysid farmashiiyaha ama markaad dano ka leedahay bagiga. Waxaad kaarka aqoonsiga ka dalban kartaa xafiiska adeegga Hey'adda cashuuraha. waxuu joogaa 400 karoon inaa ddalbatid waxuuna shaqeynayaa shan sano. Warbixin ku saabsan xafiisyada sameeya kaarka aqoonsiga ka akhriso bogga internetka ee Hey'adda cashuuraha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Si aad u dalbato kaarka aqoonsiga waa inaad degantahay Iswiidhan, da'aada eey tahay 13 sano iyo inaad caddeyn kartid qofka aad tahay. Haddii aad 18 ka hooseeyso waa in aad heeysataa ogalaanshaha qofka xanaanadaada mas'uulka ka ah si aad uu hesho kaarka aqoonsiga. Qofka xanaanada ka masu'ul ah waa qof dhanka sharciga masu'uliyad uga saaran tahay canuga da'diisa ka hooseeyso 18 sano.

Waxaad caddeyn kartaa qofka aad tahay haddii wadatid kaar aqoonsi oo sax ah ama haddii uu kula socdo qof ku yaqaan oo caddeyn kara inaad adiga adiga tahay. Qofka waxuu tusaale ahaan noqon karaa ninkaada/xaaskada, waalid, walaal ama canug weeyn. Marmarka qaarkood shaqo dhiibaha ama qof kale oo ka socdo Hey'ad dowladeed oo si fiican ku garanaayo ayaa noqon karo caddeeye.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan qofka ku caddeyn kara waxaad ka akhrisaa bogga internetka ee Hey'adda cashuuraha: **www.skatteverket.se**

Kaarka aqoonsiga oo eey sameeyso Hey'adda cashuuraha waa kaar aqoonsi oo ka shaqeynaya Iswiidhan gudaheed. Kaarkaas aqoonsi oo eey sameysay Hey'adda cashuuraha uma isticmaali kartid baasaboor ahaan markaad dibadda u safreysid. Haddii uu kaa dhumo kaarkaada aqoonsiga waa inaad wacda 020-32 32 62 kadibna aad iska xirtaa. Markaas qof kale ma isticmaali karo. Haddii uu kaarka kaa dhumo waa inaad booliska u sheegtaa.

Cadeeymada aqoonsiga Iswiidhan ansaxeeyso

Cadeeymada aqoonsiyeed ayaa la ansaxaya

- kaar aqoonsiga Hey'adda canshuuraha
- liisin iswiidhish
- kaark aqoonsi ee saaran tahay calaamada-SIS oo uu saaray bangi, adega qasnada ama soo saartay hey'ad dowladeed
- kaar shaqo ee soo saartay hey'ad dowladeed
- kaarka aqoonsiga ee qaranka iswiidhan
- baasaboorka iswiidhishka ee gaduudan
- baasaboor dalalka midowga yurub ee la soo saaray 1 sebtembar 2006-dii kadib
- baasaboor ka socdo Norway, Iceland, Switzerland ama Liechtenstein oo la soo saaray 1 sebtembar 2006-dii kadib.

Kaarka-aqoonsiga **Masawirqaade: Hey'adda canshuuraha**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sharci deganaansho laakin aadan laheyn caddeyn aqoonsi oo sax ah

Qofka leh sharci deganaansho ee laakin aadan heeysan cadeeyn aqoonsi oo la ansaxay ama heeysto qof ku cadeeyn karo, waxaad si kastaba heli kartaa kaarka aqoonsiga. Hey'adda canshuuraha waxeey warbixintaada uu bardhigeeysaa warbixinta taalo Hey'adda socdaalka. Waxa loo bardhigaayo waa magacaada, dhirirkaada, masawirkaada, saxiixaada, dokumentiga safarka iyo cadeeynta heesashada sharci deganaansho. Waxaad uu baahan tahay in aad muujiso baasaboorka iyo cadeeynta heesashada sharciga deganaanshaha. Haddii aadan heeysan baasaboor waxaad muujineeysaa lee cadeeynta heesashada sharciga deganaanshaha. Haddii aad dooneeyso in aad habkaan uu xoojiso aqoonsigaada waxaad ka warameeysaa markii aad codsaneeyso kaarka-aqoonsiga.

Ceeymiska bulshada ee guud

Ceeymisyada bulshada waa qeeyb muhiim ah oo ka tirsan bulshada dalka Iswiidhan. Waxuu difaac dhaqaale siiyaa qooyska iyo caruurta, qofka naafaha, waayeelka iyo marka ee jiro iyo dhaawac shaqo yimaado.

Hey’adda qasnada ceeymiska ayaa go’aamiso haddii aad xaq u leedahay ceymis bulsho. Hey’adda qasnadda ceeymiska waa hey’ad dowladeed. Sido kale Hey’adda qasnada ceeymiska ayaa lacagahaas soo dirto. Hey’adda hawlgabka ayaa soo dirto lacagta howlagabka iyo taageerada dhaqaale ee waayeelka.

Marka koobaad aad kaalmo ka codsaneeysid Hey'adda qasnada ceeymiska waxeey baaritaan ku sameeyneeysaa haddii aad xaq uu lee dahay kaalmada. Kaalmada nuuca aad ka codsan karto Hey'adda qasnada ceeymiska, tusaale ahaan halkaan ee ku soo socdaan:

Kaalmada kabida iijaarka

Haddii dakhligaadu yaryahay oo aadna Iswiidhan ku diiwangalsantahay waxaad xaq uu lahaan kartaa in aad caawinaad kirada uga hesho Hey'adda qasnada ceeymiska. Waxaa loo yaqaan kaalmada kabida iijaarka. Qofka carruur leh wuxuu xaq ku leeyahay in uu Lacagta kabida iijaarka codsado. Haddii aad heli karto kaalmo iyo inta aad heli karto waxeey ku xirantahay inta qof ee reerkaada ka kooban yihiin.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

Waxeey kale oo ku xiran tahay heerka iijarka iyo inta lacag ee in soo gasho. Sido kale qofka uu dhaxeeyo 18 iyo 28 sano waxuu xaq uu yeelan karaa kaalmada kabida iijaarka. Waa muhiim in aad uga waramto Hey'adda qasnada ceeymiska haddii uu dakhliga wax iska badalo. Haddii kale waxaa waajib kaaga saarmi karaa in aad lacag celiso.

Kaalmada loogu tala galay waalidka

Waxaa jirta lacag kaalmo oo loogu tala galay qofka waalidka ah ama noqon rabo waalid. Waxaad xaq uu lee dahay in aad hesho lacagta uurka haddii aad canug sugeeysid oo aad ka shaqeeyso shaqo culus aadna badali karin hoowlaha culus.

Markii aad hesho caruur waxaad lacagt uu lee dahay lacagta fasaxa waalidka iyo lacagta fasaxa waalidka ee ku meel gaarka ah. Lacagta fasaxa waalidka waxeey xaq kuu siineeysa lacag aad 480 maalmod ku heleeysid guri la jooga canugaada. Sido kale waxaad xaq uu lee dahay in aad lacag hesho marka aad ka maqan tahay shaqadaada si aad uu canugaada uu la joogto marka uu jiran yahay. Taasi waxeey khuseeysaa ilaa uu canuga ka gaaraayo laba iyo toban sano.

Waalidiinta dhamaantood waxeey xaq uu lee yihiin lacagta caruurta. Waa lacag dhan 1250 karoon oo bil kasto loogu tala galay canuga ilaa uu ka gaaraayo 16 sano. Haddii aad lee dahay hal canug ka badan, lacag dheeraad ah ayaa la socoto lacagta caruurta. Waxaa lagu magacaabaa lacagta caruurta ee dheeraadka ah. Haddii aad isla wadaagtaan qaadidda mas'uuliyadda sharciyeed ee cunuga adiga iyo waalidka kale markaas waa qeybsaneysiin lacagta taageerada carruurta.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haadii aad qabto canug naafo ah waxaad xaq uu lee dahay lacago kala duwan. Waalidka canuga naafo ah waxeey codsan karaan lacagta daryeelka canuga.

Ku noolashada itaaldarrada

Qof naafo ah waa qof qabo cudur ama dhaawac keenaayo in uu baahan yahay taageero dheeraad ah.

Qofka sidaas ah waa in isku fursada uu ulhaadaa nolosha-bulshada ee dadka kale. Tusaale ahaan caruurta naafa ah waa in ee sida caruurta kale uu helaan xanaanada-caruurta iyo dugsi dhigashada.

Waxaa jiro sharciga LSS oo ah sharci taageera iyo caawinaad xaq uu siinaayo qofka naafaha ah. Taageerada waxeey tusaale ahaan kartaa qof kuugu caawiyo si aad uu fulin laheeyd hawlqabadkaada maalmeed. Waxaad sido kale heli kartaa lacag (lacagta naafada) haddii naafanimada ee tahay mid keeneeyso kharashyo dheeraad ah ama haddii aad tusaale ahaan uu baahan tahay taageero si aad wax uu shaqeeyo ama dugsi waxbarasho dhigato. Waxaad lacagta naafada (handikappersättning) laga codsadaa Hey'adda qasnada ceeymiska (försäkringskassan).

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waxuu LSS taageero ku heli kartaa haddii aad qabto garad dhimasho, xanuunka autism ama dhaawacyo jireed ama maskaxeed. Qofka qabo canug naafao ah, waxuu heli karaa lacagta kaalmada daryeelka (vårdbidrag). Haddii aad qabto su'alooyin ku saabsan naafanimo, waxaad la hadleeysa xafiiska degmada bulshada ee degmadaada.

Adeega raacida

Haddi ee dhibaato kuugu tahay in aad kaligaa safarto ama raacida gaadiidka-dadweeynaha (basaka iyo tareemada) waxaad heli kartaa adeega raacida (färdtjänst). Waxaa markaas raaceeysaa taksi ama bas yar. Degmada ayaa go'aan ka gaareeyso haddii aad heli karto adeega-raacida.

Haddii aad jirato ama aad tahay qof naafo ah

Haddii aad jirato marka aad shaqeeyneeyso waxuu shaqo dhiibahaada bixinaa mushaar jiro mudo 14 bari ah. Waxii ka danbeeyo waxaad lacagta ka heleeysaa Hey'adda sanduuqa ceeymiska. Waxa lagu magacaabaa lacagta jirada.

Haddii aadan waqti buuxo cudur awgiis uu shaqeeyn karin ama haddii aad qof naafo ah tahay waxaad lacag ka heli kartaa Hey'adda qasnada ceeymiska.

In aad la xariiro hey'adda qasnada ceeymiska

Hey'adda qasnada ceeymika waxeey lee dahay xafiis aad aadi karto haddii aad qabto SU'AAL. Marmarka qaarkood waa in aad waqti ka balansataa. Waxaad warbixin dheeraad ah ka heleeysaa bogga: **www.forsakringskassan.se**

Haddii aad go'aanka Hey'adda sanduuqa ceeymiska uu aragto in uu qaldan yahay waad ka dacwoo kartaa. Ka dacwooshada waa in qofka uu soo qortaa, waana in uu sameeyaa mudo labo bilood gudaheed ah laga bilabaa marka go'aanka la gaaray. Waxaad ka dacwooshada uu direeysaa maxkamada maamulka laakin marka hore baqshada waxaad uu dirtaa Hey'adda qasnada ceeymiska. Sababtuna waxeey tahay si Hey'adda qasnada ceeymiska uu hesho fursad ee ku badasho go'aankeeda. Haddii Hey'adda qasnada ceeymiska ee san badalin go'ankeeda, waxeey ka dacwooshadaada uu gudbineeysaa maxkamada maamulka.

Taageero dhaqaale

Taageerada dhaqaale waa qeyb ka mid ceymiska adeegga bulshada kuwaasoo eey degmooyinka mas'uul ka yihiin.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waxaad taageeradaas dhaqaale ka dalban kartaa xafiiska adeegga bulshada ee degmadaada waa haddii aad isaga filneyn masruufkaada. Warbixin dheeraad ah oo arrintaan ku saabsan waxaad ka heleysaa qeybta ”Sidaan ayey degmadaadu u shaqeysaa” waxeyna qeyb ka tahay cutubka 2.

Waxbarashada dadka waaweeyn

Iswiidhan caadi ayee ka tahay in qof weeyn uu waxbarasho dhigto. Dad badan ayaa waxbarasho dhigto si ee ugu hormaraan shaqadooda ama uu badashaan shaqo. Dad badana waxeey waxbarasho uu dhigtaan ayagoo taasi uu arko in ee tahay mid hami leh hadana jecel in wax cusub ee bartaan. In ee arrin fiican tahay ayaa loo arka waxbarasha si socoto - waxaa loo yaqaan waxbarasho nolosha dhan socoto.

Xafiiska jiheynta waxbarashada

Haddii aadan hubin waxa aad dhiganeeyso waxaad u tagi kartaa Xafiiska jiheynta waxbarashada. Waa xafiis dadka waaweeyn ka heli karaan talo ku saabsan waxbarasho iyo shaqo kala duwan. Xafiiska jiheynta waxbarashada waxuu inta badana ku yaal dugsiyada dadka weeyn ee degmadada ku yaalo. La xariir degmadaada si aad uu hesho warbixin dheeraad ah.

Dadka waaeeyn waxeey Iswiidhan kuu lee yihin fursado-waxbarasho oo kala duwan.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xafiiska jiheynta waxbarashada waxaa kala kaa caawin karaan:

- in aad shahaado ka dalabto waxbarashadaada
- in aad codsato barnaamij waxbarasho kala duwan iyo koorsooyin
- in aad hesho warbixin ku saabsan waxa aad uu baahan tahay si aad soo gasho barnaamij waxbarsho ama koorso
- in aad hesho warbixin kale oo ku saabsan waxbarsho

Xarunta jiheynta waxbarashada (Vägledningscentrum)

Haddii aad ka yar tahay 20 sano, waxaad caawinaada doorasho waxbarasho ka heli kartaa xarunta jiheynta waxbarashada. Caawinaadda aad halkaa ka heli karto waxaa ka mid ah:

- in aad kala hadasho waxbarashada ama xirfadda aad dooneyso in aad doorato
- in aad hesho warbixino ku saabsan waxbarashooyinka xirfadaha
- warbixino ku saabsan waxbarashooyinka dalalka kale

Af-iswiidhishka loogu talagalay ajnebiga - SFI

Af-iswiidhishka loogu talagalay ajnebiga, sfi, waxa weeye barasho asaasi ah ee afka iswiidhishka oo loogu tala galay dadka waaweyn oo uusan iswiidhishku ahayn afkooda koowaad. Waxaad sfi dhigan kartaa saacado buuxa ama saacado yar. Waxbarashadu waa lacag la'aan.

Waxbarashada sfi waxeey lee deehay qeeybo kala duwan, waxeeyna ku xiran tahay waxbarashadaadi hore. Tusaale ahaan waxaa jiro waxbarsho sfi oo qofka loogu diyaarinaayo xirfad. Waxaana jiro sfi loogu tala galay dadka soo dhigtay jaamacad ama dugsi sare.

Waxaad xaq uu leedahay in aad waxbrashada iswiidhishka loogu tala galay ajnabiga, ka qayb qaadatid laga bilabaa sanadka aad buuxisay 16 sano. Laakin waxaa caadiyan ah in dadka ka yar 20 sano ay ku badashaan inay wax ka bartaan dugsiga sare. Marka aad codsanaysid SFI waxaad soo qaadanaysa kaarkaaga-aqoonsiga, liisan ama baasaboor.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

Waxbarashada dadka waaweyn ee degmada - Komvux

Komvux waa dugsi ay dadka waaweyni ku bartaan maadooyinka lagu dhigto dugsiyada hoose-dhexe. Waxaa lagu magacaabaa **waxbarshada asaasiga ee dadka waaweeyn**. Haddii aadan horay u soo dhigan dugsiga hoose-dhexe ama waxaad xaq u leedahay in aad waxbarashadaas mid u dhiganta ku barato waxbarshada asaasiga ah ee dadka waaweeyn.

Sido kale waxaad komvux ku dhigan kartaa isla maadooyinka lagu dhigto dugsiga sare ee caadiga ah. Waxaa lagu magacaaaa **waxbarashada dugsiga sare ee dadka waaeeyn**. Haddii aadan dhigan waxbarasho uu dhigmato waxbarshada dugsiga sare ee iswiidhan, waxaad dhigan kartaa waxbarshada dugsig sare ee dadka waaweyn.

Komvux waxuu lee yahay waxbarasho aad dhigan karto dugsiga sare kadib. Waxaa tusaale ahaan jiro **waxbarasho xirfadeed**. Waa waxbarsho xirfadeed oo loogu tala galay dadka waaweeyn. Haddii aad dugsiga sare ku dhigato komvux waxaad si codsan kartaa jaamacad. Waxbarshada komvux waa ka dhaqo badan tahay waxbarashada caadiga ee dugsi hoose-dhexe iyo dugsiga sare. Waa in aad si

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

gaar ah uu go'aamisid sida aad uu qorsheeyn la heeyd waxbarashadaada. Waxaad dhigan kartaa maalin ama habeen. In kombux la dhigto waa lacag la'an laakin adiga ayaa iska bixinaayo kharashka buugaagta iyo qalabka waxbarashada. Haddii aad ka weeyn tahay 20 sano, aadna dhigato ugu yaraan boqolkiiba 50 waxaad lacagta kaalmada ardayda iyo lacagta deeynta ardyda la dalban kartaa Hey'adda kalmada dhaqaale ee ardayda (Centrala studiestödsnämnden, CSN).

Sido kale waxaa jirto waxbarasha dadka waaweeyn ee loogu tala galay dadka eey wax uu dhiman yihiin ama qabo carqalado kale oo dhanka maskaxda ah. Waxbarashada nuucaas ah waxaa lagu magacaaba **särvux**.

Dugsiyada waxbarashada bulshada

Dugsiga waxbarashada bulshada (folkhögskola) waa dugsi loogu tala galay ardayda waaweeyn. Waxaad halkaas ku dhiganeeysaa koorsooyin ah heer dugsi hoose-dhexe iyo dugsi sare ama waxbarasho xirfadeed oo heer dugsi sare ah. Dugsiyo badan oo ka mid ah kuwaan waad degnaan kartaa adigo waxbarasho ku dhiganaayo. Dugsiyada waxbarashada bulshada waxaa ku baran kartaa koorsooyinka kala duwan:

- Koorsooyinka guud ayaad dhigan kartaa badalka dugsiga sare iyo marmarka qaarkood dugsiga hoose-dhexe. Waxaad halkaa wax ku baran kartaa sannad ilaa afar sano ayadoo la fiirinaayo waxbarashadaadi hore. Xawliga waxbarashaduna waa deggan tahay kan komvux.
- Koorsooyin gaar ah waa koorsooyin loo ku jiheeysan maado gaar ah. Waxaad tusaale ahaan dhigan karta heesaha ama farshaxanka. Sido kale waxaad dhigan kartaa shaqo gaar ah barashadeed tusaale ahaan hogaamiyaha guriga xilliga firaaqada ama kalkaaliyaha daryeelka.
- Af-iswiidhishka loogu talagalay ajnebiga Waxaad dugsiga waxbarashada bulshada ku baran kartaa koorsooyin SFI ah.

Dugsiyada waxbarashada bulshadu ayaa go’aan ka gaaraya qofka halkaa wax ku baranaya. Dugsiyada waxbarashada bulshadu waxay leeyihiin nidaam shahaado oo u gaar ah. Waxbarashada dugsiyadaan waxay ku siinayaan waxbarasho asaasi ah oo aad ku bilowdo jaamacadaha. Taas micneheedu waa in aad ka heleyso aqoonta aad u baahan tahay si aad wax ugu barato jaamicadaha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waxbarashooyinka xirfadeed ee heer jaamacadeed (YH-utbildning)

Waxbarashooyinka xirfadeed ee heer jaamacadeed waa waxbarasho lagu beddeli karo waxbarashooyinka dhaadhee ee jaamicadaha. Waxbarashooyinka xirfadeed ee heer jaamacadeed waxeey badal ka u noqon kartaa waxbarashooyinka jaamacadeed ee ka mudo dheer. Inta waxbarashadu socoto waxay ardaydu xiriir dhow la leeyihiin shirkadaha ayagoo ku shaqo tabooranaayo/LIA (waxbarasho shaqada lagu baranayo).

Waxbarashada lagu dhigo dugsiyada xirfadeed ee heer jaamacadeedka ah waxeey xariir dhow la lee yihiin suuqa shaqada. Ula jeedada laga lee yahay waa si uu ardaya dhaqso shaqo ugu helo markuu dhameeysto waxbarashada. Qeeybo ka mid ah waxbarashooyinka xirfadeed ee heer jaamacadeedka, waxeey soo bandhigaan iswiidhishka oo ku jiheeysan xirfad shaqo oo leh taageero dheeraad ah. Waa taageero loo fidinaayo qofka aan af iswiidhish uu aheeyn afkiisa hooyo. Haddii aad dooneyso in aad wax dheeraad ah ka ogaato waxbarashooyinka xirfadeed, la xiriir Hay'adda waxbarashada xirfadeed ee jaamacadaha **www.myh.se**

Sii aad uu dhigato waxbarasho xirfadeed ee heer jaamaceedka ah waa in aad aqoon asaasi uu lee dahay dhigashada jaamacadaha. Taas mecnaheed waa in aad shahaado uu heeysato maadooyinka la iska doonaayo si aad uu dhigato jaamacad.

Jaamacadaha iyo kulliyadaha

Dalka Iswiidan waxaa ka jira jaamacado iyo kulliyado. Farqiga u dhexeeya waa in jaamacaddu waajib ku saaran yahay in ee lahaadaan waxbarashada cilmi-baarista halka kuliyadaha ee san ku qasbaneeyn. Waxbarashooyinka jaamacadaha iyo kulliyaduhu waa isku dhibco iyo imtixaan. Ugu yaraan hal jaamacad ama kulliyad ayaa ku taalo gobol kasto.

Barnaamijyo waxbarasho ama koorsooyin madaxbannaan

Barnaamijka waxbarashada waxaa ku jira koorsooyin badan oo marka danbe horseeda qalinjebin. In la qalinjebiyo micneheedu waa in dhammaan imtixaanadii lagu gudbay oo sidaas lagu dhammaystay waxbarashadii. Waa in aad dhigataa koorsooyinka barnaamijka badankood. Laakiin waxaa jira koorsooyin uu qofku uu dooran karo. Si aad

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland



Sawir: Johnér

ugu qalinjebisid dhakhtarnimo, aqoonyahan arrimaha bulshada, garyaqaan ama inginyeernimo, waa in aad raacdaa oo dhameeysaa barnaamijka waxbarshada kuu dhigan. Haddiise aad dhiganeyso koorsooyin madaxbannaan, adiga ayaa dooranaaya koorsada aad dooneyso iyo habka aad u baraneyso. Haddii aad dhiganeyso waqti buuxa, waxaad sannadkii dhiganeysaa 60 dhibco jaamacadeed.

Waxa loo baahan yahay in jaamacad lagu bilaabo

Si aad u dhigato waxbarshada asaasiga ah ee jaamacadeed waa in aad haysataa aqoon asaasi ah. Mararka qaarkood waxaa loo baahnaan karaa aqoon gaar ah. Taasi mecnaheed waa in ad soo dhigatay koorsooyin dugsi sare oo gaar ah si aad uu soo gasho waxbarsho jaamcadeed oo gaar ah.

Shuruudaha aqoonta asaasiga ah waxaa ku soo baxaya:

- qofka haysta shahaadada dugsiga sare ama ku gudbay ugu yaraan boqolkiiba 90 imtixaanka waxbarashadaas
- qofka haysta shahaadada waxbarashada dadka waaweyn ee dusgiga sare ama ku gudbay boqolkiiba 90 imtixaanka waxbarashadaas
- qofka haysta waxbarasho iswiidhish ama shisheeye ah oo u dhiganta waxbarashada dugsiga sare iswiidhishka ama waxbarashada dusgiga sare ee dadka waaweyn, tusaale ahaan:
    - shahaadada dugsiyada waxbarashada bulshada isla markaana dhigtay koorsooyinka siinaayo aqoonsta asaasiga

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

- qofka habka u helay aqoon u dhiganta dugsiga sare ee iswiidhishka ama waxbarashada dugsiga sare ee dadka waaweyn
- qofka haysta shahaadada dugsiga ee Denmark, Finland, Iceland ama Norway
- qofka waxbarasho dalka gudahiisa ama dibeddisa ama khibrad xirfadeed ku helay aqoon uu ku bilaabi waxbarashada jaamacadda

Haddii aad heeysato shahaado shisheeye waxaa sido kale kuugu xirin shuraad ku saabsan in aad aqoon haboon uu lee dahay afka iswiidhishka iyo ingriiska.

Aqoomaha gaarka ahi waa kala duwanaan karaan taasoo ku xiran hadba waxbarashada la doonayo. Warbixin ku saabsan aqoomaha gaarka ah oo la isaga baahan yahay, waxaa laga heli karaajaamacadda waxbarashadaas lagu dhigo.

Qiimaha waxbarashada jaamcadaha

Hoowlaha jaamacadeed badankeed waxaa lagu maalgaliyaa lacagta dowlada.

Sidaas darteed ayee waxbarashada jaamacadeed uu tahay mid lacag la'an ah laakin buugag iyo qalabka waxbarashada adiga ayaa iibsaneysa.

Ardayda booqshada ku joogo ee ka yimid dalal ka baxsan EU/ESS oo mudo xadidan waxbaranaayo, waa in waxbarshada iska bixiyaan.

Haddii aad dhiganeyso ugu yaraan waxbarasho saacado gaaban, boqolkiiba 50, waxaad xaq uu lee dahay in aad codsato lacagta kaalmada ardyda ama lacagta deeynta ardayda oo laga codsado Hay'adda kaalmada dhaqaale ee ardayda, (CSN).

Warbixin dheeraad ah

Waxaad warbixin dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada jaamacadaha, kuna qoran afafka kala duwan ka akhrisan kartaa bogga internetka: **www.studera.nu**. Haddii aad dooneeyso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka codsiga jaamacadaha waxaad ka akhrsian kartaa bogga internetka: **www.antagning.se**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Qiimeynta

Micneheeduna waa in la qiimeeyo wax ay adag tahay in la cabbiro qiimahooda dhab ah. Markii la qiimeeyo waxbarashadaada ama aqoontada xirfadeed ee gaarka ah waxaa lagu magacaabaa qiimeeyn. In qiimeeyn lagu sameeyo waxbarashadaadii hore ama khibradahaada xirfadeed waxeey muujin kartaa in aad lee dahay aqoon uu dhigmato mid lagu dhigo koorsooyinka Iswiidhan. Waxaa lagu sameeyaan karaa qimeeynta aqoonta shaqada ayadoo laguu qiimeeynaayo aqoontaada laguna la yeelanaayo wadahadal hadana laga qaadaayo imtixaan. Waxaa qimeeynta lagu sameeyaa shaqooyinka tusaale ahaan, shaqooyinka dhismaha, daryeelka, warshadaha, gaadiidka iyo guriyaha/maqaayadaha.

Qiimaynta shahaadooyinka waddamada kale laga keensaday

Haddii aad haysato shahaado waxbarasho sare aad dibada kala timid, waxaa waxbarashadaada kuu qiimayn kara guddiga jaamacada iyo waxbarashooyinka sare (Universitets- och högskolerådet). Qiimeynta waa lacag la'an. In dheeraad ah ka akhriso bogga internetka: **www.uhr.se**.

Xirfadooyinka qaarkood waxaa nidaamiyaya sharciga Iswiidhan. Waxeeyna lee yihiin shuruudo lagu buuxinaayo si looga shaqeeyo xirfadaas, shuruuda waxeey ahaan kartaa in loo heeysto shahaadadada xirfada. Si looga shaqeeyo xirfad nuucaas ah waa in qofka uu ogalaansho ka codsadaa Hey'adda dowladeed oo ka mas'ul ah xirfadaas. Tusaale ahaan, dhakhtarada ama kaalkalisada caafimaadka waa in ogalaansho ka codsadaan Hey'adda maamulka bulshada (Socialstyrelsen). Xirfadaha waxbarashadana waa in qofka ogalanshada ka dalbada Hey'adda dugsiyada (Skolverket).

Turjumidda shahaadooyinka ajnebiga

Si shahaadooyinka aad dibedda kala timid laguugu qiimeeyo, waa in lagu turjumaa af-iswiidhish. Turjumudaa waa in uu sameeyaa turjumaan shaqada khabiir ah. Xafiiska shaqada marmarka qaarkood waxuu ka caawini karaa in shahaadooyinka laguu turjumo. Haddii shahaadooyinkaasi ku qoran yihiin af-ingiriis, af-faransiis, af-jarmal, af-isbaanish ama afafka waqooyiga Yurub, markaas loo ma baahna in la turjumo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Kaalmada dhaqaale ee ardayda

Kaalmada dhaqaale ee ardaydu waxay isugu jiraan deeyn iyo deeq la siiyo ardayda waxbaraneysa. Kaalmada dhaqaale waxey u qeybsantaa qeyb deeq ah iyo qeyb deyn ah. Qeybta deeqda adigaa iska leh laakiin qeybta deynta waa inaad soo celisaa iyadoo eey ribo la socoto. Marka aad dalbaneysid waxaad dooraneysaa haddii aad rabtid deyn ama haddii aadan rabin. Waxaad bixineysaa lacagta deynta ah lix bil kadib marka aad qaadato qeybta ugu dambeyso, waana waqtiga ugu dhaqsiyaha badan ee la bixin karo. Haddii aad carruur leedahay lacag dheeraad ah ayaad heleysaa.

Caadi ahaan waxaad lacagtaas xaq u leedahay haddii aad heysatid sharciga deganaashaha waddanka (PUT). Xaq waxaad kaloo u lahaan kartaa haddii eey Laanta socdaalka ku siiso sharci degenaasho sababa la xiriira inaad magangelyo doon tahay, inaad gabbaad u baahnaato ama xaalado kale oo laguu siin karo sharci deganaasho. Waad heli kartaa haddii xattaa deganaashahaaga uu waqti ku xiranyahay xattaa. Waa inaa dbuuxisaa shuruudaha kale ee lacagta waxbarashada lagu helo, tusaale ahaan in waxbarashada aad dhiganeysid eey xaq kuu siineyso kaalmo lacag waxbarasho.

Qofka ku jiro boroseeska magangelyo dalabka ah xaq uma laha in CSN eey kaalmo siiso. Warbixin dheeraa dah waxaa laga heleyaa: **www.csn.se**

Wakhtiyada firaaqada iyo ururrada bulshada

Waqtiga firaaqada waxaa lagu magacaabaa waqtiga aad fasaxa ka tahay shaqada iyo waxbarashada. Iswiidan wacaa caado ka ah ka qeeyb-qaadashada urur. Waxay ku jiraan urur-bulshadeed ama waxay leeyihiin waxyaalo ay xiiseeyaan xilliga firaaqada. Ururada-bulshadeed waxaad ku baran kartaa dad jecel waxa aad jeceshahay. Isla markaana waxaad badsan kartaa la xariirka dadka ku nool bulshada Iswiidhan. Mar haddaad dalka ku cusub tahay, waxeey ka qeeybqaadashada urur fursad kuu siin karaa in aad hesho saaxiibo cusub oo aad dhaqso afka iswiidhishka ugu barato. Arimaha bulshada ee muhiimka ahna waxaad uga hoowl gali kartaa ururo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Iswiidhan waxaa ka jirto xuriyada-urureed Taas qeeyb muhiim ah ayee ka tahay bulshada demoqraadiga ah. Xuriyada-urureed mecnaheed waa in dadka dhamantood xaq uu lee yihiin in ee asaasaan urur. Dad isku hami leh ama isku cid ka soo jeedo waxeey furan karaan urur.

Waxaa jiro ururo badan, tusaale ahaan, ururada isboortiga, ururada dhaqanka iyo heesaha iyo ururo diimeed. Hoowsha lagu qabto ururka waa mid tabruc ahaan loo qabto oo aan mushaar lagu qaadan.

In urur la dhiso

Marka urur la dhisaayo waa in uu ururka yeeasha guddi. Guddiga waxuu soo gudbinaa talooyin ku saabsan nidaamyada lagu maamulaayo ururka. Nidaamyada waxaa lagu magacaaba xeerka ururka. Ururada waxaa badanaa laga diiwaangaliyaa Hey'adda canshuuraha oo uu soo saarto lambar urur. Inta badanaa ururada waxeey lee yihiin koontobangi ama nambarka Plusgiro.

Xariirka ururada kala duwan

Haddii aad dooneeyso in aad ka qeeyb gasho urur, ama aad dhisto urur ama aad lacag uu dalbaneeysid ururkaada waxaad la xariiri kartaa degmadaada. Waxaa degmada tusaale ahaan ku oolaan karo xafiiska maamulka wakhtiga firaaqada (fritidsförvaltninge) oo caawiyo ururada.

Sida loo billaai karo iyo sida loo maareeyo urur jaaliyadeed waxaad ka akhrisan kartaa bogga internetka **www.verksamt.se**. Halkaas waxaad ka heli kartaa warbixinno ka socda Hey'adda shirkadaha, Hey'adda cashuuraha iyo Hey'adda dhaqaale kobcinta.

Ururada ajnabiga

Urur ajnebi wuxuu noqon karaa urur ka howl gala sidii dadka isku meelaha ka yimid ay isku la kulmi lahaayeen dalka cusub. Ururada ajnabiga waxeey caawinad fiican uu noqon karaan soo galooytiga cusub si ee uu fahmaan bulshada Iswiidhan.

Ururada dhaqanka

Urur dhaqan waxuu ahaan karaa urur isku keenay dad ka helo ciyaar ama riwaayad ama heeso gaar ah. Sido kale waxuu noqon karaa urur isku keeno dad ka soo jeedo isku cid iyo dhaqan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waayelo heesaayo **Masawirqaade: Colourbox**

Ururrada samafalka

Ururrada samafalku waxay ku dadaalaan sidii loo beddeli laha oo loo horumarin lahaa bulshada.

Ururka samafalka waxaa kaloo mararka qaarkood loo yaqaan ururrada tabaruca ah ama Non Governmental Organizations, NGOs Ururo badan oo noocaan ah ayaa ka hawlgala meelo badan Iswiidhan ku yaal. Qaarkoodna waxay joogaan dalal kale.

Hoos waxaa ku qoran dhawr ka mid ah ururrada samafalka dalka ku yaalo Iswiidhan:

Laanqayrta Cas (Röda korset) waa urur caalami ah oo ka jira dunida oo dhan. Meelaha qaarkood waxaa looga yaqaan bisha cas. Wuxuu ururka Laanqayrta Cas dadka ka caawin karaa in loo baadigoobo dad dadkoodii xiriirka ku kala go'ay dagaalo, iska horimaad ama masiibo kedis ah.

Ururka Laanqayrta Cas waxuu degmooyinka kala duwan kuu lee yahay hoowlo haboon uu gaar ah meeshaas. Howlaha waxeey ahaan karaan caawinaada-layliga, ama hoowlo loogu tala galay qofka ku cusub Iswiidhan. Ururka Laanqayrta Cas Iswiidhan waxuu degmooyin badan ku lee yahay xarumo daryeeleed oo loogu tala galay dadka dagaal iyo jirdil ku soo dhaawacmay.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

Ururka Badbaadada Carruurta (Rädda barnen) waa urur caalami ah oo ka shaqeeya xuquuqda carruurta dalka Iswiidhan iyo dalalka kale.

Ururka Dhallinyarada Kirishtaanka (KFUM) waa qayb mid ah ururka caalamiga ah ee YWCA-YMCA. Waxeey inta badanaa hoowlo uu hayaan dhalinyarada dalka ku cusub. Qof ururka ka socda ayaa isu keenaa dhallinyarada si ay u wada aadaan shaleemo, riwaayad ama uga qaybgalaan cayaar isboorti ah.

Ururka caawinaada gaarka ee shakhsiga (IM) waa urur caalami ah oo Iswiidhana ka hoowl galo. Waxuu ururka dalka ka qabtaa hoowlaha is-dhexgalka iyo ka tirnaanshada bulshada.

Ururo siyaasadeed

Haddii aad xiiseeyso siyaasad waxaa ka qeeyb gali kartaa xisbi siyaasadeed ama hey'ad kale oo siyaasadeed. Ururada siyaasadeed badankood waxeey lee yihiin qeeyb loogu tala galay dadka waaweeyn iyo qeeybo dhalinyaro.

Ururo kale

Ururo kale oo badan ayaa jiro. Waxaa jiro ururo dabiicaadeed iyo xayawaano, ururo bey'adeed ama urur diimeed. Sidoo kale waxaa jiro ururrada hoowlgabka oo ka shaqeeyo danaha dadka hoowlgabayaasha ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ururrada bulshada - Iswiidhan dhaqan uu lee dahay

Urur bulsho wuxuu noqonayaa dad badan oo isu tegay si ay wax uga shaqeeyaan, sida ka caagganaanta khamriga ama bey'adda. Ururrada bulshadu waxay Iswiidhan ka soo jireen muddo dheer. Urur bulsho badanaaba waa urur dalka meelo badan uga yaal. Ururrada bulshadu aad ayey muhiim u ahaayeen Iswiidhan qarnigii 1800-aad iyo 1900-aad. Xiligaas dad badan ayaa u dagaalamayay xuquuqdooda aadanimo iyo sidii loo heli lahaa bulshi dimoqraadi ah.

Ururrada ugu waaweyn waxaa ka mid ahaa ururrada ka caagganaanta khamriga, ururrada kaniisadaha madaxabannaan iyo ururrada shaqaalaha. Ururka ka caagganaanta khamriga ayaa ugu horeeyay. Waxay u shaqaynayeen sidii dadku u yaraysan lahaa cabbida khamriga. Ururka kaniisadaha madaxabannaan waxay ahaayeen urur bulsho oo masiixi ah. Horay ahaantii waxeey u dagaalami jireen waxaa ka mid ahaa in dadka dhamaantood helaan xaqqa codeeynta. Ururo bulsho oo badani waxay u dagaalamayeen sidii dadka oo dan u heli lahaayeen waxbarasho. Maanta waxay ururo bulshadeed badani ka shaqeeyaan arrimo siyaasadda la xiriira. Waxaa kaloo jira ururo bulshadeed isku beddelay oo hey'ado, sida khasnadda shaqala'aanta, a-kassan. Dhaqanka in si wadajir ah loogu shaqeeyo isbeddel weli waa uu ka jira bulshada iswiidhishka. Maantana sidaas ayee ururo badan u shaqeeyaan.

Waxbarashada bulshada

Waxbarashada bulshada mecnaheed waa in dhammaan dadka waaweyn lee yihiin waxbarasho guud. Dhammaan waxbarashooyinka lagu dhigo ururrada waxbarashada iyo dugsiyada waxbarashada bulshada ayaa waxaa lagu magacaabaa waxbarashada bulshada. Waxbarashada bulshadu waxay dalka Iswiidan aad ugu soo korortay in ka badan 100 sano ka hor. Maantana wali waa urur xoogan. Waxbarashada bulshada waxay muwaadiniintu ka helaan aqoon ay si firfircoon uga qaybqaataan hawlaha lagu dhisayo bulsho dimoqraadiga ah.

Ururrada waxbarashada

Ururrada waxbarashadu waa ururo qabanqaabiya waxbarashada dadka waaweyn. Waxaa jira ururo badan oo waxbarasho oo qabanqaabiya xalqad waxbarasho, barnaamijyo dhaqan iyo waxbarashooyin kale oo loogu

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

talagalay dadka waaweyn. Xalqada waxbarashada waxa weeye koorsooyin koox dad ah si wadajir ah ugu bartaan maaddo gaar ah. Tusaale ahaan waxeeyn noqon kartaa farshaxanka, muusikada, luuqadaha ama dhaqamada. ABF, Medborgarskolan, Folkuniversitetet iyo Studieförbundet Vuxenskolan waa dhawr ka mid ah ururrada waxbarashada. Sannad walba waxay ururrada waxbarashadu qabanqaabiyaan in ku dhow 300,000 oo xalqad waxbarasho. Waxaana wax ku barta in ka badan laba milyan oo qof.

Hagidda qaxootiga iyo adeegyo kale

Degmooyin iyo ururo samafal oo badan ayaa waxay ka shaqeeyaan sidii gacan looga geeysan lahaa isdhexgalka qaxootiga iyo ajnabiga cusub iyo dadka iswiidhishka ah. Fikrada ka dambeeyaa waa in ajnabiga iyo dadka iswiidhishka wada kulmaan waqtiga firaaqada si ay isu bartaan oo khibradooyin iska warsadaan. Waxyaalah ay ka qaybqaataan waxaa ka mid noqon kara ciyaarta bowling, booqasho matxaf ama meelaha kaloo xiisaha leh. La xiriir degmadaada si aad u ogaato waxyaabaha la sameyn karo.

Xilliga firaaqada caruurta iyo dhalinyarta

Goobaha xilliga firaaqada

Waxaa degmooyinka ku yaal goob xilliga firaaqada oo loogu tala galay dhallinyarada u dhexeyo labo-iyo-toban sano iyo 16 sano. Sido kale waxaa jiro goobo loogu tala galay dhallinyarada ka weeyn. Goobahaas waxay dhallinyaradu tusaale, ku daawadaan filimo isla markaana kula kulmaan

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

saaxiibadood. Mararka qaarkood waxaa laga qabanqaabiyaa koorsooyin lagu barto qoob ka ciyaarka, riwaayad jilidda iyo heesaha. La xiriir degmadaada si aad u ogaato waxa halkaa ka jira ama ka akhriso bogga internetka degmada.

Hawlaha dhallinyarada wax loogu qabanaayo

Goobaha xilliyada firaaqada marka laga gudbo, waxay degmooyinka qabanqaabiyaan waxqabadyo loogu talagalay dhallinyarada. Sida in la sameeyo xarumaha ay dhallinyaradu ku kulmaan oo ay fursad ugu helaan ka qaybqadasho mashruuc iyo kooxyo kala duwan. La xiriir degmadaada si aad u ogaato waxa halkaa ka jira ama ka akhriso bogga internetka degmada.

Ururrada isboortiga

Ururada isboortigu muhiim ayee u yihiin carruurta iyo dhallinyarada Iswiidhan. Halkaas ayee ku dheeli karaan isboortiga kala duwan, sida kubada-cagta, faras-raacida ama dabaasha. Cilmi-baarista waxaay muujineysaa dhallinyarada ku hawllan isboortigu ay ka caafimaad wanaagsan kuwa kale ee aan ku howlaneyn isboortiska.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su'aalaha wadahadalka cutubka 3

Haddii aad suuqa madoow ka shaqeeyo oo aadan bixin canshuur, siduu arinkaas uu taabanaa bulshada?

Maxeey tahay fa'iidooyinka iyo fa'iido darada, ku jirida urur shaqaale?

Maxeey tahay fa'iidooyinka iyo fa'iido darada, ku jirida urur qasnada shaqaalaha, a-kassa?

Dadka badankood waxeey shaqo ku helaan dadka ee yaqaaniin iyo xariirkooda bulshadeed - sidee adiga Iswiidahn uga dhisan kartaa xariir?

Maxaad uu aragtaa in ee canshuuraha loo isticmaalo oo eey ku filnaadaan?

Ma sareeyso mise waa hooseeysaa canshuurta la iskaga qaado Iswiidhan?

Sidee khibradahaadi hore uu isticmaali kartaa marka aad Iswiidhan shaqo ka raadineeysid?

Maxaad uu baahan tahay in aad ku fakarto marka aad dooraneeyso waxbarasho?

Maxaad adigu jeceshay in aad qabto xilliga aad firaaqada lee dahay?

Shaqadee ayaa dooneeysaa in aad Iswiidhan uga shaqeeyso?

Ma qorsheeyneeysaa in aad waxbarashada sii wadato?

Xariir ma la yeelatay urur adiga ku xiiso-galiyay?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

4. Xuquuqda iyo waajibaadka qofka

Tusmada

Sinnaanta dadka iyo xuquuqda aadanaha

Ka hortaga Takooriska

Qoyska iyo qofka

Xuquuqda caruurta

Xoog uu sheegadka ragga uu geeysto dumarka iyo ehelka dhexdiisa

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sinnaanta dadka iyo xuquuqda aadanaha

Sinnaanta dadka mecnaheed waa in dadka dhamantood isku qiimo yihiin isla markaana isku si loo la dhaqmaayo, iyadoon la fiirineynin halka uu kasoo jeedo, jinsiga uu ka helo iyo hadii uu cuuriyaan yahay.

Kalimada sinnaanta dadka waxaa laga soo qaatay go'aankii Qaramada Midoobay 1948dii ee ku saabsana xuquuqda aadanaha. Baaqa Qaramada Midoobay ee xuquuqda baniaadanka wuxuu ku saabsan yahay in dhammaan dadku ay isku qiimo iyo isku xuquuq yihiin. Dadka dhamaantood waxay xaq u leeyihiin in ay dhiibtaan aragtidooda, oo ay caabudaan eebbaha ay doonaan, ayna iyagu doortaan qofka ay doonayaan in ay nolosha la qaybsadaan.

Go'aankaan wuxuu khuseeyaa dhammaan dadka dunida ku nool. Demoqraadiyada casriga si fiican uu ma shaqeeneeyso haddii aan la ixtiraamin xuquuqda aadanaha. Dowlada waa in ee dadkeeda ka difaacdaa takoor iyo dulmi. Dalka Iswiidan waxaa xuquuqda aadanaha ilaaliya saddex sharci oo ka mid ah dastuurka qaranka: Xeerka hannaanka dowladda, xeerka xorriyadda daabacaadda iyo xeerka xorriyadda hadalka. Xeerarka waxeey dhigaayaan in dowlada iyo degmooyinka ka shaqeeynaayaan sugida xuuuqda helida shaqo, guri iyo waxbarasho oo loogu tala galay dadka dhamaantood.

Bogga internetka dowlada **www.manskligarattigheter.se** ayaad ka akhrisan kartaa in kale oo ku saabsan xuquuqda aadanaha.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Heshiishka Yurub

Waxeey yurub lee dahay, laga soo bilabaa sanadka 1950, heshiis ku saabsan ilaalinta xuquuqda aadanaha. Waxaa lagu magacaabaa Heshiishka Yurub (Europakonventionen). Heshiis dowladeed waxuu ka dhaxeeyaa dalal badan. Xuquuqda ka jirto heshiishka waxaa ka mid ah:

- xaqa xuriyada iyo amaanka shakhsiyeed
- xaqqa helida maxkamadeyn caadil ah
- xaqqa ixtiraanka nolasha shakhsiyeed iyo qooyseed

Sanadkii 1995 ayaa heshiishkaan lagu daray sharciyada Iswiidhan. Dowlada, xukuumada iyo degmooyinka waxeey hubinaayaan in dalka gudihiis heshiishka yurub looga dhaqmo.

Jinsiga, sinnaanta iyo mabda'a sinnaanta dumarka iyo ragga

Sinnaanta waxeey ku saabsan tahay sinnaan u dhaxeeyso ragga iyo dumarka. Dumarka iyo raggaba waxeey ka sinnanaayaan awooda saameeynta bulshada iyo noloshoodaba waana iney dumarka iyo ragga leeyihiin isku xuquuq iyo fursado. Hadba sida qofka loola dhaqmaayo waxey ku xirantahay waxyaabo aan ahyen jinsiga oo kaliya, waxeyna ka dhigantahay in dumar kasta ama nin walba eeysan nolosha kulligood isku meel ka taagneyn isla markaana eey kala duwantahay qaab nololeedkooda.

Jinsiga ama qeyb si fudu loo qeexi karo. Waxaa jira dad aan isku aqoonsaneyn iney nin ama naag midba aheyn, ama noqday jinsi aanan aheyn kii ey ahaayeen marka eey dhalanayeen. Qof walba jinsiguu raba haka soo jeedee waxaa saameynaya sida eey bulshada uu ku noolyahay u qeexeyso jinsi iyo sida eey qiimeyneyso guruubyada dumarka iyo ragga.

Mabda'a sinnaanta ragga iyo dumarka waa oraah bulsho oo micnaheedu yahay in dumarka eey guud ahaan makaankooda ka hooseeyo kan ragga eeyna tahay in wax laga badalo. Mabda'aas oo ah dhaqdhaqaaq siyaasad waxuu siyaabo kala duwan uga shaqeeyaa in ragga iyo dumarka eey isku fursad, isku xuquuq, isku waajibaad eey wax walba oo bulshada ka tirsan u heystaan. Ficil ahaan waxeey ka dhigantahay in la bedelo qaanuunyada takooridda, laga hortago kufsiga, in tirada dumarka ka howlgala goobaha go'aamada lagu gaaro kor loo qaado iyo la muujiyo in takooridda qaarkoood eey salka ku haayaan jinsiga.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sinnaanta siyaasadda iyo guriga

Gudaha Iswiidhan, bilaawgii 1900-yimadii, farqi weeyn ayaa uu dhaxeeyay xuquuqda dumarka iyo ragga. Dumarka looma ogaleeyn iney codeeyaan ilaa sanadkii 1921. Isla sanaadkaas ayaa loo arkay dumarka la qabo in ayagu wax maamulo karaan eey qaangaarna yihiin. Tusaale ahaan mecnaheed waa in markaas loo ogalaaday in eey maamushaan dakhligooda. Maanta tirada ragga iyo dumarka fadhiya baarlamaanka waa isku mid qiyaastii. Xukuumadda tirada wasiirrada ragga iyo dumarka waa isku mid. Siyaasiyiinta laga soo doortay degmooyinka Iswiidhan boqolkiiba 43 waa dumar.

Dumarka la qabo waxey awal xanaaneyn jireen guriga iyi carruurta laakiin 1970-kii ayaa waxaa carruurta loo dhisay dugsiyo xanaano oo badan. Waxaa markaas la hirgaliyay ceymiska waalidnimada kaasoo siinayay waalidiinta ineey fasaxa waalidnimada kala qeybsan karaan marka eey carruur dhalaan. Isbedelladaas waxey sababeen iney dumarka u fududaato iney shaqeeyaan oo helaan lacagey shaqeysteen. 1970-kii waxaa kaloo la hirgaliyay sharciga dhigaya iney dumarka ilmaha iska soo ridi karaan markey uur qaadaan taasina waxey dumarka siisay xuriyad ah iney iyaga jirkooda maamuli karaan go'aamin karaana haddii ilmaha dhaleyso iyo haddii kale.

Waagi hore inta badana hoowlaha guriga waxaa qaban jiray dumarka. Hoowlaaha guriga waxaa tusaale ahaan laga wadaa heeynta caruurta, dhaq dhaqida, nadaafada iyo weeyl dhaqida. Maanta hoowlaha guriga waa laga sii siman yahay sidii waagi hore, laakin dumarka ayaa ragga uga badan hoowsha guriga.

Sinnaanta dhanka shaqada iyo dugsiyada

Sanadkii 1927-dii ayey waxey gabdhuhu helaan fursad la mid tan wiillasha ey u heysteen waxbarasho dowladeed. Dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga sare waxeey lee yihiin qorsho-waxbarasho oo tilmaamaayo waxa eey casharrada ka koobanyihiin. Qorshahawaxbarashada waxaa ku qoran warbixin ku saabsan sinnaanta taasoo mecnaheedu tahay in macalimiinta eey ula dhaqmaan gabdhaha iyo wiliishaba si sinnaan ku jirto. Laakiin doorashada waxbarasho iyo mid xirfad labadaba waxey tusineysaa in doorashooyinka eey dhallinyarada sameynayaan eey hagayaan waxa munaasabka qofka ku ah iyadoo laga duulayo rag ama dumar.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

1980 waxaa soo dagay sharciga sinnaanta oo horeeyntiisaba ku saabsanaa sinnaanta dhanka shaqada iyo mushaaro siman. Maanta boqolkiiba 80 dumarka da'doodu u dhaxeyso 20 illaa 64 sano wey shaqeeyaan. Laakin shaqada ma ahan mid sinnaan ka jirto. Dumarka waxeey helaan mushaar la eg boqolkiiba 87 kan eey ragga qaataan. Taasi waxey ku xirantahay in xirfadaha eey ragga ka shaqeeyaan badankood eey ka lacag badanyihiin kuwa dumarka eey ka shaqeeyaan. Dumarka halka galin shaqeeyo ayaa ka badan ragga halka galin shaqeeyo, dumar badan ayaa fasax waalidnimo oo dheer qaata iyaga ayaana u badan xanaaneynta carruurta. Sidaas darteed farqiga u dhaxeeyo ragga iyo dumarka wuu sii badanayaa. Ragga ayaa dumarka uga badan hogganka goobaha shaqada ayaga ayaana uga badan billaabidda shirkadaha.

Siyaasadda Iswiidhan ee sinnaanta

Baarlamaanka ayaa waxuu sanadkii 2006 go'aamiyay in hadefka guud ee laga leeyahay siyaasadda sinnaanta ee Iswiidhan ey tahay in ragga iyo dumarka ey heystaan isku awood iyo fursado siman eey ku saameyn karaan bulshada iyo noloshooda. Hadefka guud waxaa loo kala qaaday lix hadefyo yaryar ah:

1. Awood qeybsi siman dhinaca awooda iyo raad ku yeelashada. Ragga iyo dumarka waa inay heystaan xuquuq iyo fursado siman oo ey ku noqon karaan muwaadiniin firfircoon iyo ineey meeleynayaan shuruudaha go'aan gaarista.

2. Sinnaanta dhaqaale. Dumarka iyo ragga waa inay heystaan xuquuq iyo shuruudo siman dhinaca shaqo mushaar leh taasoo siineysa xurriyad dhaqaale inta ey noolyihiin.

3. Waxbarasho loo simanyahay. Dumarka iyo ragga, gabdhaha iyo wiilasha waa inay heystaan fursado iyo shuruudo isku mid ah markay noqoto waxbarasho, doorashada waxbarasho iyo horumarinta shakhsiga.

4. Awood qeybsi siman dhinaca shaqooyinka aan lacagta leesku siin iyo shaqooyinka xanaanada. Dumarka iyo ragga waa iney mas'uuliyad isku mid ah ka qaataan shaqada guriga oo helaan fursado ay ku bixin karaan kuna heli karaan daryeel xanaano oo ku salaysan shuruudo isku mid ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

5. Caafimaad loo simanyahay. Dumarka iyo ragga, gabdhaha iyo wiilasha waa inay heystaan xaalado isku mid ah dhinaca caafimaad fiican isla mar ahaantaasna ay helaan daryeel iyo xanaano ku salaysan shuruudo isku mid ah.

6. Ragga dagaalka ay u geysanayaan dumarka la joojiyo. Dumarka iyo ragga, gabdhaha iyo wiilasha, waa ineey helaan xuquuq iyo fursado siman oo ah badbaadada jir ahaaneed.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda sinnaanta ee Iswiidhan iyo shaqada xukuumadda ee ku aaddan sinnaanta ka akhriso xukuummada boggeeda internetka: **www.regeringen.se/feministiskregering**

Ka hortaga Takooriska

In qofka laga ilaaliyo takoor waxeey ka mid tahay xuquuqda aadanaha. Takoorista micneheedu waxa weeye in dad ama koox gaar ah loo la dhaqmo hab ka duwan dadka kale. Taasna waa danbi laga galayao xuquuqda aadanaha.

Hey'adda kahortagga takooristu

Hey'adda kahortagga takooristu, DO, waa hey'ad dowladeed oo uu shaqeeyso sinnaanta dadka dhanka xuquuqda iyo fursadaha. DO waxeey ku hoowlan tahay in ee hubiso raacida sharciga ka hortaga takoorka.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sharciga ka hortaga takoorka waxuu mamnuucaa in shirkadaha iyo hey'addaha qof si ka xun dadka kale in ee uu la dhaqmaan ayagoo ku saleeynaayo jinsigiis, aqoonsigiisa jinsiyeed ama tacbiirkiisa jinsiyeed, diintiisaa ama caqiidadiisa, cirqigiisa, naafada ama habka uu u galmoodo.

Goobaha shaqada iyo dugsiyadaba waa in ay dejiyaan qorshe ay uga hortagayaan takoorista. La xiriir DO haddii lagu takooray. Warbixin dheeraad ah waxeey ku jirtaa bogga internetka DO: **www.do.se**

Waxaa jira wakaalado lookal ah iyo qaar goboleed oo ka shaqeeya ka hortagidda takooridda ee Iswiidhan. Waxey ka shaqeeyaan iney dadka loo geystay takooridnimada siiyaan talooyin iyo caawimaad. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan wakaaladaha ka hortagga takooridnimada halkan: **www.adbsverige.se**

Qiyaaska jinsiga iyo galmada

Bulshadaha dhamaantood waxeey lee yihiin caadooyin ku saabsan habka ee dadka uu noolaayaan. Caadooyinka waa fikrado iyo nimaadyo oo ku saabsan qalad iyo sax iyo habka ee dadka uu dhaqamayaan. Caadada ama qiyaaska ku saabsan in dadka dhan loo arkaayo dad kale jinsiga ka duwan waa mid xog leh. Bulshadooyinka badankood waxeey kale oo lee yihiin caadooyin xoog leh oo ku saabsan in ragga iyo dumarka kala duwanaanayaan iyo in hoowlo kala duwan qabanaayaan. Caadooyinku waxaa ay xitaa raad ku yeeshaan aragtideena galmada iyo xiriiryada. Tusaale ahaan aaminsanaanta in dadka oo dhan loo arko inay yihiin qaar u hamooda jinsiga kale weli aad ayay xoog u tahay.

Dalka Iswiidhan dadka ku nool oo dhan waxeey xaq uu lee yihin ee la noolaadaan eey guursadaan cidda eey doonaan, jinsiga uu rabo ha ahaadabee. Nooca jinsiga ee qofku dareensanyahay in uu ka tirsan yahay waxaa lagu magacaabaa aqoonsiga-jinsiga (könsidentet). Aqoonsiga jinsiga kuma xirno jirka sida jirku u eegyahay una shaqeeyo ee waxuu ku xiran yahay qofka dareenkiisa ku saabsan jinsiga uu ka tirsan yahay.

Hbtq waxey ka dhigantahay dadka ka hela dadka eey isku jinsiga yihiin iyo dadka labada jinsiba ka hela. Trans waxay ku saabsantahay aqoonsiga jinsiga iyo cabbirka oo wax shaqo ah kuma laha jinsiga uu qofku ka helo. Ereyga trans waxaa loola jeedaa dadka aan isku aqoonsanayn inay yihiin

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Calanka qaanso roobaadka (oo xattaa loo yaqaan Calanka Pride) waa calaamadda dhaqdhaqaaqa hbtq. Waxey calaamad u tahay in dadka oo dhan isku qiime leeyihiin iyo kala duwanaanshaha badan ee dadka ka hela dadka eey isku jinsiga yihiin iyo dadka labada jinsiba ka hela.

Masawirqaade: Colourbox

jinsiga dabiiciga ah ee ay ku dhasheen. Dadka ah trans waa eray balaaran looguna talogalay dadka isu aqoonsan inay yihiin nin, naag ama inay wakhti isku mid ah yihiin nin iyo naag labadaba . Dadka trans ah waxaa kale oo ay dooran karaan in aanay haba yaraatee tilmaamin jinsigooda. Q waxaa laga soo gaabiyay ”queer” waxuuna dhaleeceeyaa jinsiga hetero-ga ah oo caadiga ka ah bulshada. Queer waxaa kaloo ay tilmaami kartaa aqoonsi micnaheedu yahay in qofku aanu doonayn inuu qeexo jinsigiisa ama jinsiga uu ka helo ee dhinaca erey-bixinta dhaqan ahaan.

Dheeraad waxaad ka akhrisan kartaa bogga internetka Urur Qarameedka loogu talogalay xuquuqda dadka ka hela jinsiga ay isku midka yihiin, dadka u hamooda labada jinsi ee kaleba, dadka aan isu aqoonsanayn inay yihiin jinsiga ay ku dhasheen iyo dadka aan doonayn inay qeexaan jinsigooda: **www.rfsl.se**

Qof walba xaq wuu u leeyahay inuu muujjiyo jinsigiisa. Marka cid si xun loola dhaqmo sabab la xiriirto inuu qofku yahay dadka ka hela dadka eey isku jinsiga yihiin iyo dadka labada jinsiba ka hela, ama si kasoo horjeedda sida caadada ah markaas qofkaas waala takooray.

Xuriyada doorashada diimaha

Waxaa dalka Iswiidan ka soo jirey xuriyada diimaha ilaa sannadkii 1951. Xuriyada diimaha mecnaheed waa in dadka dhamaantood xur uu yihiin in ee dortaan diinta ama caqiidada ee rabaan. Xuriyada diimaha waxeey ka mid tahay shanta xuquuq ee ugu muhiimsan distoorka Iswiidhan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Heshiisyo badan oo caalami ah oo ay ka mid yihiin qaraarka xuquuqda aadanaha iyo qaraarka carruurta ee Qaramada Midoobay waxaa ku qoran qodobo ku saabsan xuriyadda diimaha. Dowlad kasta waa in ay xushmeysaa, difaacdaa iyo u shaqaysaa xurriyadda diimaha.

- Dadka dhamaantood waxeey xaq uu lee yihiin in ee doortaan diin, badashaan ama ga tagaan diintooda.
- Dadka dhamaantood waxeey xaq uu lee yihiin in ee ku dhaqmaan diintooda. Taasi mecnaheedu tusaale ahaan waa in dadka dhamantood xaq uu lee yihiin in ee furtaan urur diimeed.
- Dadka dhamaantood waxeey xaq uu lee yihiin in ee qoraan iyo in ee dhibaan wargeeys iyo warbixin.
- Dadka dhamaantood waxeey xaq uu lee yihiin in dadka kale baraan diin iyo in ee ka qeeyb galaan munaasabad diimeed.
- Qofna laguma takoori karo sabab caqiido.
- Waalidka waxeey xaq uu lee yiihiin in ee koriyaan habka raacsan diintooda.
- Shaqo dhiibaha waa in uu furnaansho ku muujiyo in dadka shaqaalaha cibadooda ku fulan karaan goobta shaqada.

Ka tirshaanaha cirqi

Iswiidhan waxaa degan dad ka yimid meelo kala duwan oo caalamka ku yaal. Ka tirshanaaha cirqi mecnaheed waa in qof kasto ka soo jeedo hal dhaqan ama dhaqamo iyo dad. Dadka dhamaantood waxeey ka tirsan yihiin hal ama cirqiyaal. In qof loola dhaqmo si ka xun sida dadka kale, ayadoo loo fiirinaayo ka tirshanaaha cirqiyeed waa takoorid, taasna waxeey danbi ku tahay xuquuqda aadanaha.

Naafanimo iyo furnaanshaha

Dad badan ayaa ah naafo. Naafinimo waxeey ahaan kartaa tusaale ahaan qof aragtidiisa xuntahay, qofka oo ku adag hadalka, maqalka, fahamka, dhaqdhaqaaqa ama isku taxalujiska. Bulshada waa in ee ahaada mid dadka dhan uu wada furan. Qofka naafaha ah waa in san ka qeeyb qaadashada nolasha bulshadeed ee san ka hor istaagin. Hoowlaha badista furnaanshaha bulshada waxaa ka mid ah in dib uu habeeyn lagu sameeyo sarooyinka dad weeynaha si ee dadka aan jaranjarada fuuli karin usoo galaan hadana qolalka uu galaan ayadoo ee san jirin wax hor istaago.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Da'

In qof si dadka kale ka hooseeysa loogu la dhaqmo ayadoo lagu dhisaayo yarid ama weeynaasho waa takoorid. Waxaa jiro sharciyaal iyo nidaamyo go'aamiyo oo marmarka qaarkood in ogalyahay dadka weeyn iyo dadka yar in si duwan loogu la dhaqmo. Tusaale ahaan waxaa jirto da' la ogal yahay in qof liisin ku qaato ama khamri ku cabo.

Qoyska iyo qofka

Waa maxay qoys? Jawaabta su'aashani waa ay ku kala duwan dhaqamada iyo bulshooyinka. Qaybo dunida ka mid ah qaarkood waxaa qaraabada ama reerka laga tirsan yahay loo arkaa qayb ka mid ah qoyska. Iswiidhan waxaa badanaaba qoyska lagu tiriyaa waalidka, walaalaha iyo carruurta la dhalay oo kaliya. Waxa loo yaqaan shakhsigu waa ay ku kala duwanaan karaan dhaqamo iyo bulshooyin kala duwan. Waxaa jira labo si oo loo arko shakhsiga, kuwaas oo kala ah aragti ku salaysan qofka shakhsiga ah iyo aragti ku salaysan koox dad ah.

Aragti ku salaysan qofka shakhsiga ah

Micnaha aragtida ku salaysan shakhsigu waxa weeye in la qabo in qof waliba ka muhiimsan yahay koox dad ah. Micnaha aragtida ku salaysan koox dad ah waxa weeye in kooxdu ay ka muhiimsan tahay qofka shakhsiga ah. Qofka shakhsiga ahi wuxuu isu arkaan qof gaar ah oo isagu mas'uul ka ah naftiisa, baraarihiisa iyo mustaqbalkiisa. Waana qof gaar ah ee ma ahan qayb koox ka mid ah.

Aragti ku salaysan koox dad ah

Micnaha aragtida kooxdu waxa weeye in danaha kooxdu ay ka muhiimsan yihiin danaha qofka shakhsiga ah. Waxa qofka shakhsiga sameeyo waxay sameyneysaa kooxda oo dhan. Bulshada ku dhisan isbahaysiga waxaa badanaaba ka jira isku xirnaan adag. Qof walba oo kooxda ka tirsan waxaa saaran mas'uuliyad. Aragtida ku salaysan kooxdu waxay badanaaba tahay in dad badan lagu xisaabiyo qoyska. Qaraabada iyo kooxdaba waxaa badanaaba loo arkaa sida qoys oo kale.

Nidaam bulshadeed ee kala duwan

Nidaamyada bulshada ee kala duwan waxeey keeneeysaa in dadka qabaan aragtiyaal kala duwan. Iswiidhan waxeey

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

hab badan ku tahay bulsho ku saleeysan hab shakhsiyeed. Waxaad qabato adiga ayee badankeed ku sameeynee oo ma saameeyneeyso qooyskaada ama qaraabadaada.

Gudaha Iswiidhan dowlada ayaa qaado masu'uliyad si ee damaano qaado qofka amaankiis. Taasi waxeey keeneeysaa in dadka ee san tiriin in qaraabada difaacdo si ee uu helaan nolol. Bulshadooyinka ee san dowlada masu'uliyad qaadin, dadkeeda waxeey badana isku tiiriyaan qaraabada si ee uu helaan nolol.

Qof haddii uu Iswiidhan danbi ku galo asaga oo kaliya, lama ciqaabaayo qofka qooyskiisa ama qarabiis.

Xuquuqda caruurta

Dalalka dunida sida ay u badan yihiin waxaa ka jira sharciyo iyo xeerar difaaca carruurta iyo dhallinyarada. Carruurta iyo dhallinyarada Iswiidhan waxaa difaaca sharciyada caalamiga ah iyo kuwa qaranka. Iswiidhan waxeey si dhab ah oo weeyn uu qaadataa xuquuqda caruurta iyo in caruurta laga difaaco hanjabaad iyo xoog-isticmaalka. Dowlada iyo degmadaba waxeey uu shaqeyaan si caruurta iyo dhalinyarada uu helaan nolol fiican.

Sawir: Johanna Nyholm, Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Baaqa carruurta

Iswiidhan waxay saxiixday qaraarka carruurta ee Qaramada Midoobay. Baaqa waxaa ku qoran xeerar ay dalal badani ku heshiiyeen. Baaqa carruurta waxaa ku qoran xeerar difaacaya carruurta xuquuqdooda aadaminimada.

Maadaama ay dalka Iswiidan saxiixday qaraarka, waxaan ballanqaadnay in xeerarka qaraarka ay khuseeyaan dhammaan carruurta iyo dhallinyarada dalka ku nool. Waxaa qaraarka ku qoran xeerar lagu magacaabo qodobada. Waxaa qaraarka carruurta ku qoran 54 qodob.

Waxaa hoos ku qoran dhowrka ugu muhiimsan:

- Carruurta waa in laga ilaaliya in la takooro. Taas oo ah in aan loo la dhaqmin si ka xun dadka kale.
- Siyaasiinta, hey'adaha dowlada iyo maxkamaduhu mar walba oo ay go'aan gaarayaan waa in ay ka fekeraan waxa carruurta u wanaagsan.
- Waalidku waa in ay carruurta u barbaariyaan si ku habboon da'dooda iyo bisaylkooda.
- Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay nolol iyo hormarid. Taas micneheedu waxa weeye in dal waliba ilmaha ka ilaaliyo in dagaal lagu dilo ama uu cudur dilo. Xuquuqda koritaanku waxa weeye in cunugga uu xaq ugu helo carruurnimo wanaagsan.
- Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in arigtoodada dhiibtaan iyo in la dhegeysto. Hey'adaha dowlada iyo maxkamaduhu waxay ilmaha weyddiinayaan sida uu wax u doonayo.
- Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay nolol u gaar ah. Waxaa tusaale ahaan ka mid noqon karto in uusan waalidku akhrisan xusuusqorka iyo warqadaha carruurta.
- Caruurta waxeey xaq uu lee yihiin in laga difaaco xoog-isticmaalka ka dhaco guriga gudihiis. Caruurta waa laga difaacaa waalidka iyo dadka weeyn oo xoog uu isticmaalo ama aan caruurta si fiican uu heeyn.

Dugsiyada dalka Iswiidhan waxeey si badan uu shaqeeyaan ayagoo raacaayo isla markaana asal ka dhiganaayo sharciyada baaqaa caruurta. Bogga internetka **www.barnkonventionen.se** ayaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda caruurta.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xuquuqda carruurta ee bulshada - BRIS

BRIS (Barnens rätt i samhället) waa urur caawiyo carruurta iyo dhallinyarada welwelsan ama dhibaatooyin qaba. Lambarka BRIS ee 116 111 in la waco waa lacag la'an. Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 18 sano, waxay mar walba wici karaan oo qof weeyn kala hadli karaan wax kasto.

Lambarka aad ka soo wacday lagama arkaayo telefoonada BRIS. Warqadda kharashka lagu bixiyana lagama arkaayo in qof wacay lambarkaas.

BRIS waxay kaloo caawini karaan waalidka ka welwelsan carruurtooda. Lambarka BRIS oo ay dadka waaweyn soo wacayaan waa 077-15 50 50. Warbixin dheeraad ah waxaa laga helayaa Internet: **www.bris.se**

Xoog uu sheegadka ragga uu geeysto dumarka iyo ehelka dhexdiisa

Xoog-isticmaalku wuxuu noqon karaa in awood loo sheegto qofka ayadoo la kontaroolaayo, in la garaaco ama loo handado.

Dalka Iswiidhan waa ka mamnuuc xoog-isticmaalka iyo hanjabaad loo geeysto qof kale. Waa sharaf ridid loo geeysanaayo dadka kale xuquuqdooda aadaneed isla markaana waa fal danbiyeed.

Sidaas darteed ayeena mamnuuc uu yahay xoog-isticmaalka ka dhex dhaco ehelka. Xoog-isticmaalka ka dhex dhaco ehelka waxaa ka mid ah nooc kasto oo xoog-isticmaaleed oo ka dhex dhici karo dad isku dhaw. Dad isku dhaw waxaa loola jeeda xariiryada ka dhaxeeyo labada isla nool, isku jinsi ha ahaaden ama yeesan ahaanin, iyo walaalaha iyo xariiryada kale ee ehelkaba. Taas micneheedu waxa weeye in ay mamnuuc tahay in qof garaaco ama dilo ilmahiisa iyo lamaanahiisa. Sidaas oo ay tahay weli xoog-isticmaal ayaa ka jira qoysaska dhexdooda. Inta badana ragga ayaa dilo dumarka. Xoog-isticmaalku wuxuu noqon karaa mid jir, mid maskaxeed, mid dhaqaale, mid alaabeed ama mid galmo.

Canug markii uu arko in waalidkiis la jirdilayo waxeey taasi ku noqon kartaa jirdil maskaxeed oo dhab ah. Waxaa dhacdo

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Ida Edgren

in xoog-isticmaalka ka dhaco reerka in qofka la garaaco ama wax garaco, labadaba yareeystaan ama inkiraan. Laakin caruurta weey arkaan, weey maqlaan, weeyna dareemaan. Sido kale waxaa dhacdo in caruurta la garaaco. Cadaadiska joogtada ah oo uu keeno dilka waxuu dhibaato uu geeysanaa caafimaadka, jir ahaan iyo maskax ahaanba.

Jirdilku wuxuu noqon karaa in qof la garaaco, timaha laga jiido ama la kala tuuro. Kufsi dhinaca maskaxda ah wuxuu noqon karaa in loo hanjabo, la cabsiiyo ama qiimaha shakhsiyeed laga rido. Waxay kaloo noqon kartaa qofka markuu qofka kale bahdiilo. Waxay kaloo noqon kartaa in loo diido in uu la kulmo saaxiibadiisa. Xoogsheegashada dhaqaaluhu wuxuu noqon karaa in qof qoyska ka mid ahi uu hayo lacagta oo dhan oo dadka kale aysan haysan lacag ku filan oo ay ku noolaadaan. Xoogsheegashadu waxay kaloo noqon kartaa marka qof ka jejebiyo alaabtaada. Kufsiga ama waxyaabaha kaloo la xiriira galmadu wuxuu noqon karaa marka uu qof isku dayo in uu galmo ama isutag kugula sameeyo sameeyo si qasab ah ama aadan kari karin inaad maya ku dhahdo.

Xoog-isticmaalka ku saabsansharafta

Xoog-isticmaalka qoyska iyo xoogga loo isticmaalo dumarku waxay ka jiran dunida iyo dhaqamada oo dhan. Xoog-isticmaalka ku saabsan sharaftu waa xoog loo isticmaalo qof jebiyey dhaqanka iyo caadooyinka kooxda ama ehelka.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Caadooyinka ugu muhiimsan oo ku saabsan sharafta waxeey ku saabsan yihiin dumarka ama gabdhaha galmadooda, iyo in gabdhaha ahaadan kuwo bikro ah marka la guursaada. Kufsiga ku dhisan shirafta waxuu ku dhisanyahay kontoroolid xooggan iyo waardiyeen. Tusaale ahaan in qof uu san go'aamin karin qofka uu guursanaayo ama uu la saaxiibayo, in qof loogu hanjabo jirdil iyo mararka qaarkoodna qafka loogu hanjabo in la dilo. Iswiidhan mamnuuc ayeey ka tahay hanjabaad iyo kufsi dad kale loo geysto, waana fal dambiyeed.

Badanaa kufsiga la xiriira sharafta waxaa loo isticmaalaa gabdhaha iyo dumarka dhallinta yar, laakiin xataa wiilasha ayey dhibaatadaas qabsataa. Dadka ka hela dakda eey isku jinsiga yihiin (HBTQ) waa guruub khatar ugu jiro in dhib loo geysto. Kufsiga la xiriira sharafta wuxuu ku badan yahay bulshada iskuxirnaanshahoodu adag yahay ama bulshada raggu ka awood badan yahay dumarka. Dumarka iyo raggaba waa ay ka qaybqaadan karaan in xoog loo isticmaalo qof jebiyey dhaqankii iyo caadadii qoyska ama qaraabada. Go'aanka ku sabasan isticmaalida xooga waa mid wadajir loo gaaro.

Dalka Iswiidan waxay saxiixday oo ey raacdaa baaqa guud ee Qaramada Midoobay oo ku saabsan xuquuqda aadanaha. Xuquuqdaasi waxay ku saabsan tahay in dhammaan dadka oo idil ay iyagu ka talinayaan noloshoodu iyo aayahooda. Taas micneheedu waxa weeye in ay iyagu u madaxbannaan yihiin jirkooda, dareenkooda galmo iyo doorashada qofka ay la noolaanayaan.

Sida sharcigu qorayo

Ninka xoog-isticmaalka uu geeysto dumar ka tirsan xarir dhow waxaa lagu xukumi karaa sharafdil weyn oo loo geystay qof dumar ah. Xoog-isticmaalka kale ee ehelka ka dhexdhaca waxaa loo xukumayaa xadgudub weyn. Qofka xoog-isticmaalka uu geeysto qof ehel ah, waxaa kale oo lagu xukumi karaa jirdil ama hanjabaad.

Waxaa jirta caawimaad la heli karo

Mas'uuliyada ugu badan waxeey saaran tahay xafiiska adeega bulshada sida uu caawinaad iyo taageero uu siin lahaa caruurta, dumarka iyo ragga ku nool xoog-isticmaal ka dhexdhaco ehel. Sidoo kale degmada waxeey ka masu'ul tahay in ee dumarka hanjabaadda iyo kufsiga loo

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

geeystayeey ka difaacaan kufsi sii sicon karo, ayagoo tusaale ahaan geeynaayo degaan sir ah (skyddat boende).

Heeganka dumarka (Kvinnojour) waa urur siiya caawimaad iyo gabbaad dumarka iyo carruurta ehelka dhexdiisa loogu xoogsheegtay. Ururrada heeganka dumarka badankood waxaa ka shaqeeya ururro samafal oo ay caawiyaan dad tabarucyaal ah. Ururrada heeganka dumarka iyo gabdhaha waxaa laga helaa dalka oo dhan. Ururada jiro waxaad ka heli kartaa bogga internetka: **www.unizon.se**

Degmooyin badan waxaa ku yaalo qaabilaadyada xaaladaha adag ee loogu tala galay dumar iyo caruur, oo caawiyo dadka xoog-isticmaal loo geeystay. Waxaa jiro qaabilaadyo gaar ah oo loogu tala galay ragga in ee ka caawiyaan joojinta isticmaalid xoog. Haddii aad tahay nin loo geeystay xoog-isticmaalid waxaad adiguna heli kartaa caawinaad iyo difaac.

Haddii aad lagu geeystay hanjabaad iyo xoog-isticmaalid aada uu baahan tahay caawinaad, waxaad wici karta talefoonka amaanka dumarka (Kvinnofridslinjen). Kvinnofridslinjen wuxuu furan yahay saacad walba. Waana lacag la'aan. U ma baahnid in aad sheegto qofka aad tahay marka aad soo wacayso. Lambarka telefoonka: **020-50 50 50**.

Boggga internetka Kvinnofridslinjen waxaa laga helaa warbixino ku qoran afaf badan, **www.kvinnofridslinjen.se**.

Haddii aad dumar tahay waxaa sido kale wici kartaa Terrafem. Shaqaalaha Terrafem waxeey ku hadlaan 50 af. Waxaad wici kartaa isliin ilaa jimco inta uu dhaxeeyso 8 iyo 17. Waana lacag la'aan. Sido kale waxaad reebi kartaa magacaada iyo lambarkaada telefoonka si ee Terrafem ku soo wacaan kadib. Lambarka telefoonka: **020-52 10 10**.

Dhilleysiga iyo ka ganacsiga dadka dhilleysiga loo isticmaalo

Dowladda dalka Iswiidan waxay u aragtaa in dhilleysiga iyo ka ganacsiga dadka dhilleysiga loo isticmaalo uu la mid yahay xoog loo isticmaalay dumarka. Sidaas awgeed ayaa waxaa la doortay in sharcigu uusan xukumin qofka loo isticmaalay dhilleysiga iyo ka ganacsiga dadka dhilleysiga loo isticmaalo. Qofka lacag ku bixnaayo galmo ama qof kale ku qasbaayo dhileeysi ayaa galaayo danbi lagu ciqaabi karo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Gudniinka gabdhaha

Dalal badan ayaa gabdhaha lagu gudaa. Gudniinka waxaa laga wadaa marka la jaro qaybo ka mid ah xubnaha taranka dumarka. Waxay kaloo noqotaa marka gebi ahaan la wadajaro, kadibna la isku tolo.

Halista caafimaadka

Gabdhaha iyo dumarba waxay la kulmi karaan dhibaatooyin markii la gudo kadib. Qaar badan ayey dhibtaa kaadidu maadaama kaadi-mareenka dhaawac gaaro. Kuwo badan waxay noloshooda oo dhan xanuun ka dareemaan gumaarka, waxaana saamayn xumi ku dhacdaa dareenkooda galmo. Waxay kaloo dhibaato kala kulmaan caadada iyo infakshano ku dhaca. Sido kale waxaa dhibaato ku dhici kartaa marka ee uur qaadan iyo marka ee umulaayaan.

Shaqada kahortagga gudniinka gabdhaha ee dalka Iswiidhan

Iswiidhan waa ka mamnuuc gudniinka gabdhaha. Sharciga waxuu sheegaa in gudniinka aan la fulin karin xataa haddii uu qofka howsha ku raacsan yahay. Qofka fuliyo gudniin waxaa lagu xakumi karaa xabsi. Waxaana qofka loo xukumi karaa gudniin gabdheed lagu sameeyey dal kale. Waxaa kaloo mamnuuc ah in dib la isugu tolo siilka tusaale ahaan, kadib marka la ummulo.

Dhamaan dadka ku hoowlan caruurta iyo dhalinyarada, waxaa waajib ku saaran yahay in ee wargaliyaan Xafiiska adeega bulshada haddii uu maleeynayaan in gabar la guday ama khatar ugu sugan tahay in la gudo.

Iswiidhan waxaa jiro ka jiro ururo badan oo ka shaqeeya la dagaallanka gudniinka gabdhaha. Waxaana ka mid ah Ururka qaranka ee joojinta gudniinka gabdhaha (Riksföreningen stoppa kvinnlig könsstympning, RISK), iyo Ururka qaranka wacyigelinta arrimaha galmada (Riksförbundet för sexuell upplysning, RFSU). Labada ururba waxay bixiyaan warbixino ku qoran afaf kala duwan.

Daryeelka iyo caawimaadda dumarka la guday

Haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahan tahay caawimaad, waxaad la xiriirtaa qaabilaadda dhallinyarada, qaybta cudurrada dumarka ama isbitaalka dumarka. Dumar badan ayaa caawimaad hela, daryeelka kadibna ku noolaada nolol caadi ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su’aalaha wadahadalka cutubka 4

Adiga maxaad uu taqaan qoys?

Adiga maxaad u taqaan xuquuqda aadanaha iyo wada sinnaanta?

Sinnaanta dadka oo dhan ma u fiicantahay? Ma jiraa qof faa’iido ku qabo sinnaanta iyo qof ku khasaarayo sinnaanta?

Waa maxay farqiga u dhaxeeya sinnaan iyo isla ekaasho?

Adiga takooris maxaad uu taqaan?

Kooxde ayaad uu maleeyneeysaa in bulshada lagu takoori karo?

Adiga ka waran khibrada aad ka lee dahay xuriyada doorashada diimaha ee dalka Iswiidhan?

Qaraarka Qaramada Midoobay ee ku saabsan xuquuqda caruurta waxaa ku qoran in waxa canuga uu fiican markasto la soo hormarinaayo. Arinkaas waxaa laga yaaba in dadka dhan sidas uu arkin. Adiga sidee uu aragtaa?

Adiiga, kalimada "sharaf" mecnahee kuu lee dahay?

Sidee uu eg yahay farqiqa uu dhaxeeyo wiilasha iyo gabdhaha marka ee ku saabsan tahay arintu cadaadiska ku saleeysan sharaf?

Maxaad uu qaban kartaa qof xoog loogu sheegto guriga?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

5. Sida qoys loo dhisto iyo sida carruur dalka Iswiidhan loogu korsado

Tusmada

Siyaabaha kala duwan ee lammaaneyaasha u wada nol yihiin

Xanaaneeynta caruurta iyo da' yarta

Xannaanada carruurta

Dugsiyada hoose-dhexe

Dugsiyada sare

Dugsiyada iyo demoqraddiyada

Kaalmo-dhaqaalaha loogu talagalay qoysaska

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Siyaabaha kala duwan ee lammaaneyaasha u wada nol yihiin

Iswiidhan waxaa caadi ka ah in lammaanayaashu isla deggaan, islana guri galaan, iyaga oo aan is guursan, carruurtana ay sidaas isku wada dhalaan. Dad badan ayaa doorto in ay is guursan. Waxay doortaan in ay isla wada deggennaadaan, sambo.

Guur

Guurka mecnihiis waa in laba qof isguursadaan. Iswiidan waxaa la oggol yahay qofka in uu guursado marka uu gaaro 18 sano. Sharciga dalka ayee sidaan ku dhigan tahay. Sharciga waxuu khuseeyaa dadka dhamaantood xataa haddii uu san qofka aheeyn muwaadin iswiidhish. Waxaa laga yaabaa in dalal kale ka jiraan sharci ka duwan. Laakin Hey'adda dowlada Iswiidhan waxeey aqbalayaan lee guurka raacsan qaanuunka ama sharciga Iswiidhan.

Masawirqaade: Colourbox

Inta aadan guursan waa in aad codsataa baaritaanka caqabada guurka (hindersprövning). Waa baaritaan lagu sameeyo qofka guursanaya, oo ah in eey san jirin caqabad hor istaageeyso in aad guursato. Baaritaanka waxaa sameeyso Hey'adda canshuuraha ee ku taalo gobolka aad ka diiwaangashantahay. Haddii ee san jirin caqabad guur waxaa lagu siinaayaa cadeeyn aad isticmaali karto mudo afar bilood

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ah. Waxaad cadeeynta uu qaadaneeysaa isku-nikaaxiyaha. Haddii aad adiga ama qofka aad gursaneeysid uu san Iswiidhan daganeeyn, waxaa baaritaanka lagu sameeyna dalka uu qofkaas ka diiwangalsanyahay.

Markii la fiiriyo sharciga Iswiidhan, waxyaalaha hor istaago karo nikaaxa waa:

- haddii labada qof mid ka mid ah ka hooseeyo 18 sano
- haddii aad qaraboo dhow tihiin qofka aad damacsantahay in aad guursato
- haddii labada qof mid ka mid ah uu qof kale qabo ama uu diiwan galsan yahay lamaane kale

Waa sharcidarro in qof guur lagu qasbo. Mecnaheed waa in uu san qof, qof-kale ku qasbi karin guur. Dadka dhamaantood ayaga ayaa dooranaayo qofka aay guursanayaan.

Waxaad markasto xaq uu lee dahay in aad diido guur aadan raali ka aheyn.

Hay'addaha dalka Iswiidan weey diidi karaan nikaax ka dhacay dal shisheeye ah, haddii mid ka mid ah labada qof lagu qasbay guurkasi.

Nikaaxa waa dhacdoonka laba qof isku guursanayaan. Nikaaxa waxuu noqon karaa mid diimeed ama mid madani ah. Sida uu nikaaxa u noqdo mid sax ah, waa in qofka isku nikaaxinaayo uu rukhsad ka heeystaa hey'ad dowladeed.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Wuxuu noqon karaa qof wadaad masiixi ah, imaam ama xirfadiisa ah in uu dadka isku nikaaxo. Nikaaxa madaniga ah waxa sameeyo qof maamulka gobolka uu xil saaray. Nikaaxa madaniga ah waa dhacdo aan lug ku laheeyn diin. Haddii nikaxa lagu fulinaayo hab diimeed oo qofka isku nikaxinaayo yahay qof aan rukhsad uu laheeyn, hadaba nikaaxas ma ahan mid sharci ahaan uu jiro. Si nikaaxu uu noqdo mid sharci ahaan uu jiro waxaa shardi ah oo kale nikaaxa madaniga ah.

Iswiidhan guurka looma fiiriyo dhanka jinsiga. Taasi mecnaheed waa in labada qof ee isku jinsiga ah is guursan karaan. Isku nikaaxiyaha rukhsada leh ma diido karo in uu isku nikaaxiyo labo qof oo isku jinsi ah. Laakin isku nikaaxiyaha ka tirsan urur diimeed, sida wadaadka masiixga joogo kaniisada iswiidhishka, waxuu kala dooran karaa in uu ogalaado ama diido. Haddii wadaada masiixga ah mid ka mid ah uu diido mid kale ayaa la weeydiisan karaa.

Dadka iska qabo waxaa khuseeyo sharciga lagu magacaabo xeerka guurka. Xeerka guurka waxaa ka mid ah nidaamka dhaxalka oo qeexaayo in haddii labada qof ee isqabto midkood dhinto, kan kale iyo caruurta ayaa markasto dhaxlaayo hantida dhammanteed.

In dheeraad ah oo ku saabsan dhaxalka ka akhriso qeeybta 8.

Lammaneyaasha wada-nol

Marka ee labo qof isla nool yihiin ayagoo isguursan, waxaa loo magacabaa sambo.

Iswiidhan iyo dalalka ku yaalo waqooyiga yurub waa caadi wada-nolanshada noocaani ah. Waxaa kale oo ka caadi ah in labada qof ay carruur isku dhallaan iyagoo aanan isguursan. Waxaa jira sharci qeexaya wada deggenaashaha. Sharcigaas wuxuu ku saabsan yahay guryaha ay deggen yihiin iyo waxyaabaha hantidooda ah. Haddii mid ka mid ah labada qof ee wada deggan uu dhinto, kan kale wuxuu xaq u leeyahay inuu gurigaas sii deggenaado. Waxaa uu qofkaas xaq u leeyahay alaabtii guriga taallay ee ay wada lahaan jireen. Si uu qofkaas uu dhaxlo qofka kale hantidiis kale, tusaale lacagta ku jirto bangiga, waa in horay uu jirtay waraaqada daradaaranka qoraalka ah.

Is furid

Iswiidan ninka iyo afaduba way dalban karaan furitaan, xitaa haddii midkood u arrintas diidan yahay. Haddii aad

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

doonaysid furitaan, (kala tagid) la xiriir maxkamadda darajada koowaad ee ku taal degmada aad ka diiwaan gashan tahay. Waxaad dalbaneysaa furriin (Furitaan sharciyeysan).

Adiga iyo xaaskaga/nikaada ayaa wada buuxin kara warqadda codsiga furitaanka. Haddii aadan heshiis ku aheeyn adiga keliga ayaa buuxin karo oo dalban kara furitaan.

Haddii aad wadajir u dalbateen inaad isfurtaan oo aydaan carruur haysan, waxay maxkamaddu go'aan arrintiina uga gaaraysaa sida ugu dakhsida badan. Haddii aad haysataan carruur ka yar 16 sano ama midkiina rabin furtaanka, waxaa la idin siinayaa wakhti ka soo fiirsasho ah. Taasi macnaheeda ah waxaa weeyaan inaad wakhtigaas kaga soo fakirtaan arrinta. Wakhtiga ka soo fiirsashada ugu yaraan waa lix billood, ugu badnaanna waa hal sano.

Haddii lixdaas billood kaddib aad weli doonayso furitaankii, waa in aad adigu la xiriirto maxkamadda degmada. Taas waxaa la yiraahdaa hirgelinta furitaanka. Haddii aadan maxkamadda warqad u dirin aadna ka codsan fulinta codsigii furitaanka, waxay maxkamadda ciribtiraysa codsigaagii. Haddii maxkamadda ay ka shakiso in guurku uu markiisa horeba ahaa mid qofka la qasbay, waxay maxkamadda xaaladaas ka soo fiirsasho la'aan go'aaminaysa furitaan.

Xannaanaynta carruurta

Xannaanaynta carruurta waxay tahay xuquuqda iyo waajibaadka saaran qofka xilhayeha xannaanadda oo badanaa ah waalidka. Taasi mecnaheed waxeey tahay in xananeeynta caruurta aad ku leedahay xuquuq iyo waajibaad ku saaran. Carruurta waxay xaq ku leeyihiin xannaanyn inta ay ka gaarayaan da'da 18 sano. Waxaa ku saaran waajib masruufid illaa uu ilmuhu ka gaarayo 21 sano waa haddii uu dhigto dugsi sare.

Xannaanaynta wadaagan waxaa loola jeeda in waalidiinta labadoodaba mas'uul ka yihiin carruurtooda. Waa in si wadajir ah u go'aamiyaan arrimaha carruutooda khuseeyso. Labada waalidba waxaa saaran isku waajibaad xitaa haddii laba waalid aysan isla wada nolayn. Qofka ah xilhayeha xannaanadda cunugga wuxuu xaq ku leeyahay in warbixin carruurtiisa ku saasban la siiyo. Macneheeda waxay tahay in aad xaq uu lee dahay in waxii caruurtaada ku saabsan ku soo wargaliyaan maamulka dugsiga xannaanadda, dugsiyada

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

caadiga, xarumaha daryeel-caafimaadeedka, maamulka adeegga bulshada, booliska iyo hay'adaha.

In waalid keligiis la siiyo xilhaynta xannaanada mecnaheed waa waalidkaas kaligiis saaran tahay mas'uuliyada canuga iyo go'aamada ku saabsan canuga. Haddii labada qof ay is qabaan waxay wadajir uu leeyihiin xilhaynta xannaanadda carruurtooda. Haddiise ay is qabin waa in warqad ku buuxiyaan maamulka bulshada (xafiiska arrimaha qoysaska) oo lagu cadeeya aabaha cunugga dhalay. Markaas kaddib ayaa labadiinaba wadajir fursad ugu heleysaan xilhaynta xannaanadda carruurta.

Haddii ay is furayaan oona ay ku heshiin karin xilhaynta xannaanadda, waa in xafiiska arrimaha qoysaska la xiriiraan. Wuxuu xafiiskas arrimaha qoyska idinka caawin karaa xal u helida qilaafka taagan. Haddii eey heshiin waayaan waxeey arinta noqoneeysaa mid uu taalo maxkamada degmada. Maxkamada waxeey markaasi ka codsaneeysaa in xafiiska arrimaha qoyska baaritaan sameeyo inta ee san maxkamada go'aan ku soo gaarin waalidka la siinaayo xilheeynta xanaanad iyo meesha uu canuga dagaayo.

Xanaaneeynta caruurta iyo da' yarta

Waalidka iyo qofka kale ee xilhayeha xannaanadda cunugga ayee saaran tahay mas'uuliyada xanaanada carrurta laakin waxaa jiro caawinaad ee ka heli karaan bulshada. Caruurta iyo dhallinyarada Iswiidhan joogo dhamaantood waxeey xaq uu lee yihiin xanaano carruureed, iskool iyo daryeel caafimaad.

Waalidiinta badankood waxeey xariir fiican la lee yiihin xarunta daryeelka caafimaadka hooyada (MVC) inta uu canuga dhalanin kadibna waxeey xiriir la leeyihiin rugta caafimaadka dhallaanka marka uu ilmuhu dhasho illaa oo kasoo koraayo. Waxaa halkaas ka shaqeeyo umuliso, kaalkaaliyaal iyo dhakhtar. Booqashada rugta caafimaadka hooyada iyo dhallaanka waa lacag la'aan.

Xarunta daryeelka hooyooyinka

Qaabbilaadda umulisada iyo xarunta daryeelka hooyoyinka, (MVC) waa xarun loogu tala galay in lagu baaro caafimaadka cunuga iyo caafimaadkaada si loo ogaado in wax kasta eey okeey

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

yihiin. Umulisada weey miisaameysaa, cabbireysaa waxeyna siineysaa wadahadal ku saabsan uurka iyo foosha waxeeyna ka jawaabeysaa su'aalaha eey waalidiinta cusub qabaan.

Xarunta daryeelka hooyooyinka waxay qabanqaabisaa kulammo oo uurleyda ka heli karto warbixinno xiriir la leh uur-qabida, dhalmada iyo naasnuujinta. Waalidka caadi ahaan wuu ka qaybgalaa kulamadaas iyo booqashooyinka. Waxaa kaloo caadi ka ah in waalidka kale uu goobjoog ka noqdaan markii hooyada ay ummulayso.

Rugta daryeelka caafimaadka carruurta

Rugta daryeelka caafimaadka carruurta (BVC) waxeey caawinaad siiyaan waalidka waxeeyna baaraan caafimaadka canuga inuu sida la rabo u koraayo oo waxkastana sidii la rabay yihiin. Waxaa kaloo heli kartaa talooyin iyo caawimaad ku saabsan sida ugu wanaagsan ee aad u xanaaneyn kartid cunugaaga. Waalidku wuxuu rugta daryeelka caafimaadka carruurta ka heli karaa talooyin ku saabsan korniinka dhallanka, naas-nuujinta, raashinka iyo cudurrada. Dhalmada kaddib markii ummusha ay gurigeed ku soo laabato, waa in khadka taleefanka rugta daryeelka caafimaadka carruurta kula xiriirtaa oo ay ballanka kulanka ugu horeeyo qabsataa. Kulanka koobaad waxaa marmar lagu qabtaa guriga. Xilliga kullanka kalkaalisada waxay ka warbixinaysaa hawlaha rugta daryeelka caafimaadka carruurta, waxeeyna baaraysa caafimaadka dhallanka. Waxaa kaloo dhallanka baari doono dhakhtar. Booqashada dakhtarka rugta daryeelka caafimaadka carruurta ee ugu horeeyso caadi ahaan waxay ku aadan tahay markii cunugga u jiro lex ilaa sideed toddobaad. Kadibna

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

waxaa ka danbeeyo booqashooyin badan oo lagu baaraayo caafimaadka sanadkasto ilaa uu canuga iskuul ka bilbaayo.

Rugta daryeelka caafimaadka waxaa waalidka loogu soo bandhigaa tallalida canuga. Iswiidhan waxeey lee dahay barnaamij tallaal oo carruta looga tallalo sagaal cudur oo ay ka mid yihiin cudurka qallalka, xiiqdheer, dhuungooyo, teetano, jadeeco, cudurka faafo oo damanka barariyo iyo cudur finan yar-yar leh. Fikrada laga lee yahay barnaamijka tallaalka waa in canuga uu uhelo difaac cudurada iyo in aan la isqabadsiin.

Daryeelka caafimaadka dugsiyada

Marka ee carruurta dugsi dhigtaan waxeey uu tagaan daryeelka caafimaadka dugsiyada si ee ugu hortagaan caafimaad dari.

Dhamaan ardayda dhigto fasalka barbaarinta dugsiga hoose-dhexe iyo dugsi sare, waxeey xaq uu lee yihiin daryeelka caafimaadka dugsiyada.

Ardayda waxaa loo soobandhigaa booqasho-caafimaad sadax jeer in ee boqdaan mudada dugsiga hoose-dhexe iyo hal jeer inta ee dhiganayaan dugsiga sare. Booqashada-caafimaadka waxeey ka kooban tahay wadahadal caafimaad, koontaroolida dhirirka, miisaanka, aragtida iyo dhabarka. Dugsiyada waxaa kale oo joogo shaqaale ka wadashaqeeyo caafimaadka ardayda. Waxeey ahaan karaan lataliyaasha, kalkaaliyaasha, maamulyaasha dugsiga iyo macalimiinta.

Gabdhaha dhigta fasallada 5 ama 6 waxaa la siinayaa oo loosoo bandhigayaa tallaalka (HPV). Tallaalka waxuu ka celinayaan oo uu ka hor istaagayaa kansarka ku dhaca afka hore ee ilma galeenka.

In waalid lagu ahaado dal cusub

U guurida dal kale waa is bedel weyn oo qofka wayn iyo carruurta saamayn wayn ku yeelanayso. Markii waalidka loo bardhiga carrurtaa ayaa marmarka qaarkood la sahlan tahay laqabsashada bulshada cusub. Sidaas darteed ayuu waalidka uu noqon karaa mid canuga aan ka marmin markii la xariiraayo meelaha kala duwan ee bulshada. Taasi waxeey qooyska uu keeni kartaa in xilkii waalidka iyo caruurta is badalaan waxeyna noqoneysaa mararka qaar in cunuga la saaro mas'uuliyad weyn. Carruurta waxey tusaale ahaan turjumaan u noqonayaan waalidiintooda markey xiriir la

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Calle Bredberg, Magaalada Göteborg

sameeynayaan iskoolka xanaanada, iskoolka, xafiisyada dowladda iyo goobaha caafimaadka.

Sidaas darteedna ayee muhiim u tahay in waalidka uu wax ka garto bulshada ee reerka usoo guureen isla markaana uu fahmo in xaaladda cusub ee carruurtooda eey iyaga xattaa qeyb ka yihiin. Markaas ayaa waalidka helayaan hab wanaagsan oo xoogan oo canuga ugu abuuraan bey'ad fiican oo aamin ah. Haddii uu qooyska dhan wada fahamsanyahay bulshada cusub uu hadanana arki karo farqiyada iyo waxyaalaha ee iskaga mid yihiin meeshi uu ka yimid, waxuu canuga sidaas ku helaa nolol xasillan. Dhalinyaro badan marka ee xilliga dhalinyarnimada gaaran waxeey isku dayaan in ee iska xureeyaan waalidka. Waxeey doonayaan in isku filnaadaan oo isku diyaariyaan mustaqbalka. Waalidka waxaa mas'uuliyad uga saaran tahay in caruurta uu ee ku taageeraan hoowlahooda mustaqbaleed. Waa muhiim in waalidka uu helo hab isku dheeli tirid leh oo xad ugu yeelo canuga. Isla markaana canuga waa in uu ku hormaaraa dalka cusub.

Jaceeyl iyo xariir

Bulshooyinka iyo dhaqamada waa ku kala duwnaan karaan sida loo arko jaceeyl iyo xariir. Isla markaana waxeey ku xiran tahay qofka sida uu yahay. Dad badan oo Iswiidhan joogo waxaa caadi la ah in ee qofka ee jeclyihiin isla degaan ama caruur iska dhalaan ayagoo is guursan. Sido kale waxuu dadka badankiisa u furfuran yahay dhalinyarka jaceeylkooda, xariirkooda iyo hab-galmadooda. Dhallinyaro badan waxeey leeyihiin hal ama qaar badan oo uu xiriir jaceyl uu ka dhaxeeyo marka eey korayaan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sharciga mamnuucaya jirdilda carruurta

Iswiidhan waxaa ka jiro sharci la yiraahdo Xeerka waalidiinta. Xeerkaas waxaa ku qoran in carruurta ay xaq ku leeyihiin daryeelid, xannaanayn, badbaadin iyo barbaarin wanaagsan. Qeeyb ka mid ah xeerkaas waxaa lagu magacaabaa anti-agalagen, wuxuuna hirgalay markii sannadka u ahaa 1979. Erayga aga waa eray iswiidhishka uu isticmaali jireen marka canuga barbaarin awgeed loo garaaco. Sharcigaan waxuu mamnuuca in barbaarinta awgeed carruurta loo geysto dhammaan falalka ku salaysan jirdil iyo fal wax yeelaayo caafimaadka maskaxdooda. Jirdilka jirka waa nooc kasto oo ka mid ah xoog-isticmaalka jirka loo geeysto. Waxaa xattaa mamnuuc ah jug fudud, timo-jiidida iyo qanjaruufada.

Dhinaca kale dabcan halis ka badbaadin awgeed, waa laga fogeyn karaa cunugga wax halis ah sida maakinada cuntada lagu karsado oo kulul, dariishad furan ama kale oo dhaawac u geysan kara cunugga.

Waxyeelka caafimaadka maskaxda wuxuu noqon karaa hanjibaad, cabsi-gelin, cidlayn ama qol ku xirid. Falalka waxyeela caafimaadka maskaxda iyo jirkaba waxeey dhawaacayaan kalsooniqabka iyo korniinka cunuga.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Aragtida xiriirka la leh barbaarinta carruurta ee Iswiidhan

Waalidiinta badankooda jacaylka ay carruurtooda u qaban ayaa ah arrinta ugu muhimsan noloshooda. Cunug kasta wuxuu u baahan yahay qof waalid ah iyo qof wayn. Qofka wayn wuxuu cunugga siinayaa hogaamin, dhiirigelin iyo jacayl. Mida kalena waxuu qofka wayn cunugga u yeelayaa xaddayn. Kalsooni qabka cunugga waa waxeey ku xiran tahay qaabka loo soo barbaariyay, taasoo aad muhim u ah. Cunugga hab wanaagsan ku soo barbaaray wuxuu ku guulaysta waxbarashada iyo nolasha mustaqbalka.

Boqolkii sano ayee wax badan iska beddeleen aragtida barbaarinta carruurta ee Iswiidhan. Intii lagu jiray bilaawgii 1900-yimadii waalid badan waxeey ahaayeen kuwo adag. Waxaan muhiim aheeyd in canuga uu dhageeysto dadka waaweeyn. Jirdil ciqaabeedka, aga, waxaa dad badan uu arkaayeen qeeyb ka mid ah barbaarista.

1950-yimadii yio 1960-yimadoo ayaa dad badan ka soo horjeesteen barbaarinta adag ee nuucaas ah. Dad badan ayaa badalay sida ee uu arkaayeen barbaarinta-caruurta. Waxaa laga sii hadlay in loo barbaarista carruurta ku dhisnaato xushmad loo lee yahay. Laakin waxaa wali caadi aheeyd in carruurta barbaarin awgeed loo ciqaabo.

1970-yimadii waxeey soo badatay aragtida demoqraadiyada maanta ee ku saabsan barbaarinta-carruurta. Ula jeedada laga lee yahay waa in canuga uu kaligiis fakaro, mas'uuliyadana kadibna noqdo qof madaxbanaan oo leh kalsooni fiican.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Adeegga bulshada

Xafiiska adeegga bulshada wuxuu siyaabo kala duwan uga shaqeeyaa in caruurta iyo dhalinyarada ey helaan barbaarin sugan. Haddii qoysku u qabo dhibaato-qoyseed, wuxuu caawinaad kala xiriiri karaa Xafiiska adeegga bulshada ama xafiiska arrimaha qoysaska ka yaalo degmada. In la doonto caawimaad ku saabsan sidii aad u noqon laheyd waalid fiican waa qaab ka mid ah qaadidda mas'uuliyadda waalidnimo. Waalidiinta dalbada oo raadsada caawimaadda waqti hore waxeey hadhoow ka fakadaan ineey ciyaalka ka halllaabaan.

Marka uu cunug ku suganyahay xaalad xun waxaa wada shaqeeya xafiiska adeega bulshada iyo dad kale si eey wada jir u suurto galiyaan inuu cunuga ku noolaado nolol wanaagsan. Xafiiska bulshada waxuu aqoon u leeyahay inuu ka shaqeeyo dhibaatooyinka kala duwan ee qoysaska. waxeey tusaale ahaan noqon karaan dagaal badan oo guriga ah, waalidiin ka walwalsan caafimaadkooda oo weydiinaya haddii eey carruurtooda saameyneyso, carruur cidlo dareensan, carruur kufsi, hanjabaad, cunsurinimo loo geystay, carruur dambi gashay, carruur khamri cabaya ama mukhaadaraad ama carruur la nool qoysas aalkoliistayaal ah.

Xafiiska adeegga bulshada waa in uu baaritaan ku dhaqaaqa haddii uu helo dacwad ku saabsan in canuga si xun loola dhaqmo. Dacwaddaas waxey ka imaan kartaa tusaale ahan, macalin, mudiir, boliis ama shaqaalaha caafimaadka. Waa waajib saaran ineey dacwad ka gudbiyaan haddii eey walaac ka muujiyaan xaaladda ilmaha. Waxeey kaloo ahaan kartaa qof xiriir la sameeyay qoyska oo walaac ka muujiyay xaaladda cunuga. Marka xafiiska adeega bulshada ey dacwada soo gaarto waxuu go'aaminyaa in cunuga durbadiiba gabbaad la siinayo. Xafiiska waxuu kaloo bilaabayaaa baaritaan ku saabsan caawimaadda eey qoyska iyo cunugaba u baahanyihiin. Waalidiinta iyo carruurta labadaba qeyb ayey ka haanayaan baaritaanka.

Waxaa caadaa in xafiiska adeegga bulshada iyo qoyska eey isku af gartaan cawimaadda uu qoyska u baahanyahay. Marka koowaad caawimaadda uu xafiiska adeegga bulshada haayo in lala siinayo waalidiinta ayaa la saxiixayaa.

Haddii eey jiraan khatar ku saabsan ilmaha caafimaadkiisa ama korriinkiisa sababo la xiriira xaalka gurigiisa ama sida uu u dhaqmaayo, markaas waxey xafiiska adeegga bulshada go'aamin karaan go'aan lid ku ah waxa eey waalidiinta

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

rabaan. Waxey ahaan kartaa in cunuga uu waqti gaaban ama mid dheer uu la degnaado qoys kale ama guri xanaano oo leh goob daryeel (HVB).

Xannaanada carruurta

Goobaha xannaanad carruurta waa magaca ee wada waadagaan meelaha caruurta lagu barbaaro. Goobaha xannaanad carruurta waxaa ka mid ah, sidaa dugsiyada xanaanada, guriga xannaanada carruurta iyo dugsiga xilli firaaqaha. Goobahas ayee carruurta joogi karaan markii waalidiinta ay shaqaynayaan ama waxbaranayaan.

Degmo kasta waxay leedahay Xannaanada carruurta u maamulo degmada. Sido kale waxaa jiro kuwo madaxbannaan ama kuwo gaar ahaan ee shirkado ama ururo uu maamulaan. Carruurta da'doodu u dhexeyso hal ilaa shan sano waxay xaq u leeyihiin in lagu xannaanadeeyo dugsiga xannaanadda ama qoysaska hoygooda carruur kale ku xannaanadeeyo. Waalidka shaqo-goobka ah ama cunug kale guriga fasaxa ugu heeysto, wuxuu xaq ku leeyahay xannaanada carruurta qiyaastii saddex saacadood maalintii ama 15 saacadood/toddobaadkii.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dugsiga xanaanada

Dugsiga xannaanadda waxaa kaloo loo yaqaanno daghem iyo dagis. Waa goob arruurta da'dooda hal ilaa shan sano u dhaxeeyso lagu xannaaneeyo ilaa ay ka bilaabayaan fasalka dugsiga barbaarinta ama fasalka koowaad. Dugsiyada xannaanadda badankood waxaay adeegsadaan qaab gaar ah oo ay carruurta wax ku baraan. Waxay kale oo leeyihiin qorshaha waxbarshada. Waxaa ku qoran ereyo faraayo waxaa la rabo in carruurta ay bartaaan. Dugsiyada xannaanadda dhamaantood waxay u hawlgalaan hab waafaqsan qorshaha waxbarshada Iswiidhan.

Dugsiga xannaanadda ee albaabada u furan

Dugsiga xannaanadda ee albaabada u furan waa goob loogu tala galay waalidiinta fasaxa ku jiro iyo caruurtooda. Dugsiga xannaanadda ee albaabada u furan waxaa joogo shaqaale aqoon leh. Waana meel fiican ee lagu barto waalid iyo caruur kale. Dugsiga xannaanadda ee albaabada u furan waxeey Iswiidhan uga yaaliin degmooyin badan.

Fasalka dugsiga barbaarinta (hoowlaha lix jirka)

Carruurta dhammaantood waa in markii ay lix sano buuxsadaan boos laga siiyaa fasalka dugsiga barbaarinta. Marmarka qaarkoodna waxaa lagu magacaabaa sexårsverksamhet(hoowlaha lix jirka). Fasalka dugsiga barbaarinta waa goob carruurta dugsi-dhigasho lagu tababaro intii aysan bilaabin dugsiga hoose.

Goobaha xilli firaaqaha (fritids)

Carruurta da'dooda u dhaxayso lix ilaa labo-iyo-toban sano waxay saacadaha dugsidhigashada ka hor ee ka danbe ba xaq ku leeyihiin in ay joogaan goobaha xilli firaaqaha. Laakinse waa in saacadahaas ay waalidiinta shaqayaan ama wax bartaan. Goobta xilli firaaqaha badanaa waxeey ku taalaa isla goobta u dugsiga ku yaallo. Carruurta da'dooda u dhaxayso tobban ilaa laba-iyo-tobban sano waxeey tagi karaan goobaha xilli firaaqaha.

Guriga xannaanada carruurta/Xannaanaynta waxbarashada ku salaysan

Qeeyb ka mid ah goobaha xanaaneeynta caruurta waxaa lagu magacaabaa Xannaanaynta waxbarashada ku salaysan ama guriga xanaanada caruurta. Qof aqoon uu leh cilmiga

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

xanaaneeynta ayaa canuga gurigaasa ku qaabilaayo oo ku heeynaayo asagoo uu qabanqaabinaayo hoowlo-barbaarin oo leh dhaqdhaqaaq waxbarasho. Carrurta dugsiyada dhigto weey tagi karaan guriga xanaanada caruurta. Waxuu gurigaas uu noqonaa sida goobta xilliga firaqaada.

Wada shaqaynta waalidiinta

Waalidku muhiim ayee yihiin xanaanada canuga. Ayagaa si fiican caruurtooda uu garanaayo. Marka uu cunuga bilaabayo dugsiga xannaanadda ama guriga xannaanada waxaa xilliyada ugu horeeya goobjoog ah qof waalidiintiisa kamid ah. Waxaa lagu magacaaba inskolning (la qabsin), waxayna qaadata qiyaastii laba todobaad. Maamulada dugsiga xannaanadda iyo goobaha xilliga firaaqada waxay wadahadal ugu yeeraan waalidiinta. Waxay waalidiinta wargeliyaan xaalada cunugga iyo sida uu ku yahay dugsiga xanaanada. Adigoo waalid ahna, waxaad ka warami kartaa sida uu aragto dugsiga xanaanada.

Codsashada booska xannaanadda carruurta

Si boos looga helo dugsiyada xanaanada iyo guriga xilliga firaaqada waa in marka hore la codsadaa boos. Taasi waxaad ku sameeyneeysaa degmadaada. Degmo kasto nidaam ayee lee dahay, laakin inta badanaa waa in aad boos ka codsataa bilooyin badan ka hor. Canuugada waa in uu ugu yaraan jiro hal sano si uu ubilaabo dugsiga xanaanada.

Dugsiyada hoose-dhexe

Dhammaan carruurta ku nol Iswiidhan waa in ay sagaal sano dhigtaan dugsiga hoose-dhexe. Taasoo ku xusan xeerka dugsiyada Iswiidhan, waxaana lagu magacaabaa waajibka-dhigashada dugsiga. Sannad-dugsiyeedka waxaa la dhigta xilliga dayrta iyo xilliga gu'ga. Waajibka-dhigashada dugsiga canuga waxuu bilaawdaa sanadka xilli dugisyeedka xilliga dayrta uu canuga gaaray 7 sano ama marka uu bilaabaayo fasalka koobaad ilaa xilliga gu'ga ee fasalka 9aad. Hoowlaha waxbarashada dugsiyada waxeey lee yihiin qorsho lagu magacaabo qorshaha-koorsooyinka iyo qorshaha-barashada. Waxaa halkaas ku qoran waxa uu canuga ku baranaayo dugsiga iyo habka waxbarashada loo socodsiinaayo. Waxbarashada iyo buugaagta lacag la'aan ayee uu yihiin caruurta ku jiro dugsiga hoose-dhexe. Sido kale qado lacag la'aan ayaa lagu siinaa dugsiga hoose-dhexe.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Carruurta dhamaantood waxeey dugsiga hoosedhexe dhigtaan 9 sano.

Masawirqaade: Colourbox

Waalidku wuxuu xaq uu lee yahay in canugiisa u doorto dugsiga. Caruurta markasto waxeey xaq uu lee yihiin in ee boos-dugsiyeed ka helaan meesha ee degan yihiin. Haddii aad dooneeyso in aad dugsi kale uga dalabto, waxaad la xariireeysaa maamulaha dugsiga aad la dooneeysid canugaada. Canuga wuu bilaabi karaa dugsiga haddii uu boos ka banaan yahay.

Carruurta aan dhigan karin dugsiga hoose-dhexe ee caadiga ah, waxay dhigan karaan dugsiga hoose-dhexe oo gaar ahaan loogu tala galay carruurta eey wax si ka yihiin. Dugsiga gaarka ah waxaa ltusaale ahaan loogu tala galay caruurta dhagoolka ah ama maqalkoodu hooseeyo. Dugsiga kale ee gaarka ah, särskola, waa mid loogu tala galay caruurta garashada dhiman oo noqon karta wax eey ku dhasheen ama wax eey gadaal ka qaadeen. Ardayda dugsiyadaan dhigto waxaa waxbarashada lagu siiyaa taageeroo dheeraad ah.

Maadooyinka waxbarasho ee dugsiga hoose-dhexe

Maado waa waxa qofka loo dhigo, sida xisaabta ama af iswiidhishka. Maado kasta waxay leedahay qorshe-koorso, kaasoo eey ku qoran tahay aqoonta ardayda laga doonaayo markii u dugsiga hoose-dhexe dhameeyo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waxbarashada galmada iyo wada noolaashaha

Dugsiyada Iswiidhan waxaa laga dhigta maadada xiriirka la leh galmada iyo wada nololashada, taasoo ku xusan qorshaha-waxbarshada. Waxeey ku saabsan tahay jaceeyl iyo habka uu qofka xariir ku dhisan xushmad, sinnaan iyo jaceyl uu ula yeelan karo qof kale. 50kii sano ee ugu dambeeyay ayaa dugsiyada Iswiidhan laga dhigaaye maadadda xiriirka la leh galmada iyo wada nololashada.

Shahaado

Ardayda waxeey shahaado helaan laga bilabaa fasalka 6aad. Xilli dugsiyeed kasto kadib ardayga waxaa la siiyaa shahaado. Xilli dugsiyeedka ugu danbeeyo ee fasaslka 9aad ayaa la siiyaa ardayda shahaada-dhameeystirka.

Shahaadada waxaa lagu qiimeeyaa darajooinka A, B, C, D, E ama F. Halka darajada F uu dhigan tahay in ardayga ku dhacay maadada. Darjada ugu sareeyo shahaadada waa A.

Hey’adda waxbarashada (Skolverket) ayaa go'aamisay nidaamka shahaadooyinka. Hey'adda waxbarashada waa hey'ad dowladeed oo ku raacsaan in caruurta iyo ardayda ku jiro iskuulada iswiidhishka helaan waxbarasho leh tayo iyo bey'ad fiican.

Waxbarashada luqadda

Haddii mid ka mid ah waalidiinta ama labadooduba ay yihiin kuwo ku hadla af aan ahayn af- iswiidish, waxay carruurtooda xaq u leeyihiin in loo dhigo afka hooyo. Si uu xaq ugu yeesho dhigashada waa in uu canuga aqoon asaasi ah uu lee yahay luuqada isla markaana maalin kasto ku isticmaala guriga.

Ardayga afkiisa hooyo usan ahayn af-iswiidish wuxuu xaq uu leeyahay barashada af-iswiidishka luqad labaad ahaan. Af-iswiidishka luqad labaad ahaanta waxaa loogu tala galay aradayda biloowga ah ama kuwa in yar af-iswiidishka ka yaqaanno. Maadada Af-iswiidhishka luuqada labaad ah waxeey ku heer tahay maadada iswiidhishka caadiga ah laakin wax-dhigashada waxaa loo habooneeysiiyay ardayda afkooda hooyo uusan aheeyn afka iswiidhishka.

Fasallada dugsi u diyaarinta

Waxaa jiro fasallo dugsi u diyaarin ah oo loogu tala galay carruurta dhawaan Iswiidhan yimid. Fasallada dugsi u

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

diyaarinta waxaa carruurta lagu tababaraa af-iswiidishka iyo maadooyinka qaarkood. Ardaydaas waxaa loo tababaraa hab ay ugu sii gudbaan dugsiga hoose-dhexe. Barida waxeey ku xiran tahay da'da ardayga, afka hooyo iyo aqoontiisa. Degmooyin badan ee Iswiidhan ku yaallo ayaa laga hela fasalada u diyaargaraynta.

Dugsiyada sare

Marka ee ardayda dhigtaan fasalka ugu danbeeyo ee dugsiga hoose-dhexe ayee codsan karaan dugsiga sare. Dhigashada dugsiga sare ma ahan mid qasab ah. Sido kalena waa lacag la'aan. Dhallinyarada da'dooda u dhaxaysa 16 iyo 20 sano waxay dhigan karaan dugsiga sare haddii ay oo dhamaysteen dhigashada dugsiga hoose-dhexe. Qiyaastii dhalinyarada dhammaantood waxeey doortaan in usii gudbaan waxbarashada dugsiga sare.

Dugsiga sarena waxuu lee yahay qorsho-waxbarasho iyo qorsho-koorso ee soo saartay Hey'adda waxbarashada. Qorshaha-koorsada waxaa ku qoran waxa uu ardayga aqoon uu yelnaayo marka uu dhameeyo. Nidaamka-shahaadada dugsiga sare waxuu la mid yahay midka dugsiga hoose.

Arydayga ayaa doorto dugsiga sare iyo barnaamijka uu dhiganaayo. Codsiga marka uu sameeynaayo ardayga waa in uu ku qoraa dugsiyaal iyo barnaamijyo badan. Hubaal ma ahan in uu boos ka helo dugsiga uu koobaad ka dhigtay.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Barnaamijyo badan oo la raadsan karo ayaa jiro. Dugsi hoose-dhexe waxaa joogo shaqaale jiheeyo ardayga oo ku caawo isla markaana talo siiyo.

Dugsiga sare waxaa ardayda lagu bara aqoonta ay u baahan yihiin sida waxbarashada ugu sii wataan, sida jaamacad ama machad farsameed.

Si aad u akhrisatid barnaamij waxbarasho dugsi sare ah oo kuwa waddanka o dhan camal ah waa in ardayga uu ku baasaa maadada iswiidhishka, xisaabta iyo af-ingiriiska uu kusoo dhigtay dugsiga hoose-dhexe.

- Si uu bilaabo barnaamijka xirfada waa in uu ardayga ku guuleeystay ugu yaraan shan maado.
- Si uu bilaabo barnaamijka diyaarinta jaamcadaha, waa in uu ardayga ku guuleeystay ugu yaraan shan maado.

Ardayga aan ku guuleeysan maadooyinka waxeey dhigan karaan barnaamijka gogoldhigga. Barnaamijka gogoldhigga wuxuu ardayga ka caawini doonaa si uu waxbarashada ugu sii gudbo. Barnaamijka gogoldhigga waxuu uu kala baxa shan qeeyb oo kala duwan. Mid ka mid ah barnaamijyadaan waa barnaamijka gogoldhiga-luuqada oo si gaar ah loogu tala galay dhalinyarada ku cusub dalka. Waxeey dhalinyarda barnaamijkaas ku dhigtaan iswiidhishka ayagoo isla markaas dhiganaayo maadooyin kale. La xariir degmadaada si aad ula socotid fursada laga heli karo goobta aad degantahay.

In dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada iyo soo galida dugsiga sare ka akhriso bogga internetka **www.utbildningsinfo.se**

Dugsiyada iyo demoqraddiyada

Arrimaha demoqraddiyada in badan ayaa looga hadlaa dugsiyada Iswiidhan. Hadafyada dugsiyada laga lee yahay waxeey tahay in ardayda noqdaan dad waaweeyn oo ka qeeyb qaato isla markaana qaado mas'uuliyada wadajirka bulshada.

Ardayda waxeey baranayaan ku noolaashaha demoqraddiyada isla markaana garanayaan xuquuqda iyo waajibaadka. Sidaas darteed ayee waxbarashadu inta badana lee dahay casharo ee ardayda ugu toobaranaayaan demoqraddiyada waxa eey tahay.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Mikael Jönsson

Dugsiyadii waagii hore

Dugsiyada Iswiidhan aad ayay isku bedeleen laga soo bilabaa bartamihii 1900-yimadii. Waagi hore waxeey dugsiyada lahaayeen nidaamyo adag. Macallimiintu waxay garaaci jireen ardayda. Taasi waxaa la mamnuucay sanadkii 1958.

Waagaas ardayda looma oggolayn in macallinka ugu yeraan ”adiga” ama magaciisa. Waxay ku qasbanaayeen in ay yiraahdaan ”marwo” ama ”mudane”. Sannadka ugu horeeyay waxaa ardayda la siin jiray shahaado ku saabsan edebtooda. Ardaygii ku dhaca laba ama saddex maado wuxuu ku qasbanaa in sannad-dugsiyeedka u mar kale dhigto.

Dugsiyada waayahan dambe

Dugsiyada waayahan dambe waxaa ardayda ku bartaan in ee si madaxbanaan uu fikiraan. Waxeeyna fursad uu lee yihiin in saameeyn ku yeeshaan waxbarashadooda. Macalinku waa hogaamiyaha kooxda, laakin xiriirka ardayga iyo macallinka wuu wada siman yahay.

Dugsiyada Iswiidhan waxeey qabaan saldhigga-heybadda oo laga soo xigsaday Baaqa xuquuqda aadanaha ee Qaramada Midoobay. Saldhigga-heybadda waxuu ku saabsan yahay sida carruurta, dhallinyarada iyo dadka u wada dhaqmaayaan. Taasoo macneheedu tahay in dugsiyada Iswiidhan qofna aanan loo geysan karin falxun. Wiilasha iyo gabdhaha waa in fursadaha loogu siiya si sinnaan ku jirto. Rradyagu wuxuu saamayn ku yeelan karaa waxbarashada haddii u ka qaybgalo shirarka fasalada iyo golaha fasalada.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dugsiyada iyo qoysaska

Iswiidhan waxaa waalidka laga filaa in ee cagan uu geeystaan barashada canuga. Waalida, macalimiinta iyo ardayga waxeey ka wada shaqeeynaayaan sida ugu canuga ugu ficnaa lahaa dugsiga. Shaqaalaha joogo dugsiga waxeey doonaayaan in waalidka uu la socdo nolosha canuga iyo in waalidka og isla markaana fahamsan yihiin waxa uu canuga ka qabto dugsiga.

Xilli dugsiyeed kasta waxaa waalidiinta iyo ardayga lala yeesha wadahadalka horumarka waxbarashada ee ardayga. Xilliga wadahadalka horumarka waxbarashada ee ardayga waxay waalidiinta tartiibtooda ugu la kulmi karaan macalimiinta. Markaas wuxuu waalidku helayaa fursad u ka hadlo caawinaadda canugiisa u baahan yahay iyo sida uu horumar usameeyo waxna u barto. Xilliga wadahadalka wuxuu macallinka diyaarinayaa qorsheha horumarka ee ardayga u gaarka ah, IUP. Haddii afka hooyo ee waalidka usan ahayn af-iswiidish, wuxuu xaq ku leeyahay in xilliga wadahadalka turjumaan ah loo balamiyo.

Dugsiyada waxay kalo qabaqaabiyaan shirarka waalidiinta, kaasoo waalidiinta lagu siiyo fursad ay saamyan ugu yeeshaan dhacdooyinka dugsiyada.

Waalidiinta waxay booqan karaan dugsiga, sida ay uhelaan warbixin ku saabsan hawlaha dugsiga iyo xaalada canugooda. Mida kalena, waxay taleefan u soo diri karaan macallinka ama maamulaha dugsiga, si ee su'aallo waydiiyaan ama ka wareeystaan canugooda.

Kaalmo-dhaqaalaha loogu talagalay qoysaska

Qoysaska carruurta haysta waxay ka dalban karaan Hey'adda qasnada ceeymiska (Försäkringskassan) kaalmo-dhaqaalee, sida kabida kirada, lacagta waalidiinta, lacagta taageerada masruufka iyo lacagta daryeelida.

Qoysaska caruurta leh ee Iswiidhan dhammantod waxaa la siiyaa lacagta carruurta. Kabida kirada waxaa la siiyaa karaa qoyska dakhligiisa hooseeyo isla markaana kiradoodu badan tahay. Lacagta daryeelida waxaa la siiyaa qoyska qaba cunug itaaldarro heeyso. Haddii ee labada waalid kala tagaan midka canuga la degan yahay ayaa kaalmada

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

masruufka ka helaayo midka kale. Waa lacag loogu tala galay in ee bixiso qeeyb ka mid ah khashyada aad uu lee dahay canuga. Haddii uu waalidka kale dhiibin lacagtaas ama uu lee yahay dakhli hooseeyo waxaad lacagta ka codsan kartaa Hey'adda qasnada ceeymiska. Waa lacagtaas lagu magacaaba taageerada masruufka. Warbixin dheeraad ah waxaad ka heleysaa bogga internetka Hey'adda qasnada ceeymiska: **www.forsakringskassan.se**

Caymiska waalidiinta

Lacagta waalidiinta waxay suurtagelinaysa in waalidka u shaqadiisa fasax ka qaato, sida uu heeysto canugiisa. Lacagta waalidiinta ee ka helaan Qasnadda ceymiska waxay waalidka ka caawinaysa dhinaca dhaqaalaha, taasoo u suurtagelinayso in xilliyada ugu horeeyo uu canugiisa guriga la joogo.

Waa caadi in ragga iyo dumarka eey fasax ka qaataan shaqada ama waxbarashada si eey guriga ula joogaan carruurtooda. Laakiin wali dumarka carruurta guriga la joogo ayaa ka badan ragga. Si kor loogu qaado sinnaanta maalmaha eey fasaxa yihiin ragga iyo dumarka waxaa jira maalmo aanan lagu wareejin karin waalidka kale.

480 maalmood ayu waalidka lacagta waalidiinta qaadan karaa. Boqolkiiba 80 oo mushaharkiisa ayaa 390 maalmood ee ugu horeeya la siinayaa. 90 maalmood ee soo hartay wuxuu waalidka qaadanayaa 180 karoon maalintii.

Waalidka oo aan lahayn wax mushahar ah ama daqli hooseeya, wuxuu 480 maalmood qaadanayaa 250 karoon maalintii. Aabaha ama waalidka kale ee dhallaanka aduunka ku cusub, waxuu xaq uu lee yahay in uu shaqada ka joogo oo uu lacag ka qaato Hey'adda qasnada ceeymiska toban maalmood marka uu canuga dhasho.

Waalidka dalka ku cusub ee haysta caruur waxay codsan karaan gunnada waalidka haddii ay soo degeen Iswiidhan. Waxay heli karaan gunno ku aadan tiro ayaamo ah oo kala duwan taas oo ku xiran intay leegtahay da'da ilmaha.

Sidaaso kale wuxuu waalidku qaadan karaa lacagta waalidiinta haddii uu canugiisa jirran yahay oo ku joogaayo dugsiga. Taasoo loo yaqaanno lacagta waalidiinta kumeelgaar ah ama daryeelka carruurta, VAB. Waxaad markaas waalidka qaadanayaa boqolkiiba 80 mushaharkiisa. Wuxuu sannadkii ugu badnaan qaadan kara 120 maalmood calaa cunug.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Aabbe waxuu ilmihiisa ka keenayaa iskoolka xanaanada carruurta.

Masawirqaade: Colourbox

Saacadaha shaqada oo hoos loo dhigay

Saacadaha shaqada oo hoos loo dhigay ayuu waalidku xaq ku leeyahay, haddii u qabo cunug weli sideed sano aan buuxsan ama weli dhigto sannad-dugsiyeedka koowaad. Mecnaheed waa in aad tusaale ahaan shaqeeyn karto lix saacdood halka aad ka shaqeeyn jirtay sideed saacadood.

Ilaalinta xuquuqda shaqalaynta

Sharcigu wuxuu shaqo-dhiibaha ka mamnuucaa in qof dumar ah oo uur leh la siiyo fursado ka xun kuwa shaqaalaha kale. Sidaaso kale waa mamnuuc in qof dumar ah uur-qabid awgeed shaqada looga buriyo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Kaalmo-dhaqaaleedka carruurta iyo kaalmada-ardayda

Hey'adda qasnada ceeymiska waxeey caruurta dhan uu dirta lacaga kaalmada carruurta. Lacagta kaalmada carrurta ee ugu horeeyo waxaa la bixiyaa bil kaddib dhalashada cunugga ama bil kaddib markii u cunugga u dalka Iswiidan u soo guuray. Lacagta kaalmada carrurta waxaa cunugga la siiyaa ilaa u 16 sano ka buuxsado. Waalidka qabo laba ama in kabadan oo carruur ah waxaa la siiyaa lacagta dheeraadka ee carruurta. Inta ee lacagtaas la ekaaneeyso waxeey ku xiran tahay inta canug ee ku joogto. Lacagta kaalmada caruurta waxaa la soo diraa qiyaastii bisha marka ee tahay 20. Haddii aad adiga iyo waalidka kale aad qeybsataan mas'uuliyadda sharciyeed ee carruurta waad qeybsaneeysaan lacagta kaalmada carruurta. waxaad heleysaan 625 karoon midkiiba. Waa haddii uu ilmuhu dhashay 1 maarso 2014 iyo wixii ka dambeeyay. Haddii uu ilmuhu dhashay wixii ka horreeyay 1 maarso 2014 waxaa lacagta la siinayaa waalidka cunuga dhalay. Haddii kali ku tahay lahaanshaha mas'uuliyadda sharciyeed ee ilmaha adiga ayaa lacagta oo dhan laguusoo shubayaa, waana 1 250 karoon bilwalba. Wax canshuur kama bixineeysid lacagta kaalmada caruurta ama lacagta kaalmaada caruurta ee dheeradka ah.

Lacagta kaalmada carruurtaada waxaa la soo diraa ilaa uu canuga ka gaaraayo 16 sano. Dhalinyarada u dhaxeeyo 16 iyo 20 sano ee dhigto dugsiga sare, waxeey helaan lacagta kaalmada ardayda. Lacagta kaalmada waxbarashada waa 1 250 karoon bil walba waxaa la bixiyaa toban bil, laba billaabo sibteembar illaa juun. Ugu badnaan waxey dhallinyarada heli karaan kaalmada waxbarashada illaa guga eey buuxinayaan 20 sano. Haddii dhallinyarada eey goosmadiisu badantahay waxey saameyn kartaa lacagtiisa kaalmada waxbarashada. Dhalinyarada uu dhaxeeyo 16 iyo 18 sano waxaa lacagta toos loogu diraa waalidka. Dhalinyarku marka uu gaaro 18 sano, asaga ayaa lacagta kaalmada ardayda toos loogu diraa. Haddii eey qoyska heystaan dakhli yar waxey carruurta heli karaan kaalmo lacageed oo dheeraad ah.

Hey'adda kaalmada ardayda, CSN ayaa bixiso lacagta kaalmada ardayda.

Qofka ajnabiga ah oo dugsiga sare dhiganaayo waa in marka hore uu codsiga xaqqa asaasiga ee taageerada waxbarashada dirtaa. In dheeraad ah ka akhriso **www.csn.se**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Kabida iijaarka ee loogu tala galay qoysaska caruurta leh

Qofka carruur leh wuxuu xaq ku leeyahay in uu Lacagta kabida iijaarka codsado. Codsadeha waa in uu Iswiidhan deganyahay oo ka diiwan-gashan yahay si uu uhelo kabida iijaarka.

Haddii aad heli karto kabida iijaarka iyo in kale waxeey ku xiran tahay inta qof aad reerka ku tihiin. Waxeey kale oo ku xiran tahay heerka iijarka iyo inta lacag ee in soo gasho.

Waa muhiim in aad uga waramto Hey'adda qasnada ceeymiska haddii uu dakhliga wax iska badalo. Haddii kale waxaa waajib kaaga saarmi karaa in aad lacag celiso.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su'aalaha wadahadalka cutubka 5

Sidee uu aragta in labo wadaagan nolol iyo guri (sambo) - ayagoo is qabin?

Farqi ma uu dhaxeeyaa ama wax ee wada wadaagaan sida adiga laguugu soo koriyay iyo aragtida ku saabsan barbaarista caruurta Iswiidhan?

Gormee Xafiiska adeega bulshada uu doonan kartaa talo iyo taageero?

Xaaladahee ee ku fiican tahay in Xafiiska adeega bulshada caruur ka wado waalidkiis?

Sidee uu aragtaa in caruurta Iswiidhan badankood dhigtaan dugsiga xanaanada inta ee san bilaabin dugsi hoose?

Sidee uu aragtaa saldhigga-heybadda ee dugsiyada Iswiidhan?

Adigoo waalid ah, sidee uu taageeri kartaa waxbarashada ubadkaada?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Barlamaanka Iswiidhan **Masawirqaade: Melker Dahlstrand**

6. Saamayn ku yeelan-shada Iswiidhan

Tusmada

Waa maxay demoqraddiyada?

Horumarka demoqraddiyada

Horumarka demoqraddiyada Iswiidhan

Hab-dhiska demoqraddiyada Iswiidhan

Distoorka Iswiidhan

Xisbiyada iyo fikradaha siyaasadeed

Hab-dhishka doorashada Iswiidhan

Demoqraddiyada nolol-maalmeedka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waa maxay demoqraddiyada?

Erayga demoqraddi, wuxuu ka soo jeedaa wadanka Griiga, wuxuuna uu mecna yahay qiyaas ahaan "xukunka-dadweeynaha". Arrimaha ku saabsan demoqraaddiyada waxaa laga hadlaay kumanaan sano laakin hal mecno oo caalamka ku heshiiyay ma jiro. Taasi waxyaalaha uu sabab waxaa ka mid ah in demoqraaddiyada tahay wax had iyo jeerba hormaro oo isbedalo. Laakin waxaa jiro waxyaalo heshiis lagu yahay oo demoqraaddiyada qeeyb ka ah, sida qiimaha aadanaha oo wada siman iyo xuquuqda, ra'yi abuurida oo xur loo yahay, xuriyada dabaacada iyo xuriyada qoowlka, in dadka dhan uu wada siman yihiin sharciga iyo in laga qabta doorasho xur ah.

Bulshad demoqraaddiyad waxaa eey lee dahay doorasha guud oo xur ah halkaasi ee dadka xaqqa-codbixinta leh dooran karaan xisbiga iyo siyaasiyiinta ee doonayaan in ee ku matalaan dhanka qaranka, gobolka iyo degmada. Siyaasiyiinta ama xisbiyada ugu cod badan ayaa loo ogalyahay in ee xukumaan.

Siyaasiyiinta la doortay waxaa matalayaan dadka soo doortay. Sidaas darteed ayaa loogu magacaabaa demoqraaddiyada *wakiilasha* Demoqraaddiyada habka wakiilashada waxee caalamka maanta ka tahay caadi. Waana nidaamka aan ku lee nahay Iswiidhan.

Xatta haddii inta tirada badan xakumeeyso bulshada demoqraaddiga ah, ma ku xad gudbi karaan xuquuqda dadka laga tirada badan yahay. Mabda' asaasiga ee bulshada ku dhisan demoqraaddiyada waa in xukunka loo isticmaalo hab lagu xushmeeynaayo xuquuqda aadanaha. Mecnaheed waa in dadka wax xakumaayo ee san dulmi karin dadka ama koox qabto ra'yi ku duwan midkooda. Dadka bulshada dhammaantood waxeey xaq uu lee yihiin in ee aragtiidooda dhiibtaan.

Doorashada guud waa habka ugu muhiimsan ee dadka saameeyn ugu yeelan karaan habka dalka loo maamulaayo. Si ee demoqraaddiyada uga shaqeeyso dalka waxaa shardi ah in dadka dalka degan ka qeeyb qaataan oo hami siiyaan demoqraaddiyada. Waxeey demoqraaddiyada noqoneeysaa mid xoogan markii inta ugu badan ee macquulka ah ka qeeyb qaataan doorashada guud. Sido kale waxaa demoqraaddiyada xoojinaayo in dadka ka qeeyb qaataan

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ururo samafal ah ama in asxaabta iyo dadka la shaqeeyo kala sheekeeystaan arrimaha siyaasada. Ama hab kala duwan ula xariiraan siyaasiyiinta oo eey kala hadlaan sida ee wax uu arkaan oo uu fakarayaan. Haddii ee dad badan dhiibtaan codkooda waxaa sahlananeeyso in la hubiyo siyaasada la fulinaayo in ee tahay mid dadka badankood rabo.

Laakin si ee bulsho uu noqoto mid ku dhisan demoqraaddiyada kuma filno lee in dadka ee ka qeeyb qaataan doorashada guud. Dhacdooyinka uu dhaxeeyo doorashooyinkana waxeey sido kale muhiim uu yihiin demoqraaddiyada.

Demoqraaddiyada waxaa shardi uu ah wada hadal ku dhisan xushmad. Waxeey ku saabsan tahay in qofka uu dhageeysto arigtada dadka kale iyo in uu sheegto aragtidiisa. Demoqraaddiyada sida fiican uu shaqeeyneeyso waxaa muhiim uu ah in dadka dalka degan dareemaan in ee qeeyb ka yihiin bulshada. Waa in dadka dareemaan in saameeyn ku yeelan karaan doorashada guud laakin isla markaana dareemaan in ee saameeyn ku yeelaan karaan arrimaha maalmoodkooda - dugsiyada, shaqada, goobta deegaanka iyo qoyska.

In dadka kale laga lee sheekeeysto waxa demoqraaddiyada ah iyo waxa aan aheeyn, arintaas lafteeda waxeey muhiim uu tahay bulshada ku dhisan demoqraaddiyada. Haddii wada-hadalka nuucaas ah joogsada waxeey calaamad uu noqon kartaa dad badan oo arko demoqraaddiyada in ee san muhiim aheeyn. Arrinkaas waa mid calaamad uu ah in demoqraaddiyada daciifeeyso.

Su'aasha ku saabsan haddii ee demoqraaddiyada tahay wax fiican ama wax xun, waa arrin laga hadlaayay ilaa ee goorta fikrada soo baxday. Waxa jiro dad ku doodo in nidaamka demoqraaddiyada uu san ahayn mid dhaqso badan sida nidaamka keli-taliska (diktatooryad), kaasi uu hal qof xakumaayo oo go'aamo dhaqso uu gaaraayo. Bulshada ku dhisan demoqraaddiyada waxeey dadka xaq uu lee yihiin in ee codkooda dhiibtaan, waa in heshiiyaa hadana la codeeyaa si go'aan loo gaaro. Sidaas darteed ayee xaaladaha aad uu adag qaarkood dhici kartaa in demoqraaddiyada la hakiyo ayadoo la doonaayo boobsiin iyo meel marin. Waxaa xaalada aad uu adag kalifi karaan in dadka maamulo gaaran go'aan dhaqso badan si ee san xaaladu usii xumaan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waxaa jiro tusaalooyin xun oo badan oona ka muujinaayo hab-maamuleedka aan demoqraaddiyada ku dhisneeyn sida eey dadka u dulmiyaan oo argagax ugu abuuraan. Dalalka kali-taliska uu ka jiro, waxaa dad aragti duwan qabo ama qolo kale ah loogu tuuri karaa xabsiyo ama goob lagu shaqaaleeyo. Taariikhda waxeey muujineeysaa in habmaamuleedka demoqraaddiyada ku dhisan uu ugu fiican yahay difaaca xuriyada shakhsiga iyo xuquuqda aadanaha. Iyo in demoqraaddiyad iyo nabad badana jirto marka ee dad ka socdo dalal kala duwan isla xariiran oo ganacsi ka dhaxeeyo.

Horumarka demoqraddiyada

Erayga demoqraaddi, wuxuu ka soo jeedaa wadanka Griiga, wuxuuna uu micno yahay, *demos* oo ka dhigan dadweyne iyo *kratein* oo la micne ah xukun. Muddo 500 sano ka hor wakhtigan ah ee hadda aynu tirsano, ayay dhisteen dadkii Griiga qadiimiga ahaa maamul ku shaqeeya nidaam demoqraddiyad ah. Markaas aya magaalada Aten ka tagtaay nidaamka kali-istaliska oo ugudbtay hab demoqraadiyadeed Laakiin ragga oo keliya ayaa weli loo oggolaa lee in aay codeeyaan. Dumarka, addomada iyo ajnabiga saameeyn kuma laheeyn go'aamda. Sidaas darteed maanta xilliga hore ee Aten ma lagu magacaabi laheeyn demoqraaddiyad.

Taarikhda yurub ee ka danbeeysay wakhtigii qaadimiga ah ilaa hada aad ayee uga fogeeyd demoqraaddiyada aan maanta Iswiidhan ku aragno. Habab kala duwan ayee demoqraaddiyada usoo korartay ayadoo ee dad badan hor istaageen in xukunka bulshada ahaay mid aan loo wada sineeyn.

Mudaddii ka danbeeysay waxaa tusaale ahaan kaniisada awood badan ku laheeyd bulshada boqolaal sano. Boqoro kali-talis ah ayaa sheegtay in awooda ka helaan Eebe oo eeysan dadka ka helin. Laakin qarnigii 1500aad ayaa awooda kaniisada daciiftay, taasi oo gaar ahaan sababtay dad badan oo doonaayay in ee badalaan kaniisada. Waxeey dadka uu arkeen kaniisada katoolikada in ee san uu taagneeyn caqiidada masiixiga oo ay kaniisada hoowlaheedu uu badneed yeelashada awood iyo lacag badan. Isbadalkaan waxaa lagu magacaaba dib u habeeyntii (reformationen). Dib uu habeeyntii waxeey keentay in kaniisada kala qeeybsanto oo daciifto. Iswiidhan waxeey 1500-yimadii ka tagtay kaniisada katoliga ayadoo uu dalka raacay kaniisada prostantiska.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dhexbartankii sanadyadii 1700, waxaa yurub ka soo abuurmay urur dadweeyne oo lagu magacaabo xilligii aqoonta. Dadka waxeey ku baraarugeen hormarka cilmiga, waxeeyna si wadaan eedeeynta kaniisada iyo dadka sheeganaaye in xukunka dalka siiyay Eebe. Charles Louis de Montesquieu wuxuu ahaa nin faransiis oo falsafoyaqaane ah. Waxuu qabay fikrad ku saabsan hab dal loo maamuli karo. Fikradiisu waxeey aheeyd in haddii awoodda maamulka la qaybiyo ay keenayso dhelitir wanaagsan. Qaybaha uu u qaybiyay waxay haayeen, awooda xeer dejinta, awooda nidaam fulinta iyo awooda garsoorka.

Dhacdo mecno weeyn ugu fadhiso hormarka demoqraaddiyada Yurub waa kacaanka Fransiiska ee ka dhacay halkaasi sanadkii 1789. Xilligii kacaanka Fransiiska waxeey dadka ku kaceen boqorkii. Kacankii kadib waxuu Fransiiska qaatay sharci laga soo xigtay fikradihii xilligii aqoonto ee ku saabsanaa in xukanka ka soo baxaayo dadka iyo in qof kale oo baniaadan ah ka qiimo badneeyn qof kale. Laakin muwaadiniinta ragga ah lee ayaa uu codeeynaaye dadka xakumaayo.

Sanadyadii 1800 waxaa hormaray mabda'a hantiwadaagga. Qofka fikradaas ugu qiimo badnaa waa Karl Marx. Mabda'a hantiwadaagga waxuu qabay in dadka dhaamantood ka dhaxeeyso sinnaan iyo cadaalad. Mabda'a fikradiihiisa si xoog leh ayuu uu faafeen. Ururada shaqaalaha iyo xisbiyada hantiwadaagga ku dhisan ayaa meelo badan ee yurub ku yaalo laga asaasay. Dhamaadkii sanadyadii 1800 waxaa soo batay codadka uu doodaayo sinnaan iyo cadaalad ee xataa dumarka ka tirsanaanaayaan.

Dhacdo loogu muda-haraadaayay xaq-co-deeynta dumarka oo ka dhacday Göteborg, 1918.

Masawirqaade: Anna Backlund, ©Nordiska museet

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Horumarka demoqraddiyada Iswiidhan

Dhacdooyin badan oo ka dhacay Iswiidhan ayaa saameeyn ku yeeashay hormarka demoqraaddiyada iyo muuqaalka bulshada waqtigaan hada la joogo. Dhacdooyin dhacay qarnigii 1800aad iyo 1900aad ayaa si gaar ah muhiim uu ahaa horumarka. Waxeey asaas uu dhigeen cariyeenta iyo demoqraaddiyada Iswiidhan.

Hab-dhiska xukunka 1809

Sharciyada Iswiidhan waa qornaayeen laga soo bilaabaa qarnigi 1300aad. Distoorka qaranka waa asaaska demooqraaddinimada Iswiidhan, waxaa lagu magacaabaa Regeringsformen (Hab-dhiska xukunka). Hab dhiska xukunka waxuu laga soo bilaabaa sanadkii 1809 mecno weeyn ugu fadhiyay hormarka demoqraaddiyada. Waxuu kaasi go'aamiyay in boqorka uu san kaligiis heeysan karin halka badalkiisa xukunka loo qeeybinaayo afar qeeybood:

- Qeeybta xukunka (awooda fulinta) ayaa boqorka loo daayay.
- Awooda canshuuraha la bixiyay waxaa loo dhiibay baarlamaanka.
- Awooda xeer dajinta waxeey uu dhaxeeysay boqorka iyo barlamaanka.
- Awooda garsoorka waxeey saarneed maxkamadaha.

Xataa haddii awooda talinta waagaas aheeyd mid la wadaago, demoqraaddiyad hormarsan ka ma jirin Iswiidhan. Laakin sharciyada cusub waxeey albaabka uu fureen hormarin demoqraaddiyad.

Xurriyadda daabacada iyo qoowlka iyo xurriyada diimaha

Hab dhiska xukunka ee sanadkii 1809 waxu sii xoojisay in badan oo ka mid ah xurriyadaha asaaska uu ah muwaadinka. Waxaa ka mid ah in Iswiidhan heshay isla 1766 sharci ku saabsan xurriyada daabacda iyo qoowlka, oo qeexay in dadka dhammaantood xaq uu lee yihiin arigtoodaada ku dhibtaan qoraal ahaan iyo af ahaanba. Hab dhiska xukunka ee 1809 waxuu go'aamiyay in dadka dhammaantood xaq uu lee yihiin doorashada diinta ee rabaan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Dugsi dhishada dadweeynaha guud

Sanadkii 1842 waxaa Iswiidhan la soo dajiyay dugsi dhishada dadweeynaha guud. Taasi mecnaheed waxeey aheeyd in caruurta dhammaantood ku qasban yihiin dhigashada dugsi. Dad badan ayaa bartay sida wax loo qoro iyo loo akhriyo. Taasi waxeey muhiim uu aheeyd hormarka demoqraaddiyada dalka Iswiidhan.

Ururada dadweeynaha iyo xurriyada ururada

Ururada dadweeynaha sida ururada ciribtirida khamro cabida, kaniisadaha madaxabanaan, ururada dumarka, ururada shaqaalaha iyo xisbiyada siyaasada waxeey Iswiidhan ku soo koreen dhamaadkii sanadyadii 1800aad. Tani muhiim ayee uu aheeyd demoqraaddiyada. Ayagoo eey dadka kooxo ee dhisteen ku biiraayeen, waxeey dadka si sahlan uu sheeganayeen waxa ee doonaayen in ee bulshada ka badalaan. Ururada dadweeynaha waxeey dadka ka bartaan is maamulida, habka kulamada looga qeeyb qaato iyo waxqabadka loo baahan yahay si loo gaaro isbedel. Ururada kala duwan waxeey uu shaqeeynaayeen arrimo kala duwan. Ururada shaqaalaha waxeey tusaale ahaan uu sheeganaayeen, wanaajinta xaalada shaqada iyo xaq-codeeynta aan ku xirneeyn jinsi iyo dakhli.

Sanadkii 1909 waxeey ragga Iswiidhan badankood heleen xaqqa-codeeynta. Sanadkii 1919 waxaa go'aan lagu gaaray in dumarka xaq ka qeeyb qaadashada codeeynta doorashada degmooyinka. Laga bilaabaa sanadkii 1921 waxeey dadka waaweeyn oo dhan, dumarka iyo raggaba, xaq uu yeesheen doorashada guud ee Iswiidhan.

Hab-dhiska demoqraddiyada Iswiidhan

Hab-dhiska demoqradiyada Iswiidhan wuxuu ku salaysan yahay wakiilasho. Waxaana dalka lagu maamulaa hab demoqraadiyad oo ku qeeybsan qeeybo kala duwan ee bulshada. Sido kale Iswiidhan waa boqortooyo. Taasi mecnaheed waa in aan lee nahay boqor iyo boqorad. Laakin labadoodaba ma lahan awood siyaasadeed ee waxeey hoowlahoodu ku kooban yihiin munasabadyada. Siyaasiyiinta la doortay ayaa dalka maamulo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Hab-dhishka xukunka, qaanuunka ka tirsan distorka oo go'aamiyo habka Iswiidhan loo maamulo, waxuu ku bilaawdaa "Awooda taliska Iswiidhan waxeey ka soo baxeeysaa dadweeynaha". Taasi mecnaheed waa go'aamada lagu gaaro golaha kala duwan ee bulshada marka hore ku dhisnaaneeyso aragtida iyo xiisaha dadweeynaha Iswiidhan.

Iswiidhan go'aamada ka soo baxo waxaa lagu soo gaaraa sadax qeeyb siyaasadeed ee kala duwan. Qeeybahaas waxeey kala yihiin golaha degmooyinka, gobolada iyo dowlada. Maadama ee Iswiidhana ku jirto Midowga Yurub (EU) qeeyb-xukun kale oo ka sareeyso dowlada ayaa jirto. Midowga Yurub waa 28 dal oo isku tagay. Qeeybaha dhammaantod waxaa fadhiyo siyaasiyiin ee shacabka ku doorteen doorasho guud. Siyasiyiintana waxa kale oo loo yaqaan xildhibaan. Siyaasiyiinta waxeey fadhiyaan golaha xukunka loo doortay: goleha degmooyinka, goleha gobolada, barlamaanka Iswiidhan iyo barlamaanka yurub.

Dhismaha barlamaanka Iswiidhan.

Masawirqaade: Melker Dahlstrandt

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Bulshad demoqraadiyada ku dhisan waxaa muhiim uu ah kormeerid dhisan oo looga hortago musuq-maasuq iyo xukunka oo si xun loo isticmalo. Waxaa hab lagu kormeero noqon karto in xukunka loo qeeybiyo qeeybo kala duwan oo habab kala duwan isku kormeero ayagu. Hab-dhiska demoqraadiyada Iswiidhan waxaa ku cad tusaalooyin badan taasi. Waxaa tusaale ah in degmooyinka iyo maamulada gobolka si gooni AH isku maamulaan. Taasi oo ah hab looga hortago in ee Iswiidhan noqoto dal hal meel laga xukumo oo dowlada kaligood xukunto. Tusaale kale waa in awooda dowlada uu qeeybsan tahay barlamaanka oo xeerarka dejiyo, xukuumada oo fuliso sharciyada iyo maxkamadaha oo xukuno raacsan qaanuunka soo dajiyo. Barlamaanka waxaa kale oo ka mid ah hoowshiisa in uu kormeero xukumada hoowsheeda. Haddii xukuumada dayaciso waxuu barlamaanka go'aanka xukuumada ku qasbi karaa in eey is casisho. Distoorka waxuu saxaafada iyo dadweeynaha fursad usiinaa in ee arkaan sida Iswiidhan loo maamulo. Arrimahaas oo dhan waxeey gacan ka siinaayaan Iswiidhan si ee san uu noqon dal uu ku badan yahay musuq-maasuq badan iyo awood-isticmaalid xad dhaaf sidii dalal kale oo badan.



Dowlada

Dowlada waxeey ka kooban tahay barlamaanka, xukuumada iyo qiyaas ahaan 350 oo maamul dhexe, shirkado, guddi iyo hey'ado dowladeed. Barlamaanka waxuu go'aan ku gaaraa waxyaalaha laga qabanaayo bulshada, xukuumada weey fulisaa ayadoo kadibna kaashaneeyso Xoghaynta-xukuumada iyo hey'addaha dowlada.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Barlamaanka Iswiidhan

Barlamaanka Iswiidhan waa golaha xeer dejinta. Waa isu taga ugu sarreeysa ee kuwa go'aanka ka gaara waddanka. Barlamaanka Iswiidhan waxuu ka kooban yahay siyaasiyiinta ee hab qarameed usoo wakiisheen dadweeynaha. Awooda siyaasadeed waxeey si xoog leh ugu xiran tahay xisbayada siyaasada, maadama xildhibaanaha barlamaanka loo soo doorto ayagoo wakiil ka ah xisbi siyaasadeed. Baarlamaanka wuxuu leeyahay 349 xildhibaan oo afartii sanaba loo soo doorto. Barlamaanka shaqada ugu muhiimsan uu qabto waa:

- Sharci dajinta iyo tirtirada sharciyada hore
- Go'aaminta miisaaniyada dowlada, taasi oo ah go'aaminta dakhliga sanadeed ee dowlada (canshuuraha iyo khidmada) iyo kharashka dowlada
- Kontaroolida habke ee xukuumada iyo dowlada uu qabaneeyso shaqadeeda
- Magacaabida ra'iisal wasaare dooranaayo xukuumad

Xukuumada Iswiidhan

Xukuumada waxeey lee dahay awooda go'aan fulinta. Mecnaheed waa in xukuumada saaran tahay mas'uuliyada fulinta hawlgallada maalmeedka qaranka. Taasi mecnaheed waa tusaale in xukuumada soo bandhigto miisaaniyada dowlada iyo habka loo isticmaalaayo lacagta dowlda, hoggaaminta wasaarada difaaca, arrimaha siyaasada dibadana mas'uul kala noqoto barlamaanka. Waxaa dowlada caawiyo Xafiiska xogheeynta dowlada oo shaqaaledowladeed ka shaqeeyaan.

Waxaa caadi ah in xisbiga siyaasadeed ee ugu weeyn ama xisbiyaal badan oo wada shaqeeyn ka dhaxeeyso la wareegaan xilka doorashada xukuumada. Qofka uu barlamaanka Iswiidhan uu doorto ra'iisal wasaare ayaa dooranaayo wasiirada loo xilsaaraayo qeeybo siyaasadeed ee kala duwan. Wasiir kasto ee ka tirsan dowlada waxuu ka shaqeeynaa wasaarad. Wasaaradaha waa qeeybo kala duwan oo mid-walba uu xiil saaran tahay arrimo gaar ah. Tusaale ahaan, wasaarada-waxbarshada waxeey ka hoowl gashaa su'aalaha la xiriira dugsiyada iyo waxbarashada halka eey wasaarada dhaqanka ku hoowlan tahay arrimaha iyo su'aalaha la xiriira dhaqanka.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Hey'addaha dowladdeed

Hey'adda dowladda waxeey uu qeeybsamaan xukuumada, maxkamdaha iyo hey'addaha maamulka. Hey'addaha dowladda waa sida Xafiiska shaqada, Hey'adda qasnada ceeymiska iyo Hey'adda gaadiidka. Xukuumada ma maamuli karto habka ee hey'ad dowladdeed uu isticmaaleeyso sharciga mana fara gasho karto arrin ee hey'adda ku hoowlan tahay. Hey'addaha waa kuwo madaxbanaan laakin waxeey raacaayaan sharciyada iyo nidaamyada xukuumada dhigtay. Dalal badan waxaa caadi ka ah in wasiir uu lee yahay awood uu ku farasho gashto hey'ad dowladeed shaqo ee ku hoowlan tahay. Iswiidhan sidaas wasiir ku ma sameeyn karo. Waxaa jira sharci maamunaacyo oo lagu magacaabo maamulka-wasiirka.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida Iswiidhan loo maamulo waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee dowladda: **www.regeringen.se**

Hab-dhiska caddaaladda

Hab-dhiska caddaaladda waxaa ka tirsan hey'addaha dowladdeed ee ka mas'uul ah dhawrista ama ilaalinta muwaaddiniinta iyo nabadgalinta muwaadiniinta. Maxkamadaha waa asaaska hab-dhiska cadaalada Hab-dhiska caddaaladda waxa kale oo lagu tiriyaa Hey'addaha ka hortagida danbiyada iyo hey'addaha danbiyada baaro, sida Booliska iyo Hey'adda kalkaalinta dhibbanaha.

Maxkamadaha Iswiidhan waxeey ka kooban yihiin 80 hey'ado iyo guddi. Maxkamada Iswiidhan waxeey uu qeeybsamaan sadax: Maxkamadaha guud, Maxkamada maamulka iyo Maxkamadaha gaarka ah. Maxkamada waxeey sugi kartaa ciqaab. Waxeeyna xali kartaa khilaaf. Maxkamada guud waxeey ka kooban yihiin maxkamda degmada, maxkamada racfaanka iyo maxkamada sare. Waxaa ka mid ah arrimaha ee maxkamada guud qaabilsan yihiin kiisaska-dambiga, kiisaska qoyska iyo kiis uu dhaxeeyo shirkado ama dad gaar ah. Maxkamdaha maamulka waxeey ka kooban yihiin maxkamada maamulka, maxkamada rafcaanka iyo maxkamada sare ee maamulka. Maxkamadaha maamulka waxeey xaliyaan khilaafyo, gaar ahaan kuwa uu dhaxeeyo shakhsi iyo hey'addo dowladeed. Waxeey ku saabsanaa kartaa arrimaha canshuurta, arrimaha shisheeyaha iyo dhalashada (maxkmadaha socdaalka), khilaaf uu dhaxeeyo Hey'adda qasnada ceeymiska iyo degmada.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland



Maxkamadaha gaarka ah waxeey xaliyaan khilaafyo khuseeyo arinta ee maxkamadaas ku shuqul lee dahay, waxeey noqon kartaa arrimaha shaqada ama macmiilka.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan qeeybaha ee maxkamada kala duwan ka mas'uul yihiin, waxeey ku jiraan bogga internetka Maxkamadaha Iswiidhan: **www.domstol.se**

In qofka arintiisa uu baarto maxkamad madaxbanaan oo dhexdhexaad ah, waa xuquuq asaasi ah oo loogu tala galay dadka Iswiidhan degan oo dhan. Distoorka Iswiidhan waxuu qeexayaa in maxkamadaha ka hoowl galaan sharciga, laakin sidooda kale waa madaxbanaan yihiin. Xildhibaan ama wasiir waa ka mamnuuc in uu saameeyn ku yeesho go'aanka maxkamadaha.

Dhawrista ama ilaalinta muwaaddiniinta waxeey uu mecno tahay in dadka dhan uu wada siman yihiin sharciga. Qofka dambi lagu eedeeyo waa qof aan dembi laheeyn ilaa ee maxkamada ku xukunto dembi. Dhawrista ama ilaalinta muwaaddiniinta waa qeeyb muhiim ah oo ka tirsan demoqraadiyada. Waxeeyna ku saabsan tahay xariirka sharciyeed ee uu dhaxeeyo shakhsiga iyo dowlada. Ula jeedada waxeey tahay in muwaadiniinta dhamaantood laga dhawro xad gudub uu geeysan karo qof kale, ama hey'ad dowladeed. Waxaa ula jeedu kale tahay in dadka dhamaantood la damaana qaado xurriyadooda iyo

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Patrik Svedberg (www.domstol.se)

xuquuqdooda. Sharciyada waa in ee ahaadan kuwo cad: waa in si toos ugu cadyihiin waxa sharci ogalyahay iyo waxa uu mamnuucaayo. Qofka fal dembi ku kaco waa in uu fahmi karaa waxa uu keenaayo falkaas.

Qofka uu arko in go'aan qalad ka gaartay hey'ad dowladdeed, tusaale ahaan Hey'adda qasnada ceeymiska ama xafiiska degmada, waxuu racfaan ka qaadan karaa go'anka laga gaaray. Habka racfaanka loo gudbisado waxaa ka warameeyso Hey'adda dowladeed ee go'aanka soo gaartay. Warbixinta nuucaas ah waxeey badanaa ku qoran tahay qoraalka uu go'aanka ku qoran yahay.

Degmooyinka

Dadka Iswiidhan dhammaantod waxeey deganyihiin degmad. Dalka waxaa ku taalo 290 degmo oo si gaar ah isku maamulo. Degmooyinka habab badan ayee ku yihiin kuwo gaar isku maamulo. Degmada waxaa hogaamiyo siyaasiyiinta golaha ee la soo doortay iyo maamulo iyo guddi uu magacaabo golaha degmada. Sharciga maamulka degmooyinka waxaa ku qoran waxyaalaha ee maamulada gobolada, gobolada iyo degmooyinka mas'uul ka yihiin iyo waajibaadka saaran. Saddaxda degmo ee ugu weyn waa Stockholm, Göteborg iyo Malmö. Waxaa jira degmooyin badan oo eey ku noolyihiin dad ka badan 100 000. Degmooyinka magaalo xattaa waa la dhihi karaa.

Degmooyinka waxay tusaale ahaan masäuul ka yihiin dugsiyada, rugta buugaagga, adeegga waayeelada iyo taageerada masruufka la siiyo dadka uu baahan. Waxeey sido

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

kale mas'uul ka yihiin gurmadka dab-demiska iyo daryeelka qashinka, qorsheeynta jidadka, guryaha, biyaha iyo korontada. Howlaha dhamaantood si ee degmada uu kala wado waxeey uu baahan tahay lacag. Degmada waxaa lacag ka soo galaan canshuurta-degmada, kharasheeynta iyo kaalmada-dowlada ee ka hesho. Dadka dakhli soo galo waxeey canshuur ku bixiyaan degmada ee ku diiwaangalsanyihiin. Inta canshuur uu qofka dhiibaayo waxeey ku xiran tahay degmada uu degan yahay iyo dakhliga soo galo.

Goleha ammuuraha gobolka iyo Gobolka

Iswiidhan waxeey lee dahay 21 gobol. Gobol kasto wax ku yaalo intaaso degmo. Gobol kastano waxuu lee yahay Gole qaabilsan ammuuraha gobolka. Xukuumada waxeey magacaawdaa hoggaamiye-goboleed oo hogaamiyo maamulka-gobolka. Maamulada gobolka waxeey xuumada ku matalaan gobolka. Hoowsha ugu muhiimsan ee qabtaan waa in ee gaaraan hadafka barlamaanka iyo xuukmada dhigtay isla markaasna tix galin siisaa gobolka awoodiisa.

Iswidhan waxeey kale oo lee dahay landsting, goleha ammuuraha gobolka (oo qaarkood loo yaqaano gobolo) Goleha ammuuraha gobolka waa heyäad siyaasadeed oo dabooleeysa isla dhulka gobolka. Goleha ammuuraha gobolka waxeey xaq u lee yihiin in ee shardiyaan canshuur. Waxeeyna ka mas'uul yihiin hoowlo bulsho qaarkood, sida arrimaha daryeelka caafimaadka iyo bukaanka. Waxeey kale oo qaabilsan yihiin arrimaha dhaqanka, gaadiidka-dadweeynaha gobolka iyo qorshaha gobolka. Goleha ammuuraha gobolka Iswiidhan waa 20. Gobolada iyo Goleha ammuuraha gobolka waxaa maamulo goleha shacabka loo soo doortay, goleha gobolka iyo goleha maamul goboleedka. Waxaa tusaale ahaan la dhihi kara gobolka galbeedka Götaland in sa rasmi ah uu yahay Goleha ammuuraha gobolka galbeedka Götaland.

Midowga Yurub

Midowga Yurub waa wadajir dhaqaale iyo siyaasadeed oo uu dhaxeeyo dhoow dal oo ku yaalo yurub. Midowga Yurub waxaa la asaasay dagaalkii caalamka labaad ka dib. Waxuuna ahaay bilaawgiisii wadashaqeeyn siyaasad iyo dhaqaale oo ka dhaxeeyay dalka Beljum, Fransiiska, Taliyaaniga, Luksemburg, Holland iyo Galbedkii-Jarmalka. Fikrada laga lahaa ayaa aheeyd dhanka siyaasada iyo dhaqaalaha laga wada shaqeeyo si uu san udhicin dagal sadaxaad,

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Barlamaanka-Yurub ee magaalada Bryssel.

Masawirqaade: www.europaparlamentet.se

ilaalinta nabada iyo kordhinta ganacsiga yurub. Fikradaha asaaska waxaa ka mid ahaay in dalalka ganacsi ka dhaxeeyo nqonaayan kuwo aan iska maarmi karin oo maarkaasna iska ilaalinaayaan khilaaf. Waxaa laga dhihi karaa in dal kasto oo ka tirsan yurub, qeeyb ka mid ah awooda siyaasadadeed uu wareejiyay Midowgya Yurub si ee uu badato saameeynta lagu yeesho caalamka.

1995 ayee Iswiidhan ayuu xubin ka noqatay Midowga Yurub. Tirada dalalka Yurub maanta waa 28 dal oo ka wada shaqeeyo sida badeeca oo si xur ah loo kala mariyo dalalka, adeegyo, hanti iyo dal, ilaalinta bey'adda iyo arrimaha amaanka iyo difaaca. Dalal badan oo ka mid ah ayaa hirgaliyay isticmaalka lacagta la wada sameeystay Euro, aakin Iswiidhan ma ka mid ahan dalalkaas.

Midowga Yurub wuxuu leeyahay saddex hay'ado oo wadajir sharciyada u dejiya: Guddiga Yurub (Europeiska kommissionen), Baarlamaanka Yurub (Europaparlamentet) iyo golaha wasiirradaha Yurub (Europeiska unionens råd). Seddexduba waxay xarun ku leeyihiin magaalo madaxda wadanka Beljum ee Bryssel iyo wadanka Luksemburg. 28 dal ee xubnaha ka ah Midowga Yurub, waxay u wada shaqeeyaan seddex hab oo kala duwan:

- **Heer-taliska ugu sareeya**
  Go'aan waajib ku ah in dhammaan dalalka Midowga Yurub xubno ka ah ay raacaan. Go'aamadaas waxa kamid ah sharciyada Midowga Yurub ay wadajir u soo

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

dejiyeen. Sharciga Midowga Yurub wuxuu ka sareeya sharciga dalka xubin ka ah dalkiisa u degsan. Sharciyada badankood waxay ku saabsan yihiin fududaynta ganacsiga, socdallada iyo ka shaqaysashada dalalka xubin ka ah Midowga Yurub. Waxaa jirto Maxkamad dejinta sharciyada Midowga Yurub u gaar ah. Waxaa lagu magacaabaa Maxkamadda Midowga Yurub waxayna ku taalaa dalka Luksemburg.

- **Heer-taliska dhexaa**
  Wada-shaqayn ikhtiyaari ah oo ka dhaxeeyaa 28 dal ee xubnaha ah, iyadoo sharci la tixraacin. Tusaale ahaan, markii Midowga Yurub u go'aan ka gaaro siyaasadda dibada iyo waxkaqabadyo militeri ah, waxay go'aanadaas ku salaysan yihiin heer-talis dhexaad.
- **Heer-taliska qarmeed**
  Dal kasta oo Midowga Yurub xubin ka ah wuxuu xaq uu lee yahay in uu isku taliyo. Laakinse dhamaan sharciyada iyo hab-maamuleedka qaranka, waa in ay waafaqsan yihiin sharciyada iyo hab-maamuleedka ka degsan heer taliska-sareeyo ee Midowga Yurub.

Awoowda taliska oo ka dhaxeeyso qeeybo badan

Xataa awooda taliska siyaasadeed ee rasmiga ah waxeey uu qeeysantaa heerar kala duwan: degmooyinka, goleha gobolka, dowlada iyo Midowga Yurub waxuu xarumo-talis ku lee yahay baslshado oo mecno ugu fadhiyo hab-dhiska demoqraadiyada. Bulshada demoqraaddiga ah waxaa muhiim ka ah saxaafada, shirkadaha iyo dadweeynaha.

Saxaafada (jornaalada, raadiyaha, telefishinka iyo internetka) waa kuwo ka madaxbanaan dowlada. Taasi mecnaheed waa in sida ee doonaan uga warami karaan uuna kormeeri karaan siyaasiyiinta iyo dadka kale ee awooda ku leh bulshada. Saxaafada waxeey hoowlan tahay shaqo muhiim marka laga hadlo abuurida dooda arrimaha bulshada.

Raadiyaha Iswiidhan (SR) iyo Telefishinka Iswiidhan (SVT), waxaa iska leh urur ka madaxbanaan dowlada. Hoowsha waxaa maalgaliyo guryaha oo dhiibo kharashka khidamada telefisinka iyo raadiyaha, waa mida loo yaqaan rukhsada-telefishinka. Mecnaheed waa in kanaaladas aan laga maalgalin faanis ama kaalmo dhaqaale ee dowladeed. Sidaas darteed ayaa lagu magacaabaa Adeega Bulshada. Shaqadoodu waa in ee ahaataa mid dhexdhexeeyn iyo asal

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

demoqraaddi ah ku saleeysan. Sido kale Iswiidhan waxaa ka jiro kanaalo telefishin iyo raadiyo oo laga maalgaliyo faanisyada oo kormeero dadka awooda ku leh bulshada, tusaale ahaan TV4.

Suuqa waxuu ka kooban yahay shirkado raasamaal ah iyo macaamiil wada saameeyo dhaqaalaha dalka iyo suuqa shaqada dalka. Horumarka dhaqaale ee shirkada waxuu saameeyn uu geeysanaa dakhliga-canshuuraha dowlada.

Bulshada rayidka ah waa magaca lagu magacaayo, qeeybta bulshada ee dadka isku caawiyaan ayadoo ee san dowlada taasi toos uu fara gashan. Bulshada rayidka ah waxaa sida horeeyn uu wada ma ahan lacag sida shirkadaha. Bulshada rayidka ah waxaa kale oo lagu magacaabaa qeeybta samfalka ah, qeeybta ikhtiyaariga ah ama qeeybta rayidka. Bulshada radyidka ah waxaa ka mid ah ururada samafalka, ururada isboortiga iyo xisbyada siyaasadeed oo saan toos ah dowlada uu maalgalin ama uu dhisneeyn lacag darteed.

Ururada dadweeynaha ee Iswiidhan, sida ururka shaqaalaha, ururada bey'adda ama ururada ciribtirida khamriga waxeey tusaale uu ahaayeen habka ee bulshada rayidka ah awood-saameeyn ku yeelan karto bulshada ayadoo ee san dowlad ama lacag aheeyn hadafkeedu. Bulshada rayidka ah waa qeeyb muhiim oo ka mid ah bulshada demoqraaddiyada, halkaasi ee qofka uu ka qeeyb gali karo isla markaana saameeyn uu geeysan karo bulshada.

Xuqquuqda demoqraaddiyada oo eey ka mid tahay xurriyada daabacada iyo qoowlka iyo xurriyada ururka waxeey si aan toos-aheeyn ugu dhiiro galinaayaan dadka in ee ka qeeyb qaataan nolasha siyaasadeed. Dadka waxeey siyaasada uga qeeyb qaadan karaan siyaabo kala duwan, tusaale ahaan waxeey ka qeeyb gali karaan xisbi siyaasadeed, amaurur si ee uu wadaan arrimo kala duwan. Dadka waxeey la xariiri karaan saxaafadaha kala duwan si ee ugu waramaan waxa ayagu muhiim uu ah. Xaq ayaad u leedahay inaad magacaaga qarisid marka aad joornaaliiste la xiriireysid. Sidoo kale dadka waxeey la xariiri karaan siyaasiyiinta joogo degmada la degan yahay, waxeeyna dhiiban karaan talo ama aragti ku saabsan go'aamo.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Distoorka Iswiidhan

Si ee bulshad demoqraaddiyeed uu shaqeeyso waxeey loo baahan yahay xeerar iyo nidaamyo. Xeerarka ka tirsan distoorka waa kuwo ugu muhiimsan Iswiidhan. Xeerarkaasi waxeey asaas uu yihiin sharciyada kale. Waxeeyna muujinayaan habka Iswiidhan loo maamulaayo. Waxeey difaacayaan demoqraaddiyada, waxeeyna ka sareeyaan sharciyada kale. Waxaa taasi laga wada in sharciyada kale ee dalka ee san khilaafki karin waxa ku qoran distoorka.

Sii loo hubiyo hab-dhiskaan in uu oo san qof uu "af-gambin" doorasho kadib, waxaa la asassay nidaam aan sharciyada lagu badali karin sida la doono. Si xeer ka mid ah distoorka loo badalo waa in barlamaanka uu gaaraa isla go'aankaas laba jeer. Sido kale waa in doorasho guud ee dhacdaa inta uu dhaxeeyo labada go'aan. Nidaamkaan waxaa loo dajiyay si ee dowlada uu gaarin go'aan dhaqso badan. Waqtiga ka fiirsashada ee dheeradka ahw waxaa loogu tala galay si fiican looga fiirsado badalka-xeerka. Xeerarka distoorka waxeey diifacaayaan demoqraaddiyada. Distoorka Iswiidhan waxuu ka kooban yahay:

- **Xeerka hab-dhishka dowlada (RF)** oo ku saabsan habka Iswiidhan loo maamulaayo. Xeerka hab-dhiska dowlada ee maanta jiro waa midkii la gaaray 1974:tii. Halkaas waxaa ku qeexan habka e xukuumada uu shaqeeneeyso iyo habka doorashada barlamaanka uu sococneeyso. Xeerka hab-dhishka doowlada (RF) waxuu ka kooban yahay oo kale xeerarka xuquuqda iyo xurriyada asaasiga ah. Tusaale, waxaa xeerka ku qoran xurriyada ururka iyo xurriyada diimaha.
- **Xeerka isku wareejinta jagooyinka (SO)** oo ku saabsan qofka boqor (ama boqorad) ka noqon karo Iswiidhan.
- **Xeerka xorriyadda wax daabicidda (TF)** oo ku saabsan waxa lagu qori karo joornaalada iyo buugaagta. Iswiidhan waxuu qofka qori karaa waxa uu doono laakin ma qori karo qoraal ku ridaayo fal dambi.
- **Xeerka xuiryada hadalka (YGL)** oo ku saabsan waxa uu qofka ka sheego kari raadiyaha, telefishinka, filimaanta iyo internetka. Iswiidhan waxuu qofka ka oran karaa waxa uu doono ilaa heer xad. Tusaale ahaan qofka dadka kale ma caay karo. Waxeey taasi ahaan kartaa waxa laga sheego qof ama koox.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xisbiyada iyo fikradaha siyaasadeed

Markii aad codbixinayso waxaad dooranaysaa xisbiga aad taageersan tahay. Xisbi siyaaseedka waa koox dadyoow ah oo isku fikrad qaba oo doonaya in siyaasadda dalka ay saamayn ku yeeshaan. Xisbi kasta waxuu leeyahay barnaamij siyaadeed u gaar ah oo muujinaayo fikrada xisbaga uu ka qabo habka bulshada uu hormareeyso. Xisbiyada siyaasaded waayahan danbe jira waxay fikradhooda ku saleeysan yihiin fikrado soo ifbaxay 1800-meyadii.

Fikradda libraaliyadda

Erayga laatiinka ah ee liber waxay ka dhigan tahay xurriyad. Xurriyad doonayaashii ugu horeeyay ee qarnigii (1700-meeyadii), waxyaabihii ay u halgamayeen waxay ahaayeen sugida xuquuqda iyo xurriyada aadenaha. Waxay tusaale ahaan doonayeen sugidda hadalka iyo qoraalka si ee dadka dhan uga warami karaan qoraal ahaan iyo af ahaan, fikradooda iyo dareemahooda.

Xorriyad doonayaashu waxay kaloo doonaayeen in la ciribtiro kharashyada la bixiyo markii wax la iibsanaayo ama gadaayo. Habkaas ayeey uu doonayeen kordhinta ganacsiga ka dhaxeeyay dalalka. Taasi oo dhaqaalaha u roona oona hoos u dhigi lahaa halista dagaalka.

Qunyar socod

Erayga laatiinka ah *conservare* wuxuu micnihiisu yahay xajin ama haysasho. Dadkii horay uu taageersanaa fikradaha qunyar socodka 1700-meeyadii, waxay doonayeen in ilaalinta taariikhda, dhaqamada iyo diinta dalka. Waxay kalo gaashan u dhigaayeen reebida awooda boqorka, kaniisada iyo dadkii ku abtirsan jiray boqortooyada. Fikradaha uu ku mecno fadhiyo Qunyar socdka waa in laga soo hojeesto isbedalada dhaqsaha badan ee bulshada iyo rebida caadooyinka rerka iyo ururada diimeed.

Hanti-wadaagga

Erayga *socialism* wuxuu ka yimid luqadda laatiinka, macnahiisana waa jaalle. Hanti-wadaagyaashii ugu horeeyay 1800-meeyadii waxay doonayeen ilaalinta xuqquuqda shaqaalaha. Waxay halgan ugu jireen in warshadaha iyo ururrada aan gaar ahaan loo yeelan. Waxay rabeen in

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

dadweeynaha wadajir u helaan milkiyadooda. Fikradaha uu ku mecno fadhiyo Hanti-wadaga tusaale ahaan waa in sinnaanta ugu badan ee macquulka ah ka dhaxeeyso dadka iyo kooxaha bulshada ee kala duwan.

Fikrado siyaasadeed oo kale

1900-meyadii waxaa soo if-baxay fikrado siyasadeed kale. Fikradahooda waxeey saameeyn ugu yeesheen siyaabo kala duwan.

Mabda'a sinnaanta ragga iyo dumarka waqti dheer ayuu soo jiray laakin waxuu xoog yeeshay 1900-meyadii. Dadka taageero mabda'a sinnaanta ragga iyo dumarka waxeey uu arkaan in raggu uu san dumarka uga awood badnaan bulshada. Waxeey xooga saaran in ee xoojiyaan xuqquuqda dumarka ee dhanka siyasada, dhaqaalaha iyo bulshada.

Mabda'a noolaha iyo deegaanka waa fikrado ku saabsan in baniaadanka yahay qeeyb ka mid ah dabiicada. Siyaasada noolaha iyo deegaanka waxeey ku saabsan tahay sidii loo abuuri lahaay bey'ad fiican iyo hormarin jireeyso uu la raacsan wanaagsanaanta noolaha iyo deegaanka.

Mabda'a wadanimada waa fikrado ku saabsan wada jirka qaranka. Dadka wadaniyiinta ah waxeey doonayaan in ee dhoowraan qaranka, dhaqanka iyo taariikhda. Dadka wadaniyiinta ah waxeey ka soo hoorjeedaa in dhaqamooyinka la isku daro.

Faashiyada iyo naasiyada waxeey soo jireen ilaa bilaawgii 1900-miyadii. Waxeeyna uu doodaan in dad koox ugu fiican maamulaan bulshada. Ayagoo ka horjeedo aheeyn siyaasiyiin hab demoqraaddi ah lagu doortay in ee maamulka heeystaan. Faashiyada iyo naasiyada waxaa fikrado siyaasadeed oo aaminsan in dhaqankoodu ka fiican yahay dhaqamada kale. Fikrada naasiyada waxeey xoog ku laheeyd darlka Jarmalka 1930-miyadii markii uu Adolf Hitler maamulaaye dalka. Naasiyiinta waxeey bilaabeen dagaalkii caalamka ee labaad waxeeyna dileen malaayiin yahood, roomaan, dadka cuuriyaamiinta ah iyo dad kale oo ka soo horjeeda siyaasaday naasiyiinta.

Xisbiyada siyaasada

Xisbiyada siyaasadda waxey heystaan door dimuquraadiyadeed oo muhiim ah waxeyna doortayaasha siiyaan waxyaabo eey kala doortaan marka eey jiraan

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

coddeyn guud waxeyna siinayaan fursado eey ku saameyn karaan, wax uga qeyb gali karaan mas'uuliyadna u qaadi karaan. Xisbiyada siyaasadda waxeey heli karaan kaalmo dhaqaale si eey u qabtaan shaqo qoto dheer isla markaana eeysan ku tiirsanaan kaalmmo bixiyayaal kala duwan. Xisbiyadu waxay taageero dhaqaale ka codsan karaa Guddida kaalmada xisbiyada. Taageerada waxaa la siiyaa hawlaha guud ee xisbiyada ee dhinaca gudaha iyo banaanka baarlamaanka labadaba. Natiijada doorashada ayaa ay ku xirantahay intay leegtahay lacagta ay xisbiyadu helaan.

Xisbiyada ku jiro barlamaanka mudada xukunka 2014- 2018 waa Centerpartiet (C), Liberalerna (L), Kristdemokraterna (KD), Miljöpartiet (MP), Moderaterna (M), Socialdemokraterna (S), Sverigedemokraterna (SD), och Vänsterpartiet (V). Doorashadii bishii sebtembar ee 2014kii kadib waxaa xukuumad dhisay Socialdemokraterna iyo Miljöpartiet. Ra'iisal wasaaraha dalka waa Stefan Löfven ee ka soo jeeda Socialdemokraterna (S).

Xisbiyo qaarkood ayaa asaastay koox siyaasadeed ee lagu magacaabo Alliansen (isbaheeygsiga). Xisbiyada ku jiro isbaheeysigaas waa Moderaterna, Centerpartiet, Liberalerna iyo Kristdemokraterna. Afartaan xisbi ayee xukuumada ka koobneed intii uu dhaxeeysay 2006-2014.

Hab-dhishka doorashada Iswiidhan

Asaaska bulshada demoqraaddiyada waa in aan ku dooran karno doorasho guud dadka aan wakiilaneeyno. Doorashadu waa muhiim maadama ee gaar ahaan shacabku saameeyn ku yeelan karo siyaasada dalka.

Doorashada iyo ka qeeyb galida codeeynta

In bdad badan coodeeyaan waxeey uu mecno tahay in dad badan kalsooni uu qabaan siyaasiyinta iyo hab-dhishka demoqraaddiyada. Haddii barlamaanka, golega gobolka iyo goleha degmada lo arkaayo in ee matalaan shacabka dhammaantiisa waa in ee jiraan dad ku filan oo xaq uu leh ka codeeynta doorashada guud. Qiyaastii boqolkiiba 86 ee shacabka dalka ayaa ka qeeyb qaatay doorashadii barlamaanka Iswiidhaan ee 2014. Doorashada goleha gobolka/gobollada iyo degmooyinka xooga in ka yar ayaa ka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

qeeyb qaadatay codbixinta. Marka aad codkaada dhiibato waxaa badaneeyso fursadu uu qof kale kuugu aragti mid yahay uu ku maamulo bulshada.

Farqi weeyn ayaa uu dhaxeeyo kooxaha kala duwan ee ka qeeyb qaato doorashada. Dadka waxbarashada iyo dakhliga hooseeyo ee ka qeeyb qaato codeynta yaryihiin dadka waxbarashada iyo dakhliga sare leh. Dadka dhalinyarta ah oo ka qeeyb qaato codeeynta waa ka yaryihiin dadka ka waaweeyn. Dadka dibada ku dhashay oo ka qeeyb qaato codeeyntana waa ka kuwo codeeyo oo dalka ku dhashay. Hamigi uu qofka doorashada uu qabo waa sii korortaa inta badana marka uu qofka sii degnaado dalka Iswiidhan mudo dheer.

Masawiir muujinaayo goob-codbeeyn ee dadka ku codeeynaayaan.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Doorashada guud

Waxaa jirto afar nuuc ee ka mid ah doorashada guud:

- Doorashada barlamaanka
- Doorashada hogaamiyayaasha maamulka gobolka -/ goleha gobolka
- Doorashad goleha degmada
- Doorashada barlamaanka Yurub

Dadka codeeyo waxeey dooranaayaan xisbi isla markaana waxeey dooran karaan mid ka mid ah dadka is soo sharaxay oo ka tirsan waraaqada-codeeynta. Dabcan waa loo codeeyn karaa xisbiyo kala duwan marka laga qeeyb qaadanaayo doorashooyinka kala duwan.

Hab-dhiska doorashada Iswiidhan waa mid barbardhac ah. Taasi mecnaheed waa xisbiyada in goleha uu dirinayaan wakiiloyaal ayagoo loo bardhigaayo inta cod ee heleen.

Doorashada guud ee barlamaanka, goleha gobolka iyo goleha degmada waxaa la qabtaaafartii sanaba hal mar oo bisha sibteembar ah. Doorashadaan waxaa la qabtaa isla hal maalin. Doorashada barlamaanka yurub waxaa la qabtaa shantii sanoba hal mar, sida caadiga ahna waxaa la qabtaa bisha juun.

Afti ka qaadista dadweynaha

Afti ka qaadista dadweynaha waxeey siyaasiyiinta qaranka, gobolka ama degmada siineeysaa fursad ee ku gartaan aragtida shacabka ee ku aadan arrin siyaasadeed. Iswiidhan waxaa lagu qaban karaa aftiyo kala duwan oo dalka dhan khuseeyo: afti ka qaadista dadweynaha ee ku saleeysan talo-siin iyo afti ka qaadista dadweynaha ee ku saleeysan ariin distoor. Agtiga ku saleeysan talo-siinta ma ahan mid siyaasiyinta ku qasban yihiin in ee raacan. Siyaasiyiinta waxeey gaari karaan go'aan ka soo horjeeda natiijada aftiga. Aftiga ku saleeysan arrin distoor waxaa lala qabta doorashada barlamaanka, wana mid ee ku qasban yihiin siyaasiyiinta in ee raacaan. Laakin Iswiidhan waligeed laguma qaban aftiga ku saleeysan arrin distoor.

2003dii ayaa Iswiidhan lagu qabtay aftigii ugu danbeeyay. Waxeey waagaas ku saabsaneeyd haddii ee Iswiidhan lacagteeda ee kronor uu badaleeyso lacagta yurub ee euro. Shacabka Iswiidhan waxeey ku codeeyeen maya. Heerka degmooyinka waxaa hal ama dhowr degmo lagu qabtaa afti ku saleeysan talo-siin. Afti ka qaadis dadweyne waxaa la

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

sameynaa haddii boqolkiiba 10 dadka codka bixin kara eey codsadaan. Aftidaas lama qaadi karo haddii saddax meelood laba meel golaha degma ama gobolka eey diidaan.

Xaqqa-codeeynta

Waxaad xaq uu lee dahay in aad uucodeeyso barlamaanka Iswiidhan haddii aad tahay muwaadin iswiidhish ah isla markaana aad da'dadu tahay ugu yaraan 18 sano.

Waxaad xaq uu lee dahay in aad uu codeeyso barlamaanka Iswiidhan haddii aad gaartay 18 sano, aadna muwaadin ka tahay dal ka tirsan Midowga Yurub.

Waxaad xaq uu lee dahay in aad uu codeeyso goleha degmada iyo gobolka haddii aad gaartay 18 sano, aadna Iswiidhan ka diiwangashaneeyd ugu yaraan 3 sano. Shardi ma ahan in aad ahaato muwaadin iswiidhish ah si aad ka codeeyso doorashada goleha degmada iyo goboleka.

Hey'adda doorashada ayaa kaarka-codeeynta uu dirto dadka codeeyn karo inta aan la gaarin doorashada. Kaarka-codeeynta waxaa loo diraa cinwaanka aad ku diiwangashantahay. Waa in aad wadataa aqoonsi marka aad codeeyneeyso.

Haddii aad xaq uu lee dahay in aad codeeyso, waa lagu dooran karaan xil siyaasadeed. Mecnaheed waa in lagu dooran karo xildhibaan barlamaan, goleha gobolka ama goleha degmada.

Iswiidhan waxaa ka jira sir-doorasheed. Waxey ka dhigantahay in aadan u baahneyn inaad sheegto xisbiga aad u codeyneyso. Dadka ka shaqeeya doorasha ama dadka waraaqahaaga doorashada kaa qaadaya ma ogaan karaan xisbiga aad u codeeysay.

Sawir: Marcus Lundstedt, Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xadka xannibaada xisbiyada yaryar

Marka uu xisbi soo galaayo barlamaanka Iswiidhan waa in xisbiga uu codaha ka heeystaa ugu yaraan boqolkiiba afar codadka doorayaasha waddanka oo dhan ama boqolkiiba 12 goobaha laga doorto wakiillada baarlamaanka ama siyaasiyiinta degmooyinka. Marka uu xisbi soo galaayo goleha gobolka waa in xisbiga uu codaha kaa heeystaa ugu yaraan boqolkiiba sadax. Barlamaanka-Yurub waxuu lee yahay xadka barlamaanka Iswiidhan camal, waa boqolkiiba afar. Xannibaa dlagu sameynayo ururyada yaryar ayaa waxey billaabmayaan laga billaabo 2018 waana marka la dooranayo degmooyinka. Xannibaadda waa labo ama saddax boqolkiba waxeyna hadba ku xirantahay goobaha laga doorto siyaasiyiinta degmooyinka.

Iswiidahn waxaa ka jiro xisbiyaal badan oo aan boos ku laheeyn barlaamaanka ee laakin xildhibaan ku leh degmooyinka iyo goleha gobolka/gobolka.

Demoqraddiyada nolol-maalmeedka

Waa muhiim in qofka uu codkiisa ku muujiyo goobo ka badan kuwa doorashooyinka guud.

Shacabka waa in ee lee yihiin fursado fiican ee ku arkaan, ku qeeyb qaataan iyo saameeyn ku yeeshaan hab-socodka go'aan gaarista siyaasada haddii ee donaan, xattaa inta uu dhaxeeyso doorshooyinka. Waxaa taasi lagu fulin karaa tusaale, in lala xariiro siyaasi, la saxiixyo aruurin-magaceed ama mudaaharaad.

Sido kale waxaad muhiim in qofka uu sameeyn ku yeelan karo go'aamada khuseeyo asaga ama arrimaha maalmeedkiisa. Tobannaankii sannadood ee ugu dambeeyay, waxaa la isku dayaayay in la kor loo qaado ka qeeyb galista demoqraddiyada la xiriirto suuqa shaqada, dugsiyada, qoysaska, ururrada iyo goobaha guryaha.

Kor u qaadka demoqraddiyada suuqa shaqada waxaa loola jeeda in shirkadaha iyo ururrada, ay fuliyaan sidii shaqaalaha uga qayb qaadan laahaayeen go’aamada. Dadka dhammaantood waa in ee helaan fursad ee saamayn ugu yeeshaan shaqadooda. Laakiinse weli go’aamada ugu danbeeyo badankood waxaa gaara madaxda.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Kobcinta demoqraddiyada ee dugsiyada waxaa loo jeeda in carruurta la baro, in arrimaha qaarkood ay aragtidooda ka bixiyaan oona is mas'uuliyad qaadan. Macallinku wax kasta go’aan kama gaari karo. Ardayda waxay ka qaybqaadan karaan qorsheyanta waxbarashada.

Kobcinta demoqraddiyada qoysaska waxaa loola jeeda in carruurta lagu barbaariyo, sidii ay u noqon lahaayeen dad madaxbanaan oo nabadgelyo leh. Waalidiinta badankood waxay la tashadaan caruurtooda, waxeeyna uu ogaladaan in ee ka qeeyb qaatan go'aamada khuseeyo arrimaha qoyskooda.

Ururro badan oo Iswiidhan ka jira waxeey mudo dheer ku dhaqmaayeen fikradaha shaqada ee ku dhisan demoqraddiyada. Waxay qaban nidaam u degsan sida shirarka iyo doorashada loo qabanaayo. Waa muhim in xubnaha oo idil ay codeeyn karaan. Codka xubin kasta waa isku qiimo.

Demoqraddiyada goobaha guryaha waxaa loola jeeda in dad,a ku nool ay xaq ku leeyihiin go’aan garida. Waxay go’aan ka gaari karaan waxyaalaha wadajirka loogu isticmaalo goobta guryaha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su'aalaha wadahadalka cutubka 6

Adiga demoqraadiyad maxeey kula tahay?

Sidee ayaad noloshaada demoqraaddiyada uga dareentaa?

Sidee musuq-maasuq looga hortagi karaa gudaha bulshada demoqraaddiga?

Maxeey ugu mecno fadhisaa oo keeni kartaa xurriyada hadalka marka ee ka jirto bulsho?

Sidee ayee xurriyada hadalka si xun loogu isticmaali karaa?

Maxeey muhiim uu tahay in qofka bulshada demoqraaddiyada ku sheegto aragtidiisa?

Waa midee fikrada siyaasadeed ee aad adiga uu aragto in ee ku haboon tahay maamulida bulshada?

Habkee ayee ka qeeyb-qaadashada dooraashadu uu tahay arrin la xariirta demoqraaddiyada?

Waa maxay sababta ee muhiim uu tahay in laga codeeyo doorashada guud?

Sidee xuquuqdaada demoqraadiyaddeed ugu isticmaali kartaa nolol maalmeedkaada?

Maxaad rabi laheyd inaad bulshadaada ka bedeshid?

Sidee ayee Iswiidhan uu tahay dal demoqraaddiyad?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

7. Daryeelidda caafimaadka ee dalka Iswiidan

Tusmada

Waa maxay caafimaadka?

Khamriga, maandooriyayaasha iyo tubaakada

Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka Iswiidhan

La kulanka daryeelka caafimaadka

Xaggee la xarireeysaa?

Daryeelka ilkaha

Haddii aadan ku qanacsanayn

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waa maxay caafimaadka?

In qofka uu caafimadkiisu fiican yahay mecnaheed waa in uu caafimaad qabo oo la fiyow yahay. Caafimaadkaada waxaa saameeyn ku yeelan karo tusaale ahaan, waxaad cunto, kadeedka, hurdada, sigaar cabida, khamriga iyo maandooriyada. Waxaa kale oo caafimaadka saameeyn ku yeelan karo waa, in aad isku faraxsan tahay, dadka agagaarkada joogo iyo haddii aad uu aragto in noloshaada mecno lee dahay.

Sido kale bulsahadaada aad joogto caafimaadka wax badan ayee ugu fadhisaa, tusaale ahaan habka aad uu degan tahay, shaqada aad ka qabato iyo haddii aad dareensan tahay in aad qaayb ka tahay bulshada.



Waxa go'aamiyo caafimaadka, laga soo xigtay Dahlgren & Whitehead

Caafimaadka dadweeynaha

Caafimaadka dadweynuhu waxuu saabsan yahay caafimaadka dhamaan dadweeynaha joogo dalka. Xaqqa helida caafimaad fiican waxeey ka mid tahay xuquuqda aadanaha. Dowlada waxeey mas'uul ka tahay in dadka dhan ee joogo bulshada helaan, tusaale ahaan, caafimaadka ee uu baahanyihiin. Xukuumada Iswiidhan iyo hey'addaha

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Saddax fac

Masawirqaade: Colourbox

dowladeed ee kala duwan, waxeey hoowl ka qabtaan sida ee dadka caafimaad fiican uu heli lahaayeen.

Hey'adda caafimaadka dadweeynaha waa hey'ad dowladeed oo qaranka mas'uul looga dhigay arimaha ku saabsan caafimaadka dadweeynaha. Waxeey hey'addan uu shaqeeysaa si dhamaan dadka Iswiidhan joogo uu helaan caafimaad fiican. Hey'adda caafimaadka dadweeynaha waxeey si gaar uga shaqeeysaa kow iyo toban qeeyb oo kala duwan. Qeeybahaas waa:

- In qofka ka qeeyb qaato iyo in saameyn ku yeesho bulshada.
- Ammaan ku aadan dhaqaalaha iyo bulshada.
- Xaalada-korrinka caruurta iyo dhalinyarta.
- Caafimaadka shaqaalaha.
- Bey'addaha iyo badeecada.
- Sii hagaajintaa daryeelka caafimaadka iyo bukaanka.
- Ka hortagida cudurada faafo.
- Galmada iyo caafimaadka.
- Jimicsiga jirka.
- Cadeeysi fiican ee cunto cunida iyo raashinka.
- Khamri, maandooriyo, isticmaalida maadooyinka awood-siinta, tobaako iyo qamaar.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ayadoo ee hey'addaha dowladu uu shaqeeyaan sida usii ficneey lahayeen caafimaadka-dadweeynaha, waxaa wali sii jiro farqi uu dhaxeeyaa caafimaadka kooxyo kala duwan oo ka tirsan bulshada. Dakda waxbarshada yar iyo dakhliga yar leh waxeey inta badanaa ka caafimaad xunyihiin dadka ka waxbarasho badan, kana dhaqaalo badan.

Cadeeysi fiican ee cunto cunida

Waxa aad cunto iyo waxa aad cabto waxeey mecno weeyn ugu fadhiyaan caafimaadka iyo sida aad dareeysantahay. Wanaajinta cunto cunida iyo idhaqdhaqaaqa waxeey yareenaayaan khatarta helida cuduro badan, oo ka mid yihiin cudurada wadnaha iyo xiddidada, cudurka sokorrowga, kansarka iyo xanuunyo maskaxeed.

Jirka waxuu uu baahnyahay maadooyin kala duwan. Si aad u hesho dhammaan maaddooyinka jirku u baahan yahay waxaa muhiim ah in aad cunto cuntooyin kala duwan. Haddii aad cunto quraacda, qadada iyo cashada waqtiyo go'an, waxaa fududaaneeyso in aad cunto in kugu filan.

Talo oo ku saabsan cuntada u fiican caafimaadka

Hey'adda arrimaha raashinka (Livsmedelsverket) waa hwy'ad dowladeed oo ka shaqeysa arrimaha la xiriira cuntada. Hey'adda arrimaha raashinka waxaay ku siineeysaa talooyin badan oo ku saabsan cuntada u wanaagsan caafimaadka, tusaale ahaan:

- Waxaad badsataa oo cuntaa khudaarta iyo cagaarka. Dooro khudradda waaweyn iyo kuwa salka leh, kaabashka nuucyadiisa kala duwan, digir iyo basal. Faa'iido caafimad oo badan ayey leedahay cunidda khudaarta.
- Waxaad cuntaa raashinka laga sameeyey daqiiqda firida qabadinka oo qalkii lagu ridqay (fullkorn) markii aad cuneeyso rootiga, baastada, bariska, koonfelegeska iyo firi qabadin (gryn).
- Cun mallaayga ama kallunka marar badan, qiyaastii labo illaa saddex mar toddobaadkiiba. Isku dheelli tir cunto subag leh iyo mid aanan laheyn waxaadna doorataa cuntada aan la bacriminin.
- Isticmaal subagga faa'iidada leh marka aad cunto karineyso, sida ooliyada geed gaabka iyo subagga faa'iidada leh.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Calaamadda daloolka furuhu

Dukaamada cuntada waxaa yaal cuntooyin ay ku dhegsan yihiin sawir u eg daloolka furaha. Waxaa cuntada noocaas ah ku yar dufanka, sonkorta iyo cusbada. Waxaana ku badan maaddada fiber marka la barbar dhigo cuntooyinka aan calaamaddas lahayn. Hey'adda arrimaha raashinka waxey talo ku bixineysaa cunto eey baakadahooda ku sawirantahay duleelka furaha.

Talooyin ku socdo dadka waaweyn

Dad badan oo waaweyn waxay dareemi lahaayeen caafimaad haddii ay cunista dufanka yareeysan lahaayeen. Dufanka aan dhaqso u milmin waxaa laga helaa xoolaha. Dufankaa aan dhaqso u milmin waxeey kku jiraan caanaha dufanka badan, garoorka, subagga burcadka ah, hilibka baruurta leh, labeenta, jallaatada iyo shukulaatada. Sido kale dufanka aan dhaqso u milmin waxaa laga helaa saliida dhirta sida saliida qumbaha iyo geed hindiga. Dufanka aan dhaqso u milmin wuxuu siyaadiyaa khatarta cudurrada wadnaha iyo xiddidada.

Dufanka dhaqso umilma wuxuu u wanaagsan yahay jirka. Wuxuuna yareeyaa khatarta cudurrada wadnaha iyo xiddidada. Dufanka dhaqso u milma waxaa laga helaa saliidda dhirta badankeed, subagga dareeraha ah, mallaayga, iyo noocyada lawska.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Khudaarta iyo cagaarka waxaa laga helaa maaddooyin jirku ubaahan yahay, sida fiitamiinno, macdan iyo fiiber. Khudaarta ay ka mid yihiin dabacasaha, barokoli, digirta iyo noocyada kabashka waxaa ku jiro fiiberka. Waa wanaagsantahay in maalin walba la cuno khudaar iyo cagaar.

Mallaayga iyo xayawaanka badda waxaa ku badan fiitamiinada iyo macdanta. Waxaa kaloo mallaayga laga helaa dufan lagu magacaabo omega 3. Wuxuuna u wanaagsan yahay wadnaha, dhiigga iyo cadaadiska dhiigga.

Haddii aad dooneyso in miisaankaagu uu noqdo mid caafimaad leh ha badsan cunista ee ku jirto sonkorta iyo dufanka. Sidaas darteed iska ilaali cabidda cabitaannada aashitada sokorta leh iyo cunida nacnaca, bardhada shiilan, doolshaha iyo shukulaatada.

Talooyin ku socdo caruurta

Caruurta waxeey uubahan yihiin in ee cunta nafaqo leh ku cunaan xilliyo go'an. Si ay si six ah ugu koraan oo ugu weynaadaan.

Dhallanka cuntada ugu fiican waa caanaha-hooyada (caanaha naaska) ama caanaha ama caanaha loo qaso caruurta yar. Rugta daryeelka caruurta (BVC) waxaad ka heli kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan cunto caruurta uu wanaagsan.

Bogga internetka Hey'adda arrimaha cuntada **www.slv.se** ayaa ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan cuntada caruurta uu wanaagsan.

Dhaqdhaqaaqa iyo jimicsiga

Bani aadanku wuxuu caafimaadkiisa ugu baahan yahay in uu dhaqdhaqaaqo. Jimicsiga waxuu yareeyaa cudurro badan oo ay ka mid yihiin cudurrada wadnaha iyo xiddidada, iyo cudurrada kansarka qaarkood. Jimicsiguna wuxuu ku kordhinaa farxad. Jiifka ayaa ku wangaasamaayo, kadeedka ayaa ka yaranaayo, miisaankaaguna ma kuugu kordhaayo. Dadka waaweyn waa in ay dhaqdhaqaaq socod sameeyaan 30 daqiiqo maalin walba. Uma baahnid in aad samayso jimicsi badan si aad u caafimaaddo. Waxaa kugu filan adigoo lugeeya.

Carruurtu waxay u baahan yihiin dhaqdhaqaaq ka badan kan dadka waaweyn. Si ay u caafimaadqabaan waxay ubaahan yihiin 60 daqiiqo oo dhaqdhaqaaq ah maalin walba.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Kadeed

Dad badan ayaa waxay dareemaan kadeed (isteriska). Taasina ma u baahna in ay noqoto arrin khatar ah. Kadeedka wuxuu qofka siiyaa awood badan oo uu ku xalliyo xaaladooyin adag. Laakiin haddii uu kadeedka badan wuxuu khatar ku noqon karaa caafimaadka. Haddii aad dareemeyso kadeed, waxaa wanaagsan in aad marka hore fahanto sababta. Markaas waxaa isku dayi kartaa in aad xaaladaada wax ka baddasho.

Astaamaha lagu garto kadeedka waxay yihiin hurdo xumi iyo adigoo dareensan farxada oo yaraato. Waxaa kuugu adkaan karta in aad wax isku taxallujiso, xasuustaada ayaa xumaan karta oo waxaa kugu dhici kara calool-xanuun, madax-xanuun iyo xanuun qeeybo kale ee jirka ka tirsan.

Haaddii aad dhaqdhaqaaqa badsato, cunto fiican cunto oo in kuugu filan seexato, waxaad jirka ku caawineeysaa in uu ka moodo kadeedka.

Hurdada

Waa muhiim in aad hesho hurdo wanaagsan si aad u dareeynto ficnaansho. Qofka weyn wuxuu u baahan yahay lix ilaa sagaal saacadood afar iyo laabatankii saacba. Caruurta iyo dhalinyarada waxay u baahan yihiin sacoodooyin intaas ka badan.

Waa caadi in qofku dhibaato kala kulmo hurdada. Waxaana sabab u noqon karo arrimo badan oo ay ka mid yihiin tubaakada, khamriga, kuurada, cudur, welwel iyo kadeed ama cuntada la cuno xilli danbe.

Waxaad si gaar ah uu sameeyn karti si ee hurdada ku sii ficnaato waa in aad seexato qol mugdi ah, shibna isla markaana qandac ah. Hurdada waxeey ku sii sahlanaa kartaa haddii aad iska ilaaliso cunto-cunida xilliga aad seexa rabtid. Haddii aad seexato aadna soo kacdo maalin walba isla waqtigaas, waxeey kuu sahli kartaa in aad hesho hurdo fiican.

Haddii aad xilli dheer hurdada dhibaatooyin kala sii kulantid waxaa fiican in aad raadsatid daryeel caafimaad.

Caafimaadka galmada iyo tarmidda

Caafimaad galmo waxaa loola jeedaa in caafimaadkaada jir ahaneed, mid maskaxeed iyo bulshadeed uu okeey yahay iyadoo laga duulayo galmadaada. Waxey ku saabsantahay

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

xuquuqda ah inaad jirkaada u isticmaali kartid sida aad rabtid adigoon khatar u galineyn kufsi, xoog ama takoorid. Caafimaad taran waxuu ku saabsanyahay warbixinta, daryeelka iyo adeegga uu oqf walba xaqa u leeyahay si uu u qorsheeyo dhlid carruur. Waa in la helaa daryeel fiican marka uu cunuga dhalanaayo, helitaanka daawada uur joojinta iyo inaad ilmaha si halis la'aan ah aad isaga soo ridi karitd. Qof kasta waxeey xaq u leedahay ineey go'aamiso haddii ey rabto ineey carruur dhasho iyo haddii kale.

Khamriga, maandoori-yayaasha iyo tubaakada

Qofka doonaayo in uu khamri ibsado waa in uu yahay mid gaaray 20 sano. Khamriga waxaa lagu iibiyaa dukaanka khamriga, Systembolaget oo ay dowladdu leedahay. Laakiin cabbitaanada ee khamriga ku yaryahay, sida nooc ka mid ah khamriga fudud iyo biyaha tufaaxa khamriga leh, waxaa lagu iibiyaa dukaamada cuntada. Haddii uu qof doonaayo in dukaamaas ka iibsado khamriga noocaas ah uga waa in da'idiisu ee san ka yareeyn 18 sano. Waxaa kale oo loo ogalyahay qofka dhaafay 18 sano, in uu khamri ka dalbado kuna cabo meesha, sida maqaayadaha.

In mudo dheer la cabo khamriga waxeey keeni kartaa xanuunka niyad-jibka, walwal iyo hurdo la'an. Haddii aad khamri badan cabto waxaad halis ugu jirtaa in aad noqoto qof aan marnaba ka maarmin. Waxaa kaloo khatar ugu jirtaa in ay kuugu dhacaan cudurro ama in ee ku soo gaaraan dhaawacyo.

Masawirqaade: Systembolaget

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Maandooriye

Iswiidhan waxaa ka mamnuuc ah maandooriyayaasha dhamaantood. Waa mamnuuc in maandooriye la gado iyo in la iibsado. Sido kale waa mamnuc in qofka maandooriye si gaar ah u isticmaalo. Ciqaabta dembiyada maandooriyayaashu aad ayey u adag tahay oo badanaa waxay keentaa xabsi.

Inta badanaa aad ayey u adag tahay in uu qofku iskiis isaga dhaafo isticmaalka maandooriyaha. Dadka badankood ee aan joojin karin isticmaalka maandooriyaha waxeey uu baahan yihiin caawinaad joojin uga baahan yihiin shaqaalaha daryeelka.

Maandooriyaasha loogu isticmaalka badanyahay gudaha Iswiidhan waa xashiishka, amfetamin, kokaayn iyo herowin. Qaadka/Jaadka xattaa waa maandooriye. In uu qofka jaadka iibiyo ama si gaar ah u heeysto, waxeey u keeni kartaa ciqaab xabsi dheer iyo ganaax aad u sareeyo.

Tubaakada

Cabbidda sigaarka waxaa laga qaadi karaa cudurro badan. Waxuuna sigaarka sababi karaa in qofka xilli hore u dhinto. Dhaawcyada u sigaarku sababto waxaa ka mid ah cudurka kansarka, cudurrada sambabka, cudurrada wadnaha iyo xiddidada, iyo nabarcalooleed (gaastarik nabar noqday). Marka aad ku jirto qol sigaar lagu cabbaayo, adiguna qiiqa ayaa jirka kuu galaayo. Waxaana lagu magacaabaa sigaar cabbida dadban. Maadam cabbida sigaarka khatar u tahay caafimaadka waa in aad jirtaa 18 sano si aad u iibsato sigaar iyo wax tubaako ku jirto.

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Shiishada

Cabbida shiishada waxaa ka soo baxo qoyaan badan. Taas mecnaheed waa in qiica shiishada ka badanyahay qiica ka soo baxo sigaarka. Qofka hal saac haddii uu cabo shiishada waxaa galaayo jirkaas qiic 100-200 jeer ka badan qiica hal sigaar. In hal mar shiisho cabbid loo fadhiisto waxeey uu dhigmataa qiyaastii 100 sigaar maadam uu cabbidu eey qaadato waqti dheer marka loo barhigo hal sigaar. Dhuxusha lagu isticmaalo cabbida shiisha waxeey ka soo baxaayo oo jirka ku faafaayo maadada kolmonoxid, macdano iyo wax keeno kansarka.

Tubaakada afka

Tubaakada afka waa tubaako la galiyo faruurta hoosteed. Tubaakada afka waxeey afka gaarsiinta kartaa cuduro iyo dhaawacyo. Waxeeyna sababi kartaa cudurka kansarka.

Sigaarka elegtrooniga

Sigaarka elegtarooniga ee loo yaqaan sigaarka-E, waa sigaar ka kooban yahay shah afka lagu qabto, battari, bukhuurdhaliyaha iyo dareeraha-qiica. Waa hab oo loo isticmaalo nikotiinka iyadoon la cabin tubaakada. Sigaarka elegtrooniga waxuu ka kooban yaahay maadooyin badan oo dhaawici karo caafimaadka, sida nikotiinka, propylenglykol iyo glycerin.

Waxaa jira caawimaad aad heli kartid

Haddii aad qabtid dhibaato xaga khamriga ama mukhaadaraadka ah waxaad heli kartaa caawimaad. Haddii aad xataa qaraabo la tahay qof dhibaatadaas heysata waxaad heli kartaa caawimaad. Marrka laga reebo dabiibiddaan ku saleysan waxyaabahaan uu qofka u bartay isticmaalidoodda iyo sidii looga jari lahaay waxaa kaloo ururo samafalayaal ah iyo kaniisadda oo siiya qofka talooyin iyo caawimaad. Waxaad talosiinta caafimaadka ka wici kartaa 1177. haddii aad rabtid inaad iska dhaaftid cabidda sigaarka ama tubaakada waxaad u tagi kartaa rugtaada caafimaadka si aad caawimaad uga heli laheyd.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka Iswiidhan

Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka waa daryeel dadka bulshada dhamaantood ka fa'iideeysan karaan ayagoo xaq uu leh. Iswiidhan ugu ma baahnid in aad lacag badan ku bixiso haddii aad uu baahantahay in aad la kulanto dhaktar, qaliin mareeysid ama isbitaal lagu seexinaayo. Waxaa muhiim ah in aad la socoto sida daryeelka u kala maamulan yahay iyo meesha aad aadi laheeyd haddii aad daryeel ubaahnaato.

Daryeelka waxaa mas'uul ka ah maamulada degmooyinka ama gobollada.

In aad adigu isdaryeesho

Waxaa adigu kaligaa wax ka qaban kartaa cudurrada iyo dhaawacyada fudud. Waxeey noqon kartaa hargabka, qandhada, calool-xanuunka shubanka iyo matagga wato ama dhaawac yaryar. Waxaa in dheeraad ah ka akhrisan kartaa buugga lagu magacaabo i Egenvårdsguiden. Waa buug lacag la'an ah oo aad ka heli kartid rugta caafimaadka.

Sido kale waxaad wici kartaa talo-bixinta-caafimaadka si aad uu hesho talooyin. Talo bixinta caafimaadka waxaa ka shaqeeya kalkaaliyayaal caafimaad. Waxay ku sheegi karaan meeshii aad tegaaysid haddii aad u baahato daryeel caafimaad.

Talo-bixinta-caafimaadka waxeey furan tahay afar iyo laabatanka saac. Lambarka telefoonka waa 1177. Waxaad halkaas ka heli kartaa talobixin loo turjumay af-soomaali iyo

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

carabi. Talo bixinta caafimaadkana wuxaa laga helaa bogga tnternetka **www.1177.se**. Waxaase boggas laga heli karaa warbixino ku qoran afaf badan.

Daawo

Dawada waxaa laga gataa farmashiyaha. Dawooyinka qaarkood waxaa loo baahan yahay waraaqad dhakhtar. Mecnaheed waa in uu dhakhtar soo go'aamiyaa in aad uu baahtantahay daawada. Daawada antibiotikadana waa in uu dhakhtar qoro. Waxaa qofka qaadan karaa markii uu qabo infekshin uu sababy bakteeriyo sida xanuunka xummada leh ee cumuhuna dadka xanuunaan ama caabuqa sambabada. Dhakhtarka ayaa markaas daawada qoraayo si aad uga soo iibsato farmashiyaha.

Shaqaalaha joogo farmshiyaha in badan ayee ka kasaayaan cudurada iyo daawooyinka kala duwan. Waxeey ka jaawaabi karaan su'aalooyin badan oo arimahaas ku saabsan. Waxaa kaloo farmashiyaha laga helaa qoraallo ku saabsan cudurro badan.

Haddii aad 18 sano ka weeyntahay waxaad iibsan kartaa dukaamda cuntada daawada aan uu baahneeyn qoraalka dhakhtarka sida daawada madaxxanuunka.

Haddii aad su’aalo ka qabtid daawooyin waxaad la xiriiri kartaa talosiiinta daawooyinka. Waxaa tusaale ahan halkaas ka heleysaa sida eey daawooyinka u shaqeeyaan, sida aad u qaadaneysid ama sida aad u keydineysid. Waxaad laanta talosiinta daawooyinka ka wacdaa **0771-46 70 10**.

La kulanka daryeelka caafimaadka

Markii aad la hadleeyso shaqaalaha daryeeka caafimaadka - sida dhakhtarka ama kalkaalisada - waxaad uu sheeganeeysaa waxa aad uu baahantahay. Adiga ayaa la socdo dhibaatada ku heeyso.

Dhamaan shaqaalaha daryeelka waxaa saaran waajibka sir-qarinta. Mecnaheed waa in ee san qof kale uga warami karin dhibaatadaada-caafimaadeed.

Haddii afka iswiidhishka aheeyn afkaada hooyo, waxaad xaq uu lee dahay turjumaan. Marka aad waqti balansaneeyso

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

uga waram haddii aad turjumaan ubaahantahay. Sido kale turjumaanka waxaa saaran waajibka sir-qarinta.

Xaggee la xarireeysaa?

Adiga iyo caruurtaada marka ee jiradaan, waxaad marka hore la xariira rugta caafimaadka. Rugta caafimaadka waxaa xiran tahay habeenka iyo maalmaha fasaxa. Haddii aad daryeel dhaqso ugu baahantahay waxaad tageeysaa qaabilaada-heeganka ama gargaarka degdega. Waxaad qaabilada-heeganka kuugu dhow ka warsataa rugta caafimaadka ama ka akhriso bogga internetka rugta caafimaadka.

Daryeelka asaasiga ah ee caafimaadka

Caafimaadka aasaasiga ah waa daryeel caafimaad oo aad ka hesho meel ka baxsan isbitaal, tusaale ahaan rugta caafimaadka. Caafimaadka aasaasiga ah waxaa ku jira rugaha caafimaadka, MVC (xarumaha daryeelka hooyada), BVC (xarumaha daryeelka caruurta), kalkaaliyaha jimicsiga, kalkaaliyaha qalabka gargaarka, dhakhtarka cilmi nafsiga, kalkaaliyaha cilmi nafsiga iyo xarumaha dhalinyarada.

Haddii aad xanuunsato, la xiriir marka hore rugaha daryeelka caafimaadka.

Marka aad dalka ku cusub tahayna waxaa rugta caafimaadka ku mareeysaa baaritaanka-caafimaadka. Baaritaanka-caafimaadka waxaa lagu la yeelanayaa wareysi aad uga

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Johnér

jawaabeyso su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga. Shaqaalaha caafimaadku waxay kaa qaadayaan baaritaanno kala duwan oo loo diro shaybaarka.

Doorashada rugta caafimaadka

Waalidka ama qofka xanaanda sharciga leh ayaa caruurta ka hooseeyo 18 sano u dooraayo rugta caafimaadka. Gobollada qaar waxaa kaaga filan inaad 16 sano jirsatid si aad adiga u dalbatid rugta caafimaadka.

Dad badan waxeey doortaan rugta caafimaadka ugu dhow. Sido kale waxaad kala doorankartaa rugta caafimaadka dowlada lee dehay iyo mid gaar ah (barayfat). Marka hore aad aado rugta caafimaadka, weey ku diiwaangalinaayaan.

Haddii aadan dooran rug caafimaad, waxaa laguugu qoraa rugta caafimaadka kuugu dhow.

Marka aad doonto ayaa iska badali kartaa rugta caafimaadka, tusaale ahaan haddii aad uu guurto. Haddii aad dooneeyso in aad iska badasho rugta caafimaadka, waxaad uu tageeysaa rugta caafimaadka aad uu badalaneeysid.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Shaqaalaha daryeelka

Daryeelka caafimaadka waxaa ka shaqeeyo shaqaale kala duwan. Waxaad halkaan ka akhrisan kartaa daryeelka caafimaadka Iswiidhan shaqaalaha joogo ee ugu badan:

Dhakhtarada daaweynta guud

Waxaa badanaa rugaha daryeelka caafimaadka jooga dakhtaro daaweyn guud. Mecnaheed waa in ee baaraan oo daaweeyaan bukaanka qaba cudurrada caadiga ah.

Dakhtarada daawynta guud waxay kaloo ka shaqeeyaan daryeel caafimaad ka hortagga ah. Mecnaheed waa in dadka ka caawinaan ka hortagga cudurrada. Waxaana ka mid noqon kara in dadka laga caawino joojinta cabbidda sigaarka, misaan iska dhimidda iyo yaraysiga cabbidda khamriga.

Dhakhaatiirta guud waxaa kale oo ay arkayaan haddii aad u baahantahay daryeelka dhakhtar ku takhasusay cudurada gaarka ah, tusaale ahaan dhakhtarka indhaha ama dhakhtarka wadnaha. Markaasi dhakhtarka guud ayaa u gudbinta u diraya rug caafimaad oo haysata takhasusiintan.

Kalkaaliyayaasha caafimaadka

Dhammaan meelaha aad daryeelka ka doonaneyso waxaa ka shaqeeya kalkaaliyayaal caafimaad. Kuwo badan oo ka mid ah kalkaaliyayaal caafimaadka, waxay aqoon dheeraad ah u leeyihiin maaddooyin gaar ah sida cilmiga cudurrada maskaxda.

Kalkaaliyayaasha hoose ee caafimaadka

Kalkaaliyayaasha hoose waxay la shaqeeyaan dakhtarada iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka. Waxayna tusaale ahaan qabtaan qaadista dhiigga iyo dhayida nabarrada.

Aqoonyahanada jimicsiga bukaanka iyo dhaqancelinta jirka bukooday

Aqoonyahanka jimicsiga bukaanka wuxuu caawinaa dadka ay dhib ku tahay in ay dhaqdhaqaaqaan sida qof dhabarku xanuunayo.

Aqoonyahanka dhaqancelinta bukaanka wuxuu caawinaa dadka cudur ku dhacay ama dhaawacmay si ay nololmaalmeed wanaagsan ugu noolaadaan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Aqoonyahanada cilmi-nafsiga, dakhtarada cudurrada maskaxda iyo lataliyayaasha

Aqoonyahanada cilmi-nafsiga, dakhtarada cudurrada maskaxda iyo lataliyayaashu waxay caawiyaan dadka maskax ahaan xanuunsan, oo uu sababay cudurka niyad-jabka (depression) ama kadeedka.

Aqoonyahanada nafaqada cuntada

Aqoonyahanada nafaqada cuntadu waxay dadka ka caawinaan in ay doortaan cunto iyo cabbitaan ay caafimaad ka helaan.

Cudurrada iyo dhaawacyada halista ah

Haddii cudur kedis ah ama dhaawac halis ahi kuugu dhaco, waxaad tegeysaa qaabbilaadda gargaarka degdegga ah ee isbitaalka. Haddii aadan ku tegi karin baabuur ama taksi, waxaad wacaneeysaa ambalaas. Waxaad maarkaasna waceysaa SOS qayladhaan oo lambarkeedu yahay 112.

Haddiise ilmo aad kaaga xanuunsado ama dhaawacmo, waxaad geyneysaa qaabbilaadda gargaarka degdegga ah ee carruurta oo ku taal isbitaalka. Gargaarka degdegga ah ee carruurta waxaa lagu qaabbilaa carruurta da'doodu u dhexeyso 0 ilaa 16 sano.

Qaabbilaadaha dhakhtarada takhasuska leh

Qaabbilaadaha takhtarada takhasuska lihi waxay ku yaalliin isbitaallada. Waxaa halkaas ka shaqeeya takhtaro aqoon dheer u leh cudurro gaar ah, sida cudurrada caloosha iyo mindhicirrada. Badanaaba dakhtarka aad ku leedahay rugta daryeelka caafimaadka ayaa warqad kuugu dira qaabbilaadda dakhtarka takhasuuska leh. U ma baahnid in dakhtar warqad kuugu qoro si aad halkaa u tagto, sugeysaa laakin waqti gaaban ayaa sugeeysaagaaban uu dakhtar kuu gudbiyo. Lacagta aad bixineysaana waa ka yar tahay marka dhakhtar kuu gudbiyo.

Qaabbilaadda dhallinyarada

Xarumaha qaabbilaadda dhallinyarada waxaa loogu talagalay gabdhaha iyo wiilasha qaba su'aalo ku saabsan isu-galmoodka, caafimaadka iyo xiriirada dadka. Xarumaha qaabbilaadda dhallinyaradu waxay u furan yihiin dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 13 ilaa 25 sano. Xadka da'da waa kukala duwanyihiin degmooyinka. Qaabbilaadduna waa lacag la'aan. Waxaa xarumaha

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Klara Stenström

Booqashada qaab-biladda dhallinyarada inta badana waa lacag la'aan laakin marmarka qaarkood waxaa lagu bixiyo lacag uu dhigmato kharashka booqshada rugta caafimaadka. Shaqaalaha joogo qaab-biladda dhallinyarada waxaa saaran waajibka sir-qarinta.

qaabbilaadda dhallinyarada jooga ummulisooyin, lataliyayaal, aqoonyahanno cilmi-nafsi, kalkaaliyayaal hoose, dhakhtarro dumarka iyo dhakhtaro caadi ah.

Isbitaalada

Isbitaalku wuxuu ka kooban yahay qaybo kala duwan. Isbitaalku waxaa ku yaalo qaabbilaadda dakhtarka takhasuuska leh iyo gargaarka degdegga ah. Isbitaalada badankood waxaa ku yaal qaybaha ummulinta. Waxaadna halkaa tegeysaa marka aad ilmo ummuleyso.

Qeeybaha isbitaalka waxaa ka mid ah:

- Qaybta lafaha: Waxay qaabbilsan tahay dhibaatooyinka qalfoofka iyo xubnaha dhaqadhaqaaqa, sida haddii laf jabto.
- Qaybta daaweynta: Cudurrada gudaha jirka, sida xanuuno caloosha iyo mindhicirrada.
- Qaybta qalliinka: Cudurrada u baahan qalliinka.
- Qaybta dumarka: La xiriira cudurrada dumarka, sida haddii uurka carqaladi qabsato.
- Qaybta indhaha: La xiriira cudurrada indhaha.
- Qaybta dhegaha, sanka iyo dhuunta: La xiriira cilladaha dhegaha, sanka iyo dhuunta.
- Qaybta cudurrada maskaxda: La xiriira dhibaatooyinka xagga maskaxda.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Qaabbilaadda gargaarka degdegga ah

Qaabbilaadda gargaarka degdegga ah waxay furan tahay saacad walba habeen iyo maalin. Qaabbilaadda gargaarka degdegga ah waxaad tegeysaa haddii dhaawac halis ah ama cudur kedis ahi kugu dhaco ama marka rugta daryeelka caafimaadku xiran tahay. Waxaa caadi ah in aad waqti dheer sugto marka aad tagtid qaabbilaadda gargaarka degdegga ah. Sababtuna waxeey tahay maadama isbitaalka uu san ogaan karin inta qof oo imaaneeyso. Waxaa la hormariyaa in la daaweeyo qofka ugu liito. Haddii uu san ku soo gaarin xanuun degdeg ah ama dhaawac degdega, waxaa kaaga wanaagsan in aad tagto rugta daryeelka caafimaadka aad ka tirsan tahay ama qaabbilaadda heeganka. Waxaad halkaas inta badana ka sameey san karta balan ama tagi kartaa adigo balan heeysan (drop-in). Iska tagida (drop-in) mecnaheed waa in aad waraaqada-safka ugoosaneeysid kadibna waqtigaada sugeeysid.

Carruurta iyo dhallinyarada

Magaalooyinka waaweyn waxaa ku yaal isbitaallo gaar ah oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada. Magaalooyinka yaryarna waxaa ku yaal rugo qaabbilaad loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada u dhexeeyo 0 ilaa 16 sano.

Caafimaaddarrada maskaxda

Caafimaaddarrida dhanka maskaxda ah qof walba ayey ku dhici kartaa Waxaa mararka qaarkood qofka ku adag in uu ka hadlo dhibaatooyinka ka haysta maskaxda. Caafimaaddarrada maskaxda waxaa badanaaba laga dareemaa jirka. Waxaa laga yaabaa in qofka murquhu xanuunaan. Waxaa kaloo laga yaabaa in dhididku bato, garaaca wadnuhu kordho, hurdadu adkaato iyo madaxu xanuuno.

Haddii aad dareensan tahay in dhibaato maskaxdu ku hayso, waxaad la hadli kartaa dakhtarkaaga rugta daryeelka caafimaadka. Wuxuuna kaa caawinayaa sidii aad u la kulmi lahayd lataliye ama aqoonhayan cilmi-nafsi.

Isbitaalada waxaa ku yaal qaybo cudurrada maskaxda oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta iyo dhallinyarada (Qaybta cudurrada maskaxda ee carruurta iyo dhallinyarada, Barn- och ungdomspsykiatri, BUP). Qaybaha gargaarka degdegga ah ee cudurrada maskaxdu waxay furan yihiin habeen iyo maalinba sida qaybaha gargaarka degdegga ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland



Masawirqaade: Colourbox

Ballanqaad daryeel caafimaad

Iswiidhan dadku waxay marar badan waqti dheer sugaan in ay helaan daryeel caafimaad. Si looga hortago sugida waqtiga dheer waxaa la sameeyey wax lagu magacaabo ballanqaad daryeel caafimaad. Ballanqaadka daryeelka caafimaadku waxuu ka tirsan sharciga daryeelka caafimaadka iyo bukaanka. Waxuuna nidaamkaas xaq ku siina in aad daryeel hesho mudo xadidan gudaheed.

Daryeelka caafimaadka asaasiga ah - Haddii aad isku daydo in aad la xiriirto rugaha daryeelka caafimaadka asaasiga ah, waxaa lagu xariiraa isla maalintaas. Taasi micneheedu waxa weeye in aad isla maalintaasba tagto rugta daryeelka caafimaadka ama aad qof ku la hadasho telefoonka. Haddii shaqaalaha rugta daryeelka caafimaadku u arkaan in aad u baahan tahay in aad dakhtar la kulanto, waa in aadan sugin muddo ka badan toddoba maalmood.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Qaabbilaadda takhtarka takhasuska ah - Haddii laguu gudbiyo dakhtar takhasus ah, waa in aadan sugin in ka badan 90 maalmood. Waxaa sidaas oo kale noqoneyso marka aad la xiriirto dakhtarka takhasuska adigoo aan dakhtar ku gudbin.

Daaweynta - Marka uu dakhtarku go'aamiyo in aad u baahan tahay hab daaweyn, sida qalliin, waa in aadan ubahhan in aad sugto mudo ka badan 90 maalmood.

Ballanqaadka daryeelka caafimaadku ma khuseeyo gargaarka degdegga ah. Qof bukaan ah oo uu hayo xanuun degdeg ah waa in uu helaa daryeel sida ugu dhaqsaha badan.

Xadka sare ee kharashka

Xadka sare ee kharashku waxa weeye in xad ugu sarreeya loo sameeyo kharashka lagu bixinayo daryeelka caafimaad iyo daawooyinka.

Xadka sare ee kharashka daryeelka micnaheedu waa in qofka bukaanka ah daryeelka ku bixyo 1 100 oo karoon lee sannadkiiba. Marka aad bixiso 1 100 oo karoon, waxaad sannadka inta ka dhiman daryeelka caafimaadku ku heleysaa lacag la'aan. Waxaana lagu siinayaa kaarka bilaashka. Kaarka bilaashkana waxaad shaqeeynaa laba iyo toban bilood, laga bilaabaa maalintii aad sameysey booqashadii ugu horreysey.

Xadka sare ee kharashka daawooyinka micnaheedu waa in qofka daawooyinka ku bixiyo 2 200 oo karoon karoon lee sannadkiiba. Marka aad bixiso 2 200 karoon, waxaad sannadka inta ka dhiman daawooyinka ku heleysaa lacag la'aan. Waxaad ka soo xisaabineysaa maalintii aad iibsatay daawadii ugu horreysey.

Caruurta qooyska waxaa dhamantood loogu xisaaba hal kaar (xadka sare ee kharashka). Taasi waxeey khuseeysaa Xadka sare ee kharashka daawooyinka iyo daryeelkaba.

Daawada carruurta ka yar 18 sano waa lacag la'aan.

Sharciga difaaca cudurrada faafa

Waxaa Iswiidhan ka jira sharci lagu magacaabo sharciga difaaca cudurrada faafa. Sharcigu wuaxaa loogu tala galay si looga hortago faafidda cudurrada halista ah oo la is qaadsiiyo.Sharcigu waxuu ku saabsanyahay waajibaad iyo xuquuq oo uu leeyahay qofka eey ku dhacaan cudurrada qaar, sida HIV, kalameediya, tiibisho, cudur faafa oo

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

mindhicirrada ku dhaca (salmonella), cagaarshowga lees qaadsiiyo ama jabto.

Sharciga difaaca cudurrada faafa waxaa ku qoran liiska cudurrada. Qiyaastii waa 60 cudur. Cudurradaasina waxaa waajib ah in qofka qabo uu sheego.

Taas micneheedu waxa weeye in aad la xiriirto rugta daryeelka caafimaadka (ku wargeliso) haddii aad u maleyneyso in aad qaadday cudur noocaas ah. Waxaana waajib kugu ah in aad sheegto magaca/magacyada qofka/dadka aad ka qaadsiisay cudurka. Dhawr ka mid ah cudurrada ku qoran sharciga difaaca cudurrada faafa waxaa la isku qaadsiiyaa galmada.

Haddii aad qabto cudur noocaas ah, dhammaan baaritaanada, daryeelka iyo daawooyinkuba waa lacag la'aan. Waxaa kaloo lagaa caawinaa in aad la xiriirto dadkii aad cudurka in aad qaadsiisay laga yaabo.

Hey'adda caafimaadka dadweeynaha waa hey'ad ka warbixisa sharciga difaaca cudurrada faafa iyo cudurrada. Bogga internetka **www.folkhalsomyndigheten.se** ayaad ka akhrisan kartaa in dheeraad oo ku saabsan sharciga difaaca cudurrada faafa.

Deeqsiinta xubnaha

Iswiidhan waxaa sanad kasto 700 oo qof oo aad uu jiran helaan hal xubin ama xubno, sida kelli ama wadno, jirka lagu tallaayo.

Isla markaana deeqsiinta xubanaha kuma filno. Dad badan ayaa dhinto maadama ee sugayaan xubno jirka loogu talaalo. Waxaana lala la' yahay xubno.

Marka aad dhimato waxaad xaq u lee dahay in aad go'aamiso waxa lagu sameeynaayo xubanhaada jireed. Waxaad dooran kartaa:

- In aadan deeq ku dhiibin xubnahaada
- In aad deeq ku dhiibto xubanaha in qof kale lagu talaalo ama
- In aad deeq ku dhiibto xubanaha in qof kale lagu talaalo iyo ujeedo caafimaad.

Waxaad wargalinta jawaabtaada ku dhiibeysaa diiwaanka-xubnaha ee ku jiro bogga Maamulka dhexe ee arrimaha bulshada: **www.socialstyrelsen.se/donationsregistret**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haddii aadan qooyskaada uga waramin in aad deeq ku bixiso xubanahaada, ayaga (qoyska) ayaa go'aan ka gaari karo marka aad dhimato.

Daryeelka ilkaha

Waxaa Iswiidhan ka jira daryeelka ilkaha oo bulshadu leedahay iyo daryeelka ilkaha oo gaar loo leeyahay. Daryeelka ilkaha dadweynaha waxaa maamula maamulka gobolka ama gobol. Daryeelka ilkaha dadweeynaha lagu magacaabaa Folktandvården. Waxaa Iswiidhan ka jira dakhtaro ilko oo iskood gaar loo lee yahay (barayfat).

Nidaamka inta aad bixineysaa waa kala duwan yihiin. Taasina waxay ku xiran tahay meesha aad deggan tahay iyo dakhtarka ilkaha aad doorato.

Dhammaan dadka Iswiidhan oo da'doodu ka yar tahay 21 sano waxay xaq u leeyihiin daryeel-ilkood oo lacag la'aan

Masawirqaade: Colourbox

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

ah. Waana isku mid haddii ay tagaan daryeelka ilkaha dadweynaha iyo daryeelka ilkaha gaarka loo leeyahay. Xadka da'da oo lacag la'aanta lagu helaayo daryeelka ilkaha, waa ku kula duwan yihiin qeeybaha kala duwan ee dalka.

Dhammaan carruurta iyo dhallinyaradu waxay joogto u tagaan dakhtarka ilkaha si loo baaro, loo daaweeyo oo looga hortago in ilkaha caafimaadkoodu xumaado. Dadka waaweeyn iyagaa iskood u la xiriira dakhtarka ilkaha.

Kaalmada daryeelka ilkaha

Dhammaan dadka ku nool dalka Iswiidan waxay xaq u leeyihiin in laga kaalmeeyo kharashka daryeelka ilkaha marka laga soo bilaabo sannadka ay gaaraan 23 sano. Kaalmada daryeelka ilkaha qaybna waa deeq (lacag) ay ku bixiyaan dakhtarka ilkaha, qaybna wa xadka sare ee kharashka daryeelka ilkaha.

Deeqda daryeelka ilkuhu waxa weeye 600 karoon sannadkii oo loogu talagalay dadka da'doodu u dhexeyso 23 ilaa 29 sano ama ka weyn 65 sano. Dadka da'doodu u dhexeyso 30 ilaa 64 sano waxaa la siinayaa deeq dhan 300 karoon sannadkii. Waxaad deeqda daryeelka ilkaha kaydsan kartaa sannad si aad u isticmaasho sannadka ku xiga.

Xadka sare ee kharashka daryeelka ilkuhu waxaa weeye in aad bixiso lee qayb ka mid ah kharashka daryeelka ilkaha. Hey'adda qasnada caymiska ayaa bixineeyso inta soo hartay.

Xaqa xadka sare ee kharashka daryeelka ilkaha waxaa la isticmaali karaa ilaa laba iyo toban bilood. Qiimaha ayaa wax lagaa dhimayaa marka aad daryeelka ilkaha ka bixiso in ka badan 3 000 oo karoon. Markaa waxaad bixineysaa kala bar kharashka daryeelka ilkaha. Haddii kharashka daryeelku dhaafo 15 000 karoon, waxaad u baahnaan doontaa in aad bixiso lee boqolkiiba 15 kharashkaas.

Daryeelka caafimaadka ilkaha

Waxaa Folktandvården ka heleysaa daryeel ilko oo qiime go'an leh. Waxaana lagu magacaabaa daryeelka caafimaadka ilkaha. Waxaad bil walba bixineysaa qiime go'an. Kadibna waxaad u tegeysaa dakhtarka ilkaha adigoo aan waxba bixin. Si aad u hesho daryeelka caafimaadka ilkaha, waa in aad saxiixdaa heshiis. Markaasna waxaa khasab kugu noqoneysa in dakhtarka ilkuhu baaritaan kugu sameeyo si uu u qiimeeyo inta aad ku bixineyso daryeelka caafimaadka ilkaha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haddii aadan ku qanacsanayn

Haddii aadan ku qanacsanayn daryeelka iyo adeegga lagu siiyey, waxaad la xiriireysaa qofka madaxa ka ah rugta daryeelka caafimaadka ilkaha.

Haddii aadan weli ku qanacsanayn, waxaad la xiriireysaa guddiga arrimaha bukaanka (patientnämnden). Waxaa maamuleed goboleed kasto ama gobol kasto ka jira guddiga arrimaha bukaanka. Guddigu wuxuu kaa caawinayaa sidii dhibaatadaada loo xallin lahaa isla markaana caawimaad u heli laheyd.

Waxaad kaloo la xiriiri karta Hey'adda kormeerka caafimaadka iyo xanaanada (Inspektion för vård och omsorg, IVO) oo wax ka qabta dacwooyinka laga qabo daryeelka caafimaadka. Warbixin dheeraad ah ka akhri bogga internetka IVO: **www.ivo.se**

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su'aalaha wadahadalka cutubka 7

Sidee ayaa saameeyn ugu yeelan kartaa caafimaadkaa?

Sababtee ayee muhiim uu tahay in dowlada ka hoowlgasho si ee dadka caafimaadka fiican uu helaan?

Maxaa sababaayo in ee badato caafimaad-xumida dadka dakhliga yar iyo waxbarashadood hooseeyso?

Ma jiran wax aad ka badali karto ama aad ku qasban tahay in aad ka badasho cunto cinadaada si aad caafimaadkaada uu kordho?

Maxaa keenaayo in aad kadeed dareemtid? Sidee ula dhaqantaa kadeedka?

Maxaad sameeysaa si aad hurdo fiican uu hesho?

Sidee uu aragtaa in dowlada kaligeed xaq uu lee dahay in ee iibiso qamriga culus iyo qamriga cenabka?

Ka waran meelaha daryeelka caafimaadka ee aad la kulantay, sidee kula ahaayeen?

Sidee isku diyaarin kartaa marka aad balan la lee dahay xarumaha daryeelka caafimaadka iyo bukaanka?

Maxaad adigu qaban kartaa si caafimaadka maskaxeed uu ahaado mid fiican?

Sababtee ayee muhiim uu tahay in qofka codsado daryeel haddii uu la kulmo caafimaad xumida maskaxda?

Ka waran meelaha daryeelka caafimaadka ilkaha ee aad la kulantay, sidee kula ahaayeen?

Maxeey sabab uu tahay in dhakhtarka ilkaha loo tago si joogto ah?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Conny Fridh, Johnér

8. In waayeel lagu noqdo dalka Iswiidan

Tusmada

Waayeel noqoshada

Hoowlo iyo dheef loogu tala galay waayeelada

Lacagta hawlgabka

Daryeelka waayeelka

Markii qof u geeriyoodo

Xeerka dhaxalka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Waayeel noqoshada

Dadka ku nool Iswiidan waxay gaaraan cimri dheer. Cimriga dhexdhexaadka ah ee dadweynaha waa 82 sano. Dumarku waxay gaaraan 84 sano, ragguna 80 sano.

Cimriga dhexdhexaadka oo kor u sii kaco waxuu keenaa in waayelka sii kordhaan. Tobonkii sanoba cimriga dhexdhexaadka waxaa ku darsanto hal sano. Wakhtiga hada la joogo ma jiran wax muujinaayo in kor u kaca cimriga dhexdhaaxdka istaagi doono. Dadka Iswiidhan ee gaaraayo 10 malyan boqolkiiba 18 waa dad dhaafay da'da hoowlgabka ee 65 sano. Sanadka 2030 dadka Iswiidhan ku nool boqolkiiba 30 waxeey ka weeynaan doonaan 65 sano.

Cimriga aad gaareeyso waxyaalo badan ayuu ku xiran yahay. Dhaxalka jinsiga aad ka qaadatay waalidkaada iyo qaraabadaada waxuu saameeynaa cimriga aad gaareeysid. Sido kalena waxaad cimriga saameeyn ku leh habka aad uu nooshay iyo bey'adda. Waayel-noqoshada waxaa la socdo isbadlo badan oo dhanka jirka ah, maskaxda iyo la xariirka bulshada. Qofka waxba kama qaban karo dhaxalka jinsiyeed laakin waxuu qofka saameeyn karaa sida uu ugaboobi lahaa asagoo iska fiirinaayo habka uu unoolayahay.



Hey'adda caafimaadka dadweeynaha waxeey kor usoo qaaday afar qeeyb oo mecno ugu fadhiyo waayel-noqosha caafimaad leh:

- Hoowlo dhaqdhaqaaq jireed
- Cunto fiican
- Wadajir bulsho
- Hoowl qabasho mecno leh/qofka in uu dareemo in loo baahanyahay

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Qofka xataa dhalinyarnimada ayuu ku saameeyaa caafimadkiisa sida uu noqon doono marka uu waayeel noqdo. Sigaar cabid, cunto xumi, kadeed, in uu san qofka dhaqdhaqaaqin, maandooriye iyo khamri dadka dhan ee uu xuntahay. Cuntada fiican iyo toobarka waxeey keenaan in qofka caafimaad qabo marka uu waayel noqdo. Waxeey uu gacan geeysan karaan cimri dheerid.

Isbadal jireed

Isbadalada jireed iyo da'da waa yaryihiin ilaa uu qofka ka gaarayo 40 sano. Kadib ayee isbadalaas bataan. Hidde-sidaha (DNA) ee ku jiro unugyada waxeey hagaan weeynaanshaha jinsiyeed oo ka socoto qeeybo kala duwan oo jirka ka mid ah. Waxeey dadka ku kala duwan yihiin hab socodka waayeel-noqoshada, goorta iyo habka loo gaboobaayo. Dadka qaarkood laalab waji iyo timo cad ayee yeeshaan goor hore, dadka qaarkoodna weey ka danbeeyan.

Marka la isku wada daro isbadalada jirka waxeey noqdaan in uu qofka gaabto, khafiifo iyo si qalalo. Gubidda maaddooyinka nafaqada jirku qaato oo yaraato waxeey keeneeysaa in khatarta qaleelka jirka kor usii kacdo. Waa muhiim in qofka uu biyo cabo.

Gubidda maaddooyinka nafaqada jirku qaato oo yaraato iyo waayelka oo dhaqdhaqaaqa yareeyo, waxeey keenayaan in ee san uu baahneen cunto badan. Sidaas darteed ayee muhiim usii tahay in cuntada la cunaayo lee dahay tayo fiican iyo in ee si wadajir ah uga kooban tahay maadooyinka nafaqada iyo fitamiinka.

Sawir: Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Markii dhalinyarada loo bardhigo, dadka waayeelada waxeey u baahan yihiin iftiin badan si eey si fiican wax ugu arkaan. Sidaas darteed ayee muhiim uu tahay in guriga uu lee yahay iftiin fiican. Sido kale da'da waxeey keeneysaa in qofka ku adkaato fahmida codadka dheer iyo kala saarida hadalka markii la joogo meel buuq leh.

Markii dhalinarada loo bardhigo, dadka waayeelka waxaa ku adag dheeli tirida, si sahalana waa duu dhacaan. Waxaa jiro waxyaalo badan oo laga qaban karo guriga si loo yareeyo khatar shil. Tusaale ahaan waxaa dhulka lagaa qaadi karaa rooga iyo wax jidka yaalo oo si sahlan loogu dhici karo.

Dadka waayeelka daawada xasaasi ayee ku sii yihiin markii loo bardhigo dadka ka dhalin yar. Dadka waayeelka waxaa ku yar dareeraha jirka, waxaana ku badan baruurta. Mecnaheed waa in dawooyinka duffanka leh ugu haraayaan jirka wakhti ka sii dheer intii loogu tala galay.

Isbadalada maskaxda

Da'dana weey sameeysaa maskaxda. Unugyada-maskaxda waa sii yaraadaan isla markaasna maskaxdana waa sii yaraataa laakin hoowl-qabadaka maskaxda badanaa ma is badalaan. Qeeybo badan oo xasuusta khuseeyo mudo dheer waxeey ahaadaan kuwo aan saameeyn gaarin. Inta badanaana, aqoonta kalimadaha iyo aqoonta guud waa mid laga dareemi kari qofka ilaa da' sare.

Qofka markii usii gaboobabo waxaa sii kor usii kaco kharta cudurka iloowshaha (demens). Laakin in xasuusta si xumaato ma lagu mecneey karo lee cudurka iloowshaha. Uloowshaha caadiga, waa sida qofka marka u iloobo meesha uu dhigay ookiyaalihiisa ama furayaashiis. Marka uu qofka iloobo in uu heeysto ookiyaale ama furo ama meel uu yaqaan ku dhumo, waxeey calaamad u tahay iloowsho uu cudur sababay.

Waa fiican tahay in qofka ku sii firforconaadio maskax ahaan iyo jir ahaanba. Maskaxda waxeey markasto dooneeyso in kalimado cusub ku barato masawiro, heeso, ciyaar, qosol, xayawaano, dabiicad iyo la xarirka bulshada. Maskaxda waligeed kama duqoowdo in ee barato waxyaalo ku cusub laakin marka uu qofka waayel noqdo wakhti sii dheer ayee ku qaadataa.

Maskaxadana waxeey xasaasi ku sii noqotaa dawooyinka qaarkood, gaar ahaan dawooyinka loo isticmaalo cudurada

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

maskaxda, sida daawada dajinta iyo jiifka laakin sido kalena daawooyinka xanuun baabi'yaha oo u dhow morfiinka.

Isbedala la xariira bulshada

Qofka markuu gaaro da'da hoowlgabka waxaa laga yaabaa in ee markii ugu horeeysay uu sameeyn karo waxuu doono goorta uu doono. Dad badan ayee sii shaqeeyso xataa marka ee gaaran 65 sano kadib. Dad badana waxeey uu shaqeeyaan si khayri ah oo ee san mushaar ku qaadan.

Tayada nolasha iyo in nolol fiican la helo markii waayel la noqdo waxeey si xoog leh ugu xiran tahay habka uu qofka uu arko iyo habka uu ula dhaqmo xaaladiisa nololeed si ee noqoto mid uu la qabsan karo, maareyn karo isla markaana mecno ugu fadhiso. Aqoon yahanada waxeey ka waramaan in wadajir bulshadeed ee muhiim uu tahay tayada nolasha - in qofka uu firforcoonaado, in uu dareemo in loo baahan yahay iyo in xariir fiican la yeesha dadka.

Hoowlo iyo dheef loogu tala galay waayeelada

Waxaa jiro hoowlo iyo dheef badan loogu tala galay waayeelada.

Waxaa jiro ururo badan oo qorsheeyo hoowlo loogu tala galay dadka hoowlgabka ah. Urur ka mid ah ururyadaas, waa ururka howlgabka qarameed, PRO.

Waxaa xiliyada qarkood, waayeelka gaadiidka-dadweeynaha ee degmooyinka qaarkood, ku raacaan lacag la'aan ama ayadoo kharashka laga dhimo.

Haddii aad da' weeyntahay hadana howl-qabadka jirkaada keenaayo in raacida gaadiidka dadweeynaha kuugu adag yahay, waxaad isticmaali karta adeega raacida (färdtjänst). Waxaa markaas kharash yar kuu raaceeysaa taksi badalka bas iyo tareen. Si aad uu hesho adeega raacida waa in aad ka codsataa degmada aad ka diiwan gashantahay. Sido kalena waa in aad codsiga ku soo dartaa waraaqada cadeeynta adeega raacida u soo qoray dhakhtar ka waramaayo in aadan raaci karin gaadiidka-dadweeynaha.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Sawir: Matilda Karlsson, Magaalada Göteborg

Safarada degmada gudaheed ah waxaa inta badanaa raaci kartaa waxa loo yaqaan flexlinjer. Waa basas yar oo dhulkoodu ku aadan yahay dhulka-jidka, si dadka ku socdo kursiga loogu sahlo soo fuulida baska. Baskaan waxuu ku soo dhaweeynaa gurigaada halka uu baska dadweeynaha kuu soo dhaweeyneeyn. Baska waxuu ku geeynaa lee meelaha uu qofka balansada in uu ka soo koro ama ku daga, sidaas darteed ayee xiliyada baska uu socdo ku kala duwnaan karaan.

Lacagta hawlgabka

Lacagta hawlgabku waa lacag aad qaadaneyso marka aad waayel noqoto oo shaqada ka fadhiisato. Inta lacag hawlgab aad qaadaneyso waa kala duwan tahay. Waxayna si la mid ah ku xiran tahay mushaharkii aad soo qaadan jirtay, waqtiga aad soo shaqaysey iyo inta lacag aad si gaar ah uu kaydsatay.

Lacagta hawlgabka waxeey ka imaan kartaa meelo kala duwan. Hey'adda arrimaha hawlgabka waxaa ka imaato lacagta hawlgabka guud. Shaqo dhibahadii waxaa ka imaado lacagta hawlgabka ku salaysan shaqada. Waxaad kale oo lahaan kartaa lacag hawlgab oo gaar aad uu kaydsatay. Lacagaha hawlgabka midba mida kale ma sameeyso ee waa la isku daraa si ee uu noqoto lacagta howlgabka aad lee dahay.

Adiga ayaa go'aansanaya marka aad noqoneyso hawlgab. Haddii aad daahiso qaadashada lacagta hawlgabka, waxaa badaneeyso lacagta aad qaadaneyso bil walba. Da'da ugu horreysa oo la qaadan karo lacagta hawlgabka guud waa 61

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Magnus Glans

sano laakin waxaad xaq uu lee dahay in aad shaqeeyso ilaa aad 67 sano ka gaareeyso. Waxaad shaqo dhiibahaada kala heshiin kartaa in aad wakhti ka sii dheer shaqeeyso.

Adiga ayaa dooraneeysid inta aad kala soo baxeeysid lacagta hawlgabka. Waxaad bil kasto qaadan kartaa in uu dhaxeeyso boqolkiiba 25 ilaa 100. Waxaad tusaale ahaan dooran kartaa in aad lacagta hawlgabka bar ka mid ah qaadatid isla markaana shaqeeysato barka kale.

Hawlgabka guud

Hawlgabka guud waa lacagta hawlgabka ee dadka dhan xaq uu lee yihiin haddii ee Iswiidhan degnaadeen oo ka shaqeeyeen. Lacagta hawlgabka waa lacag doowladeed oo eey bixisi Hey'adda arrimaha Hawlgabka. Waxaad warbixin dheeraad ah ka heleeysaa bogga internetka **www.pensionsmyndigheten.se**.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Haddii aad dooneeyso in aad wax ka sii ogaato lacagta hawlgabka guud ee aad adiga lee dahay, waxaad Hey'adda arrimaha hawlgabka kala xariiri kartaa talefoon ama in aad balan ka sameeysato oo aad waji-waji ugu la kulantid xafiiska adeega.

Sanad kasto ee aad shaqeeyso, waxbarasho dhigato ama aad fasax waalid gasho waxaad lacag ku kordhineeysaa lacagtaada hawlgab. Lacagta hawgabka guud waxeey ka kooban tahay lacagta hawlgabka dakhliga ku salaysan, lacagta hawlgabka oo faa'iidada laga sameeyo oo ayaduuna dakhligaada ku saleeysan. Haddii aad dakhli yar laahan jirtay ama aadan dakhli yeelan, waxaad heleeysaa lacagta aasaaska ah ee hawlgabka.

- **Lacagta hawlgabka dakhliga ku salaysan**.
  Lacagta hawlgabka dakhliga ku salaysan waxay ku xiran tahay lacagihi horay ku soo gali jiray. Waxaad sannad walba mushaarkaada ka bixineeysaa boqolkiiba 16 oo kuugu darsamaya lacagta hawlgabka dakhliga ku salaysan. Waxaa dakhli lagu tiriyaa mushaar shaqo, lacagta shaqo la'anta, lacagta jirada iyo waxqabadka iyo lacagta fasaxa waalidka.
- **Lacagta hawlgabka oo faa'iidada laga sameeyo**.
  Waxaad sannad walba mushaharkaaga ama dakhligaada ka bixineysaa boqolkiiba 2,5 oo laguguu kaydinaayo sanduuqyada saamiga. Waxaa midaan lagu magacaabaa lacagta hawlgabka oo faa'iidada laga sameeyo. Waxaa sanduuqyada ku jira warqado qiima-lacageed leh ama saamiyo ay dad badani wada leeyihiin. Adiga ayaana go'aan ka gaaraya sanduuqyada saamiga oo aad dooneyso in lacagtaada laguu geliyo. Lacagta hawlgabka oo faa'iidada laga helo oo aad heli doonto waxay ku xiran tahay inta lacag aad soo kaydsatay iyo wixii hadba faa'iido ama khasaaro laga helo lacagta aad ku kaydsatay sanduuqyada saamiyada.
- **Lacagta aasaaska ah ee hawlgabka**.
  Lacagta aasaaska ah ee hawlgabka waxaa la siiyaa qofka usoo gali jiray dakhli yar ama dakhli shaqo ka soo galin. Si aad u hesho lacagta asaasiga ah ee hawlgabka oo buuxda waa in aad deganayd Iswiidhan ugu yaraan 40 sano. Lacagta asaasiga ah ee hawlgabku waa sii yaraaneeysaa haddii aad Iswiidhan deganeeyd in ka yar 40 sano. Lacagta asaasiga ah ee hawlgabku wax ayaa laga dhimaa haddii ay ku soo gasho lacag kale oo hawlgab, sida lacagta hawlgabka ku saleeysan dakhliga.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Lacagta hawlgabka shaqada

Lacagta hawlgabka shaqadu waa qaybta lacagta hawlgabka uu shaqo- dhibahaada ka bixiyo. Shaqaalaha badankood waxay xaq u leeyihiin lacagta hawlgabka shaqada. Haddaba sida ee lacagta hawlgabka shaqada noqoneeyso waxeey ku xiran tahay ururada shaqaalaha iyo ururada shaqo-dhiibaha waxa eey ku heshiiyeen. Waxaa lacagta hawlgabka shaqada aan qaadanayn qofka waxbarashada ku jira, qofka shaqala'aanta ah, qofka ka shaqeeya goob shaqo oo aan ku xirneeyn heshiiska guud ee shaqada ama qofka leh shirkad gaar ah.

Haddii aad lee dahay shirkad gaar ah adiga ayaa lbixineysid lacagtaada hawlgabka shaqada. Waxaa loo yaqaan qarash-gaar ah.

Lacagta hawlgabka gaar ahaan loo kaydsado

Adigu si gaar ah ayaad u kaydsan kartaa lacagta hawlgabka. Waxaad ku kaydsan kartaa bangiyada ama sanduuqyada saamiga ee shirkadaha caymiska lacagta hawlgabka. Adiga ayaana go'aansanaya inta aad bil walba ku kaydsanayso iyo waqtiga aad dooneyso in aad bilowdo.



Laga keenay: Hey'adda arrimaha hawlgabka

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Kaalmada dheeraadka ah ee waayeelka

Kaalmada dheeraadka ah ee waayeelka waa taageero loogu tala galay haddii ee san lacagaha kale ku filneeyn. Haddii aad buuxsatay 65 sano oo lacaga hawlgabka kuugu filneeyn ilaa heer nololeed oo macquul ah, waxaad markaas xaq u leedahay kaalmada dheeraadka ah ee waayeelka. Marka aad dalbaneysid kaalmada masruufka ee da'da waxaa go'aan ka gaaraya hey'adda howlgabka oo isla mar ahantaasna baareysa haddii aad xaq u leedahay kaalmada kirada lagu kabo.

Kaalmada kirada guriga lagu kabo ee howlgabyaasha

Kaalmada kirada guriga lagu kabo waa qeyb kabid ah oo ka tirsan lacagtaada guud ee howlgabka. Qarashka ku baxa kiradaada, dakhliga kusoo galo, hantidaada iyo xaaladaada qoys ahaaneed ayaa kala saaraaya inta eey la ektahay lacagta kabidda kirada.

Waxaad dalban kartaa lacagtaas kabidda ah marka aad buuxisid 65 sano waxaadna markaas soo baxsaneysaa kulli lacagtaada howlgabnimada. Waad dalban kartaa meehsaa rabtid deganoow haddii aad xattaa degantahay guri aad adiga leedahay. Waad dalban kartaa haddii aad hanti leedahay xattaa.

Warbixin dheeraad ah ka akhriso bogga hey'adda howlgabyaasha: **www.pensionsmyndigheten.se**

Lacagta hawlgabka oo dibada lagu qaato

Lacagta hawlgabka dakhliga ku salaysan, Lacagta hawlgabka oo faa'iidada laga sameeyo, Lacagta hawlgabka shaqada iyo Lacagta hawlgabka gaar ahaan loo kaydsado waxaad heeysan kartaa meesha aad uu guurtaba ayadoo ee san wakhti ku xirneeyn. Laakin hubaal ma ahan in aad sii heeysan karto lacagta asaasiga ah ee hawlgabku. Waxeey ku xiran tahay dalka aad uu guurto iyo nuca fa'iido aad lee dahay. Lacagta asaasiga ah ee hawlgabku waxaad sii heeysan kartaa haddii aad uu guurto dal kale oo ku yaalo dalalka Midowga Yurub iyo dalka EES, Switzerland iyo xaalado qaarkood dalka Kanada. Xaqqa kaalmada dheeraadka ah ee waayeelka waa joogsanaa haddii aad uu guurto dibada.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Daryeelka waayeelka

Marka uu qof waayel nooqdo waxuu inta badanaa caawinaad uga helaa hoowlaha maalmeed. Iwiidhan waxuu qofka waayeelka xaq uu lee yahay in bulshada uu ka helo caawinaad iyo taageero. Dalalka kale halke ee qoyska ama ehelka xanaaneeyaan, Iswiidhan waxaa waayeelka gacan siyo bulshada. Inta badana ehelka kuwo la socdo qofka waayeelka noloshiisa. Xanaanada waayeelka waxaa hago sharciga adeega bulshada iyo sharciga daryeelka iyo caafimaadka bukaanka.

Degmada ama maamulka gobolka ayaa ka masu'ul ah daryeelka iyo xanaanada waayeelka, ayadoo taasi lagu daraayo xataa la xariirka dhakhtarka iyo daryeelka bukaanka degdega. Qeeyba hab ka duwan ayaa looga maamula dalka Iswiidhan. Qofka waxuu adeegyada xanaanada waayelka ka codsadaa xafiiska maamulka bulshada ee uga qaabilsan degmada. Xoghayaha kaalmada ka socdo xafiiska maamulka ayaa baaraayo, qiimeeynaayo kadibna go'aan ka gaaraayo xaqqa xanaanada iyo inta ee la ekaaneeyso.

Ula jeedada laga lee yahay waa waayeelada ku noolaadaan nolol daryeel fiican leh, tayo fiican leh iyo madaxbanaani. Sido kale waayeelka waxeey fursad uu helaayaan hoowlo micno leh oo ay la sameeynaayaan dad kale.

Deegaan

Dad badan oo waayeel ah waxeey doonaayaan in ee guriga degnaadaan inta ee macquul tahay. Maantana qofka waxuu fursad weeyn ugu lee yahay in uu guriga sii degnaado ayadoo uu bulshada ka helaayo taageero iyo habab kala duwan oo guriga loogu habeeyo. Degmadana waxeey qofka waayelka ku caawin kartaa daryeel iyo adeeg si uu usii degnaado gurigiisa. Waxaa taasi lagu magacaabaa adeega guriga.

Shaqaale ka socda xafiiska adeegga waayeelka ayaa waxay kaa caawinayaan, tusaale ahaan nadaafadda guriga, adeegga cuntada, goglidda sariirta, qubeyska iyo in garka laguu xiiro. Waxaad kaloo caawimaad heli kartaa galbihii iyo habeenkii. Haddii aad cudur qabto ama dhaawacan tahay, waxaa kuu imanaya kalkaaliye caafimaad oo nabarka kuu dhaya, daawadana kaa caawiyo.

Degmooyin badan waxay leeyihiin shaqaale waayeelka ka caawiyo dayactirka fudud. Waxaana kagu magacaabaa adeegga sameeynta. Shaqaalaha ka socda adeegga sameeynta

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

waxay kaa caawini karaan surida sawir ama beddelka daahyada. Ula jeedada laga lee yahay waa in laga taxadaro waayelka oo dhaco iyo in uu dhaawacmo.

Haddii aadan ka bixi karin in aad gurigaada ku sii noolaato, waxaa jiro guryo loogu tala galay waayeelka.

Degaanka siiniyarka iyo ***Deegaanka waayelada*** waa degaan loo habooneeysiiyay dadka waayelka ah, tusaale qalab hooseeyo iyo wiishah sii weeyn. Shirkadaha guriyaha kireeyo waxeey marmar ku shardiyaan qofka in uu gaaray 55 sano si u dego deegaanka siiniyarka halka deegaanka waayeelka laga doonaayo in uu wax yar ka weeyn yahay intaas. Haddii uu qofka uu guraayo degaanadaan u ma baahno ogalaanshaha degmada. Adiga ayaa si gaar ah u kireeysaneeysid ama gadaneeysid degaankaan.

Guriga adeega waayeelada waa degaan degmada lee dahay oo waayelka kireeystaan. Inta uu san qofka uu guurin guriyaha adeega waayeelada waxaa baaritaan lagu sameeyaa qofka nuuca caawinaada uu ubaahanyahay. Marka uu qofka waayelka degan yahay guriyaha adeega waayeelada waxuu lacag ku bixin karaa caawinaada nadiifida, cunto kariska iyo waxii la mid ah.

Deegaanka gaarka ee waayeelada sido kale lagu magacaabo ***degaanka wadajirka*** waa deegaan ka tirsan daryeel ka-aafimaadka. Waxaana loogu tala galay waayeelka si weeyn baahi ugu qabo xanaaneeyn. Si boos looga helo degaanka gaarka ee waayeelada waa in qofka uu baahi weeyn uu qabaa daaweeyn iyo xariir bulsho isla markaana daryeel uu baahan yahay 24ka saac.

Markii qof u geeriyoodo

Dhimashadana waxaa kale oo lagu magacaaba geeri. Marka uu waayel ehelka ka tidan guriga ku geeriyoodo waxaa lala xariira shaqaalaha daryeelka caafimaadka. Marmarka qaarkood jidhka waxeey geeyaan isbitaal halkaasi uu dhakhtar ka mas'uul yahay sugida-geerida. Haddii uu qofka qabo codsi gaar ah, tusaale ahaan khuseeyo hab waxqabad diimeed ah, waxaa lagala hadlaa shaqaalaha daryeelka.

Kadib ayee qofka eheladiisu la xiriiri karaan wadaad masiixi ah, wadaad yuhuud ah ama imaam ama wadaad matalo diin kale. Qofka wadaadka ka socdo ururka diimeed ayee ehelada

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

la qorsheeyn karaan aaska ayagoo ka codsanaayo habka duugista diintooda. Waxaa kaloo wanaagsan in la la hadlo maamulka qabuuraha iyo xafiis qabanqaabinta xabaalidda oo ka caawin karo xariirka iyo arrimaha aaska.

Xabaalidda/duugitaanka

Markii dalka Iswiidan qof ku geeriyooda oo la xabaalayo, waxaa xabaalidda ka soo qaybqaata ehelka iyo asaxaabta. Waxaa caadi ah in la raaco dardaaranka qofka geeriyooday oo loo duugo sidii uu codsaday. Waxaa codsigaas laga yaabaa in lagu qoray warqadda dardaaranka ama qofka geeriyooday ayaa horay u sheegay sida ay doonayaan in loo xabaalo. Waxaa jiro habab kale duwan oo xabaalada loo qabto ayadoo eey ku xiran tahay sida laa aaminsan yahay.

Xabaalidda waxaa badanaaba lagu qabtaa kaniisadda. Markii laga reebo degmada Stockholm iyo Tranås, arrimaha hoowlaha xabaalaha Iswiidhan waxaa mas'uul ka ah kaniisadda iswiidhishka (Svenska kyrkan). Habkaas ayaa loo maraa arrimahaas, meeydka diinta doono ka haystee.

Qofka geeriyooday ehelkiisa waxeey la xariiri karaan wakiilada arrimaha xabaalaha ee degmada. Wakiiada arrimaha xabaalaha waa dad uu maamulka goboka doortay oo ka shaqeeyo danta meeydka iyo ilaalinta codsiga ehelkiisa. Wakiiadal arrimaha xabaalaha waxeey ku raacan yihiin hubinta in dadka aan ka tirsanaeeyn kaniisada iswiidhishka, loo aaso meydka sida uu haboon ayagu. La xariirka wakiiiada arrimaha xabaalaha, waxaa ehelka qofka geeriyooday uu mari karaan degmada, maamulka gobolka ama ururkooda diimeed.

Sawir: Jenny Gaulitz, Johnér

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ma jiro wax sharci ah oo ku saabsan habka loo qabanqaabiyo xabaalidda. Laakiin waxaa jira xeer qoraya in qofka lagu rido sanduuq. Waxaa kaloo jira sharciyo ku saabsan habka meydka loo gubaayo iyo habka dambaska loo duugayo. Meyd-gubista waa in meydka oo sanduuqa ku jira la geliyo foorno. Foornadu waxay meydkii iyo sanduuqaba ka dhigtaa dambas. Waxaa dambaskaas kadib lagu aasaa qabri. Dambaska waxaa lagu daadin karaa meel ka mid ah qabuuraha, oo lagu magacaabo beerta xusuusta. Haddiise la doonayo in dambaska lagu daadiyo badda, waa in ruqsad laga haystaa maamulka gobolka.

Bogga intenetka kaniisadda iswiidhishka waxaad ka heleysaa warbixino ku saabsan qabuuraha degmada aad degantahay: **www.svenskakyrkan.se**

Haddii la doonaayo in meeydka lagu aaso dibada, waxaa dibada ugu qaadi karo xafiis qabanqaabinta xabaalidda oo lacag qaadanaayo.

Sida caadiga waxeey qaadataa in uu dhaxeeyso hal ilaa laba isbuuc inta aan meeydka lagu duugin Iswiidhan. Haddii ee ehelka doonaayaan duugista waa la fulin karaa sida ugu dhaqsiyaha badan. Laakin meeydka waa in la duugaa ama la guuba ugu danbeeys bil gudaheed, sida uu dhigaayo sharciga Iswiidhan.

Iswiidhan kuma badno caadada furnaanshaha sanduuqa meeydka laakin ma jirto taasi wax hor istaagaayo haddii la doonaayo sidaas.

Dadka Iswiidhan degan canshuurta ayaa looga go'yaa khidmad loogu talagalay duugista. Khidmadaas waxeey qofka xaq u siineeysaa in munaasabada duugista loogu qabto meel, tusaale ahaan qol-kanisadeed. Waxay kale oo khidmadaas xaq u siineeysaa in sanduuqa meeydka gaadiid looga soo qaado meesha oo loo geeyo qabriga.

In ku dhow boqolkibba 83 dadka Iswiidhan ku geeriyooda waxaa munaasabad loogu sameeyaa kaniisadda. Waxaa halkaas munaasabad duco ku qabto wadaad masiixi ah. Qofka loo sameeynayo munaasabadda ducadu waa in uu ka tirsan yahay kaniisadda iswiidhishka. Xabaalidda masiixiga ah lacag la'aan ayaa loogu sameeyaa dhammaan dadka ka tirsan kaniisadda iswiidhishka. Munaasabadda xabaalidda masiixiga ah waxaa sidoo kale lagu qaban karaa kaniisadaha madaxa bannaan, kaniisadaha kaatoliga ama kaniisadaha ortodokiska ah.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xabaalidda madanigu waa munaasabad aan diini ahayn. Sidaas darteed munaasabada xabaalidda madaniga ah, lagu ma qabto kaniisadaha. Waxaa lagu qabtaa meelo la iskugu imaado, sida goof ama kaynta dhexdeeda. Waxaa munaasabadda xabaalidda madaniga ah hoggaamiya qof luu xilsaaran.

Xeerka dhaxalka

Marka u qof dhinto, waxaa jira xeerar ku saabsan qofka dhaxlaayo lacagta iyo alaabta qofka uu ka dhintay. Taasi waxeey ku qoran tahay sharciyada iIwiidhan, waxaana lagu magacaabaa xeerka dhaxalka.

Haddii qofka dhintay ay qof isqabeen, qofka laga dhintay ayaa dhaxalka wada qaadanayo. Carruurtu waxay wax dhaxlayaan marka qofka laga dhintay uu dhinto. Qofka laga dhintay, afada ama sayga, ayaa hantida dhaxalka sidii uu doono u isticmaalaya.

Haddiise qofka dhintay uu ka tegay carruur ay qof kale isu dhaleen, carruurtaas dhaxalkooda dhaqso ayaa loo siin karaa. Haddii doonaayaan waa sugi karaan in ee dhaxalkooda qaataan ilaa inta qofka ay qofka dhintay isqabeen unu ka dhimanayo. Haddii uusan jirin qof ay qofka dhintay isqabeen, waxaa dhaxalka oo dhan qaadanaya carruurta. Haddii eeysan caruuru jirin, waxaa dhaxlaya waalidka ama walaalaha qofka dhintay.

Haddii caruur waalidkood dhinto, waa in carruurta ka yar 18 sano loo qabto qof wakiil ah oo caawiyo. Wakiilka waa qof ilaalinayo in caruurta xuquuqdood loo dhameeystiro.

Hantida iyo deynta laga dhintay

Hantida iyo deynta laga dhintay waa dhammaan lacagta iyo hantida kale oo qofka dhintay ka tegay. Ehelka dhaxalka xaq uu leh ayaa wadawadaaga hantidaas.

Hanti-aybinta, liiska hantida iyo deynta iyo dhaxalqaybinta

Haddii qofka dhintay ay qof isqabeen oo hanti ka wadadhaxeeysay, waa in marka hore waxa dhan loo kala qeeybiyaa labadooda. Taasi waxaa lagu magacaabaa hanti-qeeybinta. Marka hanti-qaybinta la dhammaystiro ayaa loo gudbaa qaybinta dhaxalka.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Masawirqaade: Colourbox

Liska hantida iyo deynta waa liis lagu qoro dhamaan waxii hanti ah iyo deeyn oo u ka dhintay qofka. Liiskas waa in la diyaariyey saddex bilood kadib marka qofku geeriyooday. Waxuu liskaas asal uu ahaana hanti-qeeybinta, oo ah qeeybinta hantida marxuumka.

Dardaaran qoraal ah

Dardaaranka qoraalka ah waa dokumenti sharci ah. Qofka qoro dardaaranka ayaa go'ansanaayo qofka dhaxlaayo iyo waxa uu dhaxli karo. Laakiin waxaa jira dad laga reebay. Tafiirta dhaxalka u hadha (qofka dhintay caruurtiisa,

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

caruurta ee sii dhaleen ama caruurtaasna caruurtooda) waxeey markasto xaq uu lee yihiin in eey dalbadaan qeeybta ee dhaxalka ku lee yihiin.

Dardaaran markii la sameeynaayo waa in la raacaa xeerar gaar ah. Waa in dardaaranku qoraal ahaadaa. Waa in laba markhaanti saxiixdaa. Sidaas darteed ayee uu fiican tahay in lala tashado sharci-yaqaan inta aan la qorin dardaaran.

Dadka isla nool ayagoo isqabin (wada noole) si toos ah iskuma dhaxlaan. Haddi laba qof oo isla nool doonayaan in eey is dhaxlaan waa in ee qoraan dardaraan.

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Su’aalaha wadahadalka cutubka 8

Waa maxay mecnaha ee dalka uu yeelaneeyso marka ee waayeelka ka sii kordhin badanyihiin dadka kale ee bulshada?

Maxaad uu aragtaa in ee waayeelka muhiim uu tahay si ee helaan nolol fiican?

Iswiidhan sida loogu arko waayelka, ma ku duwantahay sida dalkaada hooyo loogu arko?

Maxaad uu baahantay in aad uu qorsheeyso intaada hawlgab noqon?

Marka laga hadlo xanaanada waayelka, waa maxay farqiqa iyo waxyaalaha ee iskaga midyihiin Iswiidhan iyo dalkaada hooyo?

Marka laga hadlo munaasbada xabaadlida, waa maxay farqiqa iyo waxyaalaha ee iskaga midyihiin Iswiidhan iyo dalkaada hooyo?

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ururinta xigashooyinka

1177.se

Adbsverige.se
Almi.se
Antagning.se
Xafiiska shaqada

BankID.com
Barnkonventionen.se

CSN, Centrala Studiestödsnämnden

Wakiilka u xilsaaran takooridda

Ekonomifakta.se
Elpriskollen.se
Hey'ada dawladeed ee tamarta
Warbixinaha Midowga Yurub

Hey'adda caafimaadka dadweeynaha
Daryeelka ilkaha ee dadweynaha
Qaramada Midoobay, QM
Qasnadda ceymiska

Maamulka magaalada Göteborg

Talo bixinta iibsadayaasha (Hallå Konsument)

Gudida kormeerka daryeelka caafimaadka iyo xanaanada caafimaadka, IVO

Hey'ada dawladeed ee beeraha

Kronofogden
Khadka nabadgelinta dumarka

Taariikhda nool (levandehistoria.se)
Hey'adda arrimaha raashinka
Warbixinaha dawooyinka
Maamulka gobolka

Minoritet.se
Manskligarättigheter.se - Dawlada bogeeda ku saabsan
xuquuqda bani'aadanka
Hey'adda socdaalka
Hey'adda machadka farsamada

Hey'ada dawladeed ee deegaanka

Hey'adda howlgabnimada
Boolis

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ururka qaran ee dadka u hamooda kuwa ay isku jinsiga yihiin, dadka labada jinsiba u hamooda, dadka trans ah iyo xuquuqda dadka queer ah, RFSL
Ururka qaran ee warbixinaha galmada, RFSU
Ururka qaran ee joojinta gudniinka haweenka, RISK

Samer.se
Hey'adda cashuuraha
Hey'adda waxbarashada
Maamulka dhexe ee arrimaha bulshada
Xafiiska Dhexe ee Tirakoobka, SCB
Studera.nu
Kaniisadda iswiidhishka
Maxkamadaha Iswiidhan
Maxkamadaha Iswiidhan (Guddida khilaafaadka guri kireeyaha iyo kireystayaasha)
Telafishanka Iswiidhan, SVT
Xukuumada Iswiidhan
Barlamaanka Iswiidhan
Baarlamaanka Iswiidhan warbixinaheeda Midowga Yurub
Shirkad khamri oo eey dawladdu maamusho kaligeed

Terrafem
Hey'ada dawladeed ee kobcinta ganacsiga
Hey'adda jidadka

Guddida jaamicadaha sare iyo jaamicadaha, UHR
Unizon.se
Utbildningsinfo.se

Hey'ada dawladeed ee doorashooyinka
Verksamt.se
Gaadiidka Västtrafik

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Tusmo alifbeeto

A

Adeega guriga 189, 241
Adeega raacida 116, 235
Af-iswiidhishka loogu talagalay ajnebiga 118, 120
Afti ka qaadista dadweynaha 28, 199
Aga 161
Alla helgons dag 37
Aqoonsi jinsiyeed 139
Aragti ku salaysan koox dad ah 142
Aragti ku salaysan qofka shakhsiga ah 142
Arlanda 50
Asatro 18, 32

B

Baaqa carruurta 144
Baaritaan-caafimaad 217
Baaritaanka caqabad guur 152
Baayoolajiga jinsiga 24
Ballanqaad daryeel caafimaad 223
Barbaarinta 161
Bariga-Yurub 26
Bariiska-Påskiga 34
Barlamaanka 18, 20, 21, 22, 27, 182, 184, 185, 194, 200
Barlamaanka yurub 184, 191, 199
Barnaamijka gogoldhiga-luuqada 169
Barnaamijyo waxbarasho 121
Beeraleey 18, 21, 22
Booliska 82, 187
Boqorka 19, 22, 27, 181, 182, 195
Boqortooyo 183
BRIS 145
Bullaacadda 68, 86
BUP 222
BVC 157, 210

C

Caafimaaddarrada maskaxda 222
Caafimaadka dadweeynaha 206
Caafimaadka galmada iyo tarmidda 211
Cadaalad 181
Cadeeynta shakhsiga 111
Canshuur 20, 96, 107, 190
Canshuur dadban 109
Canshuurta dakhliga 108
Canshuurta moms 109
Caraqalad waxqabasho 116. *Fiiri* Naafo
Carl XVI Gustaf 27
Ceeymis guri 62
Ciidaha 32, 33, 37
Codbixinta 178, 179, 181, 183, 200, 202

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

CSN 120, 123, 174
Cuuriyaanimada dhimirka ah 120, 141, 166, 196
CV 102

D

Daawo 216, 241
Dabiicada 30, 46, 63, 196
Dadalka waqooyiga yurub 19, 23, 44
Dadka 50
Dagaaladii adduunka ee koowaad 24
Dagaalka caalamka ee labaad 25, 26, 190
Darajo sare/nasab fiican 18, 21, 22
Dardaaran qoraal ah 246
Daryeelid 155
Daryeelka asaasiga ah ee caafimaadka 217
Daryeelka caafimaadka dugsiyada 158
Daryeelka caafimaadka ilkaha 227
Daryeelka caruurta 172
Deeyn 105
Degmooyinka 44, 53, 56, 65, 74, 86, 148, 163, 165, 168, 185, 189, 201, 235, 241
Dembi 82, 138, 141, 143, 148
de Montesquieu, Charles Louis 181
Demoqraddiyada 24, 134, 169, 178, 180, 182, 183, 185, 194, 201
Demoqraddiyada habka wakiilashada 178, 183
Dhakhtar 97, 122, 124, 215, 216, 221, 223, 235, 241, 242
Dhakhtarada daaweynta guud 219
Dhakhtar ilko 226
Dhalasho 12
Dhalinyaro 40, 128, 143, 149, 168, 169, 211, 220, 222, 227
Dhaqan 16, 33, 76, 125, 126, 129, 130
Dharka hiddaha iyo dhaqanka 35
Dhaxalka jinsiga 18, 154, 232
Dhiigdaadkii Stockholm 19
Dhismaha guud 44, 50
Dhulalka keeydka dabiiciga ah 46, 47
Dhulka dabiiciga ah 18, 44
Dib u isticmaalid 63, 66
Dib u kulmida reeryaasha 9
Diiin 31, 139, 140, 154, 182, 195, 243
Diinta yahuudda 37
Diiwaangaliska dadweeynaha 111
Distoorka 22, 47, 134, 194
DO. *Fiiri* Hey'adda kahortagga takooristu, DO
Doorasho 178, 183, 184, 194, 197, 202
Dowlada 20, 22, 104, 107, 108, 134, 141, 143, 184, 185, 190, 192, 193, 206, 212
Dugsiga barbaarinta 73, 74, 158, 164
Dugsiga sare 86, 119, 158, 168
Dugsiga xanaanada 74, 155, 164, 165
Dugsiga xilli firaaqaha 73, 163, 164
Dugsi xanaano. *Fiiri* Dugsiga xanaanada
Dugsiyada hoose-dhexe 74, 158, 165
Dugsiyada waxbarashada bulshada 120, 122
Dul-saar 55, 105

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

E

Egenvårdsguiden 215
Elpriskollen 71
Euro 191

F

Farmashiye 216
Fasallada dugsi u diyaarinta 167
Fasaxa krismaska 38
Fasaxa kuleelaha 35
Fikradda libraaliyadda 195
Folktandvården 226, 227

G

Gacan labaad 53, 55, 57, 58, 59
Gacanyaraha taabo gelinta 16
Galbeedka-Yurub 26
Galmada 139, 149, 207
Galmada iyo wada noolaashaha 167
Ganacsate 18, 21, 22
Garad dhimasho 116
Gobol , 2, 44, 152, 190
Gobolo 190, 201
Golaha 23
Golaha wasiirradaha Yurub 191
Goleha ammuuraha gobolka 190
Goleha degmada 184, 200
Goobaha xilliga firaaqada 130
Gudbin 224
Guddiga dhexdhaadinta kirada guriyaha 55, 58
Guddiga Yurub 191
Gudniinka gabdhaha 149
Gundiga daawadeed 97
Guriga xannaanada carruurta 73, 163, 164
Guri kireeye 54, 57, 58, 60
Guri kireeyste 55, 57, 60
Guri la kireeysto 54, 59
Guriyaal saffan 56
Guriyo 53, 57, 190
Gurmadka degdegga 81
Guryaha waayeelka 74
Gustav III 22
Gustav IV Adolf 22
Gustav Vasa 20
Guur 152, 154
Guurka-qasabka ah 153
Götaland 44

H

Hab-dhiska caddaaladda 187
Hab dhiska xukunka 22, 134, 182, 184, 194
Habka galmoodka 9, 139
Habka toos lacagta looga jiito koontada 79
Hantida iyo deynta laga dhintay 245

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Hanti-qaybinta 245
Hanti-wadaagga 181, 195
Hay'adda waxbarashada xirfadeed ee jaamacadaha 121
Heshiishka gacan koobaadka 55, 58, 59
Heshiishka guud ee shaqada 93, 94, 239
Heshiishka shaqaaleeynta 96
Heshiishka suuqa madoow 60
Heshiishka Yurub 135
Heshiyaada-korontada 71
Hey'adda arrimaha hawlgabka 236, 239
Hey'adda arrimaha raashinka 208
Hey'adda caafimaadka dadweeynaha 207, 225, 232
Hey'adda canshuuraha 58, 108, 112, 113, 152
Hey'adda doorashada 200
Hey'adda kaalmada ardayda, CSN 120, 123, 174
Hey'adda kahortagga takooristu, DO 138
Hey'adda qaan-ururinta 81
Hey'adda qasnada ceeymiska 99, 113, 115, 116, 171, 187, 227
Hey'adda socdaalka 10, 13, 113
Hey'adda waxbarashada 124, 167, 168
Hey'ad dowladeed 10, 83, 98, 138, 167, 187, 189, 207, 225

I

Ictiqaad 40, 134, 139, 140
IFS Rådgivning 105
In lagu shaqeeyo suuq madow 110
Isbitaal 78, 215, 220, 221, 242
Isbitaalka dumarka 149
Isdaryeelid 215
Isdhexgalka bulshada 13, 128
Is furid 154
Isku nikaaxiye 153
Iskuulo madaxbanaan 74

J

Jaamacad 86, 119, 121, 123
Jean Baptiste Bernadotte 22
Jimicsiga 168, 210
Jirdil 62, 147
Jom Kippur 37

K

Kaalmada ardayda 120, 123, 174
Kaalmada daryeelka ilkaha 227
Kaalmada dhaqaale ee ardayda 125
Kaalmada dheeraadka ah ee waayeelka 240
Kaalmada kirada guriga lagu kabo ee howlgabyaasha 240
Kaarka-amaahda 77
Kaarka aqoonsiga 111, 113
Kaarka bilaashka daryeelka 224
Kaarka-codeeynta 200
Kaarka-koontada 79
Kaarka-maktabada 77
Kabida iijaarka 113, 171, 175
Kadaba dirista boostada 58

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Ka dacwoosho 116, 189
Kadeed 206, 210, 220, 233
Kalkaalisayaasha dugsiyada 158
Kalkaaliyayaasha caafimaadka 215, 219
Kanisada iswiidhishka 20, 243, 244
Karl XII 21
Karl XIII 22
Khamri 32, 142, 206, 207, 211, 219
Khamri culus 32, 37
Khidmada duugista 244
Khilaaf 187
Kiisaska-dambiga 187
Kontroolida 61
Koonti-bangi 79
Korontada 190
Krismaska 37, 39. *Fiiri* Maalinta ka horeeyso maalinta krismaska
Kulliyadaha 86, 119, 121, 122

L

Lacagta aasaaska ah ee hawlgabka 238
Lacagta deeynta ardayda 120, 123
Lacagta fasaxa waalidaka 171, 238
Lacagta hawlgabka 108, 237, 238
Lacagta hawlgabka dakhliga ku salaysan 238
Lacagta hawlgabka gaar loo kaydsaday 236
Lacagta hawlgabka guud 236, 237
Lacagta hawlgabka ku salaysan shaqada 236, 239
Lacagta hawlgabka oo faa'iidada laga sameeyo 238
Lacagta jirada 108
Lacagta kaalmada daryeelka 115, 116, 171
Lacagta kharashka bulshada 110
Lacagta la siiyo haweenka uurka leh 114
Lacagta taabo galinta 15, 98
Lacagta waalidka ee ku meel gaarka ah 172
Lacagta waxqabadka 238
La daggane 58
Lamaanaha isu diiwaangashan 12, 112, 153
LAS. *Fiiri* Sharciga difaaca shaqada, LAS.
Liberalerna 197
Liiska bixinwaaga deynta 80
Liiska hantida iyo deynta 245

M

Maalinta dhalashada 41
Maalinta ka horeeyso maalinta krismaska 38
Maalinta ka horeeyso midsommar 36
Maalinta-Lucia 37
Maalinta qaranka 20, 35
Maalinta-sadaxiitobaanaad 39
Maalinta sugida 97
Maamulka dhexe ee arrimaha bulshada 124, 225
Maamulka gobolka 86, 154, 185, 190, 192, 201, 226, 243
Maamulka qabuuraha 243
Maandooriyo 206, 233
Magangalyo 8, 10

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Magdhaw 62
Maxkamada degmada 55, 188, 192
Maxkamadaha gaarka 187
Maxkamadaha guud 187
Maxkamada maamulka 116, 187
Maxkamada sare 187
Maxkamada sare ee maamulka 187
Maxkamada-Yurub 192
Maxkamadda arrimaha shaqada 94
Maxkamadeeyn 135
MBL 92
Meyd-gubin 244
Midoowgii-Kalmar 19
Midowga Yurub, EU 13, 28, 49, 112, 184, 190, 191, 200
Mudada tijaabinta shaqaaleeynta 96
Munaasabada kaniisad ku soo dhaweeynta 39
Munsaasabada ducada xabaalaha 244
Mushaar 89, 93, 94, 96, 99, 108, 126, 172, 235, 238
Mushaarka jirada 97
Mushaarko jumlo ah 96, 108
Mushaar saafi ah 108
Muujinta rabida shaqada 102
MVC 156

N

Naafo 26, 115, 139, 141, 171, 226, 235
Nidaadmka nabadgalida iyo daryeelka Iswiidhan 27, 107
Nikaax 153
Norrland 44
Nouruz 34
Nubbe 37
Nuuca kaluunka Kräftskiva 36

O

Ogeeysiinta guurida 58
Olof Skötkonung 18

Q

Qaabbilaadda dhallinyarada 221
Qaabbilaadda dumarka 149, 221
Qaabbilaadda gargaarka degdegga ah 217, 220, 222
Qaabilada-heeganka 217, 222
Qaanuunka-ajnabiga 9
Qabriga 244
Qaramada Midoobe, QM 26
Qashinka 63, 67
Qashinka oo dibada lagu daadiyo 68
Qasnada shaqo la'anta 92
Qaxooti 9, 26
Qaybta cudurrada maskaxda ee carruurta iyo dhallinyarada, BUP. *Fiiri* BUP
Qeeyb bixinta lacagta deeynta 55
Qiimeeynta aqoonta shaqada 124
Qiimeynta 124
QM 9, 26, 134, 141, 170
Qof kasoo jeedo gobolka Tornedaling 53

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Qolka dhar-dhaqida 61
Qoriga dheer ee midsommar 36
Qorshaha ganacsiga 104
Qorshaha taabo gelinta 98
Qorshaha waxbarashada 164
Qorsheha horumarka ee ardayga u gaarka ah, IUP 171
Qunyar socod 195

R

Ra'iisal wasaare 28, 186
Ramadan 39
Rugaha caafimaadka 219
Rugta buugaagta 57, 189
Rugta daryeelka caruurta, BVC 157, 210. *Fiiri* BVC

S

SAF, Ururuka shaqo-dhiibaha ee iswiidhishka ah 25
Samer 51
Sanduuqa saamiyada 238
Sanduuqyada saamiga 239
Semlor 33
Sfi 118, 120
Shahaadada 124
Shahaado 101, 118, 121, 122, 167, 170
Shaqaale 27, 86, 91, 92, 93, 201, 239
Shaqaaleeyn 93, 95, 96, 103
Shaqaaleeyn joogto ah (Tillsvidareanställning) 95, 96
Shaqaaleeyn mudo xadidan leh (Tidsbegränsad anställning) 95
Shaqaaleeynta saacadeed (Timanställning) 95
Shaqo dhiibe 91, 92, 93, 95, 96, 97, 98, 99, 102, 141, 173, 237, 239
Shaqo ku meel gaar ah (Vikariat) 95
Shaqo qaate 91, 92
Shaqo-Toobar 100
Sharaf 146
Sharci dajin 148, 192
Sharciga adeega bulshada 241
Sharciga deganaanshaha 9, 13, 16, 98, 113
Sharciga difaaca cudurrada faafa 224
Sharciga difaaca shaqada, LAS. 93, 96
Sharciga fasaxa 97
Sharciga-shaqada 13
Sharciga wadatashiga, MBL. 92
Shibhi jasiireedka Skandineefia 44
Shirkadaha caymiska lacagta hawlgabka 239
Shirkadaha ka warbixinta deeynta 81
Shirkadaha shaqaalaha kireeyo 98
Shirkadaha shaqaalaha shirkad kale uu helo 98
Shirkadle 13, 239
Sigaar cabid 206, 213, 233
Sinnaan 134, 181, 196
Sinnaanta dumarka iyo ragga 135
Sinnanta dumarka iyo ragga 89
Siyaasiyiin 144, 178, 184, 187, 192, 201
Snaps 37
Soo galooyti 53, 105

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

SOS qayladhaan 220
Sportlov 33
Suuqa shaqada 86, 89, 91, 98
Svealand 44
Svenskt näringsliv 91
Systembolaget 212

T

Taageerada masruufka 171
Taageerada masruufka. 76, 116, 189
Tacbiir jinsiyeed 139
Tafiirta dhaxalka u hadha 246
Takhtarada cilmi-nafsiga 220, 221
Takooris 134, 138, 141, 144
Talo bixinta caafimaadkana 215
Tamar 63, 66, 69
Tixraac 101
Tubaakada 207, 211, 213
Turjumaan 77, 78, 171, 216

U

Urur 55, 56, 92, 125, 126, 235
Ururada shaqaalaha 92
Ururada shaqo dhiibaha 91
Ururka ciribtirada khamriga 32, 183, 193
Ururka shaqaalaha 183, 193
Ururo bulshadeed 129
Ururrada waxbarashada 129

V

VAB 172

W

Waajibaad 95, 155
Waajibka-dhigashada dugsiga 74, 165
Wadaadada 18, 21, 23
Wadahadalka dugsiga 165, 171
Wada noole 59, 152, 154, 247
Wakaaladda ka hortagga takoorridda 139
Wakhtiga firaaqada 76, 125, 130
Waraaqada shakhsiyeed 101
Wareeysiga shaqaaleeynta 102
Warshadaynta 23
Waxbarashada bulshada 129
Waxbarashada dadka waaweyn ee degmada 119
Waxbarashooyinka xirfadeed ee heer jaamacadeed 121
Waxbarsho xirfadeed 119

X

Xaalad adag 16
Xabaalidda 41, 243, 244
Xadka sare ee kharashka 224
Xafiiska adeega bulshada 75, 78, 116, 162

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Xafiiska jiheynta waxbarashada 117, 118
Xafiiska shaqada 16, 98, 99, 187
Xafiiska xidhiidhinta guryaha 56
Xafiis qabanqaabinta xabaalidda 243, 244
Xalqad waxbarasho 130
Xanaanada caruurta 26, 73, 107, 115, 163
Xannaanaynta waxbarashada ku salaysan 164
Xaqiijin (xaflad kaniisadeed) 40
Xaqqa-codeeynta 178, 181, 183, 200
Xarunta daryeelka hooyooyinka 156, 157. *Fiiri* MVC
Xarunta dib u isticmaalida qashinka 64, 67
Xarunta jiheynta waxbarashada (Vägledningscentrum) 118
Xeerka barlamaanka 22
Xeerka dhaxalka 154
Xeerka dhaxalka boqortooyada 22, 194
Xeerka dugsiyada 165
Xeerka xorriyadda daabacaadda 22, 134, 194
Xeerka xorriyadda hadalka 134, 194
Xildhibaan 200
Xiliga ogeeysinta ka tagida shaqada 55, 61, 96
Xilliga fasaxa 27, 36, 93, 96
Xilliga shaqada 93
Xilligii aqoonta 21, 181
Xilligii barafka 16
Xilligii birta 17
Xilligii dhagaxa 16, 32
Xilligii dhexe 18, 19
Xilligii naxaaska 17
Xilligii qadiimiga 16
Xilli shaqo oo dheeraad ah 94, 97
Xilliyada sanadeed 46
Xisbi 178, 199
Xoghayaha kaalmada 241
Xoog-isticmaalka guriga gudihiisa 144
Xukuumada 51, 135, 185, 190, 194, 206
Xuquuq 18, 35, 51, 95, 128, 129, 134, 138, 143, 144, 178, 182, 195, 196, 245
Xuquuqda aadanaha 134, 135, 141, 170, 178
Xuquuqda dhexjoog dabiicada 46
Xuquuqda iibsiga degganaanshaha 55, 59
Xuquuqda lahaanshaha 56
Xurriyada diimaha 194
Xurriyada ururada 126, 183, 194

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

© Maamulka magaalada Göteborg iyo Maamulka gobolka Galbeedka Götaland

Buugaani waxaa loo qoray qofka dalka ku cusub

Buuga waxuu ku saabsan yahay bulshada Iswiidhan. Waxaad halkaan ka heleeysaa warbixin ku saabsan hey'addaha dowlada Iswiidah, xeerarka iyo nidaamyada, shaqo iyo waxbarasho, daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo arrimaha caruurta iyo qooyska iyo in kale oo dheeraad ah.

Dalbo buugan iyadoo loo marayo
www.informationsverige.se

Maamulka magaalada Göteborg

MAAMULKA GOBOLKA
GALBEEDKA GÖTALAND

978-91-984845-7-1